

Salluu calal Xabiib NNKH.

M…….
T……/……/…….
S…….

الثقلين

ATH-THAQALAYN

SAQALAYN

SAQALAYN[1]

Jin, Insi Iyo Sixir

Cabdikariim Maxamuud Cabdi "Xikmaawi"

[1] *Saqalayn waa kalmad carabi ah, waxa na la isku yidhaahdaa Jinka iyo Insiga, waxaa na ay ku caddahay arrintaasi suuratu Al Raxmaan, aayadda 31-aad-ee Juska 27-aad ee Qur'aanka kariimka ah. Sababta aan magacan ugu dooray buuggu na waxa weeyaan maaddaama uu ka warramaayo macluumaadyo labada qoloba taabanaaya, waa magacii ugu habboonaa – ee aan helay.*

@Cabdikariim Xikmaawi.
Xuquuqda oo dhammi waa ay dhawrantahay,
buugga oo dhan ama qayb ka mid ah lama daabacan karo,
lamana minguurin karo oggolaansho qoraal ah
iyadda—oo aan laga haysan qoraaga buuggan.
Madbacadda Raad Press Raadpress1@gmail.com
Jaldiga waxa nashqadeeyay Yoonis Baarri,
Daabacadda 1aad 2023.
Raad Press. Soomaaliya, Muqdisho.
SAQALAYN: Jin, Insi Iyo Sixir
Qoraaga wixii faallo, tilmaan, aragti
iyo xidhiidh ah ee looga baahdo
waxa laga heli karaa tixraacyadan hoose:
Xikmaawi2005@gmail.com
Facebook, Cabdikariim Xikmaawi

HIBAYN

Buuggan waxa aan u hibaynayaa dhammaanba culimada Soomaaliyeed—ee intii karaankooda ah dedaalka ugu jira sidii ay dadka jahliga uga saari lahaayeen, waxa kale—oo aan u hibaynayaa ardayda da' walba leh—ee iyaguna culimadaas ka loox jiidanaaya; meesha ay rabaanba ha kala joogaane…

—Cabdikariim Xikmaawi—

Tusmo

1.JIN IYO JACAYL 13

Sheekadanii waa mid dhab ah, waxaa na ay ku dhacday wiil dhallinyaro ah oo reer Hargeysa ah, waxaa na ay socotay sheekadani 2009-2014-kii. Sheekadani waa mid dhaygag badan, waana qisada sababtay aslan ba in aan buuggan qoro.

2.CAALAMKA QARSOON 109

Cutubkani waxa uu ka warramayaa caalamka innaga qarsoon, waxaana uu waxoogaa ka iftiiminayaa noocyadiisa, asalka abuurtiisa, halka ay salka ku hayso cadaawadda uu Insiga u qabo Jinku iwm.

3.FAALALAWGII TOOBBAD KEENAY 137

Sheekh X*aamud Aadam* oo u dhashay dalka Suudaan ayaa cutubkani uu ka warramayaa noloshiisii intii uu saaxirka ahaa, dadka markaa uu la noolaana ay u haysteen nin wali Ilaahay ah! Sheekh Xaamud muddo 17-sanno ah ayaa uu u adeegaayay caalamka jinka, isaga oo dadka na iskaga dhigaayay nin caalim ah oo laga barakaysto!

3.FAALALAWGII TOOBBAD KEENAY 2-AAD. 190

Sh. *Daa'uud Maxamed Farxaan* oo u dhashay dalka Yaman ayaa aynu isna wax yar ka warrami doonnaa noloshiisa intii uu saaxirka ahaa, sheekh Daa'uud cimrigiisa marka laba loo qaybiyo meel ahaan ayaa uu arrimaha sixirka ku soo qaatay, ugu danbayntii se waa uu ka toobbad keenay...

4.SANAN IYO SIXIR 204

Cutubkani waxa uu ka warramayaa aqoontii ay Soomaalidu u lahayd cilmiga kala geddisan ee ku saabsan caalamka Sixirka, Tafaafulka, Faalka, Asmada, Shurugga, Qataarka, Raadgurka, Isdhaafiska, Ibriiq-Xidhka, Dhawda Iwm...

Tixraacyo: 243

FG:

Fadlan bisinka ku bilaabo buuggan, shayddaanka na iska naar, in aad wayso gabto na waa aan kugula talin lahaa. intaa ka dib,isku day in aanad buuggan ku akhriyin meel madaw—oo aad kali na ku tahay; mahadsanid.

Cutubka 1aaD

1.JIN IYO JACAYL

Qisadii Axmed-Nuur

Sheekadanii waa mid dhab ah, waxaa na ay ku dhacday wiil dhallinyaro ah oo reer Hargeysa ah, waxaa na ay socotay sheekadani 2009-2014-kii. Sheekadani waa mid dhaygag badan, waa na qisada sababtay aslan ba in aan buuggan qoro.

Sannadku waa 2009, bishii 2aad. Ma hubo maalmaha inta dheer, waa se galab gaaban. Shantii iyo badhkii ku qiyaas. Wakhtigu wuu ordayaaye, ka kaalay wixii hore. Bacdal makhrib igula fiidso. Waa aniga iyo laba ka mid ah jaallayaashay. Midkood waa Maxamed Daahir, ka kalana nin fog ma aha—e, waa Khadiir Maxamed. Masjid Tawfiiq la yidhaahdo, oo xaafaddayada u dhaw ayaannu aniga iyo jaallayaashay ku akhiriyaynay maaddada Financial Accountig 1. Jaamacadda ayaanu nahay sannadkii koowaad (fresh). Waa Hargaysa; Jaamacadda Hargeisa lafteeda ayaannu dhigannaa. Masjidkii annaka oo fadhina, ayuu si lama filaan ah taleefankaygu u soo dhacay. Waa wacitaan ii muhiim ah. Ka qabtay qofkii, annaka oo aan hadalka kala bogan ayaa uu taleefankii ka go'ay qofkii. Lacagta ku hadalka oo go'day ayaa sababtaye, waxa aan u baxay Substation agtayada ahaa, si aan taleefanka uga soo lacagaysto. Substationka waxa haysta Kayse Cabdi nin la yidhaahdo, oo aannu asxaab dhaw nahay illaa carruurnimadii. U galay Kayse aniga oo degdegaya. Taleefan ayuu ku hadlayaa. Taleefankii laynka ahaa ayuu dhegta ku hayaa. Walaw aanay sameecadda sare u furnayn, haddana codka qofka la hadlaaya waa la maqlayaa. Waa gabadh! Hadal kale uma hollanayn in aan idhaahdo e, markiiba 'ku shubasho (prepaid) iigu shub' ayaan ku idhi. Iima soo jeedsan Kayse; hadalkiisii iyo kaftankii isaga iyo gabadha u socday ayaa uu iska sii

watay. Aan doolaallo e, hadalkay ku wada hadlayeen nuxurkiisu wuxu ahaa, lacag ku hadal ah iigu soo shub iyo dumarkaa lacagta wakhtigan hayee soo daa lacagta...

Halkaa marka sheeko marayso, waxa afkayga ka soo baxay kalmad ahayd, 'waar naga daa gabadhan shaxaad doonka ah oo lacagta iigu shub. Hadalkaygii ayay inantii maqashay, waxaanay Kayse ku dhaarisay in aanu lacag iigu shubin! Ninku wuxu igu caayay illaa uu ii sheego ha ugu shubin lacagta ayay ku celcelisay. Isna igu yidhi 'la hadal intaan kuugu shubayo'. Gacantii taleefanka ayaan qabsaday. 'Waaryaa ninkaagan i caayay, ma is baran karnaa?' Ayay igu bilawday. 'Dhibi kuma jirto'! Ayaa aan si gaaban ugu celiyay. Magacaygu waa Tasmiin, waxan ku noolay magaalada Hargeysa, dhawaan ayaan dalaka Norway ka imid...' Intaas kolka ay si kartiyi ku jirto iskugu kay raacisay, ayaa aan anna ugu jawaabay. 'Anigana Axmednuur ayaa lay yidhaahdaa, qolqol joog Hargeysaawi ah ayaa aan ahay walaal intaasi markay nakala gaadhay, ayay lacagtii iigu soo dhacday Mobile-ka. Markan hubsaday in muraadkaygii ii dhammaaday, ayaa nin hadal u socday ma aan ahayne aan ku idhi, Barasho wanaagsan; nabad ku waar. Intaas kolkaan idhi, ayay igu tidhi, 'Intaanad tagin ii ballanqaad in aad soo noqonayso; waan ku sii sugayaaye! 'Waayahay' ayaa aan ku idhi, hadal aan dibnaha dhaafsiisnayn, aniga oo raba in aan warkeeda uun iska soo afjaro. Masaajidkii iyo asxaabtii ayaa aan

ku soo noqday. Akhriskii ayaan sii wadannay illaa 9:00 cawaysnimo. Maan ku noqon inantii, waayo maba aan awoodayn—oo akhriskii baa aan ku daalay, gaajana waa i haysay oo xaafadda ayaan hamuum kula itaalay. Muddo toddodaad ku dhaw ma aan haleelin in aan Substation-kii ku noqdo, imtaxaankii jaamacadda oo ii socday awgeed. Laakiin markaan Kayse is aragnaba, waxa uu igu yidhaahdaa, 'Waar abti inantii baa ku doonaysa—e maad u timaaddid!' Cajiib, wax ay saa ahaataba, goor casar ah toddobaadkii labaad ayaan soo maray substation-kii. Asxaab badan baa fadhida markaas. In yar markaan taagnaa ayuu telephone soo dhacay. Kayse ayaa eegay Telephone kii dhacayay. Waa iyadii; lafteedii! Inta uu soo kacay oo albaabkii iga furay ayaa uu yidhi, 'Abti kaalay ka qabo oo la hadal waa yartiiye'. Asxaab badan oo madasha fadhiday ayaa kaftan ila boobay, 'oo maxay ahayd yartaasina Kayse?' 'Waar waa goob shaqo meeshu—ee meelahaa la tag shukaansiga' iyo hadallo badan ayay asxaabtii igu miiseen. Kaftankooda iyo xaalkaygu halka uu kala joogo aniga oo ku qoslaaya, ayaa aan gundhada u galay substationkii. Degdeg u qabtay telephonko dhacaya. Sidaas markii aan u qabtay ba, waxa ay igu tidhi,

'Hello' 'ii warran walaal?' ayaan ku bariidiyay. 'Waan fiicnahaye, ma ninkii i caayay ee igu soo noqon waayaybaa?' Ayay iigu tiraab celisay. Saa inta aan qosol yar isku daadraaciyay, jeerka gabbasho kala ma jirto e,

aan 'haaye saw lama wacna?' ugu hal celiyay. Waan yaabbanay! Waar qofka adaaba taleefanka ka qabtay cidina kuuma sheegine, maxay tolaw markiiba kugu garatay ayaan is weyddiinaaya. Malaha intii yarayd ee maalintii ayay codkaaga si fiican u baratay; cajab! Aniga oo hadba isla yar baxsan, ayaa su'aalaheedu malahan dhisayaba ay kala qubaan. Waa saase, waxa aad iigu socota gabadha sheekadeeda. Gabadh cod dhuuban, kaftan badan, hadal aqoon ah oo waliba firfircooni iyo qosol durbadiiba igu jalbeebisay ayaan maan maqan kula hadrayaa. Ninyaw malaha inanta Kayse ayaa kuu qarinaaya e, waa gabadh si wacan kuu garanaysa—oo way kugu ciyaarayaan ayaa marar igu soo dhacda. Wax walba ha igu soo dhacaane, hadda se sawtan iyadiiba i af duubtay ee warka in aan ka guraa ha joogto e, sheeko kale iyo hadal aan gabadhii ku haasaawiyaba la iga la'yahay!

Waxaas intan iska dhaafay, is xaal waraysannay. Siday hore iigu sheegtay maaha e' intii kale ee xogteeda ahayd ayay ila wadaagtay. Caalam aanan waligay aragti daaye hore sheeko ku maqal ayay durbadiiba i mushaaxsiisay. Waa la isii sitaa! Waykaas sii socda…! Nolosheeda gaarka ah, ta qoyska, qoladeeda iyo kumannaan hadal oo kala duwan ayay waxna ii sheegaysaa waxna iga weyddinaysaa. Waan hanuunay! Wax kale kuma gartide waan hoggansamay durbadiiba. Lah iyo xiise xagga hadalkeeda ii jiidaaya ayaa i beer

qaaday. Codkeeda ayaan ku maqanahay. Bal codkan macaani wejiga uu ka soo baxayaa sida uu u eegaan karo ayaan masanuuninayaa! Sheekadii oo Hii iyo Haa, Haye iyo Kow noo maraysa, ayaa salaaddii Maqrib masjidkii noo dhawaa ku dhuftay. Niyadda ayaan ka idhi, 'yaa wakhtiga yara riixa; hoh, xilligan oo kale miyaa la addimaa!' Inta aan xiisaha i haya is illawsiiyay, ayaan inantii ku idhi, 'waa la eedaamay walaale, salaadda ayaan aadayaaye nabad ayaan kuu dhaafayaa…' 'Waa si wanaagsane, markaad soo tukato igu soo noqo' ayay iyana iigu hadal celisay. 'Waa hagaag haddii Rabbi xukmo' inta aan ugu jawaabay, ayaan gacantii iyo madaxii taleefanka isa saaray. Inta aanan bixinba ayay maskaxdaydu wax is weyddiinaysaa, se dooc badan ma siinnine, degdeg inta aan kadinka uga soo booday ayaan masjidkii aaday.

Maqrib illaa salaadda cishaha inta u dhaxaysa, aad ayuu substationku mashquul u ahaan jiray. Macaamiil badan ayaa ka adeegan jiray wakhtigaas, sidaa daraaddeed kuma aan soo noqon inantii iyo ballankeediina kama aan soo bixin. Intaas oo kaliyaata uun maqnaantaydu ma qaadane, laba illaa saddex cisho kuma aan noqon substationkii. Anigu aan maqnaado e, shaw iyadu intaas ba way isoo waci jirtay maalin walba! Gabbal iyo waalana taleefankii ku soo waashay meheraddii. Dharaartii danbe ayay xal keentayoo, shaw Kayse ayay ku tidhi, Talefanka gacanta ee Axmednuur

wato i sii walaal... Isna kuma masuugine[2], durbadiiba waa kaas halhaleel ugu soo taagay. Toddobadka saddexda cisho ee hore tafsiirka Qur'aanka ayaan sheekh Dirir[3] masjidkiisa ka soo dhigan jiray. Qaar ka mid ah asxaabtayda ayaanu soo wada marsan jirnay kitaabka e, aniga oo masjidkii fadhiya ayaa lanbar aanan garanayni isoo wacay. Inta aan sidaas u eegay, lanbarka isoo wacaayana aan garan waayay, ayaa aan iska damiyay talefankii. Iska sii watay casharkaygii. Kolkii salaaddii cishaa'i laga soo baxay, ayaan furay talefankaygii aniga oon masjidkaba ka soo bixin. Sidaadan u furayba, mise lanbarkii aan kolkii hore ku damiyay ayaaba haddana isoo wacaaya. Niyadda ayaan ka idhi, 'waar qofku dantuu leeyahay weynaa'! Markaan sidaa u soo baxayba talefankii waan qabtay. Hello, sidaadan u idhiba, anoon hadalkii dhammaynin, saa 'Inaabti ii warran?' Ayaan durbadiiba maqlaa! Inta aanaan wax kalaba is dhaafsan, waxa iga yaabiyay hadalkeeda degdegga ku jira, ee aad mooddid in ay war dhiillo[4] leh ii sheegayso. 'Waan wanaagsanaye ma wax dhibbaa jira dhankaaga walaal?' Ayaan weyddiiyay. Iima ay jawaabine, badweyn iyo haasaawe dheer wataas

---

[2] *Masuugin: Bakhaylin.*

[3] *Dirir: Sheekh Maxamed Cumar Dirir. Sheekh reer Hargeysa ah, oo tafsiirka Qur'aanka iyo weyddiimaha diinta ee bulshada aad ugu caan ah.*

[4] *Dhiillo: Naxdin.*

durbadiiba ila gashay. Degdeg ayaan masjidka uga soo baxaye, Cabdirisaaq iyo Maxamed oo ila socday isoo gaadhe anoo mobile-kii ku hadlaya. Is garab galnay anoo kolba ka yara durkaya. Muddo toban daqiiqo ka badan markaannu wada hadlaynay ee mobile-kii ka go'i waayey, ayaan ku idhi, 'Markaan xaafadda gaadho ila soo hadal hadda suuq baan dhex marayaa, asxaabna way ila socdaane'. 'Hayee iga qabo taleefanka' inta ay i tidhi, ayaannu 'macasalaama' is nidhi kolkiiba.

Intii aanan gaadhin guriga ayay haddana dhawr mar isoo wacday. Waxa ka muuqda dagdag iyo in ay tahay qof meel u socda, qudhaydu se waan xiisaynaayay in aan la hadlo markan. Ka qabtay Mobile-kii. 'Hello, walaal wali maanad gaadhin gurigii?' Ayay i weyddiisay. 'Mayee ila hadal waa caadiye, kaligay baan ahaye…' ayaan ugu jawaabay. Noo bilaaban hadalki. Daaqadda guriga hoostiisa oo xagga dibadda ah ayaan fadhiistay, waxa aannu wada hadlaynay ku dhawaad 4 saacadood haddaanay ka badnayn. Habeenkani gabi ahaanba wuu ka duwanaa mararkii hore ee aan wada hadlaynay, sababtoo ah waxay iiga warrantay sheekooyin qalbiga taabanaya. Waxay iiga sheekaysay arrimo igu sababay anoo markii horeba dhankeeda u sii janjeedhay; inaan u sii dhawaado!

Waa gabadh hadda da'deedu 17 tahay. 13 carruur ah ayay ugu yartahay. Hadda Hargeysa ay la joogto Habaryarteed, waxaana loona keenay magaalada

cilaaj! Wadaad qur'aan ku akhriya ayaa todobaadkiiba 4 cisho loo geeyaa. Siday ii sheegtay, inanta waxa laga cilaajiyaa 'il' ku dhacday intii ay Norway joogtay. Hadda in aad caafimaadkeedu u wacanyahayna ii raacisay. Iyada—oo aad codkeeda ka dareemayso dareen aad u shucuuraysan ayay igu tidhi, wadaadka aan u tagaa si gaar ah ayuu dawadayda ugu sheegay aniga iyo Habaryartay! Inta aan naxay ayaan ku idhi, 'Muxuu idiinku sheegay walaal?' Wuxuu yidhi, 'marka aad guursato waad bogsanaysaa ee guurso' Kute! Intaas kolka ay i tidhi, ayaan naxdin la qaboobay! Wali way ii waddaa sheekada. Waan ka gurayaa—saa wax aan anigu idhaahdaaba ma jiraan; wali iyadaa ii warramaysa. Iyadoo sheekooyinkay iiga sheekaynayso iyo shucuurta hadalkeeda ku ladhani ay maanka ka guuxayaan, ayaa baytarigii mobilekaygu digniin bilaabay. Dhawr mar ayuu iiga digay in uu damaayo. Dareentay oo tidhi, 'Mobilekaagu ma bilaa dabbaa?' Eegay, mise 6% ayuu dabku sii socdaa. Ugu jawaabay, 'Haa walaal; dabkaa dhacaya'. Si naxariis leh ayay iigu tidhi, 'Axmednuur waxan rabaa in aan kula hadlo e, Mobileka soo dabee'. 'Hawraarsan walaal—ee i sug' ayaan ugu jawaabay. Soo kacay, waxa aan soo galay qolkaygii anoo wali la hadlaya. Fiishtii/baraysadii iyo xadhiggii mobileka ayaan soo qaaday. Dam.. eegay Mobilekii, ala ka daa lahaydee ha damine! Dabka galiyay. Si degdeg ah u shiday. Markii uu sidaa usoo kacayba way isoo wacday!

Nasiib-darro ma hayo xadhko dhegaha ah oo aan ku hadlo, xadhigga dabku na aad ayuu u gaabanaa. Ka qabtay Mobilekii intaan fiishtii kor u soo qaaday, waxa aanan u sheegay inay i sugto inta waxoogaa dab ahi ku dhacayo Mobilka. 'Haye' iigu jawaabtay, ka dib waan dhigay.

Naftaydii ayaan la shawrayaa. Sheekooyinkay iiga sheekaynaysay iyo waxay igu lahayd ayaa igu soo laba noqonaaya. Ma cashayn. Dhaygag ayaan la gaafwareegayaa. Waxyaabo badan ayay naftaydu intay maqnayd is weyddiinaysaa. Waxa aan ka fikirayaa waxa ay uga socoto hadalkan illaa fiidkii ay igu dhurayso! Waxa aan ka werwersanahay danta ay iga yeelan doonto. Mobilekii kolkuu dab yari iigu dhacay, ayaa ma sugi karo e, aan ku celiyey inantii. Waa diyaar! Ilbidhiqsigiiba way iga qabatay; allaylahee. Wax ay sheekadu noo socotaba, ugu danbayntii ayay iisoo jeedisay arrin ka fudud waxan ka malaysanaayay oo dhan. Waxay igu tidhi, 'Walaal wax ma kaa codsan karaa?' Naxdintii adduunkaa iskugu kay timid; 'qoodh iyo xero waxad ka werweraysay wakaas hadda bilaabmay' ayay maskaxdii leedahay. 'Haaye iga codso' ayaan ku idhi. Xidhiidh! In aannu xidhiidh sheeko wadaag ah, oo kii gayaan loo ogaaya aannu wadaagno ayay iga codsatay. Kolka hore waan naxsanaaye, waxa layga codsaday haddii intaas uun ay tahy anna kuma diidin. 'Hawraarsan' iyo guddoon inta aan ugu

bantookhay, ayaa xalladda hadalkeedu isii jiitay. Intii hore hadalkayagu wuxuu ku saabsanaa isbarasho iyo iswaraysi guud uun, hadda se wuxuu isku beddalay xidhiidh sheeko. Wax ay saa ahaataba. Inantii waxa ay noqotay qofka ugu badan ee nolosha iigu wehel yeela. Waxa aannu wada hadli jirnay wakhtigayga oo dhan. Mar walba iyadaa isoo wacda. Mararka qaar waxaannu wada hadalnaa 1:00pm illaa salaadda casar. Habeenkii intiisa badan wax aan iyada ahayn lama qaato. Wax ay sheekadu socotaba, waxay gaadhay in xataa markaan dariiqa lugaynayo aan wada hadalno. Sii durugtay! Hadda waxay maraysaa in airphones ku dhagaha iigu jiraan markaan xiisadaha dhiganaayo! Iyadaa iga codsatay sidaa! Kute, 'Waxa kaliya wehel ii ahi waa codkaaga, fadlan hal daqiiqo ha igala maqnaan!' Kuma diidin! Dhammaan asxaabtaydii ayaannu kala xidhiidh furmannay. Waxa marar igu soo dhacda heestay midhaheeda ka mid ahaayeen, *Anna sida banjoog Cawl, Ciirsi-laan bannaanada, Keliday ka baaqaa,* sababta oo ah, wakhtigayga intii shaqada iyo intii waxbarashada mooyee intii kale oo dhan iyada ayaa yeelatay. Markaan duhurkii soo rawaxo, waxaan telephone la soo fadhiisan jiray geed ku yaal guriga hortiisa, illaa casar laga eedaamana halkaas baan ka tawaawici jiray. Muddo saddex bilood ah kolkaannu wada hadlaynay, ayaan ka codsaday in aannu is aragno. 'Waa arrin wanaagsan walaal in aynnu is aragnaa, se waligay dibadda uma soo

bixin aniga oo keliday ah; suuqa daaye, xataa dukaannada xaafadda keliday ma tago. Habaryaro ayaa meel walba ii raacda, se waxa iga ballan ah in aynnu si uun isku aragno...' Ayay noqotay jawaabteedii. 'Waa si wacan walaal; bal haddii Rabbi xukmo arrintaas ku soo dedaal, waayo muddo badan ayaynnu is naqaannay, ismana weji garanayno e, bal aynnu isa soo baranno...' Ayaan ugu hal celiyay. Aniga oo qorshaynayna sidii ay u soo bixi lahayd, ayay ila soo hadli wayday muddo laba cisho ah! Mobilkeeduna wuu xidhnaa labadaa cishaba. Su'aasha ugu badan ee labadaa cisho niyaddayda dhex wareegaysay waxay ahayd, 'Talow maxaa helay inantii aan daqiiqad oggolayn in aad ka maqnaato'! Xiise aan markii hore iba haynin ayaa kolka i galay. Shaki weyn ayaan qaaday oo ah, 'waar ma markaad is arag ka codsatay ayay baxsatay gabadhii?' Naftii ayaa bilawday marna in ay ka werwerto, marna ay ka shakido. Siddeed iyo afartan saacadood ayaa isku soo wareegay. Daqiiqad daqiiqad ayaan hadba talefankeeda u garaacayay; bal in ay mar uun furto ayaa naftaydu aad u tamanniyaysaa. Wax dhacay ma ogi. Waan se werwersanahay. Aniga ayuunbaa shaw werweraaya e, waxa dhacay ma yara...

Afar caano-maal inanta warkeedii ma hayo. Arrimuhu way igu cakiranyihiin. Nin hilaw iyo muxibbo lagu beeray ayaan ahaye, saa werwer ayaaban hadda dareemayaa. Qalbigayga xiise aan xad lahayn ayaa u gelay nafteedii. Dhegahaygu waxa ay aad ugu

darsadeen codkeedii. Naftayda ayaaba u buseeshay gabadhii baarriga ahayd ee bixisadu sida fudud ii bartay. Marar ayaan naftayda eersanayaa! 'Bal maxaa kugu watay ee aad ballanta uga dalbanaysay' ayaan isku ciilkaanbiyayaa. In ballantayadii ay waxanba kaliftaan moodayaa. Goor casar ah, abbaaro shantii galabnimo tiiyoo ku dhawdhaw, waxa si kadis ah u soo dhacay talefankayga gacanta. Waan la booday! Tasmiin ayaan moodaye, hungo ayaan la karaar jabay. Ma garanaayo lanbarkan. Macno iima samaynaayo in aan ka qabto iyo in kale. 'Qushi, bal hadda ka qabo' ayay naftu igu durraamatay. Ka qabtay. "Hello, walaal iska warran Axmed?" Ayaa laygu bilaabay. 'Nabad iyo wanaag walaal, waa tuma?' ayaan ugu hal celiyay. "Walaal waa tu aanad garanayne, Tasmiin ayaa igu tidhi 'la hadal' sidaas ayaanan kuula soo hadlay, waxaanan kuu sheegaayay in inantii Tasmiin ay jabtay! 'JABTAY AAAAA?' "Haa walaal way jabtay!" 'Halkee ayay ka jabtayna walaal?' "Lugta ayay ka jabtay, halkaas kubka iyo kuraantu iska galaan'. Naxdin weynaa! Aniga oo degdegaaya ayaan haddana u raaciyay, 'Oo maxaa jabiyay walaal?' "Walaal baadka tiiyoo ka soo baxaysa ayaa marmarku u siibtay!"

Intaas haddii aannu is waydaarsannay inantii isoo wacday, taleefankii dhigtay. Nabar ayaan fakaloon ku maqnaa. Waxyaabo badan ayay maskaxdaydu is weyddiinaysay oo xaaladda inanta ku saabsanaa. Ma

deggana naftaydu. Warkan inantu ay ii sheegtay ayaa isaguna oog aan damayn laabtayda ku sii hurinaaya. Wax ay saacaddu socotaba, bacda maqrib ayaan mar kale wacay lanbarkii inanta kale iga soo wacday, maadadama kii hore ee Tasmiin xidhanyahay. Muddo ka dib, haddii dhawr mar ay iga qaban wayday, markii danbe ayaa Tasmiin lafteedu lanbarkeedii iga soo wacday. Farxad ayaan la boodbooday sida carruurta.

"Hello, Axmednuur ii warran walaal?" 'Fiicne adigu ii warran walaal?' Ayaan gu jawaabay. 'Maansha Allah, walaal waan fiicnay hadda' ayay iigu tiraab celisay. Intaas kolkaannu is waydaarsannay, ayaan ka waraystay xaalkeeda iyo sida wax u soo gaadheen. Inta aanay iigaba warramin waayaheeda, waataas inantii oohin qabsatay! Waar illayn tanoo kale! Qof kula jooga ama aad si wacan u taqaan ayaad af garataa waxa aad ku aamusiinayside, halkan waanigaas baroorta ku dari gaadhay! War kale ma jiro e, sasabaad iyo suubaalin saan ugu waday, ugu danbayntii ku guulaystay in aan aamusiiyo, waxa jirana ay ii sheegto. "Walaal horta waatan kuu sheegay arrinkii naftayda khuseeyay ee wadaadku ku taliyay. Sidaa awgeed, hooyaday iyo habaryartay ayaa igu khasbaya in la ii guuriyo wiil habaryartay dhashay, anna arrintaas waan diiday. Maalintii aan jabi doono, hooyaday ayaa ila soo hadashay, waxaanay ii sheegtay 'in aan sii diyaar garoobo—oo la ii dhisi doono habarwadaaggay,

iyaduna soo socoto, wax walbana diyaar yihiin. Cadhadii aan ka qaaday arrinkaas, ayaan go'aansaday in aan gurigaba ka baxsado. Ka dib baadka ayaan galay anigoo aad u cadhaysan, soo bixitaankiinaa waanigaas siibtay ee sidaa ku jabay! Halkaas ayaa miir iigu danbaysay, waxan soo baraarugay uun anoo dhakhtarka aalla, lugtana nuuradi igaga xidhantahay, dad i dul fadhiyaan..!

Halkaa kolka ay sheeko marayso, ayay haddana oohin kale qabsatay! Waan aamusiin kari waayey illaa uu naqaskii ku dhagay oo ay hadli kari wayday oohin darteed! Anoo anfariirsan baan dhigay mobilekii, haddana isla daqiiqaddiiba waan ku celiyey. Juuqna, ha iska dhaca uun... Markii mobilekii ay qaban wayday waan ka daayay garaacii. Saacaddu markay ahayd 2:30 habeennimo, ayay isoo garaacday Tasmiin. Wada hadalnay xilligaas. Intaan dejin karayeyna dejiyey. Laakiin markay xoogaa joogtaba way ooyeysay. Xal aan ku xakameeyo oohinteedana wali ma hayo. Cabsi badan ayaa i gashay. Inantu waxan ay ka ooyayso ayay wax badan naftaydu iska weyddiisay. Wax aan naftayda jawaab uga dhigo wali ma hayo... Muddo illaa laba toddobaad ah ayaannu sidii ku wada hadlaynaa. Subax walba iyada ayaa ii kicisa salaadda subax. Walaw habeenkii oo dhanba aannu wada hadlayno, oo inta aannu jiifsannaaba ay waxyar tahay, haddana marnaba may seegi jirin inay ii kiciso salaadda. Subax danbe

ayaanay inantii iba soo wicin ina kicin! Barqo danbe oo aan soo kacay haddii aan wacay, weyddiiyayna waxa ay saaka ii kicin wayday, ayay ii sheegtay in lacagta ku hadalka ee talefanku ay ka madhnayd. (Waligeed waa markii koowaad ee aan ka maqlo lacag ayaa iga madhatay) Intii aannu wada hadlaynay ayay gabadh yar ku tidhi, "Cid ha u sheegin, hana tusin lacagta e, hooyoo dukaanka 20$ oo ku shubasho ah iiga soo iibi!"

Mar haddii inanti jabtay, anna arday aan ahaa wakhtigaas, aanan bixinna karin lacagta ku hadalka ee intaa leeg, waxay igu tidhi, "Nationlink innoo soo fur". Qofkii ku hadlay ayaa garanayee, shirkadda Nationlink waxay lahayd laba Sim Card oo la isku furan jiray, taas oo bishii $5 lagu shuban jiray, 24 saacadoodna lagu hadli jiray. Labadii Sim Card ayaan soo furay. Mushkiladi waxay ka taagantahay sidii aan ugu gayn lahaa! Arrintaas anoo ka fikiraaya, ayaan la kaashaday iyada warkaas. Sheeko badan kadib, ii sheegtay in ay jirto gabadh yar—oo 10 jir ah, taas oo joogta gurigooda, ayna u dirato waxyaabaha yaryar ee ay ka qarinayso habaryarteed, sidaas awgeed in ay taas yar iisoo diri doonto ii sheegtay, anna aan ugu soo dhiibo kaadhka shirkadda cusub. Sidii ayaan isku waafaqnay. Ii tilmaantay xaafaddii ay deggenayd. Halkii ay ii astaysay ayaan soo joogsaday. Ilbidhiqsiyo gudahood ayay iigu timid gabadh yar oo dheer, taas oo illaa xad qurux badanayd. Inta aan u dhiibay bushqad yar oo

hadyad ah, taas oo ay ku jiraan Sim Cardkii, fargal iyo sawir kur ah oo anigu aan leeyahay, ayaan iyadana ka guddoomay bushqad (Involope) ah oo ka yara weyn tayda. Markii aannu sidaa u kala guddoomannayba is nabdaadinnay. Ilbidhiqsigii ay iga dhaqaaqday tii yaraydba, il iyo baal meel ay martay arki waayay! Amankaag; aar talow maxaa yartii la booday? Haddana niyadda iska idhi waar 'waar waa ciyaal iyo caadaood—oo, malaa way carartaye haysku sii mashquulinnin. Wax yar markaan ka soo dhaqaaqay ayaan istaagay meel fooq hoostii ah, waxa aan furay bushqaddii ay hadyadda iigu soo dhiibtay Tasmiin. Sidaadan u furay bushqaddii hadyadda ahaydba, waxa ishaydu ku dhacday ubaxa cas ee noociisa oo kale weligay aanan xataa filim ku daawan. Far dhexada farahayga oo laba jeer la isku daray ayuu dharar leegyahay. Baallaha waa casaan. Urtiisa yaabka leh ayaan sanka durbadiiba saaray. 'Haax, ala udgoonaa..' ayaan cod la maqli karo ku idhi, waligay kaas oo kale. Dhawr goor oo kale inta aan urtiisa yaabka leh sanka ku nuugay, ayaan u jeestay alaabtii kale. Mar kale ayaan sawirkeeda quruxda badan aan kor ula soo booday. Masha Allah, ala inantu qurux badanaa! Laakiin wajigeeda oo sawir ah in aan arkaayo, ee aanan si dhab ah u hor taagnayn ayaan hilmaamay. Xubin ka mid ah jidhka aadamaha in uu wejigu yahay ayaan xusuustayda ka fogaatay. Markaas ayaan nabar ku dhaygagay sanqaroorkeedii iyo indhaheedii quruxda

badnaa, anoo midabkeeda ka helay! Kartoon yar oo xanjo ah ayaa hadyadda kaalintiisa kaga jira. Inta aan soo qabtay, dhaayahana aan aad ugu dhaweeyay, ayaan gadaashayda danbe ka tuuray anoon furinba. Mar kale ayay ishayda soo jiidatay gacanta caagga ah ee madaw, taas oo dhudhunkayga in lagu soo qiyaasay aad moodaysay, iyana gacanta bidix 'jaf' siiyay. Wixii aan ka qaadanaayay inta aan jeebadda ku gurtay, ayaan galkii alaabtu ku jirtayna bartii ku tuuray.

Wakhtigu waa noo samaa. Wax mushkilad ah oo danbe dharaarahan ma anu arag. Haasaawahayagu si wacan ayuu noogu socdaa. Dhaawaca ay qabto ayaan layl kastaba la murugoodaa. 'Ax' marka ay tidhaahdo, ayaan 'Hee gacaliso ugu jawaabaa'. Xiisahayaga ayaa cirkaas maray. Maalintay jabtay, haddii aannu ka joogno afar bilood oo buure ah, lugtiina ay si wacan u soo kabmayso inantii, ayay maalin danbe kala dhacday! Xanuunkii ka soo gaadhay dhaawacaas labaad ayaa maalmo suuro gelin waayay in aannu wada hadalno. Mar kale dib loo kab. Halkiina sheekada ka sii anbaqaadnay. Imtixaankan nagu wareegaya aad uga werwernay. Oohinteeda aan wakhtiga lahayn sasabaad joogto ah la miciinsaday. Intii ay jabniinka danbe ku jirtay, ayay dharaar habaryarteed u qaadday dalka Jabuuti. Sidaadii diyaaradda loo saaray, ayaa mar qudha miyir laga waayay gabadhii! Anfariir awgeed ayaa lagu soo xoomay. Ilbidhiqsiyo haddii ay isla maqnayd, ayay

mar qudha ku alaladday, 'Axmednuur, gacaliye... Ila hadal Axmed... Xabiibi...' Naxdin ayaa dadkii afka gacmaha wada saaray. Sidii hadday inyar ahayd, ayay mar kale caadi ku soo noqotay. La socoy. Jabuuti markay galeen, ayay habaryarteed isoo wacday aniga. "Hello, Axmednuur saw ma aha?" 'Haa walaale waa tuma?' ku jawaabay. "Waa Tasmiin habaryarteede; hoo hooyo la hadal way ku doonaysaye!" Ayay igu tidhi! Intaas markay tidhi, ayaa naxdin wadnuhu isoo dhaafi gaadhay. 'Oo habaryarteedna yaa kuu sheegay' ayaan is weyddiinayaa. Anoo dhaygagsan, ayay fajicii iga toosisay Tasmiin, kolkii aan maqlay iyada oo leh, "...Miyaanad i maqlayn walaal?" Sidii qof hurdo ka toosay inta aan soo booday, ayaan degdeg inantii ula hadlay. Salaan wax aan ahayn in aanay iila socon ayay ii sheegtay, waxaana ay igu sii dardaartay in aan jacaylka dhexdayada aad u ilaaliyo, iyaduna ay si dhaba ii jeceshahay oo aanay rabin marnaba in aan ka fogaado. Muddo aan badnayn haddii ay Jabuuti joogtay, ayaa markii danbe Hargaysa lagu soo celiyay. Siddeed bilood oo danbe ayay qaadatay in ay kabanto inantii. Kabantay. Alle mahaddii siday ii sheegtayna si wacan u taltallaabsatay. *(Ma arag ilayne, waa sida ay iiga sheegto talefanka)!*

Wax ay saa ahaataba, dharaartii danbe ayay ila soo hadashay anoo xiisad ku jira. Sidaadii aan uga qabtay taleefankaba, durba dhegahaygii inta ay jiidhay

oohinteedu, ayay qalbiga meel aad u shishaysa ay 'hubuq' igaga tidhi. Waan naxay! Inta aan gariiray ayaan xiisaddii ka soo baxay anoo aan juuq odhannin! Jaamacadda dhexdeeda goobaha la fidhiisto middood inta aan imid, ayaan si dareen leh hadalka ugu celiyay anoo gariiraaya. Muddo haddii hadalka aannu isku celcelinaynay, ayay ii sheegtay in haddana loo sheegay inaabtigeed in loo guurinaayo. Amakaag kale ayay igu noqotay. Hadda Tasmiin muddo sannad iyo dheeraad ah ayuu xidhiidhkayagu marayaa, walina il iyo baal ma saarin, guri ay magaalada ka gashana si rasmiya uma arkin. Wax ay hadalkii waddaba, ugu danbayntii waxa ay iga codsatay in aan guursado! Hadalkaasi aad ayuu iigu adkaaday. 'Sidee ayay ku dhici kartaa wali anoon ku aragba in aan kuu ballan qaado guur' ayaan weyddiiyay. 'Dhib ma leh, wax walba oo guurkeenna ku baxaaya anaa bixinaaya, kaliya i meherso uun horta si aan uga badbaado wiilkaas aanan rabin' ayay kaga jawaabtay weyddiintaydii inta—ay ka Lashay! Hadalkii ayay sida roobka hadba dhan igaga keentay. Ugu danbaynna anoon is ogayn ayaan ka aqbalay in aan guursado! Hadalku kolka uu dibnahaygii soo dhaafay ayuunbaan is ogaaday! Naxdin ayaan hadal kale tahli waayay! Iyada oo ku faraxsan ballanka aan galay, ayay igu tidhi, 'Innoo xisaabi lacagta ku baxaysa guurkeenna!' Anoo warqad iyo qalin kula kala dhigdhigaaya kharashkii guurka ayaan mar kale is arkay! Sidii qof laydh ka go'ay, inta

aan si naxdin leh u soo booday, ayaa haddana inta shooggii la igu celiyay, aan dib u fadhiistay. Xisaabtii wadnay, ugu danbayna ku heshiinnay *'Aroorta soo bax, aynu halkaas iskugu nimaadno, hawlahana sidaas ku galno'*. Halkaas marka aannu arrin isla dhignay, ayaan anoo dhididsan xiisaddaydii ku noqday. Saa fasalkiiba qof ma joogo e, shaw mar hore ayaa nusasaacihii loo dareeray! Iska baxay. Habeennimadkii halkii sheekada ka sii wadanay. Subaxdii kolkaan wacay, mise lanbarkii gabadhuba waa xidhanyahay! Ala haya, waar bal tanoo kale yaa arkay. Maalin qaaday, oo laba qaaday, oo haddana saddex ku dhawaa intii uu xidhnaa taleefankeedii. Dhaygag ayaa dharaarahanba i dilay. Dhabannada inta aan shanta saaro, ayaan hadba la dhukaamayaa waxa dhacaaya ee aanan dhan ay u socdaanba garanaynin. Habeen saddexaadkii, abbaaro 11:00 ayay si kadis ah ii soo wacday. Waxa helay haddii aan weyddiiyayna, in ay mar kale xanuunsatay—oo wadaadkii loo geeyay, laguna sheegay in uu sixir haysto' ayay ii sheegtay! Af kala qaad ayay haddana igu noqotay sheekadeedu. 'Oo markaa yaa ku sixray ayuu yidhi wadaadku? Ayaan is kala garan waayay goor aan si fudud u idhi. 'Norway markaad joogtay baa lagu sixray' ayuu yidhi... Ka soo gudubnay sheekadaas. Hawshii ilama ay soo qaadin, anna waxba kama weyddiine, 'Eebbaw illawdaa' ayaaban niyadda ka lahaa culayskeeda ma karee. Sheekadii oo sidaas ah, ayaanay

haddana isoo wicin dhawr maalmood oo kale. Aniga oo yaabban, inantan arrimaheeduna aad ii murjiyeen, ayay galabtii danbe iga soo wacday lanbar aanan garanayn. Sidaa markaan uga qabtay, judhiiba waxay igu bilawday, "Gurigii waa la iga wareejiyey. Waxa la i geeyey guri cidlo ah, waxaana la igu yidhi, 'waa gurigii lagugu aroosayey'. Waardiye albaabka taaganna waa la igu ballamiyay. Albaabka guriga in aan soo istaago layma oggola. Mobilekiina waa la iga qaaday ee sidaa ula soco..." Maskaxdaydani waa wareertay markaa! Waxa qorshaheedu yahay ee ay damacsantay haddii la waardiyaynaayo markaan weyddiiyay, ayay iigu jawaabtay, 'Walaal guriga wiil yar ayaa jooga, isaga ayaanan isku dayayaa in aan sasabto oo muraadkayga ka dhaadhacsado. Hadduu i yeelo, lacag inta aan u soo dhiibo ayaan kuu soo diriye, adoo raalliya moobil iyo kaadh ii soo iibiyoo, iiguna soo dhiib walaal...' Intaas hadday ii sheegtay, ayaan anna ka aqbalay codsigeedii, una sheegay wixii awooddayda ah in aan u fududayn doono.

Afar cisho oo danbe ayaanan warkeeda helin. Aniga oo la tacajabsan sidan ay wax u socdaan, ayay galabtii shanaad abbaaro shantii galabnimo lanbar kale iga soo wacday. Waxay ii sheegtay in wiilkii yaraa oggolaaday, galabtana ay u soo dhiibayso lacagtii, meesha caynkaas ahna in aannu aniyo wiilku iskugu nimaadno ayay iga codsatay. Waa si wanaagsan intan

ugu jawaabay, ayaannu is nabadgalyaynay markaas. Arrinkaygu yaab ayuu ka bixi la'yahay. Su'aalo ciidda ka badan oo aanan jawaab u hayn ayaan maskaxdaydii ku daaliyay. Niyaddayda ayaa igu leh, 'tolaw miskiintan yar maxaa laga ciqaabayaa?' haddana mar kale ayay naftu is weyddiinaysaa, 'tolaw xaggee ayay wax ka qaldanyihiin'. Beliyo baas ma maqli jirtay, allaylahee malaha tanaaba u dhaw! Bacda maqrib ayaa wiilkii yaraa iigu yimid bartii aannu ku ballannay. 100$ ayuu sidaa. Inta aan kaxeeyay, ayaan Hadiya meheradda la odhan jiray moobil wanaagsan uga iibiyay. Xarunta shirkadda Nationlink oo iyana aan kaba fogaynna aan Card kiina uga furay, sidaasna wiilkii yaraa ku nabadgalyeeyay cawayskaas. Marku iiga dhaqaaqay xagga basaska laga raaco, ee inyar aan sii eegaayay ayuu libdhay. Fogaan arag uu igaga qarsoomo dadka ma uu socone, durbadiiba waxa qariyay ayaan la yaabay! Markaas ayuu shaki i galay! Waxa aan toos u soo xusuustay yartii habeenkii hore mar qudha aan waayay. In wax weyn oo aanan dhaaddanayni ay jiraan ayaa habeenkan iisoo baxday. Shakigii horeba iigu biiray, ayaa mar kale haddana igu sii ballaadhay habeenkaas!

Inantii markii mobilekii loo geeyey, ayay isoo wacday iyada oo beddalan! Way hiqlaynaysaa! Oohinteedu mid iyo maaha e, sida ay u ooyaysaa qalbigaaga ayay dhaqaajinaysaa. Dhawr goor haddii aan weyddiiyay waxa ku dhacay, ayay ugu danbayntii igu

tidhi, gabadhii Norway joogtay, ee markii hore isoo korisay, carruurtayda kalana dhashay, *'Hooyadaa maaha'* ayaa laygu yidhi! Waxa ay ku hadlayso ayaan si caadiya u garan waayay. Dhawr goor ayaan su'aalay waxa ay uga jeeddo hadalka. Wixii hore ay ii tidhi wax ka duwan haddii aan maqli waayay, ayaan ku idhi, *'Oo sidee ayay ku dhacday markaa taasi?'* Sheeko dheer ayay halkii iiga gashay, ugu danbaynna waxa ay tidhi, "*Hooyaday markii ay i umulaysay waa la igu qalay, markaa way umul-aroortay, carruurta aan moodaayay in aan isku aabbe iyo isku hooyo nahayna, kaliya wiil Maraykanka jooga oo iga weyn ayay hooyaday dhashay, inta kale islaantan hooyada ii sheegatay ayaa dhashay…"* Aniga oo anfariirsan, ayaa aan si cadho ka muuqato ugu idhi, *'Oo intaas oo dhan sideed wax u ogaan wayday ee maanta keenay in aad ogaato?'* Iyada oo dhanna iga dejinaysa, dhanna teedii cuslaysay ayay igu tidhi, *"Maanta waxa arrinka la iigu sheegay, abtiyaashay baa yidhi, 'mar haddii inantii la guursanayo waa in loo sheegaa hooyadeedii dhabta ahayd, si aanay mar dhaw ceeb innoogu noqon, marka qoyska guursanayaa ogaadaan in ay moodayso in islaatan korisay hooyadeedii ahayd' sidaas ayaana la isla qaatay, anigana laygu sheegay"!*

Habeenkaasi walbahaarkiisa ayuu lahaa. Cadho inta aan madoobaaday, ayaa aan karaahiyaystay wax walba ay igula hadlayso inantu! Shakigii waayadanba igu hadhaysnaa, ayay hawl lama filaanana iigu dartay. *(Bac ayaa marka igu xidhantay)!* Wax kaliya oo aan sameeyo

ayaan garan waayay. Af xumo iyo cay igama gaydo. Aamminaad iyo daacadnimo danbana anaa ka soo istaagay. Aniga oo hadba maskaxdayda dhan ula shawraaya, ayaan maqlay codkeeda leh, *"...maanta adaa iigu jira halkii hooyo, adiga ayaanan kaa haystaa wax wehel ah oo dhab ah, waan ku baryayaaye ha igaga tagin ninkan la igu khasbaayo. Axmedaw arrinkayga ha fududaysan walaal..."* Aniga oo wax aan ku hadlo garan la' ayaan ugu jawaabay, *'Wax waliba way innoo hagaagi doonaane; niyadda khayr u sheeg Tasmiin'*. Muddo ayaannu si teelteel ah u soo wada xidhiidhaynay. Habeen kale ayay ii sheegtay in walaasheed iyo aabbaheed ay rabeen in ay dalka yimaaddaan. Walaashan ay sheegayso xagga aabbe ayay ka walaal yihiin) laakiin walaasheed ay umushay oo sidaas ay ku baaqdeen. Hawlaheeda ayay u socdeene, in ay sidaas muddo ku yar hakanaayo guurkii ayay ii raacisay. Laba habeen kolkay ka soo wareegeen habeenkan, ayay haddana ila soo hadashay iyada oo dhiillaysan! Waxa dhacay haddii aan weyddiiyay, waxa ay ii sheegtay in walaasheedii umusha ahayd ay geeriyootay! *'Alle haw raxmo'* inta aan ku idhi, ayaanu halkii gellin murugada ku haasawnay. Muddo haddii laga soo wareegay wakhtigan, ayaa aabbaheed yimid dalka. Kolkii ay ii sheegtay imaanshaha aabbaheed, halkii aan ka eegayey in uu dhibkeeda hoose u eego, oo war fiican ay iisoo sheegi doonto ayay tidhi, *"Aabahay waxa uu yidhi, 'si aad u caafimaaddo, waa in aad guursataa*

inaabtigaa isaga ayaa la garanayaaye, aabbe warkaas war ha ka soo celin' ayuu igu yidhi..." aabbe waxa aan ku idhi, *'arrinkaas ma yeeli karaayo'* balse waxa uu iigu jawaabay, *'Waad ku khasbantay'*.

Wax yarba haddii habeenkaas laga joogay, wiilkii ay ilmaabtiga ahaayeen ayaa loo meheriyay inantii, hawshaasna sidaas ayaa lagaga faroxashay. Dhawr cisho oo danbe haddii aanan arag, ayay isoo wacday maalin danbe. *'Nabade nabad sheeg'* haddii aan ugu jawaabay, ayay *'Wanaag iyo walbahaar adduun'* iigu jawaabtay. *'Walaaca iyo walbahaarku miyaannu hadhayn sawtay hawluhu dhammaadeen'* ayaan ku idhi. Qosol war dareensiin ah inta ay i maqashiisay, ayay si dheeldheel ah iigu tidhi, *"Maxaa dhammaaday inaadeer, waa la i meheriyay uune, ninku iguma soo dhici karo, agtayda in uu yimaaddana waa loogu taag waayay. Dadkii oo dhan ayaa hadda la yaabban; cabsi ayuu iga qaaday aan xad lahayn!"* Hadalkan kolka ay i leedahay, ayaa laftaydii aan cabsi dareemay! Hadalkeeda aad ka dareemayso xataa in ay aniga ii hanjabayso. Codkeeda aad mooddo in uu isa soo beddelaayo ee kii ragga u soo eeg! Hadallada cadcad ee aanan hore ugu aqoon iyo igu soo dhiirranaanteeda in ay i canaananayso aad mooddo anoo ka anfariirsan, ayay cod aad u hooseeye inta ay warka iigu beddeshay, waxa ay si gaaban iigu tidhi, *"Waa lagu dilayaaye is jir Axmedow. Aad isku ilaali, xaafaddayada ayaa rabta in lagu dilo maaddaama aan ku*

jeclaadaye, aad iskugu badnaw..." Intaas kolka ay igu tidhi, ayaa aan hal mar hawada iskula booday—oo aan ku qayliyay, *'YAAAAA, ma anaa la i dilayaa! Oo maxaa dhacay ee laygu dilayaa dee...?'* Marar badan ayaan ku celceliyay waxa ay ku falayaan reerkoodu dilmashadayda. Iyada—oo ooyaysa ayay iigu jawaabtay, *"Reerkayagu markay ku ogaadeenba way iga kaa ilaalinayeen..."* Iyada oo hadalkeedii wadata, ayaa inantii ooyaysay marna ii digaysay ay haddana cod kulul ii saartay. Aniga oo yaabban, wax aan ku hadlana garan la, ayay dhegtaydu maqashay ninka i leh *(Hadda waa nin qofku) "Waaryaa naagtan anaa jecel ee baddeeda maad ka bixi mise wallaahi waa aan ku dilaa?"* Naxdin inta aan qaboobay, ayaa aan dhegta ka qaaday taleefankii oo aan lanbarka eegay. Wallaahi waa lanbarkeedii uun! Dhegta ayaan mar kale saaray, mise nin ayaa ka dhex hanjabaaya taleefankii. Cod aad onkod mooddo oo aan dhegahaygu u adkaysan karin ayuu igu haaraamayaa! Sidii qof si wacan ii garanaaya ayuu iila hadlayaa. Mar kaliya hanjabaadda iyo digniinta ii kala joojin maayo. Inta Alle yaab ii keenay, ayaan is idhi talefanka ku jar. Haddana awoodda ayaa ii saamixi wayday in aan ku jaro. Markan arkay sida xaal yahay, inta aan ragannimo iska baadhay ayaa aan ku idhi, *'Waar adigu kumaad ahayd, maxaad se ka hadlaysa?'* Itaasi hadday afkayga soo dhaaftay, ayaa wadnuhu baqe ila gariiray. Aniga oo cadho madaxu i qarxi gaadhaayo, ayaa aan maqlay

kiiyoo leh, *"Cabdiqaadir baa la i yidhaahdaa. Dalka Norway ayaa aan joogaa. Gabadhan aad iskala hadlaysaa waa jacaylkaygii. Haa waa runtay, waa jacaylkaygii. Iyadaa i diidday, anna sidii baan u jecelahay. Nin kale ma heli karo marna, haddii aad nolosheeda ka dheeraan waydana sidaan kuu galo waa la arki doonaa..."*

Hadal kolkii uu kala joojin waayay, ayaa aan xanaaqay oo aan ku idhi, *'Hadday ku diidday maxaa ku daba dhigay haddaa? Waar sida carruurta nin loogu hanjabi karo ma ihiye, wax kale ka sheekee...'* Inta uu aad u xanaaqay, ayaa uu cirkaas ka qaliyay oo jallaafo iyo hadimo wixii uu dhib marsiiyay ii taxay, *"Wax walba anaa ku sameeyay oo dhib ah. Markii ay jabtay anaa riday oo jabiyay, waayo aday kuu soo baxaysay. Xaafaddooda anaa ku diray si aanay fursad u helin ay ku baxsato. Aniga ayaa nacsiiyey inaabtigeeda loo meheriyay, oo maba soo hor istaagi karo—oo wuu ka baqanayaa, adna haddaad hawsheeda ka bixi waydo naftaan ku dhaafinayaa wallaahi; arrimaheeda ka bax"*. Inta yaab Alle iskugu kay keenay, ayaa aan ogaaday belada inanta ku maraniba in uu ninkan yahay. Si deggan inta aan hadalkii ugu dhigay ayaa aan ku idhi, *'Waayahaye Cabdaw, waan ka baxayaa hawlaheeda e, caawa uun isku kaayo yar daa aannu wakhti kooban wada hadalnee!'* Waayahay iyo diiday midna isaga oo aan i odhanin, ayaa aan maqlay codka sida daciifka ah ii leh, *'Walaal maxaa igu dhacay?'* Hadalkeeda kolka aan maqlay ayaa aan aad u xanaaqay. Inta aan cadho is kala garan waayay ayaan

ku idhi, *'Annakaad kolba waji noola imanaysaa. Naa ma ilmo yar ayaa aad ii haysataa oo kolba wax looga sheekayn karo?'* Hadallo qalqallafsan haddii aan ku boobay ayay oohin qabsatay! Siday u ooyaysay ayaa naqasku qabtay oo aan hadalba ka maqli waayay! Taleefankii ayaa aan ku dhigay. Haddana isla markiiba waan ku celiyay. Nagba, waataase bal cid ba ha kaa qabato taleefanka. Markii aan ku daalay ayaa aan iska dhigay. Ku dhawaad saacad ka dib ayay igu soo celisay. Markii aan ka qabtayba, waxa aan weyddiiyay wixii dhacay. Bilaw illaa markaas aannu joogno ayay sheekadii ii taxday. *"Ninkani waa ninka ishu igaga dhacday. Waa ninka markii layga dabiibi kari waayay la damcay in la ii guuriyo qof kale. Waa ninka wax kaste oo noloshayda u soo kordhaayaba is hortaaga ee baabiiya. Markan ku lahaa wiilkii inbtigay ahaa wuu igu soo dhici waayay, dee anigu maxaan yeeli karaa ninkaas ayaa iska kay hortaagay. Waa ninkii i jabiyay, ee xaafaddayada iyo dadkaba ila collaysiiyay. Waa ninka raba adigana in uu ku dilo imminka..."* Sheekadaas dheer kolkay ii gashay, ayay naftaydii soo yar dabacday marka. Waxa ay ila noqotay in sida ay sheegaysaa ay dhab tahay. Waxa aan u qaatay in tuhunkii iyada ii galay ee aan mooday in ay jin tahay aan is moodsiiyay. Waxa qalbigayga galay naxariis iyo jileec uu ka damqanaayo dhibka gabadha haysta. Aad ayaa aan uga xumaaday mar kale waxa haysta gabadhan miskiinta ah. Waxa ay ila noqotay in dhibkuba uu ninkan uun yahay. Waxa

aan xaqiiqsaday masiibada isha iyo cawridu leedahay. Markaas ayaa aan isku qanciyay anna in aanan il iyada ka kasbane, intii karaankayga ah aan u dabacsanaado. Habeenkaas aniga oo werwer hadli kari la' ayaa aan taleefankii dhigay.

Markii aan taleefankii dhigay, ayay igu soo dhacday ballantii uu ninku igaga tagay. Cabsi xoog leh ayaa aan markaas dareemay. Waxa ay ila noqotay in uu weerarrada xaggayga u soo wareejin doono. Waxa aan ku tashaday in aan xidhiidhka gabadhan halkaas ku joojiyo. Walaac hor leh ayaa markanna ii bilawday. Qof aad arkayso ayaa la iska ilaaliyaaye, wax aan la arki karin ayay *'iskajir'* igu leedahay Tasmiin. Dhulkaa ii dhaqaaqay. Habeenno badan oo aannu inantii soo wada hadlayno kolkaan is arkay, ayay cabsidii ballanqaadku igu sii korodhay. Adkaarta in aan gaashaan ka dhigto ayaa aan ku dedaalay. Sidii ayaanan muddo danbe aan kula sii hadlaayay inantii Tasmiin. Muddo kolka arrini ay sidaas ahayd, ayay ila soo hadashay habeen aniga oo xaafadda iska jooga. War naxdin leh oo ay igu salaantay ayay iigu sheegtay in aabbaheed gaadhi la dhacay! Naxdintii aan la soo hinqadayna tiiyoo aan dhammaan, in uu geeriyooday oo aaskiisa loo dareeri doonana ii raacisay. Markiiba niyaddayda ayaa uu ku soo dhacay ninkii ballanta ila galay! Aad ayaa aan habeenkaas u cabsaday. Inyarba tiiyoo aan ila hadlin ayay taleefanka dhigtay. Halkii ayaa

caloolyaw hor lihi igu abuurmay. Waxa igu soo degdegay hadalkii uu ku bantookhaayay kolkii uu lahaa, *'Ciddii u soo dhawaataba anaa ka dheereeya. Ma jirto, mana heli doonto cid ay naxariis ka helaysaa...'* Inaas markan xusuustay, ayaa aan dhawr goor shayddaanka iska naaray. Aayaatul kursiga inta aan ku laba celiyay, aniga oo ka fikiraaya xilligii la isoo gaadhi lahaa ayaa aan seexday habeenkaa. Habeenno iyo dharaaro cabsi badan ayaa aan galay. Dhukusaad iyo dhabar gaabni ayaa aan waddooyinka ku maray. Baalla-daymood iyo babbiso nafsi ah ayaa la ii saaray. Aniga oo sidaas ah, ayaa aan dhanna kala hadlaayay inanta.

Hadda sheekooyinkii hore waa ay is beddaleen. Niyaddaydu quus ayaa ay ka istaagtay hadallada inantan. Sir iyo caadba waxbaan u su'aalay, dhan se aan u saaro ayaa aan garan waayay marnaba. Wax sax ah oo nolosheeda ku saabsan ayaa aan sinaba uga heli waayay. Tiiyoo xaajo halkaas marayso, ayay dharaartii danbe igu tidhi, *"Axmednuuraw maanta waa aan ku arkay markad jaamacadda joogtay!"* Inta aan soo booday, ayaa aan ku idhi, *'Oo haddaa maxaad iila hadli wayday walaal?'* Markaas ayay igu tidhi, *"Iga raalli ahaw walaal, ma awoodo in aan kula hadlo, se anigu mar walba waa aan ku arkaa inta badan maalintii, aragtidaada ayaana ii ah nafis iyo naxariis aan naftayda ku qaboojiyo...!"* Inta aan yaabay, ayaa aan bilaabay su'aalo la xidhiidha sida ay ii taqaanno in aan weyddiiyo, maaddaama ay sheegtay in ay maalin walba

i aragto, si wacanna ay ii taqaanno iyadu. *'Horta waxa aan ku weyddiiyay, maaddaama aad maalin walba sidan ii aragtid, sidee ayaanan kuu garanayn anigu walaal?' "Maya wallaahi, adigu ima garan kartid, laakiin anigu adiga, carruurtiinna reerkiinna iyo xataa gurigiinna ayaa aan aqaanaa..!"* Intaas kolka ay tidhi, ayay igu soo dhacday sibiqdii aannu isku barannay. Kolkaas ayay niyaddu mar kale tidhi, *'Wallaahi inantani malaha waa xaafadda—e, waa lagu tijaabinaayay—e dabinkaa waad ku dhacday'*. Berigaas na waxa jiri jiray in wiilka aan dumarka u furfurnayn, ay habluhu mar walba isku dayi jireen in ay si uun uga hadliyaan oo xogtiisa u helaan; taasoo kale in ay igu dhacday ayaa aan u tuhmay. *'Horta taleefan ayaynu si kadis ah iskaga barannaye, ka hor miyaa aad i taqaannay?'* Ayaa aan mar kale weydiiyay. *"Haa, maalin aniga iyo laba hablood oo kale annaka oo wada joogna, ayaa aad na salaantay. Markaas ayaa aan gabadh hablihii ka mid ah ku idhi, 'wiilkani wa ayo? 'Heli maysid ninkane, saaxiib iska dhaaf warkiisa'* ayay iigu jawaabtay inantii maalintaa. Wacad ku maray anna in aan ku barto…" Inta aan hadalkii ka dhex galay, ayaa aan ku idhi, *'Habluhu kuwee ayay ahaayeenna?'* Markaas ayay igu tidhi, *"Heblaayo iyo heblaayo ayay kala ahaayeen"*. Si wacan ayaa aan u gartay labadii hablood ee ay ii sheegtayba. Labadaba Jaamacadda ayaan wada dhigannaa. Mid Jaamacadda waxa noo dheer derisnimada, ta kalana si wacan ayaannu isku naqaannaa. Weyddiimahaygii ayaa aan sii

yar watay, kolkaas ayaa aan ku idhi, *'Oo haddaad ballantaa gashay, sidee ayaa aad igu ogaatay maalintaad igala hadashay substationka, adiga oo markii hore Kayse la hadlayay?'* Inta ay yar aamustay, ayay iigu jawaabtay, *"Maalin hore ayaa aan kugu arkay adiga oo substationka jooga, maalintaan kula hadlayna, in adiga aad tahay waan ku dareemay!"* Shaki kale oo hor leh ayaa i galay habeenkaasna. Iyada oo hadalka wadda, ayaa aan anna go'aansaday in aan gabadhan faraha kala baxo arrimaheeda oo dhanna aan bartaas ku illaawo, saa macquul maaha la sii socodkeedu. Go'aanka se intaanan qaadan, ayaa aan bilaabay in aan dabogal ku sameeyo gabadhan iyo nolosheedaba. Subaxdii ayaa aan labadii hablood ee ay i tidhi waan wada joognay aan mid ka mid ah u tagay. Nabdaadin ka dib, waxa aan weyddiiyay in ay garanayso gabadh noocaas ah, inta aan lanbarkeedii iyo sawirkeediiba tusay. *'Inantii, waligayna gabadhan iyo lanbarkan toona ma aan arag'* ayay igu tidhi. Iskaga tegay gabadhii. Tii kale ee ay lahayd way wada joogeen ayaa aan Jaamacadda ugu tegay. Sidii si la mid ah ayay igu tidhi iyana. Aniga oo inantii danbe la taagan, ayaaba ay isoo wacday nasiib wanaag Tasmiin. Markan sidaas uga qabtayba, waxa aan ugu dhiibay inantii.... *'Hello'* markii ay inantii ku tidhi na, degdeg ayaa ay ugu dhigtay talefankii. Marar badan oo aan ku celiyayna iga qaban wayday taleefankii.

Mar kale ayaa shaki aan caadi ahayni i galay. 'Ninyaw waxan ku haystaa waa maxay' ayay niyaddaydu

igu wareerisay. Tacajab ayaa aan la go'sanahay. Dhanka kale, in gabadhani aanay qof caadiya ahayn ayaa maalmahanba maankaygu ku muransanyahay. Tiiyoo sidaas ah, ayay isoo wacday gelin danbe aniga oo guriga jooga. Ka qabtay, kuteh *"Waar saaka ma anigaad heblaayo iigu dhiibaysay taleefanka?" 'Oo yaa kuu sheegay in ay heblaayo tahay?'* Ayaa aan kula soo booday. *"Ma qof aan wax la socon ayaa aad ii haysataa, waan ogahay in aad xataa gabadhii kale u tagtay oo aad aniga raadinayso xogtayda e..."* Markii ay dhanna warka u saari wayday, ayaa aan ku dhigay taleefankii, dabeed na iska xidhayba moobilkii. Ma maqli jirtay 'arrinkaas waa loo qaylay' allaylahee waan u seexday! Si aan gabadhan warkeeda u soo af jaro ayaa aan go'aansaday in aan la hadlo inta ay naftaydu awooddo, bal si aan u arko cid ama hawl qabashadeedku in ay taleefankayaga soo dhex gasho. Habeen dhan oo arbaca ah iyo maalin khamiiseed ayaa aan darteed u hurday. Galab khamiis ah oo jimce soo gelaayo ayaa aan si wacan isu diyaariyay. Bacda maqrib inta ay isoo wacday, ayaa aan ka qabtay taleefankii. Nin diyaar ah aan se isku sheegin baa aan ahaye, waxa aan la hadlaayay illaa sallaaddii subax! *'Ax'* iyo *'Ux'* toona hal mar kama maqlin. Cid la hadlaysa iyo cid ay la hadlayso toona ma aan maqlin intaasba. Anigu in aan idhaahdo *'i yar sug adoo khadka ku jira'* mooyaane, iyadu hal mar xataa waxbaan cunayaa, ama musqul ayaa aan gelayaa midna ima ay odhanin. Sii wadnay hadalkii.

Sidaan ula hadlaayay, ayaa salaaddii duhur ee jimcaha la galay. Daqiiqad qudha iyada xataa dabku kama dhicin! Aniga dhawr moobil oo aan dhagaxa u kala beddelaayo ayaa i agyaalla. Dhegtaa i daashay. Indhahaa i cascasaaday. Dhankaan hadba dhulka ku hayo ayaa kabuubyo igu dilay. Sidaas markuu xaal noqday, ayaa aan qaatay go'aan kama danbays ah, waxaana aan naftayda ku idhi, *'qoftan arrinteedu bili'aadminimada waa ay ka baxsantahay, sidaas kaga hadh oo faraha kaga qaad'*. Halkaas ayaanan taleefan lanbarkaygii ku tuuray, xidhiidhkii gabadhaas na aan ku jaray.

Go'aankii Axmed Iyo Gocashadii Tasmiin

Dhawr maalmood ayaa uu lanbarkaygii xidhnaa. Mid kale ayaa aan iska isticmaalaayay muddaba. Wax ay sidaas ahaataba, dharaartii danbe ayaa uu ii yimid nin aanu asxaab dhaw nahay—oo *Cabdirisaaq Maxamed* la yidhaahdo. Shaw dhawr cisho ayaa uu i waayay—e, maalintii danbe ayaa aannu is helnay. Canaan ayaa uu igaga qaadqaaday saaxiibkay. Aad ayaa uu u xanaaqsanyahay. Waxa dhacay haddii aan ka toydayna, *'Wax walba waad ogtaye miyaanad qof dammiir le ahayn, oo il iyo inkaar ka baqaaya. Waar maxaad gabadhan miskiinta ah ka cadaabaysaa?'* Ayaa uu si cadho leh iigu yidhi. *'Ninyaw waxa jira...'* Haddii aan idhi ayaa uu hadalkii iga dhex galay, *"Wixii doonaaba ha jiraane hadda talefankaaga fur inantana la hadal, haddii kale saaxiibtinnimadeena maanta ayaa iskugu danbaysa; wejigayga kula hadal..."* Ayaa uu yidhi. Inta aanan se, *'waayahay'* iyo *'diiday'* mid na odhannin, ayaa uu hadalku naga kululaaday, kolkaas ayuu yidhi, *"Dib kaaga soo ergayn mayo—e, maanta uun wejigayga kula hadal oohinteeda uma dulqaadan karo e!"* Ka aqbalay saaxiibkay. Sidaadan lanbarkaygii hore u furayba, annaka oo saaxiibkay wada taagan ayay isoo wacday iyada oo ooyaysa Tasmiin! Cabdirisaaq Maxamed waa nin aannu aad saaxiib u nahay. Habeenkii ay masjidka anoo jooga isoo wacaysay ayuu ila socday. Hadda muddoo laba sanno ku dhaw ayaanu

gabadha is naqaanne, Cabdirisaaq xogtayda wuu la socdaa. Ma yaqaanno gabadhu cid ay tahay, se marar aan taleefankiisa kala hadlay iyo marar aan iyaga is barayba waa ay jirtay. Halkaas ayaa ay ka haysatay taleefankiisa, ogaydna xidhiidhka saaxiibtinnimo ee dhexdayada yaalla. Cabdirisaaq ayaa aan isku dayay in sida wax ay u jiraan aan u sheego. Wuu iga diiday haba yaraato—e wax cudur-daar ah in uu iga dhegaysto. "*Adiga oo la hadla mooyaane, in aanan eray kaa dhegaysan ayaa igu wallaahiya…"* Ayaa uu dhaar iiga 'xagaf' siiyay. Inantu muddadii aan ka maqnaa aad ayay u xanuunsatay. Waa siday ii sheegtaye, haddii aanay codkayga maqal waxa diiqad ku abuura ninkii Cabdiqaadir ee jeclaa. Ma hadli karto. Kolal ayaa uu cunaha ku dhegaa oo ay neefsan kari waydaa! Wiilkii inaabtigeed ahaa waddo ayaa uu ka mariyay. Nolosheedu waa in ay cilaaj taallo, ama waa in ay aniga ila hadasho. Intaas wixii ka soo hadha Cabdiqaadir ayaa halis ku ah nafteeda. Hadda cid ma haysato. Aabbaheed, walaasheed iyo hooyadeedba waa dad aakhiro. Habaryarteed oo culays iyo dhib ay ku hayso ayaa nafteeda la xarbiyaysa. Sheekhii cilaajkuna wax aan hadalkiisii hore ahayn lama soo taagna mar walba oo loo tago. Waa wararkeedii dhiillada lahaaye, sida xaalku yahay marka aan arkay ayaa aan maalmo kale la sii hadlay. Dharaartii danbe, ayaa habaryarteed talefankii ka qaadday. Dhibtaba xaggayga ayay u tirinaysaa

malaha e, in ay iga jarto ayaa ay habaryarteed ku dedaalaysaa. Muddo danbe ayaanan arag. Dharaartii danbe ayay taleefan kale iga soo wacday. Aad kolkay iigu calaacashay, ayaa aan ku idhi, *'wiilkii yaraa iisoo dir anaa taleefan kuugu soo dhiibaaya—e!'* Inta ay aad iigu mahadcelisay, ayaa ay *"Hawraarsan"* iigu jawaabtay. Moobil ayaa aan diyaariyay. Card kii aannu ka wada hadli jirnay ayaa aan u soo furay. Xilli bacda maqrib ah in wiilku halkii habeenkii hore iigu yimaaddana ku ballannay. Caawimada caynkan ahi iga lillaahi ma aha! Waxa aan doonayaa in aan daba galo wiilka yar. Haddii ay suurtogal noqoto, bal illaa halka uu ku gaadhsiiyo daba soco ayaa ay niyaddu igu tidhi. Talo ayaa aan rogrogay. Kolkaas ayaa uu saaxiibkay Cabdirisaaq igu soo dhacay. 'Allaylahee inta aad Cabdirisaaq kaxaysid, waxa aad u sheegtaa in sidaada aad taleefanka ugu dhiibto wiilkaba, isaga oo agtaagan aan se adiga kula taagnayni ha daba galo wiilka'. Sidii ayaa aan yeelay. Saaxiibkay arrintii ayaa aan ku qanciyay. Isa soo raacnay. Annaka oo isku dhaw, haddana sidii laba qof oo aan is garanayn midkaayaba dhan isku mashquuli. Wiilkii yaraa marku ii yimid, sidaadii aan taleefanka ugu dhiibayba, saaxiibkay noqoy mid aan qof u dhaxayn oo wiilka daba gala. Markay inyar iga sii socdeen, anna soo daba dhaqaaqay. In talefan uu igu soo hago haddaannu is wayno ayaa noo ballan ahayde. Marka uu basaskii xaafaddooda u bixi jiray ay isla galeen, anna aan

waxoogaa ka yar danbeeyo, ayaa anoo arkaaya uu saaxiibkay soo laabtay. Aad ayuu u naxsanyahay. *'Waar maxaa dhacay saaxiib*?' Haddii aan ku idhi, kuyeh, *"Waar ninyaw wiilkii yaraa sidii aan cidiba noogu dhaxaynin, ayuunbaan hal mar muuqiisiiba waayay! Bar bannaan anoo lugaynaya ayuunbaan is arkay!"* Inta aan qoslay ayaa aan ku idhi, *'Inna mari saaxiib waa shaqadoodiiye!' "Waa shaqadoodii maxaad uga jeeddaa?"* igu wareeri. Hor iyo haddeer ayaa aan uga warramay sida xaal yahay kolkaas. Saaxiibkay ayaa madaxa is qabtay. Hadalka ayaa ku yaryaraaday. Shoog inta uu la dhaqaaqi kari waayay, ayaa sheekadaydu ay culays ku noqotay. *"Halkaas sheekada iigu joojiyoo, horta inna mari makhaayaddaas ka haashno—e"* ayaa hadal ugu danbaysay. Soo fadhiisannay. Ilama hadlaba e, sidii qof aanay hore isku aqoon ayuu si aad ah ii eegayaa saaxiibkay. Waxa aan uga sheekeeyay oo bilaw ahaa ayaa ka daadegi waayay. Hal mar inta uu isla booday ayuu igu yidhi, *"Mar haddii ay sidaas tahay, naagtan bartaas kaga hadh saaxiib"*. Dabadeedna inta uu iska kacay ayaa uu halkii igaga dhaqaajiyay. Saaxiibkay sida uu u naxsanyahay kolka aan arkay, ayaa aan is idhi 'waar ninku malaha xataa adiga ayuu kaa shakiyay e, nafis ha qaato—e daa oo iskaga hadh'. Halkii ayaa aan kaga hadhay. Cabbaar haddii aan fadhiyay ayaa ay iyadii isoo wacday. *"Oo caawa ma Cabdirisaaq ayaa kula socday?"* Ayay igu salaantay! Inta aan yaabay, ayaan ku idhi, *'Maxaad*

aragtay'. Kuteh, *"Wiilka yar ayaa ii sheegay in uu Cabdirisaaq kula socday!"* Anfariir ayaa aan la sare joogsaday. Inta aan *'I sug'* ku idhi, ayuu madaxu i wareeray. Oo wiilka yarna maxaa baray saaxiibkaa? Ninyaw siduu ku ogaaday in uu kula socday? Haddaa in uu dabo galayna wuu arkaayay—oo warkaasna kollay waa u sheegay' ayay naftu igu tidhi. Ninkaygii dhammaa meel aan ku baxsado ma haysto. Mar haddii wax walba sidan loo ogaanaayo, xalka kaliyaata ee aan haysto ayaa iila muuqday in aan talefanka tuuro. Kuma celin dabadeetana e, inta aan taleefankii xidhay ayaa aan iska tegay. Laamida ma maro—oo dharaartay igu tidhi, *"Gaadhi indho-cadde ah ayaa aan kaxaystaa"* ayaa iigu danbaysay. Luuqluuqyada ama baska xaafadaha taga ayaa aan si shaki miidhan ah ku raacaa. Siday i arkayso inta aan hareeraha iskaga eegay, ayaa aan si degdeg ah makhaayaddii uga soo baxay. Naftayda cabsi xooggan ayaa i gashay. Qof kaste oo dumar ah si ayaan uga baydhi jiray, siiba ahaanna laba noocba dumarka u labbista aad ayaan uga sikan jiray:

1-*Gabadha dharka wada madaw ku labbisan,*
2- Iyo gabdha dharka wada cad ku labbisan!

Intii sheekadayadu ay sida wacan u socotay, ayaa aan dharaaro weyddiiyay waxa dookheeda ah ama ay jeceshahay... *"Wallaahi sidaa uma dookh badni, laakiin*

xagga dharka waxa aan u jecelahay kuwa madmadaw. Haa dharka wada madaw ayaa aan u jecelahay, haddii laga tegi waayana, marmar ayaa aan kuwo wada cad ku lebbistaa..." Iyada oo hadalka wadata maalintaas, ayaan weyddiiyay cuntooyinkana kuwa ay ugu jeceshay. Anigu macmacaanka ayaa aan iska jecelahay. Qofka kaliyaata ee xaafaddayada ka dookh duwan ayaa aan ahay. Way i seegtay in aan weyddiiyo xaafaddooda kale waxa ay jeceshahay, saa markaas ma dhaaddanaynba, qofkan aan la hadlaayaa waxa uu yahaye, haddana waxa aan weyddiiyay meelaha ay nafiska ku dareento ama ay jeceshay in ay ku dalxiisto. Anigu meelaha la iskugu yimaaddo ayaa aan aad u jecelahay, sida; aroosyada, suuqyada, xafladaha iyo meelaha dadku ku badanyahay... Iayada oo hadalka wadata ayaa aan ka dhex galay, kolkaas ayaa aan ku idhi, *'Oo qof cajiib ah ayaaba aad tahaye, dadku meelaha cidlada ah iyo goobaha lagu dalxiiso ayay jecelyihiine...'* Hadalkaas intay iga dhex gashay ayay igu tidhi, *"Meelaha biyayaaga leh ayaa iisoo raaca intaas. Laakiin badanaa nalooma oggola in annaku ka hablo ahaan aannu tagno meelo badan!"*

Maalmaha aannu sidan u sheekaysanayno, aniga waxa ay ila tahay in aan la sheekaysanaayo qof caadi ah, laakiin imminka hadalladeedan kolka aan xusuusanayo, werwer weyn ayaa ay hadba igu sii furayaan. Daqiiqad walba waxa aan xusuusanayaa sheeko si sibiq ah igu dhaaftay oo maalin ay iiga

sheekaysay. Maalmahaas waxa kale oo aan weyddiiyay heerkeeda aqooneed. In aanay se dugsi sare dhaafin oo jaamacad aanay bilaabin ayay ii sheegtay. Annaka oo kaftamayna, ayaa aan weyddiiyay maalmahaas dookheeda iyo ragga ninka ay ka hesho dabeecadihiisa. Inta ay qosol *'jag'* ka siisay, ayaa ay si dheeldheel ah iigu tidhi, *"Dookhayguba waa adiga uun dee!"* Qof lagu yidhi waa *'adiga uuni'* maxaa uu ka garanba dookh? Iska soo dhaafay. Xusuusahayagii hore ayaynu ku raagnaye, makhaayaddii ayaa aan si degdeg ah uga soo baxay. Wax aan hadba sekad ka soo laababa, ugu danbayntii waxa aan imid gurigaygii. Taleefankii waa xidhanyahay, dibaddana ma joog joogine inta aan qolkaygii galay, ayaa aan degdeg iskaga seexday.

Maalmo danbe oo xaggayga nasasho ka ahaa, xaggeedana naar ka ahaa ayaa ka soo wareegtay habeenkan. Nin aan laba arki jirin oo marna waxbarasho iyo shaqo ku maqan, marna haasaawe iyo hadal dishooday ayaa aan ahaaye, mar kale ayaa aan asxaabtaydii ku soo laabtay. Goobihii lagu cawayn jiray ayaa aan barbaartii ugu imid. Naftaydii ayaa nashaad iyo xasilooni dareentay. In aan jeel nafsi ah ka soo baxayna waa aan is taawiyay; jawi kale ayaa ii bilawday. Dharaartii danbe, aniga oo asxaabtaydii qaar la socda ayaanu soo marnay ninkii Kayse ee substationka haystay. In gaaban haddii aannu la joogjoognay, ayaa aan Kayse gaar ula baxay. Waxa aan ka waraystay

gabadhii uu taleefanka iigu dhiibay muddo dheer ka hor iyo waxa uu ka yaqaannay. Wakhtigan aan Kayse la sheekaysanaayo, substationnadii waa kaceen. Moobillada gacanta ayaa dadka badankiisu wada hastaa, Kayse na waa iska illaawayba arrimahaa labada sanno ka soo wareegeen. Maskaxdii ayaa uu aad u wareejiyay. Xusuusay. *"Ala, waar hadda ayaa aan xusuustaye, dee gabadh qurbaha ka timid oo khadka uun igula macmiil ah oo aan lacagta ugu shubo ayaa ay ahayd. Waar ninyaw waan illaawayba e, horta waatii adiga talefankaaga qorataye ma haysaa gabadhii?"* Ayaa uu igu yidhi. Markan arkay in Kayse aanu warba haynin, ayaa aan sheekadii u beddalay oo aannu soo kala dhaqaaqnay. Ninkii Cabdirisaaq ayaa noo yimid annaka oo asxaabtii kale meel wada fadhina. Dharaarahanba yaab ayaa uu ku maqnaaye, si kaftan ah ayaa uu sheekadaydii meesha u soo geliyay. Raggu waa is carsaday. Laba nin oo raggii ka mid ah ayaa yidhi, "*Haddii inantaas aannu soo saari wayno oo aannu arki wayno waligayaba ha na tirsan!" 'Eebbaw yaa wax u sheega, bad ayay geli doonaane'* ayaa aan niyadda iska idhi. Uma aan se jixinjixine, mid walba lanbarkeedii ayaan farta ka saaray*, 'nin walawba sida aad ula hadlaysana aday ku jirtaa'* ayaa aan ku idhi. Intaas uun war kuma daynine, ninkii inantaas la kulma in aan *100$* siinaayo ayaa aan dhaar ku maqashiiyay. Cabdirisaaq isagu waa na eegayaa uun. Raggan badda galay in uu la yaabbanyahayna waan arkaa. Indhaha ayaa aan kala

hadlayoo, in aanu wuxu ogyahay sheegin ayaa aan u ishaaray. Ragguna sidaas ku hawlgale, habeenkaasina kaas ahaa…

Dhawr maalmood kolkii aan bilaa moobil ahaa, ayaa aan dharaartii danbe lanbar kale soo furtay, halkii ayaana aan hawlahayga ka sii bilawday. Saddex cisho haddii aan lanbarkii cusbaa watay, ayaa galabtii afraad lanbar aanan garanayni isoo wacay. Dabeecaddaydu ma ahayn in aan taleefanka cid ku dhegaysto e, lanbarkii ayaa aan qabtay. *'Hello'* haddii aan idhiba, codkii Tasmiin ayaa igaga soo booday! Naxdin ayaa wadnuhu i gariiray. *'Tolaw ma raggii ayay ogaatay'* ayaa niyaddu igu tidhi. Cidda se lanbarkaygan aan qofba haynin siin karta ayaa aan is weyddiiyay. Ogaaday haddana in ay tahay ruux aan hawl yarayne, daqiiqado kooban la hadlay inantii. Wax walba samaysayoo, in xidhiidhkeeda aanan sii wadi karin galabtaas u caddeeyay. Si walba ii bariday. Si adag oo badheedh ah uga gacan taagtay sheekadeedii. Inta ay xanaaqday, oo aad u xanaaqday, cod aanan hore u maqlin ku oyday! Aad inta aan u naxay, ayaa aan si degdeg ah ugu jaray taleefankii, isla markiiba waa aan xidhay haddana. Xabsigii moobil la'aanta ayaa aan dharaaro kale ku sii jiray. Ninkii saaxiibkay ahaa ee Cabdirisaaq ayay nafta ka soo jartay inantii. Ha iigaba ergaynine, hal mar uun taleefanka iigu dhiib ayaa ay muddo ka durraamanaysay. In badan ayaa uu ku adkaaday isaguna. Dharaartii danbe ayuu ku yidhi, *"Dee*

ninku hadduu kaa tashaday maxaa ku daba dhigay?" "Waar igamuu tashane, waa tuug oo wuu isoo xaday" ayaa ay ugu jawaabtay! Xeelad ayaa lagu soo diraye, Cabdirisaaq oo xiimaya ayaa ii yimid. *"Waar adiga iyo Tasmiin maxaa idin dhex maray?"* Ayaa uu igu yidhi. *Wax walba sawdiga og saaxiib, ma sheekadeeda intii kuu hadhsanayd ayaa aan kuu dhammeeyaa?'* Si kaftan leh ugu idhi. Inta uu yar warwareegay, ayaa uu igu yidhi, *"Ninyaw dharaarahanba aniga ayaa khaati ka taagan. Hal daqiiqo kama nasto talefankaas. Muddaba sidaadii ayaa aan ahaa saaxiib, laakiin imminka waxa aan kuugu imid..."* Inta aanu hadalkaas dhammayn ayaa aan ka dhex galay aniga oo in uu ergo yahay moodaaya. *'Waar waxaas hore ayaynu uga ballannaye sheeko gaaban haygula soo meeraysan ayaa aan ku idhi'.* Inta aan xanaaqay ayaanan iskaga kacayba. *"Waar wallaahi xaggaas maaha, waar bal horta kaalay. Waar..."* Marku saas iiga soo dabo qayliyay ayaa aan ku idhi, *'Maxaad ii sheegi lahayd haddaa dee?'* Inta uu hareeraha iska eeg eegay, codkiina uu gaabiyay oo xanshaashaq ka dhigay, ayaa uu afka igu soo dhaweeyay. Isaga oo cabsi badani ay ka muuqato kuyeh, *"Waar inanta ma lacag ayaa aad ka dhacday?"* Weyddiintiisaa inta aan kaftan u qaatay, ayaa aan ku idhi, *'Ma anigii ayaad taas iila timid adna?' "May wallaahi saaxiibe, inantu ninku lacag ayaa uu iga dhacay ayay igu wareerisay!"* Aniga oo fahmay in xidhmo been ah lagu soo beer laxawsaday saaxiibkay, ayaa aan ku idhi, *'Immisa ayay ahayd lacagtu ayay ku tidhi?'* Isaga oo laftiisu

waxa uu afka iga odhan doono la yaabban, ayaa uu yidhi, *"30.000$ soddon kun oo doolar ayuu iga dhacay baa ay tidhi"*. Inta aan ku qoslay, ayaa aan ku idhi, *'Horta lacagtaasi ma iga muuqataa?'* Labadii nin ee kale ayaa mid ka mid ah aannu toddobaad ka dib is aragnay. *'Ka warran inantii?'* Ayaa aan ku idhi. Kuyeh, *"Waar naga tag, annaka ayaa aad lanbar nin noo dhiibaysaa!"* Anigii ayaa naxay. *'Waar bal tus lanbarka?'* i tus lanbarkii. *'Waar wallaahi waa gabadhe la hadal'* ayaa aan ku idhi. Ma i rumaysanine, isaga oo warkaygiiba ilaaq u qaba ayaa uu iga dhaqaaqay. Muddo gaaban haddii ay maalintaas ka soo wareegtay, waxa aan soo furtay lanbar kale oo cusub. Dhawr cisho oo danbe ayaa aan iska watay lanbarkayga cusub oo aan cidina aqoonnin. Ninkii kale ee aannu asxaabta ahayn isaga maba raadsan, lanbarkan cusub haddaad kala hadashana beladii ayaa ku soo raadsan ayaa aan is idhiyoo, mar kaliyaata anna ma wicinba. Dhawr cisho kolkii aan watay lanbarkii cusbaa, ayaa galabtii danbe lanbar aanan garanayni isoo wacay. Niyadda ayaa aan markiiba ka idhi, *'Wallee waa iyadii'*. Waan ka qabtay. Inta aan sameecadda furay, ayaa aan iska fogeeyay moobilka si qofka hadli doonaayi uu wax i yeelaayo. Markiiba waxa aan maqlay codka aan keedii ahayn ee taleefanka ka dhex baxaaya. Inta aan sameecaddii dibadda xidhay, ayaa aan moobilkii dhegta saaray oo aan, *'Hello'* idhi. Shaw qofku goorahanba wuu hadlaayay e' waan ka dhex galay, *"Adigii ayaanu kuu taag*

la'ayn, kolkaas ayaa aad rag kale soo adeegsanaysaa saw ma aha? Lafahaaga ayaa aan in badan kuu daayay e, bal waxa kugu dhaca eeg haddaad arrimahaas faraha kala bixi waydo... Waa markii labaad; waa laba hadda—e la soco..." Ayaa aan maqlayaa qofka leh. Dhawr goor ayaa aan is idhi hadalka ka dhex gal, balse hadalka iyo hanjabaadda ayuu kala joojin waayay. Siduu u hadlaayay, ayaa uu hal mar qofkii talefanka igu dhigay. Ku celi ayaa aan is idhi qofkan. Sidaadii aan halka dadka ku soo wacay lagaga celiyo u tegayba, mise lanbarkiiba meesha kuma jiro. Aad ayaa aan u khalkhalay. Si walba waan u baadhay moobilkaygii. Haba ka yaabin. Wali qof isoo wacayba ma jiro sidan lanbarkan cusubba u soo furtay. Markaas ayaa uu igu soo dhacay hadalkii saaxiibkay ee ahaa, *'Annakaad nin talefanka noogu dhiibtay'*. Waxa aan is idhi malaha Tasmiin ayaa sidan u hadlaysa. Cidda ii hanjabaysay si aan u ogaado, goor aan lanbarkii Tasmiin wacayba waa aan garan waayay! Taaggayga malaha canaano ayaa aan is lahaaye, moos aan iska xidhay ayaa aan mawjaddiisii isku soo faruuray! Markii aan la hadlayba. Oohin iyo baroor ayaa ay iga hor keentay. Toddobaaddadii ay i la'aydba in uu silic u dhammaaday oo Cabdiqaadir nafteeda halis geliyay ayay igu taabatay. In cilaajkii lagu celiyay dhawr maalin, oo weerar culus uu nafteeda ku soo qaaday ayay iiga warrantay. *"Wiilkii inaabtigay ahaa waa la iga furay, cid uu ninkani igaga leexdo in la ii dhiso ayaa la doonayaa. Qofka*

kaliya ee uu igaga leexanayaana waa adiga walaal. Fadlan walaal wax walba aniga ayaa dhammaynaaya e, adigu in aad i guursatid iga aqbal..." Ayay ku calaacashay. Markiiba niyaddayda ayay ku soo dhacday hanjabaaddii. Waxa aan dareemay in ciddii iisoo hanjabtay uu ninkii Cabdiqaadir ahaa. Hadal kalaba aniga oo aan gabadhii u dallicin, ayaa aan taleefankii ku jaray oo si degdeg ahna waan u xidhay isla markiiba moobilkii. Dhawr maalmood oo kale ka dib, waxa aan arkay ninkii kale ee aan inanta u diray. Haddii aan ka waraystay halka wax u marayaanna, waxa uu igu yidhi, *"Waar markii hore way isoo dhawaysay inantu. Dhawr cisho markii aannu wada hadlaynay ayuunbay igu tidhi, 'Basaas baad tahay!' Inta aan naxay ayaa aan weyddiiyay waxa ay hadalka uga jeeddo. Ugu danbayntiina, 'Ninka Axmednuur la yidhaahdo ayaa ku soo diray, wax walbana waa aan la socdaa' ayay igu tidhi; waar ninyaw waxa maxaa wax walba ogaysiiyay ma jinbaa?"* Ayaa uu saaxiibkay si yaab leh iigu yidhi. Inta aan dhoolla-caddeeyay ayaa aan ku idhi, 'Horaan kuugu idhi ha isku dhibin saaxiib'. Niyaddana waxa aan ka idhi, 'haddaa ma Insibaa dee waa Jinkaase'!

Muddo badan ayaa aan bilaa taleefan ahaa oo aan iska xidhay. Maaddaama aan laga maarmi karin moobilka, dharaartii danbe ayaa aan furay. Waxyarba isaga oo aan furnayn ayay isoo wacday. Waan eegay, mise waa Tasmiin. Waan ka qabtay. Hadalba inta aanan u bilaabin ayay iyadu igu tidhi, *"Walaal Alle ayaan kugu*

dhaarshaye, taleefanka ha igu dhigin hal eray ayaa aan kuu sheegayaaye". 'Hayee sheeg' ayaa aan ku idhi. Hadal dheer inta ay gashay, ayaa ay iigu soo gebagabaysay, *"Walaal marka aan ku soo waco, mar kaliyaata ayaa aan ku odhanayaa waan ku jecelahaye, intaas uun ii oggolaw walaal".* Codsigeedaas anna kuma diidine ka aqbalay. Mar haddii intaas uun ay kugu daynayso, ha iska tidhaahdo waxa ay doonayso ayaa aan niyadda ku qaboojiyay. Ballantii way ka dhabaysay. Maalintiiba mar inta ay isoo wacdo, ayaa marka aan ka qabtaba aan halkaas taleefanka iska dhigi jiray. '*Axmednuur waan ku jecelahay'* iyada oo ka sii dhex leh ayaana aan maqli jiray!!

Muddo ayay arrini sidaas ahayd. Noloshaydii caadiga ahayd ayaa aan ku soo noqday. Soo wicitaankeedii badnaa iyo hadalkeedii ayaa aan ka raystay. Cabsidii iyo werwerkii iga hayay xaggeeda ayaa iga ba'ay. Tiiyoo arrini caynkaas tahay, ayaa ay maalin ila soo hadashay. Markii aan ka qabtay, ayaa aan maqlay tiiyoo leh, *"Waxbaan kuu sheegayaa walaal..."* Waan dhegaystay. Markaas ayay igu tidhi, *"Maanta Hargaysa waan ka maqanahay, Berbera ayaa aan iskaga dalxiistagay".* Hadalka iyada oo wadata ayaa aan ku idhi, *'Xaafaddee ayaad ka degtay Berbera?' 'Daaroole ayaa aan ugu tagay xaafad ehelkayaga ah" 'Oo xaafadahaa waan wada aqaanbee e, waa ilmo ayo kuwa aad wax isku tihiin?'* Ayaa aan ku idhi. Hubaal hadalku dhab igama ahayn, balse waxa aan doonaayay in aan wiil si fiican u kala yaqaanna

magaalada weyddiiyo. *"Ilma Jarlas ayaa la yidhaahdaa"* ayay iigu jawaabtay. Is idhi allaylahee maanta ayuunbaad ugu dhawayd oo aad xog heshay. Ninkii saaxiibkay ahaa ayaa aan mar danbe wacay. Magacii inantu ii sheegtayna u sheegay. Muddo markii aan warka ku akhriyaayay ayuu igu yidhi, *"Ninyaw xaafadaha Daaroole la yidhaahdaa waa dhismihii hore ee magaalada. Kharaabado dunsan iyo meelo bakhaarro ah oo wax la dhigto ayaa ay u badanyihiin. Dad badan oo aan garanayaaba meeshaas ma deggana e, bal haddana waan soo baadhi doonaa"*. Dhawr cisho ka dib ayaa uu igu soo warceliyay wiilkii, magacaas aan u sheegay xaafad la yidhaahdaana in aanay meesha degganayn ayaa uu iisoo sheegay. Ka quusannay xaafaddaasna markaa. Dhawr cisho oo danbe wax war ah igumay soo celin inantii. Maalintii danbe ayay isoo wacday. *"Hargaysa ayaa aan ku soo laabtay oo waan nabad imid"* ayaa ay iigu bushaaraysay. *'Nabaddaadaba naxdintaada ayaan ka jecelahay'* inta aan quluubta ka idhi, ayaa aan warkii ka sii guray. Cabbaar ayay ii sheekaysay inantii. Wax ay hadalka ii waddaba, aniga oo is leh ma ku tidhaahdaa, ballaanteenni ha illaawin ayaaba ay iyadii igu tidhi, *"Ballanna waynu lahayn oo waxan oo hadal ah in aad iigu dulqaadanayso waan ku arkaaye, waxa aan rabaa in aynu is cafino. Aniga jacaylkaagii wuu i daayay. Xiisihii aan kuu qabayna wuu iga dhammaaday. Waxa aan rabaa intii inna kala gaadhayna in aynu iska cafino, anna noloshaydii way fiicnaatay, haddana jaamacad*

ayaa aan galayaaye sidaas iyo nabadgalyo". Hadalkeedaas kolka aan maqlay, ayaa ay naftu igu tidhi, *'waar malaha xeelad kale ayaa ay kula rabtaaye, warkeeda ha rumaysannin'. 'Waayahay walaal, dhankayga saamax ayaa aad ka tahay, waxba na kuuma qabo—e noloshu kuma xumayso'* ayaa aan war ugu soo gabagabeeyay. Waar Alle ayaa faraj khayr qaba kuu furaye cid ha iskaga sheegin ayaa aan ku xanshaashaqay gellin!

Noloshii xorta ahayd ee bilaa cabsida ahayd ayaa aan dib ula soo qabsaday. Hawlahaygii iyo shaqooyinkaygii ayaa aan iska sii watay. Imminka muddo inantii iyo cid kale toona ma arko. Farxad ayaa aan iskaga jiraa. Sheekadayda cid lama wadaago. Saa qof waliba in uu isagii iga cararo ayaa aan ka baqday. Bishii ayay mar ama laba isoo salaantaa. Hadda way i daysay. Si fiican ayaa aan u illaaway cabsi iyo murugo badan oo isku kay biirsaday waayaba daraadeed. Tiiyoo arrini caynkaas tahay, ayaa ay galab danbe isoo wacday. Markii aan ka qabtay ayay igu tidhi, *"Maanta ayuunbaad ugu dhawayd in aad i aragto. Kadinka Jaamacadda markaad galaysay, anna askarta meesha fadhiisata mid ka mid ah ayaa shandaddayda baadhaayay!" 'Maxaad iila hadli wayday kolkaas?'* Ayaa aan ugu jawaabay. *"Waan kaa cabsanaayay"* ayay igu tidhi. *'Run ayaanad sheegayn'* ayaa aan ku idhi. *"Wallaahi waa runtay oo waadigii dhar noocaas ah xidhnaa, wiil garamad casina uu kula socday. Waydinkii wada lugeeyay ee waddada Dahabshiil soo hor marta soo*

raacay!" Inta ay sheegtayba runteed ayaa ay ahaayeen, miyaan se dan ka leeyahay imminka warkeedaba.

Maalin kale ayay haddana anigoo jaamacadda imtixaan ku jira ay in badan talefanka igu soo celcelisay. Saacado dhan ayay isoo wacaysay shaw e, markii aan dibadda u baxay ayaa aan ka qabtay kiiyoo wali talefankaygii dhacaaya. Si ay cadho ka yar muuqato ayay iila hadashay. *"Illaa maanta maxaad taleefanka iiga qaban wayday" ayay igu tidhi. 'Imtixaan ayaa aan ku jiray walaal oo ma arkayne, maxaa dhacay?'* ugu jawaabay. *"Jaamacadda ayaan joogay illaa maanta oo in aan is aragnaan rabay!"* Ayay igu tidhi. Farxad iyo naxdin wax aan u kala garan waayay ayaa aan isku dhex daatay gebigayguba. *'Imminka ku mee walaal? Ma kuu imaaddaa? Halkeed joogtaa?'* Waanigaas wax iska dhex tuuray. *"Maktabaddaas wax lagu daabaco soo hor is taag waan ku arkaaye"* ayay iigu jawaabtay. Aniga oo farxad la duulaya ayaan degdeg meeshii u soo tagay.

Dagaalkii Axmednuur Lagu Soo Qaaday

Maktabaddii ay igula ballansanayd ayaa aan soo hor istaagay. Meesha ardayda ayaa aad ugu badan oo qaar basas ka raacayaan, qaarna gawaadhi u gaar ah ay ka korayaan. In door ah ayaa aan taagnaa. Nin ila socday oo aannu asxaab ahaynna *'i yara sug'* ayaa aan mar hore ku idhi. Taleefanka ayaan kala hadlayaa. *"Waan ku arkaa. Waadigaas isoo eegaaya wallaahi. Alla maxaan araggaaga ka helaa..."* Hadal uun wataa igu miistay. *'Haaye aan is aragno e, bal adiguna iskay tus walaal'* ayaa aan ku idhi. Kolba kaarto ayay ii keentaa. *"Waan cabsanayaa!"* Ayuu warkeedii dhaafi waayay. *'Halkaas askartu joogto aan istaago—e agtooda iigu kaalay haddad cabsanayso'* ayaa aan haddana ku idhi. *"Adiga kaama cabsanaayo in aad wax i yeesho, laakiin soo hor istaaggaaga ayaanan awoodi karayn"!* In badan kolkii aannu hadalka isku celcelinnay baan ku idhi, '*Miyaanad imminka qof qawl leh ahayn, haddaanad ii imanayn war cad ii sheeg dee'*. Inta ay qososhay ayaa ay iska tidhi. *"Aragtidaada ayaa aan u baahnaa, imminkana waan nafisay markaan ku arkay. Waxba kale kaama doonayn, iska raalli ahaw kuuma iman karaayo walaal"!* Inta aan aad u xanaaqay, ayaa aan garan waayay goor aan waxan cay hayayba ku miisay. Taleefankii ayay igu dhigtay. Sidaadii aan is idhi u dhaqaaq ayaa wadnaha laygu dhegay! Xummad badan ayaa aaan dareemay. Makhaayad ii dhawayd inta aan

fadhiistay, ayaa aan wacay jaallahaygii i sugaayay. Wuu ii yimid isna. In door ah markaan fadhiyay, ayaa aan nefisay. Wadnihii ayaa garaacii saa'idka ahaa yareeyay. Dhididkii ayaa aan iska tiray. Inta aan shayddaanka iska naaray, ayaan caadigaygii ku soo noqday. Saaxiibkay ayaa i weyddiiyay sida aan ahaa, ama waxa aan dareemay. Waxba uma sii sheegine, wax yar markaannu fadhinay ayaanu isa soo raacnay. Bas in aanaan raacin ee aannu iska lugayno ayaannu ku tashannay. Waxoogaa kolkii aannu soo soconnay, ayaa waddada uu nagu jiidhi gaadhay gaadhi samadaa marayaa. Dirqi ayaanu dhinac iskugu wada baydhnay aniga iyo saaxiibkay. Sidaa markuu gaadhigii ii dhaafay, ayay isoo wacday inantii. Waan ka qabtay. *"Wallaahi jiidh ayaa aaan is idhi! Gaadhigaas aad ka yaacdeen ayaan wataa. Waan iska kaa daayay haddana—e iska noolaw…!"*

Waan yaabay. '*Maxaad ii jiidhi wayday?'* Ayaa aan ku idhi. Markii aan intaas idhi ayay oohin qabsatay! *"Adigu naftaada haddaad nacday, wallaahi anigu waan ku jecelahay! Sideen kuu jiidhi karaa walaal? Ma ogid miyaa heerka uu leegyahay jacaylka aan kuu qabaa?"* Calaacal iyo oohin ayay halkii isku dartay. Iyada oo hadal kala joojin la' ayuu jidka igaga soo hor baxay nin askari ah oo aannu ilmaadeer nahay. Markii uu na salaamay. Ayaa aan ku idhi, *'Waar hoo inaadeer Jamaalaw naagtan jinka ah iga af garo; askarta ayaa jinku ka baqdaa baa la yidhiye...'* Haldalkaas inta aan u dedejiyay ayaa aan taleefankiina

dhegta u saaray. *"Hello"* markii uu ku yidhi, ayaa ay ku jartay taleefankii. In gaaban haddii aannu wada taagnayn, ayaannu soo kala dhaqaaqnay askarigii. Saaxiibkaygii ila socday ayaa aan uga warramay xaaladdayda. Aad ayaa uu u yaabay runtii. U qaadan waa isaga oo ka muuqdo, ayuu haddana iga guraayay sheekadii yaabka lahayd. Dhawr habeen ka dib, aniga oo la jooga niman aannu asxaab nahay ayuu isoo wacay Cabdiraxmaan nin la yidhaahdaa –waa Jamaal walaalkii— *"Ninyaw ninkii Jamaal maalmahanba xanuun ayaa uu la jiifaa. Kolba waa lagu soo boodayaa oo wadnaha ayay wax qabanayaan. Ninkii wuu iska ildaranyahay walaal kaw dheh, dee ninkaas ayaan xaaladdiisa kula soo socodsiinaayay e, bal sidaas xaafaddana ugu sheeg, keliday ayuunbaa maalmahanba la silcaayay ninka hayntiisa—e!"* Hadalladaas kolkii aan maqlay, ayaa naxdin aan gebigayguba la dubaaxiyay. Waxa igu soo dhacday maalintii dhawayd ee aan Jamaal la hadal siiyay Tasmiin. Cadhadeedii iyo hanjabaaddeedii ayaa aan soo xusuustay. Aad ayaa aan u murugooday dhabtii, in xaggeedii arrintu ka socotana kolkiiba waan is moodsiiyay! Aniga oo iskala garan la' ayaa aan bas soo raacay. Cid kale umaan sheegine, ninkii Cabdiraxmaan oo Jamaal la xarbiyaaya ayaa aan u imid. Sidaadii aan u soo galay qolkii, ayuu Jamaal soo sare fadhiistay. Dhidid waaweyn ayaa ka soo booday. Gacanta midig ayuu ku hayaa wadnaha. Sharaab hor yaallay inta uu

laba jeer cantuugay, ayaa sidii qof aan shiddaba haynin uu iigu yidhi, *"Ii warran inaadeer Axmed?"* Shoog inta uu igu dhacay, ayaa aan garan waayay wax aan ku hadlaba. Waa aan isku dhex yaacay runtii. Hadallo iska wada dhex tuur ah ayaa aan ugu jawaabay. Waxa aan ka cabsanaayay in uu igu yidhaahdo, *'Xanuunkan adaa igu sababay!'* Jamaal se sidaas waxba uma dhaaddana.

Cabdiraxmaan ayaa aan dibadda ula baxay aniga oo gebigayguba gariiraaya ayaa aan ka waraystay xaaladdiisa iyo sida loo helay Jamaal. Cabdiraxmaan oo laftiisu ka yaabay ninkii uu la xarbiyaayay sidan wax uga go'een kolkii aan u imid, ayaa igu yidhi, *"Ninyaw ninkani waa nin iska dhib badanoo, gabadh ayay ili kaga dhacday ayaa aan u malaynayaa! Wax aad cod dumar mooddo ayaa ka dhex qaylinaaya. Siduu u joogo ayaa hal mar wadnaha inta la qabto, meel kaste oo uu maraayaba uu ku suuxayaa. Qolyahan farmasiiyada ayaa aan geeyay—oo, 'arrintiisa waxba kama garanayno' ayay yidhaahdeene, bal xagga cilaajyada ayaa aan is leeyahay gee imminka".* 'Waa saase, dhankaaga iiga warran inaadeer adigu, adeerkay warka ma gaadhsiisayna adigu?' Inta aan weedho aan habboonayn iska dhex tuuray, ayaa aan ka soo dhaqaaqay Cabdiraxmaan oo aan Jamaal dib ugu soo laabatay. Markii aan isa soo dultaagay, ayaa uu Jamaal soo sare fadhiistay. Aad ayuu u qoslayaa oo u faraxsanyahay. Ma mooddid inta aan duljoogo in meelna ay qodax yari ka xagatay. Nashaad iyo firfircooni cajiib ah ayaa laga dheehanayaa. *'Alle*

caafimaadka ha kuugu wado inaadeer' inta aan niyadda ka idhi, ayaa aan raggii sii nabdaadiyay oo aan ka soo tagay habeenkaa gurigii ay joogeen.

Aad ayaa aan u werwerayaa. Xaaladda Jamaal iyo sida aan dhibtiisa xidhiidhka ula leeyahay ayaa aan ka damqanayaa. Diir igama saarna in ay Tasmiin wax yeellaysay Jamaal. Hubaal ayay ahayd in cadhadii ay maalmahanba ii qabtay ay isaga kula dhacday. Goor baas in aan hadalkeeda la doontay ayaa aan is dareensiiyay. Muddo badan ayaa aan ka fikiraayay Jamaal iyo xaaladdiisa. Gabbal iyo waale ayaa dhiillada warkiisu ay sii kordhaysay inaadeerkay. Alla xanuun badanaa xaaladdan oo kale... Kolba dhakhtar ayaa loo geeyaa, haddana mid kale ayaa lagula tacaalaa, markaasaa haddana ku kale lagula quustaa. Intuba cilinkiisa waa fahmi waayeen, midbana xanuun gaar ah ayaa uu ku sheegay. Dhawr toddobaad kolkii ay ka soo wareegeen, ayaan galab kale u imid Jamaal oo aad xaaladdiisa looga dayrinaayo. Inta dhakhtar laga soo celiyay, ayaa la leeyahay markan aynnu 'Qur'aan saar ku dayno'. Waa goor gaaban, dumar badanina guriga waa joogeene, inta aan salaamay dadkii, ayaa aan u soo galay qol Cabdiraxmaan uu Jamaal ku hayay, dad kale oo waalid ahina ay la joogaanoo rag iyo dumar leh. Madaxa ayuu gidaarka ku garaacayaa! Xoog ayaa lagu hayaa Jamaal. Dhididka ka da'aaya iyo cabaadka ka baxaaya Alle ayaa yaab kuu keenaaya. Naftu in ay ka gurmayso

ayay dadku u qaateen, saa Qur'aan iyo duco ayaa hareeraha lagala fadhiyaa. A'shahaadda ayaa ay qaarkoodna u laqimayaan. Isagu se waxaas uma jeedo e, aad iyo aad ayay xaaladdiisu u liidataa. Sidaadii aan qolka u soo galay, ee aan dadkii salaamay ayaa uu hal mar Jamaal dhaqaaqii joojiyay! Sidii wax suuxay ama koomo galay oo kale ayuu 'dam' yidhi. *'Ala miyuu go'ay?'* Ayaa lala soo wada booday! Naxdin ayaa aan suuxi gaadhay. Laba daqiiqo ayay baroortu is qabsatay. Illinta ayaa aan gaarkayga hoos iskaga biiyay. *"Ma gu'ine qaylada naga daaya ayuu si cadho leh Cabdiraxmaan ugu dhawaaqay"*. Wax yar haddii uu sidii ahaa, ayaa uu labada indhood soo kala qaaday! Inta uu toos iisoo fiiriyay, ayaa uu si badheedh ah u dhoolla-caddeeyay! Naxdin aan dadka kale dareensanayn ayaa kaliday igu jabtay. *'Waa aan ku fahamsanahay'* sidii qof igu leh ayaa uu ila noqday. Hoos ayaan u foorarsaday. Inyar haddii aan la joogay, ayaa uu Jamaal soo sare fadhiistay. Si degdeg ah ayuu ii gacan-qaaday. "*Inaadeer iska warran Axmednuur?"* Kolkii uu i yidhi, ayaa dadkii oo dhammi tacajab u go'een. Ninkii imminka loo barooranaayay, ayaa kaftankayaga la isku dhawrayaa! Cabdiraxmaan ayaa hal mar inta uu soo booday yidhi, *"Ninkan Axmednuur habeen horraysay oo uu noo yimidba Jamaal caynkan oo kale ayay xaaladdiisu noqotay, markii uu sidaas nooga baxayna sakaraadkii adduunka ayaa la iskugu keenay..."* Hadalkaasi inta uu af kala qaad igu noqday, ayaa aan isku dayay in

aan sheekadii danbabaso. Waxa ninka Alle ka yeedhsiiyay ayaa aan diiday. Naftayda ayaa tuhun dilaye, in isna uu walaac kale igu habseeyo ayaa ila qadhaadhaatay. Meesha waxa joogay dumar ayay u badnaayeene, arrintaas in ay dhaqan geliyaan oo anigu aan dawada Jamaal noqdo ayaa ila adkayd. Wax se aan is dhaafin ahayni meesha ma yaalaane, halkii sheekadii dhan kale u leexiyay.

Intan uu Jamaal xanuunsaday iyo maalmaha ba ma aan arag/maqal Tasmiin. Kulankaygii Jamaal kolkii ay dhawr maalmood ka soo wareegeen, ayaa ay dharaartii danbe Tasmiin ila soo hadashay. Aniga oo iska dhigaaya sidii qof ka xanaaqsan ayaa aan ula hadlay. Iyada kama ay qasnayne, *"Inaadeerkaa Xamse wiilka ugu dhashay miyiga ma maqashay?"* Ayaa ay igu bilawday! Yaab ayaa Alle ii keenay. *'Waxba ma aan maqale, adiga yaa wax kuu sheegay?'* ayaa aan ku idhi. Kute, *"Ninyaw habeenkii dhawayd aad ayaa aan ugu farxay markii aad hortayda soo fadhiisatay!"* Yaab ayaa uu Alle ii keenay! *'Habeenkee ayaa aan hortaada soo fadhiistay?'* Ayaan ku idhi, iima ay jawaabin laakiine, aadyar ayay taleefankiiba igu dhigtay, dabadeedna way xidhatayba; nabadeey! Dhawr habeen oo kale markii ay iga maqnayd, ayaa ay isoo garaacday maalintii danbe, *"Jamaal ka warran?"* Ayaa ay war igaga bilawday! Inta aan yaabay, haddana aan calool adayg muujiyay ayaa aan ku idhi, *'Jamaal adigaa haysta—e sii daa dee miskiinka yar...'* Inta ay si dheeldheel ah iigu

qososhay, ayay igu tidhi, *"Maanta Dubay ayaa aan joogaa oo aan kaala hadlayaa!"* Maskaxdaydan yar in ay naagtani waalayso ayay ila noqotay. Mise lanbarkii ay igala hadlaysay ayaa aan eegay. Qoodh iyo xero waa runteeda waa lanbar xaggaas ah, hadda gara—oo lanbarkeedii gudaha ayay iga soo wacday kolkii hore, ka aan ka qabtayna lanbarkaas gudaha ah ayuu ahaa. Maalmahanba se waxa aan weyddiiyaba kama jawaabtee yoolkay lumisaa. Imminka xidhiidhkii ay ila soo samayn jirtay hoos ayuu u dhacay. Ma maqlo calaacalkeedii, se sida haatufka ayay kolba war meel iiga soo sheegtaa. Warka waan ka guraa uun. Wax walba oo ay ii sheegtaa na dhab ayuu noqdaa. Maalintay i lahayd 'inaadeerkaa Xamse ayaa mi'yi wiil ugu dhashay', muddo ka dib ayaannu ogaanay oo dhab ayay ahayd. Cadho in ay ii qabto waa aan dareensanahay, se iskuma jilciyo—e, adkaartana waan badsadaa, waysadana waa aan ku dedaalaa. Waa aan arkayaa Jamaal waxa haysta, se waxa aan ka cabsanayaa in dhibaato intan ka badan ay u gaysato haddaan kala hadlo. Haddana kama adkaysan karo xaaladda uu ninkaasi ku jiro. Cadhadii ay ii qabtay oo dhan ayaa ay kula dhacday ayaa aan is leeyahay. Hadda in dabiib lagula quusto oo goobaha Qur'aan saarka la dhigo ayaa la qorshaynayaa. Waxa aan ka sii cabsanayaa haddii qur'aanka lagu akhriyo, waxa uu Jamaal ku hadli doono. Ma aha mid marnaba caloolyawgu iga yaraanaaya!

Haddii muddo la qorshaynaayay cilaajkii lagu qur'aan saari lahaa Jamaal, ayaa ugu danbayntii mid la isla gartay. *'Haa, sheekh hebal cilaajkiisaa ayaa ugu macquulsan, nadaafad ahaanna wanaagsan...'* ayaa la isla waafaqay. Ninkii Jamaal ahaa waa la soo qaaday, cilaajkii ayaana la keenay. Ka sakaw in qur'aanka qofka lagu dabiibo, haddana waxa dheer dhirta iyo dawo dhaqammeedka kale ee meesha lagu isticmaalo, taas oo ruuxa lagula tacaalaayo. Arrimihii uu halkaas Jamaal kala kulmay, iyo waxyaabihii noloshiisu martay ayuu iiga sheekeeyay muddo danbe oo uu ladnaaday. Aniga oo laga yaabo in aan hadalladiisa iyo waxyaabuhu ii sheegaayay aan kala illaaway, haddana waxa aan isku dayayaa in aan idinla wadaago wuxu iiga warramay—oo uu yidhi:

Xusuusihii Jamaal

Goor gaaban oo galabnimo ah ayaa la isoo qaaday. Runtii aad ayaa aan u dareemaayay xanuun ba'an. Xiskaygu waa taam. Wax walba oo dhacaaya si deggan ayaa aan ula socdaa. Halkaa wadnaha ayaa se xoog la iiga hayaa. Marmar ayaa aad mooddaa in gacan xoog weyn wadnahaba lagu maroojinaayo. Xoog ayaa naqaska la iigu qabanaayay. Dhididka iyo xummadda i haysa ma aad malaynayn. Aniga oo sidaas ah, ayaa sheekh *Shukri* la ii keenay. Waxa aan ku aqaannay cilaajka sheekha mid aan sidaa u sii weynayn. Hadda se mid caalam ah ayaa uu iila muuqdaa. Rag iyo gabdho shaqaale ah oo is dhaafaaya ayaa aan arkayaa. Ma rumaysan karo waxa aan arkaayay in uu dhab ahaa iyo in kale, waa se aan arkayaa xaqiiqdii. Dadkii ehellada ahaa ee ila socday waxa ay raadinayeen kuraas ay ku fadhiistaan. Waxa aan maqlaayay tiiyoo hooyaday *'Dhulka iska fadhiiso'* lagu leeyahay. Aad ayaa aan hadalkaas ula yaabay. Hadal ma tahli karayne, haddana waxa aan arkaayay kuraasta buushka ah ee gadaashooda taalla. Cilaajka kumaan aqoon dad dhar cadcad oo ka shaqeeya, se imminka waxa aan arkayaa wiilasha iyo gabdhaha dirayska cadcad ku wada lebbisan ee is dhaafaaya. Wejigooda mid qudha ma arko, haddana shaqadooda waan ka boganayaa eegmo ahaan; shaqo xoog leh ayaa socota. *'Haa waa kan sheekh...'* Ayaa lagu

yidhi. Wuu isa soo kay dultaagay sheekh Shukri oo ahaa nin aad u xoog weyn. Wuu igu soo foorarsaday, kolkaas ayaa la iga jaray xanuunkii. Madaxa ayuu gacanta iga saaray, markaas ayaa aan aad u qaboobay. *"Waryaa, kuma ayaad ahayd?"* Ayaa uu si dabacsan ii weyddiiyay. Ma hubo—e, waxa aan ku soo miiraamay uun garaacitaankiisii! Waa aan miirsaday. Waan sare fadhiistay. Kulaylka iga baxaaya xadhigga uu igaga giijiyay faryarada bidix ayaa jiifka ii diiday.

Mar kale ayaa aan indhaha kala qaaday. Qadhmuunka dhirta ee qooshan iyo waxa la igu dhabooqay ayaa madaxa i xanuujiyay. Darxumada qolka aan dhex galgalanaayo ee cawda yar feedhaha la ii saaray ayaa aan ku miirsaday! Hoos ayaa aan isku eegay, mise nigis kaliyaata ayaa aan xidhanahay! Dhammaan jidhka waxa iga marsan saliido iyo dawooyin. Waa xilli danbe. Walaalkay Cabdiraxmaan ayaa agtayda jiifa. Kac ayaa aan is idhi, saa nin dhakhtar ahi labada garab inta uu i qabtay, waxa uu dib iigu jiifiyay sariirtii! Waxa aan maqlayaa gabadha kalkaalisada ah ee wax iga qoraysa. Quruxda gabadhan agtayda fadhida ayaa aan daawqnayaa. Aad ayaa wejigeeda faraxsanaan badani uga muuqataa. Marka aan fiiriyaba, iyada oo iyana isoo eegaysa ayaa aan arkayaa. Hadba way dhoolla-caddaynaysaa. Aad ayaa jawigaygu isku beddalay. Ma ogayn runtii wax aan ku suganahay, se goobta aan ku jiro iyo sida ay u

habaysantahay waligay ma aan arag nooceeda! Ninkii digtoorka ahaa ayaa su'aalo i weyddiiyay. Aniga oo su'aalihii ka jawaabaya, ayaa ay gabadhii goorahanba agtayda joogtay soo kacday. Madaxa ayay gacanta iga saartay. Naxariistii gacanteeda anoo aad ugu qaboobay, ayaa aan ku beraarugay gidaarka aan madaxa ku dhuftay! *'Gawdii'*, xanuunkii iyo qayladii aan ku dhuftay, ayaa uu Cabdiraxmaan iigu soo galay musqusha! Musqulahan fadhiga leh ayaa uu ahaaye, aniga oo faraha kula jira biyihii lagu nadiifinaayay godka ayaa aan is arkay! Wuu isoo garbagaleeyay. Aad ayaa aan u burbursanahay. Ma aqaanno e, waxa aad mooddaa in seedaha iyo dhuuxyadaba la iga garaacay. Socodka ayaa aad ii dhibaaya. Waxa uu i jiifiyay cawdaydii. Niyadda ayaa aan ka dareemay in walaalkay i dhibsanaayo! Gacmaha uu sida adag iigu hayo ayaa aan ku garanaayay arrinkaa. Ma aan ogayne, goor labada cagood silsilad laygaga jebiyay oo aan sinniqsanaayo ayaa aan is arkay. Qaylo badan ayaa meesha ka baxaysa. Qol walba qof ayaa ku xidhan. Qaarkood sidayda ayaa lala joogaa, qaarna waa kelidood, halka kuwo kale ay dhawr qof qolkiiba ugu wada jiraan. Kulaylka iyo kaneecada ayaa wax kaste noo dheer. Waa waaberi ku dhawaad. Cida eyda iyo codka kaneecada mooyaane, codkii kale eennu maqalnaaba waa qaar annaka naga mid ah. Waagii ayaa beryay. Codka dhawaaqa dheer leh ee eedaanka ayaa naga dul yeedhay. Ma garan karo, awal hore waa aan

tukan jiray, se imminka wax iga qaldan ma ogiye, anoo halkii fadhiya ayaa salaaddii laga soo baxay. Waxan is arkayaa aniga oo mar qoslaaya, marna ciyaaraaya. Runtii ma ay jirin cid ciyaartayda iga joojin jirtay, se marka aan saaxiibbaday kor ula hadlo ayaa walaalkay hurdada ka boodi jiray! In door ah ayaa aan halkii iska fadhiyay. Waan xusuustaa runtii, dad ehelka ka mid ah ayaa noo keenay subaxnimadaas quraacda. Anigu ma rabin quraacda, se markii wadaadku noo yimid, ee inta loo sheegay in aanan quraacda cunayn uu jeebadda gacanta geliyay, inta uu geed yar ka soo saarayna sanka iga saaray ayaa miyir iigu danbaysay... In door ah kolkii aan miyir la'aa, ayaa aan soo miiraamay mar danbe. Mise waa Sheekh Shukri oo i dul taagan. *"Cun waryaa quraacda"* inta uu si adag iigu yidhi, ayaa aan degdeg u daldalay wixii meesha yaallayba. Sheekhu waa nin aad u adadag. Xooggiisa waa aad yaabaysaa. Shaabuug adag ayaa uu sitaa. Sida awrka qoodheed geela u dhex qaado ayaa uu bukaanka dhexdiisa u gaashaan-qudhublaynayaa! Yaa ku dhaca marka ay aragto in cunto ayaa aad sheegaysaaye xaggiisa soo eegto; ninku qallafsanaa! Inyar markii aan quraacdii ka joogay, ayaa dhammaantayaba daaradda la iskugu kaayo keenay. Qaylada, taaha, saxarada, kaadida iyo wax kaste oo qof caadi ahi ka dheeryahay ayaa aannu dhex qaadaynaa. Dhengedda nalala dhacaayo, biyaha nalagu rushaynaayo ayaa nagaga darnaa. Rusho yaa aan

odhanin, waxa ay ahayd harqin! Haa, harqin ayaa ay ahaydoo, baaldiyo biyo ah ayaan nalooga tudhayne, sida guryaha oo kale ayay 'shaxdaas' nagu hayaan biyuhu. Wax kale iska daaye, naqaskii ayaa aan ku sigtay in uu igu dhego. Se qaar iga sii daran oo naftu qabatay ayaa aan arkaayay hafin aawadeed. Sidii annaka oo ah, ayaa haddana sameecado nalagu istaadhay. Afarta derbi ayaa dayaankii sameecadaha isku celiyay. Ma garan karo waxa ka baxayaa in uu qur'aan ahaa, waayo qur'aanka yaraantaydii waa aan dhigtay, waliba si wanaagsan ayaa aan anigu u xiftiyay. Kolkaas sameecadaha naloo shiday laba mid ayuunbuu ahaa waxa ka baxaayay. In uu yahay cod uu sheekh Shukri duubay oo cilmi aanan garanayn uu ku hadlaayay, iyo in qiraa'o kale oo aanan maqal uu qur'aanku ku baxaayay. Labada ta hore ayaanan anigu u badinayaa inay ahayd! Rag kaliya maaha dadku; dumar ayaa xataa ku jira! Wallaahi waan ooyaa marka imminka aan arko qof dumar ah oo xiskeedu maqanyahay. Waayo waxan dareemayaa marxaladda ay nolosha kaga sugantahay! Waa saase, gellin kolkii halkii nalagu hayay ayaa nala kala xareeyay. Dhir iyo waxyaabo la isku dardaray, oo inta saliid lagu dhabooqay caagado lagu shubay ayaa la ii soo qaatay. Qaar madax laygaga shubo, qaara la i cabsiiyo, qaar sanka la igaga shubo, adigu wixiiba waa lagu malluuqay. Cabbaar haddii aan sii jiifay, ayaa dhidid layga furay. Kulaylkii adduunka ayaa daaqadaha la ii soo saaray.

Baaxaadeg iyo is laba rog ayaa ii bilawday. Ala beladu daranaa maxaa i keenay xero baastan. Dhawr habeen iyo dhawr dharaarood kolkii aan ku jiray, ee aanan dib u arkin dadkii meesha is dhaafaayay iyo caalamkii aan gelaayay kolalka qaar, ayaa la yidhi, *'Wuu ladnaadaye kaxeeya'*. Intii aan se go'aankaas la isla qaadan, ayaa bahal masoo madawga aad yaabtaa daaqadda iiga soo galay. Waa aan kacay, saa milliqsigiisa iyo labada carrab ee is dhaafaya ayaa iga khalkhaliyay. Waa aan waabiyay, oo aan haddana waabiyay, saa inta uu igu soo booday, bartaas qoorta uu iskaga kay duubay! Qaylada iyo cabaadka iga baxaaya, orodka iyo dagaalka aan galay malayn maysid. Walaalkay ayaa i qabqabanaya; ala walaalkay siduu ahaa! Malaha muu arkayn bahalka dhan ee dagaalka igula jira, mise tolaw ka ogaan ayay ahayd? Aniga oo aan bahalkii isla ildarannahay, walaalkayna uu aniga i xejinaayo, ayaa sheekh Shukri oo xiimayaa noo soo galay. Sheekhii ayaa isna xoog iila qabtay walaalkay. Bahalkii oo qoorta igaga duuban ayaa aan buruciisa ku qabtay sheekh Shukri. Khasab ayay igu jiifiyeen. Maskii oo buruca sheekhu cidhiidhyay ayaa isa soo rogay, sidaadii uu isku rogayna bartaas qoorta ayaa aan ku dhegay. Sidan u xejinaayay qoorta ayaana ay naftii ka siibay. Si adag oo aad u xooggan ayaa aan bahalka u hayay. Intii aan xejinaayay, wax qaniinyo ah ilama gaadhin, se dabada ciddi uu ku lahaa ayuu iga taagay. Aad ayay meeshii ii kaartay, muddo badanna waa aan

ka seexan kari waayay kaarkeedii meeshaas. Arrintaasi kolkii ay dhacday, ayaa la isla waafaqay in aanan wali bogsan ee muddo la isii baxnaaniyo. Dhawr maalmood iyo dhawr habeen oo kale ayaa aan ku sii jiray. Saqdhexe iyada oo ay tahay, ayaa qolkii aan ku jiray ay iigu soo galeen nin iyo gabadh dharkii caafimaadka xidhan. Gabadhu waa gabadhii habeenkii u horraysay aan meesha ku arkay. Aad ayay gabadhu u dhoollacaddaynaysaa, se ninku ma ahayn mid weji furan leh. Dhawr su'aalood ayaa ay i weyddiiyeen, anna siday ahayd ayaa aan uga jawaabay. Su'aalihii waxa aan ka xusuustaa, *"Halkee masku kaa qaniinay?"* Inta aan yaabay, oo aan la cajabay siday ku ogaadeen, ayaa aan ku idhi, *'Ima uu qaniinine, halkan gacanta ayuu ciddi igaga muday'* Mar kale ayay i weyddiiyeen, *"Maad dishay markaa bahalkii mise wuu cararay?" 'Haa waan dilay, maydkiisii daaqadda ayaaba aan ka tuuray'* ayaan ku idhi. Inaas kolkii aannu is waydaarsannay, ayaa aan hal mar waayay ninkii wejiga adkaa! Si uu ninkaasi ku baxay iyo sifo uu igaga qarsoomayba waan garan la'ahay wali! Ninkii markii uu tagay, ayay inantii soo fadhiisatay sariirtan ku jiifay madaxeeda. Gellin ilama ay hadale, inta ay labada cagood isa saartay ayay xaggii kadinka nabar daawatay. Quruxda Eebbe u dhammeeyay ayaa aan anna isha la raacaayay! Waxan illaaway xanuunkii iyo kaarkii uu masku igaga sii tegay. Goor danbe ayay isoo jalleecday aniga oo si yaab leh ugu maqan.

Gacanteeda midig inta ay labada indhood igu qabatay, ayaa ay haddana markiiba isii daysay! Mise waxaaba i dultaagan ninkii markii hore naga baxay! Mar kale ayaa aan tacajab u go'ay. Ninkaygan dhaygagsan iima ay jeedin labadooduba e, dushaydii ayaa ay isku waraysteen. Ninku markan aad ayuu u faraxsanyahay, gabadhu se markan aad ayay u yaabbantahay! *"Waa runtii oo wuu dilay, maydkiisii ayaa hadda la aasaayay..."* Waxaas ayaa uu kula hadlaayay gabadhii ninku! Wuxu u jeedo ayaa aan fahmi waayay. Gabadhu intaas uma jawaabayso. Hadalkii ayuu sii waday ninku, markaas ayaa aan dareemay in wixii aan dilay ee maska ahaa ay ka sheekaysanayaan. Haddana iyagu nin ayay ka hadlayeen. In door ah markii ay aamusnayd gabadhii, ayay tidhi, *"Aniga ninkaas ayuunbaa iigu darnaa, noloshayda dhan walba isaga ayaa iga hor taagnaa. Siduu doono ha u dhinto e, aniga naftaydii xorriyad ayay helaysaa. Waxaana igu ballan ah in ninkan aan u abaalgudi doono..."* Aniga oo hadalka dhegaysanaaya, ayaa salaaddii subax la addimay. Mise qolkaygii yaraa ayaa aan keliday dhex galgalanayaa! Meel ay labadii qof ka baxeen ma hayo e, inta xanuunkii si fiican iiga go'ay, ayaa aniga oo taam ah aan sariirtii dulfadhiistay. Aniga oo caadi u soo jeeda, ayaa waagii beryay. Dhawr habeen oo kale ayaa aan ku sii jiray cilaajkii. Ugu danbaynna waxa la iga soo saaray aniga oo labadayda addin ku tallaabsanaaya. Nefis ayaana aan

galay. Shaqadaydii ayaa aan dib u bilawday, hawlahaygii adduunna halkii kaga toosay.

Tani sheekadii *Jamaal* ayay ahayd, sidii uu cilaajka ku galay, wixii uu la kulmay iyo habkii darnaa ee loola dhaqmaye, maalmahaas uu leeyahay waan nefisay, ayaa iigu horraysay muddo sannad ku dhaw wicitaankii Tasmiin. Goor habeennimo ah, aniga oo jooga suuqa dhexe ayay igu tidhi, *'Waan ku arkaa oo waadiga halka Telesom iyo Caddaani u dhexeeya waddada maraaya; wallaahi caawa mar ayaan is idhi ma jiidhaa, haddana waa aan iska kaa daayay ninyaw…"!* Inta aan naxay, muddo dheer ayaa aan ka raystay hanjabaaddeediiye ayaan ku idhi, *'Wali miyaa aad i daba socotaa, bal i jiidh waanigaas waddada maraayo—e haddaad naag tahay..'* Hadalkii ayaannu isku yar celcelinnay, ugu danbayntiina talefankii ayay igu dhigtay. Anna kuma celine, luuqluuqyada xaafadaha ayaa aan soo maray aniga oo bisinka xejisanaaya... Gurigii ayaa aan iska imid. Aad ayaa aan u naxsanaa habeenkaas, oo beladii waatan kugu soo noqotaye, maxaa aad yeeshaa ayaa niyaddaydu is weyddiinaysay. Runtii cabsi xooggan ayaa habeenkan iskugu kay timid. Ma aan moodayn in ay igu soo laaban doonto beladaasi! Si ay ahayd mooyaane, habeenkaas baqe ayaa aan seexan kari waayay runtii. Hadba dhan ayaa aan isku rogaa. Laydhka ayaan bakhtiiyaa, markaas ayay haddana wax ii khaakhaayiraan. Waan shidaa, haddana

marka aan ku seexan kari waayo ayaa aan damiyaa... Markii ay hurdo ii iman wayday, ayaan alaabtaydii iyo shandaddahaygii iska baadhay. Qolkaygii ayaa aan kala nidaamsaday. Internetkan maanta la galo iyo moobilladan waaweyn ee qofka mashquuliyaa ma ay jirine, waxa ugu weyn ee la isku mashquulin jiray akhriska buugaagta ayaa uu ahaa. Anna sidaa ayaa aan damacsanaa, oo buug yare sheeko ah ayaan is idhi iska akhriso. Kaas ayaa ila galay hawsha qolka iyo kala nidaamintiisaba. Aniga oo shandaddaydii baadhbaadhaya, ayaa aan arlay warqaddii ay Tasmiin barashadayadii ii keentay, taas oo ay ku jireen sawirkeeda iyo ubax yar oo guduudani, intaas oo aan xusuus u haystay! Waan soo qabtay. Wallaahi waa sawirkii ay ii keentay oo sidiisii ah! Niyaddayda ayaa shaki ku abuurmay. Sidee ayaa ruux jin ah sawirkiisa aad u arki kartaa ayaa aan is weyddiinayaa. In aan sawirka jeexjeexo ayaa aan go'aansaday, haddana se kuma dhiirran arrintaas. Ubaxii ayaan soo qabtay, isna laba sanno iyo dheeraad ka dib waa sidiisii. Sanka ayaa aan saaray. *'Aax, ala bahalku udgoonaa'*. ayaa aan kor u idhi. Waa yaabe, caraftii ka uraysay habeenkii ay ii keentay, ayaa haddana ka uraysa iyada oo in wax ku siyaadeen ha joogto e, aan haba yaraato—e waxba iska beddelin; oo sideedii ah! Mar kale ayaa uu haddana werwer igu furmay. Sababta ubaxan uu cadarku uga bixi waayay ayaa aan is weyddiinayaa! Waa yaab

wallaahi. Waxani wax caadi ah maaha' ayay niyaddu i leedahay. *'Haa maaha, maaha, maaha....'* In cabbaar ah markii aan alaabtii ku dhaygagay, ayaa aan markii danbe ubaxii qaadayoo, kidif iyo kidif ayaa aan u kala gooyay. Sawirkeedii ayaa aan ku xigsiiyay oo, isna qurub iyo qurub inta aan u jarjaray ayaa aan xashiishka ku daray. '*Waar wuxu waa maxay, maskaxdii ayaaba ay kaa waashay beladaniye'* cod hiinraag leh ayaa intaasi igaga soo baxday. Dhididka iga dhacaya malayn maysid. Cabbaar ayaa aan qolkii dhex war wareegaayay. Hadba waxbaa maskaxdayda ku soo dhacaaya. Mar waan isla doodayayaa, marna aniga iyo naftayda ayaa caadi u wada sheekaysanayna. Haa waa sidaa, xaalad aan ku suganahayba maan is kala garanayn runtii. Waxa aad mooddaysay in madaxuna waxoogaa xanuun ah tirsanaayo, daal iyo juucjuuc na igama maqna, intaba se wahsiga ayaa ii dheeraa! Markii ay hurdana ii iman wayday, waxan is lahaa akhrina aan ka caajisay, ayaa aan dibadda iskaga baxay. Aqalkayagu dayr ma lahayne, kaabadda dibadda ayaa aan soo fadhiistay. Laydhka daaradda inta aan soo bakhtiiyay, albaabkana aan soo celiyay, ayaa aan halkii guriga hortiisa cabbaar iskaga laydhsaday. Inyar haddii aan fadhiyay, ayaan arkay gaadhiga cad ee sekadda naga soo horjeedda yaalla, afkiisuna uu xaggayga u soo jeedo. Heeso ayaa ka baxaya gaadhiga. Dheg uma aan jalaq siinnin, heesaha ka baxaayay se Soomaali in aanay ahayn muusiggooda

ayaa aan ka dareemaayay. In door ah ayaa uu isna iska taagnaa, anna aan iska laydhsanaayay. Hadda waan nastay, aadna waa aan iskaga nafisay, wali se hurdo aan seexdaa iima dhawa e, cabbaar in aan iska sii fadhiyo ku tashaday. Aniga oo aan wali kicin, ayaa gaadhigii la istaadhay. Laba indhood oo dharaar ah ayuunbuu igu qabtay! Waar qofku siduu yahay imminka! Gacanta ayaan kula hadlayaa si uu indhaha iiga bakhtiiyo ama ii dhaafo. Nag ba! Waxan arkay in aan la ii jeedin, markii aan u adkaysan waayay, ayaa aan u soo dhaqaaqay aniga oo is leh aad qofka la hadashid. Sidaadii aan u soo dhaqaaqayba, mise waa gaadhigii oo istoobbadiisa cascasi sakadda ka sii laabayaan! Waan u qaadan waayay runtii. Qofka baasi dheereeyee ayaa aan is leeyahay. Haddana shakhi ayaa i galayoo, armaa Tasmiin ahayd ayaa igu soo dhacday. Markii ayaan gocday oo aan isku canaantay, *'Maxaad nooca gaadhiga iyo lanbarkiisa u eegi wayday? Ah, aar markan way ku seegtay malaha...'* Ayaa aan iskugu jawaabayaa. Gocasho waxba tari mayso e, kaabaddaydii in door ah oo kale iska fadhiyay. Aniga oo halkaygii fadhiya, ayay isoo wacday Tasmiin! Waan ka qabtay. Cabbaar haddii aannu sheekaysanaynay ayay igu tidhi, *"Ma in aan sidaas kugu daynaayo ayay kula ahayd. Run ahaantii markii aad suuqa ka soo baxdayba waa aan ku soo daba galay. Adigu waxad is lahayd meel aan waddo ahayn mar, haddana meel kaste waan kaa soo daba maraayay. Cabbaar ayaa aan daawanaayay muuqaaga caawa. Wallaahi*

waa ii farxad walaal. Hay illaawyin yaa? Sidaas dad ku kala tagaaya ma nihine, cadhadana ka soo laabo oo caadi iska dhig..." Intaasba iyada ayuunbaa hadlaysaye, markii aan is idhi wax weyddiiba lanbarkii ayay igu dhigtay. Dhawr goor oo danbe ayaa aan ku celiyay, mise in aanu ahayn lanbarkani mid la furaayo ayaa ii xaqiiqawday.

–JAMAAL- "Markii la iga soo saaray cilaajkii, ee aan aad iskaga ladnaaday, ayaa aan safar gaaban ugu baxay miyiga. Dhawr toddobaad ayaa aan ku maqnaa. Intii se aanan miyiga ka soo laabannin, ayaa qolo xer ah oo meel deggan aan habeen u tagay. Aad ayay u shallaadayeen. Dikriga iyo qasaa'idka ayay kala roganayeen. Tuldo geel ah inta ay dhuundhabeen, ayay darab iyo mud miidhan isla dhacayeen. Rag iyo dumar lama kala soocnayn. Qaadku waa uu ka dhaxeeyayay islaamaha nasrada sita iyo ragga waaweyn ee xertu ka haybadaysato! Fooxa ayaa *'budhaas'* haya. Inyar kolka la fadhiyaba, cadarkii furcaddaha la odhan jiray ayaa la isku rushaynayaa. Sheekh Jaylaani iyo rag kale oo ay sheekh Isaxaaq iyo ka mid ahaayeen ayaa meesha lagaga dhawaaqayaa. Qaar ayaa suuxaya oo meesha galgalanaaya... Hadba ruux jibbaysan oo xamaasaddu sidato ayaa dhinac ii jiidha. Cadarkii ayaa sidii noogu socda. Qiiqa sigaarka oo aanan anigu urtiisa jeclayn ayaa caawa dani i yeelsiisay. Saacaddu way sii durkaysaa. Aniga oo arkaaya ayaa dhallinyaro iyo dumar badani

guryahoodii u hurdo tegayaan. Rag qamaamuur ah iyo dumar qadhadhayti ah ayaa meesha iskugu soo miidhmaaya. Dumarku ma badna; waa faro ku tiris. Se ragga amnaxyadoodii sita, ee xiiska iyo ablayda ku gaashaaman ayaa orta jiibinaya. Qaadku waa rasaysanyahay, walaw hilibka ragga waaweyn loo dhigay hadba taray la keenaayay, haddana anigu mid dar-leef ah ayaa aan fiidkii galay, saa ma hiddigine waan muhanayaa. Baahi ayay tabanaysaa calooshu. Indhaha laftooda ayaa hurdadii fiidka gocanaaya. Inta aan labada indhood marmartay, haddii aan af muggii kala waaxay oo aan hamaansi ku jiiday, ayuu nin rag yaqaan ahaa mijin jaad ah afka igaga dhuftay. Walaw markii hore aanan rabin in aan qayilo, haddana gar ayay noqotay in aan hadda hurdada iskaga duuliyo caleentan. Qaad qamax ayaan muddo hore ahaan jiray, se intii caafimaadkaygu xumaadayba bahalka waa la igala dagaalami jiray, anna markii danbe ahmiyad badan ma siin jirin. Mijin dadar ah ayuu igu taartaye, inta aan gaagaabsaday ayaa aan taqsiinta u adkaystay. Sacab aanan goorahaasba tumin waaniga ku laba rogay meeshii. *'Shuba hadda; Haye hadda Haye...'* In door ah markii aan qayilaayay, wakhtiguna waa dhawaad yahay, ayay bacdaydii soo daba yaraatay. Dhawr mijood oo balballeeti ah ayaa haddana laygu fadhiisiyay. Haatan waa la yaryaraaday. Dadkii qaar ayaa aan meelba tagine, xabaalaha wada dhex xamaaranaaya! Odayga inta uu

jibbooday qabri dul yuurura ee ciidda isku qasaya malayn maysid. Dumarkii qaar galgalanaaya ayaa jira—oo intay nasradu jiidhay, jibbo iyo suuxid wax aanan u kala saxayn la widhiidhiyaaya. Cidi cid kuma mashquulayso. Sidaa iyada oo ah, ayay kaadiyi i qabatay. Inta aan labadaydii kabood iyo wayso qaatay, ayaa aan holladay in aan meel yar durugsan gaadho. Markii aan kacay, ayaan gudcurkii waxba ka arki waayay. Aar meeshu madoobaa dii aan idhina, nin sii jeeday oo dhar madmadaw xidhnaa ayuunbaa igu yidhi, Inna mari anaa kuu iftiimine. Waannu is raacnay ninkii. Waannu sii sheekaysanaynay. Wax aannu is lahayn illaa hadda ma xusuusto, se ninkaasi in aanu toosh sidin, haddana jidku noo iftiimayay si wacan ayaa aan u xusuustaa. *'Halkaaba iska fadhiiso'* inta uu igu yidhi, ayaan mar qudha waayay nuurigiisii meel uu marayba! Markii aan xaajo dhammaystay, ayuunbuu haddana iftiinkii i hor qaaday! Intaas waannu sheekaysanaynay, se wixii aan is lahayn ma xusuusto. Markii aan soo galay halkii la fadhiyay, ayuu ninkii iska istaagay halku markii hore iga raacay. Dadku aad ayay u sii yaraadeen. Salaaddii subax inyar ka hor, aniga oo dhex fadhiya raggii ugu waaweynaa meesha, ayaa wafti cusubi noo yimid. Sheekhii meesha u weynaa ayaa isla booday. Ma ogi in dadka kale ila arkayeene, raggii noo yimid mid ka mid ah oo weyjigiisu illaa hadda maskaxdayda ku sawirnayn si uu ahaa, ayuu sheekhii waran uu sitay oo dhanna bud

ka ahaa inta uu hor qabsaday, oo afkiina gacan ku qabtay, xaggii danbe ee warankana gacan ku qabtay, dabeed na uu hoos foorarsaday ninkii. Ninkiina waxbuu ku saydh saydhiyay kii hoos foorarsaday; salool ayaa aan u malayn in uu waxaasi ahaa. Intaas ayaa si ilbidhiqsiyo ah u dhacday. Dhawr nin ayay ahaayeene, way na soo dhax fadhiisteen. Wax salaan ah iyo wax hadal ah toona nalamay yeelan raggaasu. Anigu raggan nagu soo biiray waan arkayaa, se raggan meesha fadhiyaa in aanay arkaynba ayaad mooddaa. Qaadka ayay qaar kaga joogjoogsanayeen. Shaaha way la cabbayeen. In door ah markii aan fadhiyay halkii, ayaa mid igu xigay oo weyjigiisu kolkii hore aanu ii muuqani ila hadlay. *"Waaryaa Jamaal, imminka innakii uunbaa isku soo hadhnaye"* ayuu igu yidhi. Waan fahmi waayay waxa uu u jeedo. Dhawr goor markii aannu hadal isku celcelinnay ayuu igu yidhi, *"Ninkaas taagan miyaad garanaysaa?"* Ninkii taagnaa haddaan jalleecay, mise waa kii markii isii kaxeeyay. Inta se aanan hadal kalaba u celinnin, ayuu iska rogay koofiyad ku gadaannayd oo wejigiisii si wanaagsan ii tusay. *'Ala, ala, oo waa kiiye! Yaa, waa isagii wallaahi..!'* Ayay maskaxdu degdeg u leedahay. Aniga oo isku dhex yaacsan, wejigiisiina si wanaagsan u gartay, aan se magaciisii haynin, ayuu igu soo foorarsadayoo wuxu igu yidhi, *"Ha werwerin, magacaygu waa Sakhar, ninkii digtoorka ahaa ayaan ahay ee cilaajkii sheekh Shukri kuugu iman jiray..."* Inta aan aad u

cabsaday, ayaa aan is idhi ka guddoon salaanta gacan uu soo fiiqaayay. Sidaadii aan gacanta u soo taagay, ayay wax aanan arkayni ila boodeenoo, waxa aan ku soo miiraamay qorraxda kulaylka badan leh iyo ciidda aadka u kulul ee isku kay qabtay! Waan kacay, mise waxa aan dhex jiifaa meel aad u niis badan oo bataax ah! Afarta jiho ayaa aan eegay, mise dhul aan weligay sawirtayna ma joogo. Waa xeeb, bataaxa niis weynta ah ee hanfiga leh ayaa aan soo dhex lugeeyay. Xeelligii badda ayaan raacay. Waxa aan ka cabsanaayay haddaan neecawda biyaha badda ka fogaado in harraad ba'ani xeebta igu dilo. Wax aan halkii socdaba, gabbalkii danbe ayaa ii dhacay anoo socda. Lugta ayaan lugta daba dhigayaa. Aad ayaa diihaal badani ii haystaa. Gaajo ayuu beerku i dhex yaallaa. Nis danbe oo habeennimo ah ayaa aan tuule yar oo cammiran ku soo baxay. Aad ayaan ugu farxay runtii. Tuuladii ayaan naf kula soo itaalay. Meeshu waa wada laydh. Gawaadhida is dhaafaysa waad yaabaysaa. Suuqyo siraadan ayaa ka binaysan. Laakiin hal qof oo dhex socda ma arkaysid, gawaadhi yaryar oo wada yaacaysa ayuunbaa ku waydaaranaysa. Meel aan wax ka cuno ayaa igu adkaatay cid aan weyddiiyaba in aan helo. Afarta koone ayaa aan magaaladii u goobyaalay. Aad ayaa aan u tabcaamay sidan kolba dhan ugu socday magaaladii. Gaajo ayaan la dawakhay kolkii danbe. Naf waxa iigu danbaysay markii aan sii dhacaayay! Runtii ismaan lahayn nolosha

taas oo kale ayaa ku soo mari doonta, se maalintaasi bilawgii casharradayda ayuunbaabay ahayd shaw—ee belo way…

Tiiyoo cunto afka laygu guraayo, oo ninkii Sakhar i siisiinaayo cuntada ayaan soo miirsaday. Waan booday, saa inta uu isoo qabtay ayuu igu yidhi, *"Salaantii ayaa waxaas oo dhan kuu gaysatay!"* Maan fahmin waxa uu markaas u jeeday, se gadaal ayaa aan ka ogaaday in salaanta caynkan ahi ay aad u dhibto *Sakhar!* Way i qabteen, dabadeedna waxa la i geeyay meel rag badani fadhiyaan. Cid aan Soomaali ahayni kuma ay jirin. Sidan dareemaayay shir ayaa u socday. Aniga se xabsi ayay goobtu iiga dhignaydba. Meesha hadallo qasaa'id iyo shallaad u badan ayaa ka socday. Waa deegaan qubuuro ah. Dhanka waqooyi bad ayaa kaga teedsan, dhanka galbeed-koonfureed na buuro, halka xabaalo badan, ceelal biyood, guryo daaro ah iyo wax la hal maalaana ay ku hareeraysanyihiin.

Deegaanka sidan ah, waxa yimaadda dad aad u kala duwan, sida oo kala waxa deggan bulsho rag iyo dumar ba leh. Waxa kale oo ka jira maqaammo ama goobo qubuuro ah, kuwaas oo dadka ku aasan si weyn loo siyaarto. Dad badanaa in ay nolosha ka saahideen isku dhigaaya ayaa goobta ka buuxa. Habeen iyo maalin mid na fooxu kama damo. Cadarrada kala wada jaadka ah ayaa gacmaha isku shubayaa is dhaafaan gabbal iyo waale. Waxa jira dad in ay ka barakaystaan goobta u

yimaadda, kuwaas oo goobo ka mid ah si gaar ah u taga Meesha. Sida in ay dhagax dhunkadaan amaba ku fadhiistaan. Goobta waxa kale oo noogu yimaadda dad iska socda oo aan jiho ay u jeedaan aanay jirin. Cuntada waa la kariyaa uun, cidi na wax ba ma kala laha—e waa la cunaa uun. Dad waxa jira aan xus ahaan dhammayn, hadda na meesha imashadeeda lagu ibtilieeyay! Geedka Qaad ka la yidhaahdo isaga gallinna lama waayo. Waa hubaal in ay noo yimaaddaan dad magac iyo mansabba bulshada ku dhex leh; xataa siyaasiyiin caab ah ayaa noogu iman jirtay meesha. *Muruudka* goobta ayaa dadka bari jiray wixii macluumaad ah ee goobta looga baahdo.

Bal hadda hadda kaalay ku tuso waxyaabaha qaar meesha ka socda e! Ma aragtaa islaantaa tusbaxa weyn leh, eeg hadda sida ay ciddiyuhu ugu baxeen! Sida la ii sheegay waxa ay goobtan joogtay muddo labaatan sanno ka badan. Maydhasho iska daaye, intii ay meeshan joogtay xataa maalin ka mid ah ilkaheeda caday ma ay marin! Laakiin waad la yaabtay intan yare maxaa dhacay? Waxa aan u malayn adiga wax badan laguuma sii sheegi karo! Eeg gabadhaas dhagaxaanta dhundhunkanaysa; way barakaysanaysaa! Haa, waxa ay aamminsantahay in ay ka helayso barako iyo wax anfaca. Buulka yar ee halkaa ka muuqda waxa deggan nin weyn oo sheekh ah! Haa, waa ragga ugu cilmiga badan goobtan aynu joogno, wax kale iska daaye,

hadalkan aynnu ku wada hadlayno waa ay maqlayaan! Lama xanto isaga wax na lagama sheegi karo..

Waa maalmihii iigu horraysay markii aan sidan ugu sheekaynaayay mid ka mid ah dadka meesha nagu soo bookhday, laakiin aniga oo sheekadii u wada ayaabu iska dhaqaaqay! Shaw waxan aan ka sheekaynayaaba waa ka khatar meesha oo lama oggola in sidaa loo hadal badnaado! Habeenkii markii aan seexday ayuu Sakhar ii yimid. Inta uu beerka igaga fadhiistay ayuu cunaha i qabtay. Gallin markii uu i ceejinaayay ayuu isii daayay! Isaga oo xanaaqsan ayuu igu yidhi, *"Waryaa adiga oon waxba ogayn yaa ku yidhi dhuran! Mar danbe haddii waxaas ama hadal ba lagaa maqlo adaa isku gaystay wixii kugu dhaca…"* Aniga oo qaylinaaya ayaa aan hurdadii ka soo booday. Sidaadii aan indhaha u kala qaaday na waxa aan arkay ninkii aan shalay u warramaayay oo agtayda taagan—oo dhoolla-caddaynaaya! Ilama uu hadlin, anna wax ba ma su'aalin, inta aan cabbaar sii eegay ayaa aan hurdadaydii iskaga laabtay.

Maalintii ayaa iigu danaysay in aan wax ka sheego meesha, imminkadanna wax badan in aan ka sheego haddii aad iga waydaan ha ila yaabina! Muddo shan sanno ah ayaa aan goobtii joogay. Waxa aan kala bartay dadkii meesha joogay oo dhan. Waxa aan gacanyare u noqday ninkii buulka yar ee cooshadda ah degganaa. Waxa uu ahaa nin aan inta badan halkaa ka

soo bixin. Wax kaste oo uu cunaayo ama cabbaayo aniga ayaa u gayn jiray. Marar ayaa dhici jirtay meesha qaad laga waayi jiray, markaa sheekhan aan u khidmeeyo ayaa inta buulka uu fadhiyo dhabarkiisa la isa soo taago la odhan jiray, *Wali Aallaw naftii walaftay!* intaa kolka uu maqlo ayuu ducooyin akhriyi jiray, kor na waa u qaylin jiray. Inyar ka dibba waxa noo iman jiray gaadhi lalaaya ama cid uun qaad sidda! Mararka qaar xataa buulasha sheekha dushiisa ayuu odhan jiray '*ka soo qaada halkaas baa la dhigaye'!* Sidaas ayay goobtu u ahayd mid aan wax ba laga waayin. Sheekhan aan gacanyaraha u ahay waxa uu gaadhay yaqiinta! Macnaha wax mukallifaad ah laguma laha, sida; *salaad, soon, sako, sadaqo, xaj iwm*…

Muddadaa aan la joogay wax badan oo cilmi ah ayaa la i baray, cilmiga la i barayna waxa ugu mudnaa dhirta iyo faa'idadeeda. Aad ayuu sheekhu ii jeclaa muddooyinkii danbe oo dhan. *"Nin burji fiican ayaa aad tahay"* buu igu odhan jiray. Aniga oo sidaas ah, ayuu maalintii danbe igu yidhi, *"Adiga waxa lagu sikhray dawaynta dadka, wax walba na waad ku dawayn kartaa… Orodoo dadkii magaalooyinka ayaa kuu baahane dadka dawee.. Carar shinbirkii dabiibka ayaa aad tahaye!"* Aniga oo yaabban, amarka sheekha na aan diidi karin ayaan ku idhi, *'Sheekh iin, een…'* Markaas ayuu igu yidhi, *"Waryaa waan ogahay waxa aad ka fikirayso, lacag yar iyo wax aan micno lahayn ayaa qalbigaaga ku soo dhacay iyo*

xaggeen wax ka bilaabayaa… Soco adigu, laba nin ayaannu kugu darnay, dadka oo dhammi na way ogyihiin in aad tahay sheekh dadka dawynaaya; waa lagu sugayaa!"

Sidii ayaa aan ku soo baxay. Laba nin oo raggii meesha joogi jiray ah ayaa ila socda. Tuuladii ugu horraysay ee aan soo gaadhay markii aan imid ba, nin dadka deegaanka ah ayaa na siiyay guri aannu degno, isaga ayaa dadkii oo dhanna iigu yeedhay. Muddo bil ah oo aan halkaa joogay, waxa la kala waayay dadka aan dabiibayaa meel ay kala istaagaan! Waxa aan sitaa ducooyin qur'aan ah oo sheekhaygii iisoo qoray, kuwaas ayaanan dadka ku akhriyaa, dhirta na markii hore waxoogaa la ii soo dhiibay ayaa aan sitay, kuwaas ayuun baan dadka na wada siin jiray. Qof kaste ba meesha uu ka cabanaayo biyo aan ducooyinkii ku akhriyay ayuun baan ku saydhi jiray! Labadii nin ee ila socday ayaa yidhi, *"Mar haddii aad nin ummaddiisa ku dhex jira noqotay, annaku waa aannu kaa sii tagaynaaye, waa ku kaase halkaa ka sii wado hawsha…"* Markii ay iga tageen nimankii, ee ay dhawr habeen iga maqnaayeen, ayuu habeenkii danbe ii yimid nin dhar wada cad xidhan. Guud ahaan oogadiisu na ay wada caddahay. Waxa kaluu sitay ul tukube oo kale ah oo qalqalloocda, iyadu na waa ay caddayd! Aniga oo dhabarka u jiifa inta uu isoo duljoogsaday ayuu warqad ii dhiibay, kolkaas ayuu igu yidhi, *"Waxa kuu soo dhiibay sheekhaagii, waxaana uu ku soo faray in aad warqadda si wacan u akhrisato, wixii lagu*

faraayana aad sidaa ku qaadato". Warqaddii ayaa aan sidii kaga guddoomay, markii aan kala furay ayaan judhiiba salaantiisii uu caanka ahaa isha ku dhuftay iyada oo qoraal ah. Hoos ayaa aan isha u wada mariyay. Guud ahaan markii aan dhammeeyay na, inta aan isku laabay, ayaan u dhigay sidii la i faray!

"Afar mar isku jabi, kana dhig wax yar oo aad u kooban. Dusha ka gali bac, kana ilaali in wax biyo ahi ay taabtaan warqaddan. Marka aad isku laabtid, waa in ay samaysaa sawir saddex-gees ah. Haa, sidaasi haddii ay samaysmi waydo ku noqo isku laabkaaga. Waligaa ilaasho warqaddaas, waxa aannu kuu galinnay cilmiga dhirta iyo jacaylka dadka… Sida ugu dhakhso badan uga tag magaaladan aad hadda joogtid. Gaadh, oo hore u gaadh magaalo heblaayo. Waxa ku sugaaya dad badan oo dhaawadaaya dabiibkaaga. Orod iyaga ayaannu shinbir kaaga dhignaye…" Intaas markii aan wada akhriyay, waxa aan yeelay sidii la i faray, waxaa na aan u xadhko-xidhay magaaladii la ii diraayay. Intii se aanan bixin, waxa magaaladii aan joogay iigu yimid nin dadka ladan ee hantida haysta ah. Majliskaygii haddii uu ila soo fadhiistay ayuu iigu bushaareeyay intan, 'Sheekh waxa aan doonayaa in aan ku geeyo magaalo heblaayo, guri aan halkaas ku leeyahay ayaan ku siinayaa, waxaa na aan rabaa in cilmiga Alle ku baray aad dadka wax kaga dawaysid. Intaad nala joogto qarashkaaga, amnigaaga, hoygaaga iyo xataa haweenay aannu ku siinno annaka

ayaad naga taqaannaa; sidaas nagu raac sheekh. Isla doonasho Ilaah. Magaaladan uu rabo in aan u raacaa waa tii markii hore ba in aan tago la igu soo amray! Inta aan hoosta ka farxay, ayaa aan si deggan ugu idhi, *'Haddii ba aad tihiin dad sidaas u ixtiraamaaya dadka ummadda waxtarka aqooneed u leh, xaq ayaa aad u leedihiin in aan idiin raaco meeshii kaste eed rabtaanba; waxaanan ahay diyaare goorma ayaynu baxnaa?'*

Waxa aan xidhaa khamiis buluug ah. Nin marka hore na jismi xoogganaan u dhashay ayaan ahaaye, waxa aan ku yeeshaa qaab haybadeed qurux badan marada aan xidhanahay. Inkaste oo aan ahaa dadka timaha adag, hadda na waa aan ku khasbanaa in aan gadh la baxo. Sii daayay intii taaggayga ahayd timihii gafuurka igaga yaallay. Wax aan sitaa bac ay dhir iyo ciidi ku jirto! Ciiddan aan sito dadka ayaa aan ugu talo galnay in la sii siiyo. Waa ciid carfi leh oo udgoon, midab ahaanna waa ciid aad u cas. Dadka waxa aan uga dhignaa wax laga soo qaaday qubuuraha qaar ka mid ah Eebbe awliyooyinkiisa, sidaa na ay carafta udgoon u leedahay. Mararka qaar na waxa aan uga dhignaa in goobihii ay ku waysasteen qaar ka mid ah awliyooyinka Ilaahay aan ka soo qaaday ciiddan, sidaa na ay carrafta saa'idka ah u wadato. Xaqiiqadu se taas ma aha, ciiddan annaka ayaa cadarro ku darna, annaka ayaana udugyo kala duwan ku shidna oo sidaas ku carfina!

Magaaladii la ii soo waday ayaa aan imid. Dad aad u tiro badan ayaa maalin walba dabiib iyo dawo iga soo naadsan jiray. Dadka waxa aan siin jiray uun dhirta aan sitay oo qudhaata, qaarkood na biyo ayaa aan cashar ugu tufi jiray oo kaliya. Waxa qaar aan u xidhi jiray qardhaaso xaggii sheekhayga la iiga soo dhiibay, sidaas ayaanan ku noqday nin weyn oo aad bulshada uga wada dhex caan ah, sidaas ayaanan ku tabcaday maal badan! Sidaas fudud ayaana aan ku helay sumcad iyo karaamo la igaga danbayn jiray! Sidaas ayaa aan muddo aad u dheer ahaa, ugu danbayntii na habeen danbe ayay ii timid gabadh aad iyo aad u qurxooni. Waa gabadh ku labbisan dhar wada cad! Sariirtii aan ku jiifay ayaa ay madaxeeda soo fadhiisatay. Anigu dhabarka ayaa aan u jiifay, iyadu na waxa ay soo fadhiisatay meel madaxayga ku toosan. Dhawr mar ayay indhahayga hortooda gacanteeda marmarisay, markii danbe se waa aan dareemay, waana aan ku kacay hummaaggii gacanta la iiga sawiraayay.

Qacdii aan indhaha ku siiyay ba, waxa ay igu soo dhawaysay quruxdii foolkeeda! Ashqaraarkii wajigeed ayaa aan dhab ula muusooday farxadda ka muuqatay. U holladay in aan sare fadhiisto, se iyada oo aad mooddid in ay ila ilaaqtamayso, ayaa ay gacanteedii barakaysnayd dib iigu celisay sariirtaydii. Ii bilawday sheekada. Aniga oo aad i mooddid in aan u hamuun qabo weedheeda na hadalka ku bilawday, Jamaal waa

aad mahadsantahay, runtii ma garan karaayo wax aan abaalkaaga ku gudo, se in aan sidan u faraxsanaado ama aan u qurux badnaado adiga ayaa ka danbeeyay! Waxa laga yaabaa in aad marar hore wajigayga aragtay, se aanad wax aqoon ah oo kale aanad ii lahayn. Haa waa aad i aragtay, waliba aniga iyo Sakhar ayaa marar kuugu nimid goobtii *Sheekh Shukri*. Intii muddadaa ka danbaysay ee aad adigu na meesha ka soo maqnayd, dabcanna noloshaadu ay ka soo fiicnaanaysay tii hore ee ay ahayd, aniga na sidaas oo kale ayaa ay noloshaydu uga soo kabanaysay dhibtii iyo rafaadkii hore ee ay ku jirtay. Dhab ahaan ma doonayo in aan kaaga wada warramo noloshayda, se maanta waxa aan ku suganahay heersare, adiga in sidan laguu maamuuso, dadka na dabiibka dhirta laguu soo dhex mariyaa waa mid ka mid ah abaalguddadii aad igu lahayd, waa se aan ka sii badin doonaa intan haddii aad adigu samirkeeda lahaatid!

Waa aan kaa raalligalinayaa mar kale haddii aan hore kuu dhibay, anigu waxa aan ahay Tasmiin! Waa laga yaabaa sida aad ii eegayso in aanad magacayga garan, waxa se aan ahay gabadhii uu Axmednuur taleefanka kuugu dhiibay adiga—oo askari ah. Waxa aan ahay gabadhii ka danbaysay in aad xanuunsato oo cilaaj lagu geeyo, waxaa na aan ahay sida oo kale tii ka danbaysay in aad fiicnaato oo caalim lagaa dhigo! Taasi na waxa ay ku timid abaalgud aad igu yeelatay. Ma

xusuusataa ninkii aad ku dhex dishay cilaajkii Sh. Shukri? Oh, idinku *mas* ayaa aad tidhaahdaan laakiin. Adigu waa kaas uun waxa aad rabtaan ba dhaha—oo; saw ma xusuusatid? Ninkaasi waxa uu ahaa kii nolosha igu ciilay! Isaga ayaa aabbahay, hooyaday iyo badiba ehelkayaga laayay, adigana waxa uu doonaayay in uu ku dilo, maaddaama aan wadnahaaga kaga dhuuman jiray marka uu isoo weeraro! Habeenkaa aad halkaas ku dishay, ayaa aniga nasasho iigu horraysay, adigana bogsasho danbe kuu ahayd; waayo waxa aan ka baxay jidhkaagii aan gabbaadka ka dhigan jiray! Isaga laftiisa waa aan daayay inaadeerkaa Axmednuur, dib na wax garab ah uma aan weyddiisan, laakiin waxa uu ahaa isagu nacas nasiib-badan! Waa laga yaabi lahaa in wax badan oo adiga aanan tarin aan isaga tari lahaa; laakiin u sheeg imminka marka aad aragto, in wax walba aad ogtahay, dhammaantiinna faraha idinka qaaday…

Amakaag iyo dhaygag ayaa warka inantani uu igu keenay aniga. Hurdadii ayaa hal mar si toos ah iiga go'day! Waa aan nuuxsaday, dhaqaaqay—oo soo sare kacay waliba! Markii aan sare fadhiistay ee aan indhaha kala qaaday, ayaa aan mar kaliyaata waayay gabadhii ii warramaysay! Markii aan soo sare fadhiistay, ayaa aan hareerahayga fiiriyay, mise wax igu cusub ama intii aan qolkayga ku ogaa aan ahayn ayaa aan arki waayay. Markii aan is idhi dib u seexo, ayaa aan aad ula yaabay sida uu jidhkaygu u burbursanyahay una daallanyahay.

Mase u joojine, si degdeg badan inta aan isku duuduubay, ayaa aan hurdadaydii iskaga laabtay. Cabbaar kale haddii aan hurday, ayaa waagii beryay, sidaas ayaa na aan ku soo kacay maalintaas. Kolkii aan gallinkaas hawlahaygii qabsday, ee dadkii ii imanaayay aan u shaqaynaayo, ayaa ay maskaxdayda aad ugu soo noqnoqtay wixii xalay aan arkay! Aad ayaa ay arrintaasi maalintaa fikir kale oo aan iyada ahayn ay iigu diidday! Markii aan waxba qaban kari waayay ayaa aan go'aansaday in aan iska jiifsado, ka dib na waxa aan iska galay qolkaygii.

Cabbaar ayaa aan sariirtaydii dul aallay aniga oo ka fikiraaya wixii xalay dhacay. Fikirkaa markii aan ku daallay, ayaa aan hor istaagay muraayadda la isku daawado ee qolka ii taallay. Waa aan is fiiriyay. Dhan kaste ba waa aan iska eegay. Cumaamaddii madaxa iigu duuduubnayd ayaa aan iska furtay. Cabbaar ayaa aan timahayga yar ee gadhka iigu yaalla aan had ba dhinac u salaaxay. Waa aan is garan waayay dhabtii. Mar kaliya ayaa aan u muuqday qof hurdo ka soo toosay! Buuqa iyo hadalka dibadda ka socda ayaa anfariir igu riday. Markii aan nabar shoogsanaa, ayaa aan daaqadda ka eegay dadkan bulhaamaya! Waa dad aad u tiro badan oo dumar iyo carruur u badan! Dib ayaa aan sariirtaydii ugu laabtay. Waxa aan damcay in aan seexdo, hadda na laba indhood ayaa aan isku keeni kari waayay! Aniga—oo laba boglaynaaya, ayaa uu albaabka igu soo garaacay

ninkii guriga i dejiyay martidana aan u ahaa. Markii aan ka furay albaabkii, ayaa uu ii dhiibay sharaab, hilib, caano iyo cunto uu siday. Ka dib na waxa uu igu yidhi, *"Sheekh malaha saakana ma aad quraacane, qadadii ayaaba inna haysa—e lafahaaga wax u cun…"* ka dib na waa uu iga baxay!

Wax kale ma aan qabane, inta aan sharaabkii oo aad u qaboobaa laacay ayaa aan is tuuray, ka dib na waxa aan galay hurdo dheer oo aan toosiba kari waayay! sidii aan u hurday ayaa aan baraarugay iyada oo ay habeennimo tahay! Waa aan booday, ka dib na waxa aan arkay iyada oo dadku ay sii kala carraabayaan! daaqadda ayaa aan wax ka fiiriyay, mise guriga oo dhan waa laga wada tagay oo kaliday ayuun baa qolkaygii hurda! Inta aan soo fadhiistay, ayaa aan hadda na iska cabbay caano geelii saaka la ii keenay, cuntadii saakana inta aan wax yar ka cun cunay, ayaa aan hadda na dib iskaga seexday! Waxa aad mooddaa daalka i hayaa in uu yahay mid qardo iyo soojeed badan tirsanaaya. Marka aan sidaa dhabanka dhulka u dhigo ayaa aan ka shubayaa. Runtii ma xusuusto goor aan hurdo sidan ah seexdo ba muddo dheer. Seexday, habeenkii oo dhan na khuurada laba jaray!

Wax aan hurdaba, kolkii uu habeenku laba u kala jabay haddii intiisii badnayd ay tagtay, ayaa uu qolkaygii soo galay nin dheer oo madoobi. Toos inta uu iigu soo socday, ayaa uu u muuqday in uu aniga isoo

koraayo ba! Inta aan booday ayaa aan kor u qayliyay! Ka dib na inta uu dhoolla-caddeeyay ayaa uu madaxa iga taabtay, kolkaas ayaa uu igu yidhi, "*Waar Jamaal fulaysanidaa waa ninkii Sakhare…"* waxa uu iska rogay wax aad koofiyad mooddo ama timo oo wajigiisa qaybo ka mid ah qarinaayay! Gadaankii sariirtayda ayaa uu markaa ku soo fadhiistay, ka dib na inta uu dhabarka ii jeediyay ayaa uu ii sheekeeyay: "Ninyahaw muddo badan ayaa aad naga mid ahayd, haddana caadi noogama aad tirsanayn. Annaku waxa aannu nahay rooxaan, waxaana aannu kaa soo raacnay taleefan aad ku hadlaysay! Haa, malaha ma aad rumaysan wali sheekadii ay xalay Tasmiin kaaga warramaysay; waaba tane. *(Tasmiin oo wajigeeda ay cadho saa'id ahi ka muuqato ayaa markii uu hadalkaas yidhi baa an arkay iyada oo hortayda soo taagan…!)* Sidaa kolka ay tahay, Jamaalaw annaku wax kaste oo aannu ku yeelnay waxa aannu abaalgud kaaga dhignay in aan shaqo kuu samayno, dadka na aannu ku barno, cilmi aanad wax ba ka lahayn na aannu kugu sheegno—oo sidaa ay kugu aamminaan deegaanku!

Waxaas oo dhan ba hadda iskaga kaalay, wax ba ku yeeli mayno imminka ka dib, wax na kaa dooni mayno, wax kale na ku tari mayno, waxtar aannu kaa sugayno adigana ma jiri doonto, sidaa awgeed, annaku caawa ayaa aannu kaa guuraynaa, wax kaste oo garab ahaa oo aannu sheekhaagii kuu soo dhex marin jirtayna

waa aannu la laabanaynaa, adiga iyo waxa aad tahay iyo waxa aad taqaan oo kaliyaata ayaa isku soo hadhaaya. Sidaa awgeed waxa aan kugula talin lahayn, intii aad meesha ku fashilmi lahayd in aad ka baxsato halkan, waxan ay dadku kugu barteen na aad iskaga dhex baxdid, magaaladaadiina aad iskaga laabatid. Hore bana askari ayaa aad u ahayde, imminkana aad halkaas shaqadaadii ka raadsatid; annaka waa taa taladayadu, wali ba na waxa aad tahay midka kaliya—ee aan u nasteexaynay, sababtuna waa abaalkaaga awgii…!

Hadalladaasi iyaga oo sidaas iigu socda, ayaa xoog loo garaacay albaabkii qolka aan hurday! Hore sidan oo kale marnaba cidi uguma ay garaaci jirin albaabka, waayo dadku aad ayaa ay ii ixtiraami jireen. Sidii kululayd ee albaabka loo tumay iyo hadalkii ii socday ayaa wax igu dhaliyay, aniga oo waxaas ka fikiraayana waxa aan furay albaabkii! Markii aan furay ba waxa ii soo galay ninkii guriga lahaa oo hadalkiisa aad ka dareemaysid in uu i canaananaayo! Waxa uu igu dhaliilayaa dhawrka cisho—ee aanan cidna wax ba u qaban iyo albaabkan aan illaa shalay furi waayay! Imminka na waa barqo-dheer, wax quraac ah ama cunto ah oo uu ii sidaa toona ma jiraan! Inta aan iska kacay, ayaa markii uu iga laabtay aan fadhiistay, ka dib na aad ayaa aan u fikiray. Waxa aan is weyddiiyay waxa igu dhici doona haddii meesha aan sii joogo, wixii aan sheeganaayay oo dhammi na ay been noqdaan, dadkii

aan dabiibaayayna ay dawadaydu wada wax yeellayso, ballantii Sakhar iyo Tasmiin na waa aan xusuustay. Kolkaas ayaa aan go'aan kama danbays ah gaadhay.

Duhurkii ayaa aan wiil yar makiinad iyo maqasyo u dirtay, mid kale na inta aan lacag u dhiibay ayaa aan ku idhi, "*Ii keen funaanad iyo surwaal sports ah oo koofiyaddoodii iyo kabahoodii xataa wata…"* Intii ayaa aan isku habaystay, wixii bana waa la ii wada keenay. Wax aan guriga dhex meeraysta ba, ugu danbayn ayaa gabbalkii dhacay shaaciina uu madoobaaday. Wax aan sii jooga ba, kolkii salaaddii cishe laga soo baxay, meeshuna meel iska tuule ah oo dad yar ayaa ay ahayde dadkiina kala hoydeen, ayaa aan makiinaddii iyo maqaskii gadhka iskaga xiiray, timihiina aan iskaga gaabiyay. Dhallinyaradu sida ay u xiirato ayaa aan isku ekaysiiyay. Intaa markii aan sameeyay, ayaa aan dharkaygii oo dhanna aan shandad ku guray, wixii lacag aan haystayna aan qaatay, dawooyinkii, ciiddii iyo dhirtiina suuliga ayaa aan ku shubay, ka dib na inta aan dharkii sports ka ahaa xidhay, ayaa aan iskaga tagay wixii aan sitay ee kalena dhammaantood. Meesha laami ayaa dhex marta tuulada e, waxa aan iska dhigay qof laamida jimicsanaaya, waxaana aan orod guclayn ah kaga soo baxay tuuladii habeennimo ay saacaddu xilli danbe ay marayso…!

Sannad ka dib weeye markan Jamal iiga sheekaynayo waxan oo xusuus ah, waana mar inta uu

bogsaday uu ciidankiisii dib ugu laabtay. Waa mar anigana ay Tasmiin i daysay oo noloshayda aan si qumman u wato, waana mar wax kaste oo dhacay iyada oo xusuus ah aannu ka wada sheekaysanayno uune, midkaaya na aanu qabin kolkaas wax dhib ah ama cabsi ah. Beladii meheradda sida fudud iiga raacday, ee muddo labo sanno iyo dheeraad ah noloshayda khalkhalka iyo cabsida ku ridday, Jamaal caafimaadkiisii iyo hankiisiiba kala dhantaashay hadda waa aannu ka bed qabnaa. Galabtan uu sheekada ugu danbaysay Jamaal iiga sheekaynaayana waxa aannu wada fadhinaa masjidka Tawfiiq oo u dhaw xaafaddayada, waana masjidkii muddo dhawr sanno ka hor annaka oo fadhina aan ka baxay, ka dib na aan ku soo laabtay aniga oo gabadh jin ah soo bartay. Sababta aan masjidka u fadhinaa waa in aan wax walba dhankayga uga sheekeeyo Jamaal, is na uu dabcan wixii uu xusuusto uu iigaga warramo, taasi na waxa ay u dhacday si qurux badan, annaka oo labadayadiiba faraxsan oo dhoolla-caddaynayna ayaa aannu bacda cishihii ka nimid masaajidka, waxaa na aannu iska dardaarannay in aannaan wayso la'aan iyo adkaar la'aan aannaan mar naba meel ku marin...

Cutubka 2aad

2.CAALAMKA QARSOON

Eebbe nolosheenna waxa uu u sameeyay xad, xad kaste—oo Eebbe innoo gaar yeelayna waa mid ay innaka dani innoogu jirto. Hadda ba, in Eebbe innaka iyo caalamka jinka uu inna kala qariyay waa in aad u dareentaa in ay innaka aadame ahaan ay dani innoogu jirto, in aynu wax ka baranaana ha joogto e, in aynu caalamkaa sidiisa ba farogashanno ama raadsanaana innooma qummana sinaba.

Kawnkan aynu ku noolnahay Rabbigii weynaa ee khalqay ayaa cid walba uga aqoon badan. Isaga ayaa iska leh, isaga ayaana amarkiisu horrayso iyo danbaysa ba uu ka shaqaynayaa. Wax cir jira, wax dhul dul saaran, wax bado ku hoos jira iyo guud ahaan makhluuqa intaa dhexdooda ku nool—ee qaarkood is arkaan, qaar aanay is arki karin, qaar is yaqaannaan, qaar na aanay waligood is baran karin, qaar socdaan, qaar jiifaan, qaar duulaan, qaar xammaartaan qaar bana ay si u noolyihiin, guud ahaantood cidda u cilmi badani waa Rabbigii abuurtay. Nolosha sidan ah ee jaah walba iskaga gadaaman, guud ahaan wixii noole ah ee neefsada laba ka mid ah ayaa uu Rabbi masuuliyad gaar ah saaray, iyaga ayaana ah kuwa waxa kale oo dhan ka dhibta badan, maaddaama ay xisaab danbaysa leeyihiinna, abaal-marino ka farxiya ama ka nixiyaana waa ay u danbeeyaan!

Noloshu waxa ay ahayd mid aan canaadnimo lahayn. Waxa ay ahayd mid aan marnaba lagu caasiyin Rabbigii sameeyay nolosha iyo wixii ku noolba. Waxa ay ahayd mid ay ku suganyihiin makhluuqaad aan waligood amar-diiddo laga maqlin, waxaana ay ahayd mid xasilloon, nabdoon oo shukri-naq iyo cibaadaysi ku dhisan. Makhluuqaadka abuuran badankoodu waxa ay ka samaysanyihiin nuur, waa kuwo aan daalin, aan tarmin, aan caajisin, aan baahan, xamdi-naqana aan mar kaliya ka nasan; waaba inta loo abuuraye! Waa malaa'iigta, waxa ay ku abuurmaan amar Rabbi, amar

Rabbi na waa ay ku socdaan, waana ay ku suganyihiin. Noolayaasha caynkaas ah, waxa jira noole kale oo isagu na ku weheliya deegaanka ay joogaan. Waa noole aan se iyaga la abuur ahayn, waxa se lagu tilmaamay in uu ahaa noole cibaado badan, aad na Rabbigii u raalli galiya. Dhammaantood ba waxa ay ku sugnaayeen samada. Rabbigii abuuray ayaa mid walba oo noolahaa ka mid ahi iskii u raalligalin jiray. Waa madal aan lahayn xifaaltan, xiqdi, xoorid iyo xumaan midna. Waa madal aan loollan la isku garbiyaa ka jirin. Waana madal cibaado oo aan cod kele lagu maqlayn...

Noloshii sidaas ahayd, ayaa waxa ku soo biiray noole kale oo uu Eebbihii kawnka iska lahaa uu uumay. Waa *Aadam*, haa abbaheen Aadam. Haddii samada markaa ay ku wada sugnaayeen Malaa'iigta oo nuur ka abuuran iyo Iblays oo ka abuurnaa dab holac ah, markan waxa ku soo biiray aadamaha oo Rabbi uu dhoobo ka khalqay aabbaheen Aadam. Abuurkan samada ku wada uunnaa haddii aynu si kale u eegno, qurux ahaan waxa ugu qurux badnaa Malaa'iigta, waxaa na ku xiga xagga quruxda Aadamaha, halka Jinka ama Ibliisku na uu ku sifaysanyahay foolxumo! Xagga cilmiga haddii aynu ka eegno, waxa ugu cilmi badan Aadamaha, xagga caqliga na waxa ku xooggan Aadamaha. Sida culimada qaar ay sheegaan, jinka kooda aadka u cimriga dheeri, caqli ahaan haddii la miisaamo waxa u la mid yahay qof aadame ah oo 10—

jir ah! Dhanka cimriga waxa ku xooggan jinka, oo kii aabbaheen Aadam jannada ka soo saaray ayaa wali nool, waxaa na uu Eebbe ka codsaday in uu nafta u daayo illaa inta dadka dib looga soo saaraayo, sida uu Qur'aanku innoo sheegaayo na, Eebbe waxa uu ka aqbalay illaa inta suurta laga afuufaayo in uu noolaado; malaa'iigta ayaa isna ka cimri dheer!

Gees kale mar ka aynu ka fiirinno, waxa jira dhawr sifo oo aadamaha iyo jinku ay ka simanyihiin, sifooyinkaasna waxa ay kala yihiin amaba ka mid ah:

1- Labadaba masuuliyad ayaa saaran oo ifka waxa ay ku sameeyaan ayaa ay aakhiro xisaab iyo abaalmarin labada ba ay ku mutaysanayaan; janno ama naar!

2- Labadu ba waxa ay leeyihiin baahiyo, sida in ay u baahanyihiin cunto, cabbid, galmo iwm… Aadamaha kolkaa cuntadiisa waa aynu naqaannaaye, jinku na waxa uu cunaa lafaha aadamuhu ay hilibka ka cunaan, ayaa Eebbe u saaraa iyagana hilib oo ay sidaas ku cunaan. Halka xoolaheennu na ay baadka ka cunaan, iyaga xoolahoodu waxay cunaan digada xolaheenna!

3- Labaduba waxa ay leeyihiin kuwo mu'miniin ah, munaafiqiin ah, kufaar ah, mushrikiin ah iqk.

4- labadu ba waa ay tarmaan, waana ay is guursadaan qolo waliba dhexdooda si madax bannaan ayaa ay u macaamilaan oo qolooyin na ay u leeyihiin...

Intaas oo dhan ba haddii ay ka simanyihiin Jinka iyo Insigu, waxa jira ino kale oo ay ku kala duwanyihiin labadaa makhluuq ee Eebbe wada uuntay. Hadda ba bal haddii kala duwanaantana innaka oo soo koobkoobayna aynu qodobbayno, waa sida tan:

1- Jinku aadamaha waa uu arkaa, se aadamuhu isaga ma arko, waxaana innoo kala xidhan xijaab.
2- Jinku waxa uu leeyahay awood is bedbeddal oo wixii uu rabo uu had ba iskugu ekaysiin karo, se aadamuhu suuraddiisa ma beddalo.
3- Abuur ahaan xagga itaalka jinku waa uu ka awood badanyahay aadamaha meelo badan...
4- Xagga orodka ama aragtida labada ba na waa uu uga dheereeyaa jinku aadmiga; meel fog na wax waa uu ka arkaa, xawaare aad u sarreeya na waa uu ku gaadhaa goobaha uu hadba rabo.
5- Abuur ahaan jinku waxa uu leeyahay kuwo duula marka ay socod rabaan, kuwo xamaarta, iyo kuwo sida aadamaha u guura una lugeeya!

Inta aynaan dib ugu laaban samadii iyo abuurtii Aadam ka dib wixii dhacay, waxa kale oo aan dooni lahaa in aan baraarujiyo laba arrin oo aad khatartooda u leh;

1- In qofka aadamaha ahi uu yidhaahdo, adduunka ma jiro wax jin la yidhaahdaa… arrintaasi waa mid gef ah, culimadu na ay isku raacsanyihiin haddii qofku qaddiyaddaas uu ku madax adaygo jirrid la'aanteeda

in uu gaalnimo ku mudanaayo; waayo waxa uu qofkaasi ku gafayaa—oo beeninayaa qaybo ka mid ah qur'aanka iyo axaadiista nebiga scw. Sababta oo ah, qur'aanka kariimka ah kalmadda Jin waxa lagu sheegay 22—jeer! Halka Jaan oo ah aabbihii uu jinku ka yimid na isla qur'aanka 7-jeer lagu sheegay.

2- In qofku fartii la qaado ba uu yidhaahdo, Jin ayaa ka danbeeyay, sikhray, sababay, suurto galiyay… In qofku uu noqdo qof ku talaxtago awood-siinta jinka! Arrinta caynkaas ahi na waa mid halisteeda leh oo Rabbigii xukunka iyo awoodda ba lahaa qaddarkiisii makhluuq loo tirinaayo; arrintaa na ha laga dheeraado… Sirtu markaa waxa ay tahay in aad ogaatid aammintid na in abuurka jinku uu jiro, wax badan na aynu iskaga mid ka nahay, wax na aynu ku kala duwannahay. Wax ay inna dheeryihiin, wax na aynu dheernahay. Meelo ay innagaga awood badanyihiin, meelo na aynu kaga awood badannahay; sidaa ha kuugu kala soocnaato.

Markii uu Aadam ku soo biiray noolihii samada, waxa uu Rabbi amray in ay maa'iigtu ay u sujuuddo Aadam, dhammaan malaa'iigtii na iyaga oo amarka Rabbigood fulinaaya ayaa ay sujuud u daateen, waxa se amarkii Raxmaanka ka madax-adaygay oo halkaa ku caasiyoobay Ibliis, kaas oo isagu diiday in uu Aadam u sujuudo. Rabbiga xikmadda badani waxa uu weyddiiyay

Ibliis sababta uu amarka u diiday, Ibliis na isaga oo qarsan kari waayay hinaasihii iyo xiqdigii uu Aadam u qabay, ayaa waxa uu Rabbigii ugu jawaabay, [5]'Rabbiyaw aniga waxa aad iga abuurtay Dab, isaga na waxa aad ka abuurtay dhoobo, markaa sidee ayaa aan ugu sujuudaa wax aan ka sarreeyo…!' Halkaas ayaa cadhada Alle ay Ibliis kaga dhacday, waxaa na lagu amray in uu ka dego samadii uu joogay! Sidaas ayaa lagaga soo caydhiyay Ibliis samada, waxa se uu Rabbi ka codsaday Ibliis in uu cimriga u dheereeyo illaa Qiyaamha[6], Rabbi na waa uu ka aqbalay in uu noolaado illaa suurta laga afuufaayo. Mar kale ayaa uu Ibliis Rabbi ka codsaday mar haddii Aadam awgii samada lagaga soo dejiyay, in ciddii Aadam iyo tafiirtiisa ah ee uu lumiyo maciisa laga dhigo, taas na Eebbe weyne waa ka aqbalay in ciddii Aadame ah ee isaga raacdaa ay iyagu na la xeer noqon doonaan isaga; lana abaal ay yihii.

Intaasi kolkii ay dhacday, ayaa Aadam Eebbe uu u sheegay in Ibliisku uu cadawgiisa yahay, warkiisa na uu iska ilaaliyo. Waxa kale oo aabbaheen Aadam la

---

[5] Suuratu, Al Acraaf, aayadaha 7 – 13 aad ayaa Rabbi uu innoogu sheegay dhacdadaas uu Iblaysku isku kibriyay, amarkii Rabbigiina uu ku caasiyay isaga oo Aadam iska weyniisaana!

[6] Aayadaha sida cad u sheegaya in Iblays uu codsaday in illaa qiyaamaha loo dheereeyo cimriga, Rabbina uu ka aqbalay waxa ka mid ah, Suuratu Al Acraaf, 14 – 15, Suuratu, Al Xijir 36 – 38, Suuratu Saad, 79 – 81.

amray in uu jannada ku noolaado isaga iyo hooyadeen Xaawa ba, waxa se laga reebay in aanay cunin hal geed oo jannada ku yaalla. Sidaa iyada—oo xaalku yahay, ayaa Iblays uu aabbaheen Aadam afka u soo dhuubay, waxaana uu iskaga dhigay mid nasteexiisa ah. Waa uu u calan-waleeyay, waxaa na uu naftii Aadam u horseeday in ay amarkii Rabbigeed jabiso, geedkii la yidhi, 'ha cuninna'[7] Aadam waa uu cunay! Halkaas ayaa amar jabintii koowaad ee Aadamuhu Rabbigood ay ku sameeyaan na ay ka dhacday, dabinkii ugu horreeyay ee Iblays aadamaha u maleegaa na uu ku hirgalay! Waxa kale oo xusid mudan, in Aadam iyo Xaawa markii ay danbigaa ku dhaceen ee Rabbigood uu jannadii ka soo saaray ay toobbad keeneen, gafkoodii na ay qirteen[8], sidaa awgeed na iyaga oo aan wax danbi ah lahayn oo daahir ah ayaa Eebbe uu aadamaha duniga maanta aynu joogno uu u soo dejiyay, halka Iblays isaga oo nacdalan oo madax adag dhulka la keenay.

Hadda ba, dagaalka Jinka iyo Insiga u dhaxeeyaa aslan ba waa midkaas uu Iblays hormuudka u ahaa ee maalintaa soo bilawday, illaa inta suurta la afuufaya na Iblaysku waa mid dagaalkaas ku hayn

---

[7] Suuratu Al Baqra ayaa 35 – 36, aayadahaasi waxa ay caddaynayaan in shayddaanku uu lumiyay Aadam Iyo Xaawa, sidaana loogaga soo saaray jannada.

[8] Suuratu Al Acraaf, 22 – 25, waxa ku cad in danbigii ay ku dhaceen ay qirteen, Rabbigoodna ay weydiisteen danbi dhaaf.

doona aadamaha! Mana aha arrintaasi mid qarsoone, waa wacad uu Iblaysku Rabbigeenna weyn hortiisa ka qaaday in uu lumin doono Aadan iyo tafiirtiisa oo dhan ba! Sidaa kolka ay tahay, qof kaste oo aadame ah waa ay ku habboontahay in uu aqoon haba koobnaato—e u yeesho caalamkaas uu dagaalku ka dhaxeeyo. Sidaa haddii aynu u dhignayna, waxa imanaaya su'aalo badan oo ku saabsan jinka iyo noocyadiisa. Magacyada uu kala leeyahay, kala soocnaantiisa, farqiga innoo dhaxeeya iyo xadka aynu kala leenahay, kuna habboon in aynu kala raacno. Si taas hadda ba aynu u yar fahamno, waxa ugu mudan in aynu ka bilawno magacyada, si markaa aynu u sii raaci karno qaybaha kale ee noloshiisa oo dhan.

JIN[9]: Inkaste oo macne ahaan kalmadda marka carabida loo eego fasiraado badan la siiyo, hadda na aynu ka soo qaadanno sida uu ku macneeyay sheekh Maxamed Ismaaciil, waxaa na uu yidhi sheekhu, kalmadda *Jin* asalkeedu waxa ay ka timaaddaa ficilka *Janna,* taas oo macnaheedu tahay, Wuu qarsoomay/la arki waayay.. Markaa Jin waxa loo yidhi qarsoomidda uu innaga qarsoonyahay ee aan la arkayn, isagu se wuu inna arkaa. Kalmaddaa haddii uu sidaa ku sharraxay sheekhu, bal aynu sii raacno qeexitaannada kale—ee uu sida fudud u soo koobay, isaga oo leh, **Shayddaan:**

[9] *Kalmadda "JIN" 22 jeer ayaa ay ku soo aroortay qur'aanka kariimka ah, halka Jaan na ay ku soo aroortay 7.*

Makhluuq kaste oo madax adag ayaa loo adeegsan karaa eraygan; Jin iyo Insiba. **Ibliis**: Min-ablasa, kii naxariistii Alle ka quustay, waana mid ka mid ah uun Jinka Ibliisku, sida qur'aankeenna kariimka ah ba ku cad... **Jaan:** kalmaddan Jaan qur'aanka kariimka ah waxa ay ku soo aroortay 7-jeer, sida culimadu ay u badantahay—ee ay ku sheegeenna waxa weeyaan, Jaan: Aabbaha jinka, halka aadamaha ba odaygii ay ka soo farcameen Aadam loo yidhaahdo ee dhoobo looga abuuray, ayaa odaygii ugu horreeyay ee Jinku ka soo farcamay na looga abuuray dab, waxaa na lagu magacaabaa Jaan. **Cifriid:** is na waa mid ka mid ah uun bahda jinka. Waxaa na lagu magacaabaa Cifriidka kuwooda madaxda ah, cimri ahaa na gaboobay. Cifriidku sida oo kale waa kuwa la shaqaysta saaxiriinta—ee waxa ay rabaan u keena!

Intaa haddii aynu kaga nimaadno sharrax guud, halkaas oo aynu ku kala baranaynay magacyada jinka iyo siyaabaha uu u kala duwanyahay, waxa aynu si guud mar kale sharrax kooban uga bixin doonnaa habka uu u dhisanyahay cadawgan aynu ka soo sheekaynay. Markii Ibliis dhulka loo soo dejiyay isaga—oo nacdalan, ma fadhiisane halkii ayaa uu ka sii waday dhakriddii uu Aadamaha ku hayay. Tallaabadii labaad—ee uu qaaday waxa ay ahayd in uu isku diro labadii wiil ee aabbaheen Aadam ka mid ahaa ubadkiisii ugu horreeyay. Haabiil iyo Qaabiil markii lagu yidhi,

'mataanaha idinla dhashay mid ba ta uu la dhashay ma ahane ta kale ha guursado' waa kii shayddaanku arrintaa ka shaqeeyay ee Haabiil ku sababay walaalkii Qaabiil. Halkaas ayaa hadda na ugu horraysay dhiig aadame oo dhulka oogadiisa ku daata, dhagartaa na waxa ka shaqeeyay waxa uu ahaa ninkaa cadawga innagu ah ee Ibliis.

Ibliisku si uu khiddaddiisa iyo dagaalkiisa uu u sii xoojiyo, waxa uu samaystay boqortooyo iyo maamul kala sarreeya. Madaxii dawladdiisuna waa Ibliis, waxaa na uu kursiga boqornimadiisa Ibliis dhigtay meel aan aadame ka soo gaadhi karin oo badda dusheeda ah. sida uu sheegaayo xadiis nebi oo saxeex ahi, shayddaanku waxa uu isku dayaa in uu u muuqdo mid isagu kawnka oo dhan maamula, waxaana uu labadiisa gees subax walba ku aaddiyaa qorrax soo baxa, markaa sawir ayaa uu sameeyaa ah in qorraxdu ay geesihiisa ka soo dhex baxday, dedaalkaa na waxa uu ugu jiraa in uu sheegto awoodda kawnka oo dhan! Mar kale sida uu xadiis saxiix ahi innoo sheegaayo, Shayddaanku si uu iskugu muujiyo in uu sarreeyo, wax walba oo aadamuhu ay haystaan ama ay fuulayaan waxa uu kaga sii fadhiistaa figta u sarraysa, isaga oo intaa ka dhiganaaya sarrayn iyo kibir!

Kibir iyo madax adayg waaba kii uu Rabbigiisa kaga kufriyay—oo waa la wada ogyahaye, waxa aan rabaa in aan isla eegno makhluuqani marka laga tago

inahaa guud, ma tarmaa? Lab iyo dheddig ma leeyahay? Maxaa uu dhalaa? Sidee ayaa uu se u tarmaa? Weyddiimaha caynkan ah culimada islaamku aad ayaa ay ugu kala tagaan, se intooda badani waxa ay isku raacsanyihiin ayaa ah in shayaadiintu ay lab iyo dheddig leeyihiin, in ay is guursadaan ayna tarmaan. Qur'aanka iyo axaadiista ba sida ku cad, lab iyo dheddig waa uu leeyahay jinku, sida oo kale na awlaad waa uu leeyahay, awlaaddu na waxa ay ka timaaddaa uun lab iyo dheddig isku tagay. Waxa kale oo culimadu ay sheegaan in jinku uu dhalo ugxaan, iyaga oo ka soo daliishanaaya xadiiskii nebiga CS—ee ahaa, *'Midkiin haddii uu awoodo yaana uu noqonnin qofka suuqa ugu hor taga, sida—oo kale na yaa uu noqonnin ka ugu danbeeya ee suuqa ka soo baxa; waayo jinka ayaa suuqa ku dhala oo ugxantiisa dhigta!'*

Haddaba, jinku lab iyo dheddig, yar iyo weyn waxa ay ku hawlanyihiin sidii ay aadamaha u lumin lahaayeen, waana ballankii uu Ilaahay ka qaaday markii uu Iblays caasiyoobay. Ballanka caynkaas ah hadda ba si uu Iblays u fuliyo, aadamaha waxa uu u fadhiistaa jid kaste—oo wanaag uu uga soo kordhaayo ama ay Allahood ugu dhawaanayaan. Waxa uu awooddiisa ugu badan iskugu geeyaa jinku dadka kuwooda toosan, waxaana uu u adeegsadaa shayaaddiintiisa jin iyo insiba! Shayddaanku si uu u lumiyo dadka wanaagsan, waxa uu hadba isku dayaa in waxa ugu sahlan ee qofkaa uu ku dagi karo in uu sameeyo. Haddii aynu si guud ugu kala

jabinno, shayddaanku dadka marka uu laba u qaybiyo, wixii da' yar—ee dhallinyaro ah waxa uu u qurxiyaa wixii shahawaad ah, waxaana uu ka faa'idaystaa tamarta iyaga ku jirta rag iyo dumar ba, sidaas na waxa uu ugu sahlaa in ay ku dhacaan dhallinyaradu sino ama wax la halmaala oo macsiyo ah!! Dadka dhaafa xadkaas dhallinyaranimada—ee reeraha samaysta na, shayddaan ku waxa uu isku dayaa in uu dhexdooda ka abuuro cadaawad iyo is nac!! Waa na arrin masiibo ah labadan qodob oo qof kaste—oo caqli lihi ba maanta uu ogyahay!

Arrintu intaas oo kaliya ma aha, Ibliis iyo xertiisu waxa ay u xusul-duubayaan oo ay intaa u ordayaan in ay aadamaha tafiirtiisa cidhib tiraan, waxaana uu ku foogganyahay intaa sidii taranta aadamaha loo yarayn lahaa. Haddii aynu kor ku soo sheegnay in jinku uu leeyahay boqortooyo—uu Iblays madax u yahay, waxa aad ogaataa boqortooyadaasi cidda ay billadaha ugu sarreeya ay siisaa in ay yihiin kuwooda soo kala fura laba ruux oo muslim ah, sidaa na ku soo burburiya reer dhan oo dhaqnaa. Haddaba, boqortooyada sidaas innoogu hawlan—ee dhibteenna uun ku fooggani waxa yaab leh in aanay hadda na lahayn dhaqaale madax bannaan iyo wax noloshooda kafeeya—oo ay iskugu filnaadaan! Tan marka aad maqashid waxa laga yaabaa in ay qariib kula noqoto, waxa se aad ogaataa in jimanka iyo shayaaddiin tu ay

koox waliba ku daba jirto qof aadame ah, wax la cunto, la seexato noloshiisa oo dhan na ay la wadaagto; waa haddii aanu qofkaasi bisinka iyo adkaartii loo jideeyay ahayn mid ku dheggan. Axaadiista sida ku cad, qareenka jinka ah ee qofka aadamaha ah la socdaa markaa uu soo raaco qofkii uu la socday—ee uu gurigiisa yimaaddo, haddii qofkaasi aanu bisinka qabsan shayddaan ka na iska naarin, qareenkaasi waxa uu u yeedhayaa koox kale oo jiman ah, waxaa na uu ku leeyahay, 'kaalaya waxa aan idiin hayaa hoy aad gashaane…' sidaas ayaa ay markaa jimanku ay qofkaa aan iska naarin ay gurigiisii kula soo galaan! Mar kale ayaa uu hadda na qareenku dhawaaqayaa, waa haddii qofka inta cunto loo soo dhigo aanu bisinka u qaban, markaas ayaa uu leeyahay, 'kaalaya cunto ayaa aan idiin hayaaye la cuna…'! wax kaste oo qof aadame ahi uu qabanayo na sidaas ayaa ay shayaaddiintu ula isticmaalaysaa haddii aanad bisinka ka qabsannin!!

Shayaaddiintu sidooda ba waxa ay u kala sarreeyaan derojo ahaan sida ay adduunyada ugu kala fasahaad badanyihiin! Waxaas oo dhammi iyaga oo jira, ayaa haddana shayddaanku intaa kuma uu joogsane, waxa uu u soo tallaabay oo toos uu ugu soo badheedhay aadamaha, waxaana uu samaystay safiirro iyaga ka mid ah oo ay aadamaha ku dhex lahaadaan. Rag iyo dumar aadamaha ka mid ah, ayaa uu ka dhigtay shayddaanku gego uu ku soo dego, kuna nasto—oo

halkaas uu kaga sii duulo dadka kale ee aadamaha ah. Masalan waxa ka mid ah dadkaas in uu samaystay niman saaxiriin ah, kuwaas oo dadka ay la noolyihiin iskaga dhigaaya culimo ama dad karaamaysan oo awliyo ah. Dadka caynkan ah ee uu shayddaanku shaqaalaystay, ayaa si ay dadku u aamminaan karaamada iyo waxa ay sheeganayaan, waxa uu u fuliyaa ama u fududeeyaa shayddaanku in uu dadkaas u qabto wax aanay dadka kale ee caadiga ahi aanay awoodayn. Waxa kale oo dadka caynkaas ah shayddaanku uu ka dhigtaa qalab lagu ugaadhsado oo uu aadamaha uga sii dhex taltallaabo.

Haddii aynu soo yar dhawayno tusaalaha si aynu iskula garanno, masalan ka soo qaad islaamaha saarka/Mingiska/Booranaha tuma—ee yidhaahda 'dad ka ayaa aanu ka cuudinaynaa rooxaan'! Islaamahaasi sida ay jinka ugu shaqeeyaan dadku na aanay fahamsanayn waxa ka mid ah; Islaanta caynkaas ah ee fooxisada ah marka loo tago, lagu na yidhaahdo naga cuudi saarka na haya, ayaa waxa ay dalbataa shayddiintii ay wada shaqaysanayeen, ka dib na wax baa ay akhridaa, waa ay is ruxdaa, waxaa na ay u yeedhaa magacyo jiman oo ay 'rooxaaniyiin' ugu sheegto dadka. Intaa marka ay samayso, fooxa na ay dabka ku gurto, bun ama aleel midkood na ay isku mashquuliso, ayaa waxa ay faraysaa dadkii u yimid in ay Qurbaan bixiyaan! Haa, qurbaan ayaa laga rabaa qofka! Qurbaanku waa laaluush iyo

xoolo la siiyo shayaaddiinta ay islaantani la shaqaysanayso. Waxaa marka la bixiyo, ayaa uu jinkii u adeegayaa fooxisada. Masalan qurbaanka waxa ka mid ah in ay islaantu odhanayso, 'neef caynkaas ah ha la qalo, raashin sidaas ah ha la kariyo, cuntada intaa ha la dhigo halkaa…' waxaas oo dhan—oo aan Alle dartii loo samaynine loo sameeyay jimanka awgood ayaa shirkiga ugu weyn lagaga dhacaa halkaa. Cuntadaas shayddaanka loo sameeyay markaa cid kaste—oo cuntaa waxa ay cuntay cunto xaaraan ah oo aan Alle dartii loo samaynin. Shirkiga caynkaas ah marka ay dadku ku dhacaanna, Eebbe ayaa ka dheereeya naxariistiisa, halkaas ayaa na uu shayddaanku ka helayaa fursad uu ku sii lumiyo dadka. Qofkii marka laga gooyay xidhiidhkii Alle ee xaaraan la cunsiiyay, ayaa hadda na intaa lagagama hadhaayo e, marka islaantii u shaqaynaysay jimanku ay tunto wixii ay tumaysay ee dadkii goobta yimid qaarkood ay daataan, halkaas ayaa uu hadda na shayddaanku kala sii xidhiidhaa dad kale oo hadhaw uu safaarado ka dhigto, kuna soo biira shaqaalihiisa!!

Abuurkiisa iyo dabeecadihiisa haddii aynu sii yar falkinno, sida uu xadiis nebi oo saxeex ahi innoo sheegaayo, jinku marka uu socdo waxa uu ku socdaa kab kaliyaata, waana sababtaa arrinta uu nebigu CS innooga reebay in aynu kab kaliyaata xidhanno. Waxa kale oo isla xadiis kale uu innoo caddaynayaa, in jinku

marka uu hadhsanaayo uu qayb ka mid ah jidhkiisa uu cadceedda u dhigo, qayb kale na uu dhirta hadhkooda wax ka hadhsado, waana taa sababta la innoogu boorriyay marka aynu dhirta hadhsanayno ama meel fadhino in aynu hadhka wada galno, ama aynu bacadka wada fadhiisanno. Waxyaabahaas oo dhammi waa waxyaabo uu nas ku soo arooray—oo aan iska dhihid ahayn, mar haddii caalamkani uu yahay mid la innaga xijaabay na, waxa mudan in mar kaste lagu koobnaado wixii xadiis ama aayad qur'aan ahi ay ka sheegeen. Iyada oo arrini ay sidaas tahay, hadda na waxa jira in aadamuhu ay wax badan ka ogaadaan caalamka innaga qarsoon, waa marka se la dhaafo xuduudkii innoo dhaxeeyay ee Eebbe uu innagu kala dahaadhay. Inta aynaan se wixii aadmigu uu caalamkaa ka soo ogaaday aynaan sii faaqidin, aynu is weyddiinno ma bannaantahay in jin muslim ah ama mid gaal ah sir iyo caad sinaba loo adeegsado? Sida ay badanka culimadu isku raacsantahay arrintaasi sinaba uma bannaana[10], sababta na waxa ay ku daliiliyeen in aanu mar naba nebi Maxamed gargaarsan jimanka, saxaabiyiintii aanay

[10] Waxa jirta in culimada qaar ay yidhaahdeen Jinka waa loo adeegsan karaa wixii mubaax ah. Halka Culimada badankoodu ay qabaan in aanay sinaba u bannaanayn in jinka wax macaamilo ah lala samayn karo, iyaga – oo u daliisahanaya in aan marna la arkin nebiga ama saxaabadii waaweynayd oo kaalmo (haba wanaagsanaatee) jinka u adeegsanaaya.

adeegsan, sida oo kale na aanay xataa taabiciyiintu adeegsan.[11] Taas halkaa marka aynu ku dhaafno, aan u soo noqonno macaamilkii uu aadamuhu la sameeyay jinka iyo waxa ay ka barteen, ama xataa magacyada iyo sifooyinka jimankaa ay aadamuhu barteen iyo waliba shaqooyinkooda. Magacyada iyo sifooyinkooda inta aynu ka helnay innaka oo is raacinayna, ayaa waxa aynu ku lammaanaynaynaa shaqooyinka jimankaas na. waxa se aad maanka ku haysaa, magacyada jimankani waa kuwo inta badan ay aadamuhu ula baxeen ama ay u yaqaannaan, waana arrin ka dhalatay isla macaamilka labada la cusleeyay—ee kawnkan ku wada nool..

1- *Qawl:* Qawlku waa nooc ka mid ah noocyada jinka, sida la sheego na waxa uu ku noolaada ama uu ku dhaqmaa caanna uu ku yahay dhulalka bannaanada ah. Inaha dabeecadihiisa laga bartay waxa ka mid ah in uu dhibaateeyo aadamaha wixii saddex qof ka yar. Waxyaabaha kale ee uu sameeyo wax aka mid ah inta uu carruurta yaryar u dhawaaqo, in ay u baxaan habeennadii dhulka mi'yiga ah, ka dib carruurtaa inta uu horgalo ayaa uu had ba meel sii durugsan uga sii baaqaa, ugu danbayn na sidaas ayaa uu bahalo afka uga

---

[11] *Culimadu arrinta ah jinka ma la adeegsan karaa ama ma lala macaamili karaa waa ay ku kala qaybsanyihiin, jamhuurkoodu se waxa ay ku tageen in aan sinaba jinka loo adeegsan karin, wax macaamilo ah na loola samayn karin.*

galiyaa carruurta, ama uu dhibaato badan u marsiiyaa![12] Waxa kale ee isla Qawlku uu sameeyaa, aad na ay Soomaalidu u taqaannaa in uu nimanka darawallada ah ee habeenkii kalidood gaadhiga wada uu iskaga soo dhigo ruux dumar ah, ka dib na uu jidka u istaago—oo uu ka codsado in la sii qaado. Inta ay gabadhi qurux leedahay isaga—oo isku ekaysiiyay ayaa uu soo raacaa gaadhiga, ka dib marka uu waxoogaa la soo socdo, ayaa uu sameeyaa inta badan in uu dirawalka tuso cagihiisa ama gacmihiisa oo qoob dameeraad[13] oo kal leh!! Inta

---

[12] Waxa aan ku xusuusanayaa jinkan carruurta u dhawaaqaya sheeko laga yaabo in inta badan dadka Soomaaliyeed ee qoraalkaygan akhriyayaa ay garanayaan, waa na sheekada ah XANFALEYDA! Haa, 'Xanfaley ku qaadatay, Xanfey ayaa qaadatay' in badan in weedhaha caynkaas ah aad maqashay waa laga yaabaa. Soomaalida qaar waxa ay aaminsanyihiin xayawaankaas magaciisa aynu soo sheegnay oo aan muuqiisa la arkini in uu carruuraha yaryar xilliyada fiidadawga uu uga yeedho duddada reerka meel u dhaw, carruurta yaryarina ay moodaan qof waalid ah ama ehel ah, sidaas na uu waxaasi ku kaxaysan jiray oo aan dib loo arki jirin. Markaa Soomaalidu waxa ay waydo ee ay ka quustaan ayaa ay odhan jireen, Xanfelay ayaa qaadatay… waana arrin laga yaabo in ay xidhiidh la yeelan karto habdhaqanka jinkan Qawl lagu magacaabo.

[13] Waxa jirta sheeko aad u naxdin badan oo arrintan oo kale ah, wiil dhallinyaro ah oo jaamacad ka dhigan jiray Muqdisho, ayaa goor habeennimo ah soo baxay, isaga oo meel u socda oo jid

uu labada cagood isa saarto, ayaa uu dhashkawarka gaadhiga sidaa u saarayaa, ka dib na dirawalkii marka uu isha ku dhufto cagahaas, naxdinta uu qaado ayaa laga yaabaa in uu gaadhigii meel kala dhaco, sidaas ayaa

---

magaalada ka mid ah raacaaya, ayaa ay kulmeen gabadh aad u qurxoon oo iyadu na waddada maraysay. Wiilkii iyo gabadhii waa ay isku soo lugdareen. Waxa uu maqlayaa kabaheeda shibidhka marka ay marayso sanqadhu ka baxayso – ee Qodhob, qodhob, qodhob… taas haya! Waxa uu u haystaa in ay inantu xiddhantahay kabo la odhan jiray 'Qaraafiic' oo hoosta loox adag ka ahaa. In door ah se markii ay wada socdeen wiilkii iyo gabadhii ee ay meel iftiin ah soo gaadheen ayaa uu wiilkii arkay cagaha inantu in ay yihiin qoobabkii dameeraha oo kale! Naxdin inta uu qaboobay ayaa uu orod is dhigay, isaga oo qaylinaaya na waxa uu soo qabsaday jidkii ka horreeyay. Orodkii isaga oo ku jira, qaylana cirkaas maraaya, ayaa uu ku soo baxay oday is na waddada fadhiya! "Alla adeer iga qabo, adeer iga qabo, adeer…" ayaa uu ku qaylinayaa wiilka yari. Markii ayaa uu odaygii la hadlay – oo uu ku yidhi, "Waar wiilyahaw maxaa ku helay?" wiilkii yaraa na isaga oo dabada galinaaya dhankii uu odaygu ka xigay, jidkii ay gabadhu martay na sii eegaaya ayaa uu u sheegay wixii uu arkay. Odaygii fadhiyay ayaa wiilkii yaraa ee u warramaayay kana sii jeeday waxa uu dhabarka kaga gujiyay gacantiisa, waxaa na uu ku yidhi," Waar ma kuwan oo kale ayay ahaayeen cagaheeda aad sheegaysaa?" inta uu isna tusay qoobab dameeraad oo uu ku gu'gujinaayay wiilka yar! Qacdii uu wiilka yari baladan kale indhaha ku siiyay ayaa miyir ugu danbaysay, halkii ayaana subaxdii loogu yimid isaga oo yaalla wiilkii!

na uu bahalkaasi dadka u dhibaa oo dhibaato ugu sababaa!

2- *Sucaala*: Sucaala waa nooc ka mid ah jinka, inta badan na waxa uu isku ekaysiiyaa qof dumar ah, waxaa na uu yimaaddaa goobaha ay dadku joogaan xilliyada fiiddadawga, sidaas ayaa na uu inta badan dadka ku soo dhexgalaa. Sucaala waa jinka inta badan sheekeeyinkiisa ay Soomaalidu sheegaan, iyaga oo ka warramaaya dad uu la kulmay. Masalan xilliyada makhribka afka lagu soo hayo ayaa uu yimaaddaa goobaha ganacsiyada, isaga oo isku soo ekaysiiyay gabadh aad u qurxoon, sidaas ayaa na uu ku helaa inta badan rag ilaaqa—oo aakhirka na uu kaxaysto! Sida marar badan aad sheekooyin ku maqli kartaan, nin la odhan jiray Ina Dhoorre oo reer Hargeysa ahaa, halkaa fooqa Jajabka la yidhaahdo ee dooxa qarkiisa ahaa na ku haystay hilible, ayaa waxa galab walba u iman jirtay gabadh aad u qurxoon, wixii hilib ah—ee ku soo hadhay na iyada ayaa ka wada iibsan jirtay. Dhawr mar oo kala duwan ayaa uu ninkaasi gabadhaas ilaaqay, ugu danbayntii se waa ay wada hadleen, ka dib na waxa ay uga digtay in aanu iyada ku gali karine—uu iska joogo, waa se uu diiday. Aakhirkii gabadhii ninkaa waa ay kaxaysay, dadkoodii ayaa ay u gaysay, waxaa na laga xaqiijiyay in

aanu gabadhan u iman karin cadceed dhaca wax ka horreeya, sida oo kale na aanu gabadhan la jooggeeda waagu ugu ag beryin mar naba! Labaa shuruudood ba waa aqbalay ninkii, se muddo markii uu sidii ku jiray, ayaa dharaartii danbe ay hurdadii la tagtay, waxaa na uu barqo-dheer ka dhex toosay xashiishka iyo guddaafadda dooxa weyn isaga oo dhex hurda!! Qayladii uu booday iyo mascagalayda/ afaryo-addinleyda goshiisa ku nabnayd ee carartay ayaa isku raacay, sidaas ayaa na uu ninkaasi ku waashay ugu danbayntii!! Waxaa na uu ahaa nin caan ah oo la yaqaanno isaga iyo qisadiisa ba markii danbe. Abwaan Gaarriye mar uu tixdiisa Ergo ku daraayay qisada ninkan waa kii lahaa, *Kolkii waagu iftiimay, Sidaan ay inna Dhoorre, Usarkaan ka dhex toosay, Indhahaw daranaa!*

3- *Dahlaab*: Dahlaab ku waa nooc ka mid ah jimanka, waxaa na uu ku noolyahay inta badan badaha, waxaa na uu midab ahaan isku ekaysiiyaa dhagaxaanta waaweyn—ee badaha lagu dhex arko. Inta badan waxa uu ku dedaalaa in uu meel aad u gaaban iska tuso maraakiibta ama doomaha biyaha badda gooshaaya. Khalkhalkaas iyo naxdintaa uu sameeyay awgii na waxa laga yaabaa in ay u gaddoomaan doonyaha ama wixii kale ee had ba badda ay dadku gooshayaan..

4- *Shaqi*: Shaqi/dhanxiir waa nooc ka mid ah

jimanka, waa na mid labawajiilayn badan oo inta badan dadka muran iyo is qabsi ka dhex abuura! Masalan waxa uu isku dayaa in uu soo agmaro dad meel iska fadhiya—oo iska sheekaysanaaya. Dadkaas ayaa uu qaar na isku tusayaa in uu bisad yahay, qaar na in uu ey yahay! Halkii ayaa labadii qof ama ay dadkii ku murmayaan iyaga oo isku haya, Waa ey iyo Ma aha e, bisad ayaa meesha martay!! Sidaas ayaa na uu u shaqeeyaa jinkaasi na, muhiimaddiisa oo dhammi na waa in uu dadkaas uu is nacsiiyo oo muran madhalays ah ka dhex abuuro..

5- *Cammaaralmakaan:* Waa nooc is na jinka ka mid ah oo inta badan waxa uu dadka la degaa guryaha, waana uu la guuraa xataa haddii guri kale ay u guuraan dadkaasi. In kaste oo culimadu ay sheegaan sida kuwo badan oo kale in aanu isagu u sii dhib badnayn, hadda na waa mid habboon in laga akhristo adkaartii marka guri cusub aad degayso, guriga aad ka baxaysid, guriga aad soo galaysid; inahaas oo dhan waxa qumman in laga akhristo ducooyinkii loogu talogalay goobahaasoo dhan.

6- *Cifriid:* is na waa mid ka mid ah uun bahda jinka, waxaa na lagu magacaabaa Cifriidka kuwooda madaxda ah, cimri ahaana gaboobay. Cifriidku sida oo kale waa kuwa la shaqaysta saaxiriinta—ee waxa ay rabaan u

keena! Awood ahaan waa kuwa ugu xoogga waaweyn leh, waxaa na aynu odhan karnaa waa qabqablayaasha ama hoggaamiyayaasha jimanka kuwa ugu caansan. Waxyaabaha uu sameeyo waxa ka mid ah marka uu la shaqaysanaayo saaxiriinta, in marka loo yimaaddo saaxirka iska dhigaaya sheekha marka ay dadku u yimaaddaan ee ay wax weyddiiyaan uu adeegsado Cifriidka, markaa Cifriidkii ayaa uga warramaaya arrimaha qofkan la xidhiidha, isaga oo adeegsanaaya Qareenka qofka. Ka dib waxa uu saaxirkii sheekha iska dhigayay uu dhanayaa, 'sidaa iyo sidaa saw wax uma jiraan, waxaa iyo waxaa kale ma dareentaa?' waxaas oo wada jira marka uu saaxirkii kuu sheego, ayaa uu ku odhanayaa, Haa, waa lagu sixray, waxaa na laguu adeegsaday ciddiyo, timio iyo lafo; haa, haa, bal eeg waxa laguu galiyay sariirtaada hoosteeda barta madaxaaga ku beegan ee dhulka ah ha la qodo, waxaas na ha laga soo saaro… halkii ayaa la imanayaa, markaa ayaa laga soo saarayaa wixii uu saaxirka sheekha sheeganayaa uu sheegaayay, ka dib na marka la yaabo, ayaa la odhanayaa, Yaa ku aasay waxan meesha? ka dib na Cifriidkii ayaa markii ba saaxirkii u sheegaaya qofkan cid uu xifaaltan ka dhaxeeyo ama ay is hayaan, ka dib na qof caynkaas iyo caynkaas ah ayaa ku aasay ayaa uu odhanayaa. Masalan 'gabadha lagula qabo ayaa ku aastay' ayaa uu odhanayaa, ka dib na halkaas ayaa ay dadkii ehalka ahaa ama wada noolaa ay colaadi uga

bilaabanaysaa, waana inta kaliya—ee uu jinku doonaayo in uu dadka isku diro oo uu xumaan dhexdooda dhigo…

7- *Khinsab*: Khinsabku waa nooc ka mid ah jimanka waxaa na uu qofka kala dagaallamaa xagga cibaadada dhexdeeda in aanu wax qushuuc ah qofku ku helin. Waxa uu isku dayaa in uu qofka dhibo—ood maqashid qofkii oo 'Allaahu, allaahu, ak, ak.. akbar' taa haya! Haddii aad weyddiisid qofkaa waxa haysta na waxa uu ku odhanayaa 'ninyahaw salaadda ayaa ii xidhmi la'a!' Markaa qofkii waa uu ku dhex dhibbanyahay salaadda, qushuucdii qofku na aad ayaa ay hoos ugu dhacaysaa, waxa kale—oo dheer intaa in dadkii jamaca ahaa laftooda na ay qushuucdii ka dhimato, maaddaama ay maqlayaan qofkan xidhashadii salaadda, bilawgii faataxada, ataxyaadkii—wax waliba ay ku adagyihiin!

8- *Walhaan:* waa nooc ka mid ah jinka isagu na, waxaa na uu inta badan dadka ka khalkhaliyaa xagga nadaafadda iyo waysada. Masalan qofkii wax uun baa ku odhanaaya nijaas ayaa kugu duushay, sidaa awgeed waxa laga yaabaa in qofkaasi uu muddo aad u dheer uu ku qaato inta uu iska hagaajinaayo wasakh! Sababaha uu arrintan u samaynayo jinkanina waxa ka mid ah in

qofka uu kala dagaallamaayo sugnaanta in uu daahir ahaado ama waysadu ay u dhawrnaato, ugu danbayn na qofka waxa uu ku furayaa tashuush ah, 'ma adigaa ba daahir ba ah maxaa aad tukan, ma adigaa caynkan kale ah… imminka iska daa oo mar kale samee..' arrimaha caynkaas ah ayaa uu ninkaasi na ka shaqeeyaa.

9- *Ummusibyaan*: Isagu na waa nooc ka mid ah jinka kuwooda uu aadamuhu aqoonta badan u leeyahay waliba. Jinkani inta badan waxa uu aadamaha kala dagallamaa xagga taranta, waxaa na badanaa uu haleelaa haweenka, isaga—oo hoy uu dego kana waxyeelleeyo ka dhigta makaanka gabadha!! Jinkani waa mid ka caan ah magac ahaan bulshada Soomaalida dhexdeeda, dadka na waxa uu ku hayaa dhibaato aad u badan oo mid caqiido iyo mid waxyeello labada ba leh. Waxa kale oo jinkani uu sameeyaa in uu carruurta yaryar ka nixiyo isaga oo kolba wax isku tusaaya, sida oo kale dadka waaweyn laftooda jinkani waxa uu isku dayaa in uu hurdada ka khalkhal galiyo—oo uu ka sasiyo!

Dhammaan ba arrimahan aynu ka soo sheekaynay iyo macluumaadkaas tirada badan waxa aan rejaynayaa in qofkii akhriyaa uu wax badan ka baran doono, si wacan na uu u garan doono asal ba jinka, abuurtiisa, dabeecadihiisa kala duwan, dhaqankiisa, waxa uu doonaayo iyo hagardaamooyinka uu qofka aadamaha

ah ku hayo intaba. Eebbe weyne ayaa innoo sheegay hadda na in jinka waxaas oo dhan ku hawlani uu yahay mid aad u daciif ah, balse haddii uu helo cid iska waabin wayda waxa uu u hoggaaminayaa sida uu rabo, illaa uu gaadhsiiyo heer duniibtiisa xataa aanu iblays gaadhin!! Aqoon fiican hadda na kooban haddii aynu caalamkaas u soo yeelannay, waxa aynu hadda na isla eegi doonnaa niman muddo badan la soo shaqaysanaayay caalamkaas, casharro aad u badan oo wax ku ool ah na innaga siinaaya guud ahaa na ba arrimaha ku saabsan falalkii ay iyagu farahooda la soo galeen. Sidaa awgeed waxa aad si dhugmo leh isha ugu haysaa casharrada soo socda iyo meelaha la isla maro, mar walba na xusuusnaw in buuggani uu yahay binniixin yar oo ku saabsan arrimo badan oo dadkeenna iska wada dhex galay, arrimhaas in qofkii marar badan akhrintiisa ku celceshadaa na uu si fiican u baran doono ayaa aan rejaynayaa.

Cutubka **3** *aaD*

3.FAALALAWGII TOOBBAD KEENAY

Sheekh Xaamud Aadam oo u dhashay dalka Suudaan ayaa cutubkani uu ka warramayaa noloshiisii intii uu saaxirka ahaa, dadka markaa uu la noolaana ay u haysteen nin wali Ilaahay ah! Sheekh Xaamud muddo 17-sanno ah ayaa uu u adeegaayay caalamka jinka, isaga oo dadka na iskaga dhigaayay nin caalim ah oo laga barakaysto!!

*W*axa uu ku koray *Daarfuur;* gobolka bari ee waddanka Suudaan, dhalasho ahaanna isla waddankaas ayaa uu ka soo jeeday. Ujeeddadiisu waxa ay ahayd cilmi raadin iyo aqoon korodhsiimo uu diintiisa in uu u yeesho uu ku han weynaa. Taas ayaa dano kale looga faa'idaystay. Isagu waxa uu ahaa nin dhallinyaro ah oo aad u maskax furan, hase yeesho—e maskaxdiisii, dedaalkiisii, kartidiisii iyo daacadnimadiisii ayaa laga dhex arkay dano kale oo aanu isagu markaas dhaaddanayn. Isaga oo cilmi raacdays ah, ayaa uu tagay deegaan uu joogay wadaad isku sheeggii waddada ka leexin lahaa. In badan oo uu cilmi barad ahaa ayaa uu ka loox jiidanaayay nin la yidhaahdo *Axmed Alburdi,* kaas oo ka mid ahaa ragga culimada ah ee deegaankaas ugu caansan. Muddo badan markii uu wax ka baranaayay Axmed, ayaa uu *Xaamud* noqday wiil aqoon ahaan la siman sheekhiisii, waxaana markaa ay noqotay in uu sheekhiisii yidhaahdo *'waxa aan kuu gudbinayaa sheekh kale—oo isagu na ku sii dallacsiiya'.*

Tuulada *Duwaal* oo uu wax ka baran jiray ayaa uu ka xadhko xidhay *Xaamud*, waxaa na uu u maleegtay magalada *Jinaynah* oo uu joogay wadaad la yidhaahdo *Al-Qaasim.* Isagii ayaa na aan muddo badan wax ka sii korodhsanaayay, ugu danbayn markii uu isaga la sinmay na waxa uu u sheegay in hadda uu dhaafay dhammaan ba culimada *Soodaan* joogtaa intii ay garanayeen aqoon, loo na baahanyahay in uu dalka ba ka tago. *Alqaasim*

waxa uu u tilmaamay *Xaamud* culimo isla dariiqadooda suufiyada uun ah oo joogta halka ay iska soo galaan xuduudka ka dhaxeeya wadammada *Jaad* iyo *Nayjar*, markaa waxa uu *Xaamud* dhaafay derejooyin[14] badan—oo sida jaranjarta ay u soo maraan cilmibaradka iyo culimada Suufiyada iyo waliba dariiqada uu ka sii tirsanyahay ba. Derejo ahaan markaa *Xaamud* waxa uu gaadhay hadda *Watad*, kaas oo u dhigma in uu tiir yahay. Dariiqada dhexdeeda kolkaas *Watadyadu* waa ay badanyihiin, waxa se jira *Qudab* oo kaas ka sii sarreeya, waxaa na xertani ay leedahay kaliya afar *Qudab*—oo u qaabbilsan afarta jiho—ee kawnka!

Waxa markaa loo dallacsiiyay nin *Watad* ah, si ay u dhammaystiranto addoonnimadaaduna sheekha u khidmee ayaa lagu yidhi. Halkaa ayaa uu *Xaamud* muddo shan sanno ah sida addoonka ugu shaqaynaayay ninkaas. Markaa ninkan *Watad* ka ah aqoon ahaan markii uu la sinmay, ayaa uu u sheegay in aanay hadhin meel ka sarraysa isaga—oo hadda uu u gudbin karaa, sidaa awgeed na in uu iskala joogo ayaa uu u sheegay, oo meesha kaliya—ee labadooda ba ka sarraysaa hadda

---

[14] Aslan ba culimada dariiqadu waxa ay kala leedahay magacyo u kala sarreeya sida ay aqoonta ugu kala sarreeyaan, magacyadaas oo ay ka mid yihiin, Arday, Sheekhal-khalwa, Sheekhalxalqa, Naqiib, Muruud, Watad ugu danbayn na waxa la gaadhaa derejada Qudab/Qudbi.

waa *Qudab*, kaas na adduunka dhan afar nin ayaa u haya xerta, in uu midkood noqon doonana waa dhici kartaa.

Xaamud ugu horrayntii markii ninkan uu la sinmi doono loo keenay waxa laga qaaday shuruud, waxaana lagu yidhi, 'Mar haddii aad sheekhan arday u noqonayso, waxa aad ogaataa laba arrin, wax la yidhaahdo *Cilmu-Daahir* iyo wax la yidhaahdo *Cilmu-Baadin*. Sidaa awgeed, awliyadu waxa ay isticmaashaa *Cilmu-Baadinka*, halka anbiyada iyo dadka badankii na ay isticmaalaan *Cilmu Daahirka*! Mar hadday sidaas tahay, adigu umuuraha meesha ka socda ama aad aragtaa wax aad gaadhay maaha—e, waa aad arki, maqli, waana aad iska dhaafi. Sheekha oo khamri cabbaya haddii aad aragto, khamri ma aha e—waa indhahaaga, se isagu cibaado ayaa uu ku jiraaye waad iska dhaafaysaa; wax walba oo aad aragtaana taas ayaa ay la mid tahay. Waxa kale oo iyana meesha taalla, wax aad sheekha weyddiin kartaa ma jirayso, haddii kalana sidaas ayaa aad xerta kaga tagaysaaye la soco. Waxanina wax aad fahmi karto maba aha… Sidaas ayaa shuruudahaas lagaga saxeeyay wiilkii dhallinyarta ahaa, sidaas ayaana uu sheekhii dariiqada ugu noqday arday.

Waxyaabahaa inan aqbalo waxa u sabab ahaa ayuu yidhi, waxa ay nagu yidhaahdeen 'Awliyadu waxa ay adeegsataa cilmi aysan jirin cid wali gaadhay, xataa anbiyada waa ay ka aqoon badanyihiin—oo awliyadu Ilaahay ayaa ay toos ula xidhiidhaan!' Qisooyinka la ii

soo qaatay markii arrimahaas la iga dhaadhicinaayay waxa ka mid ahayd ayaa uu yidhi, qisadii *Nebi Muuse* iyo *Khadir*. Waxa ay igu yidhaahdeen '*Nebi Muuse CS, Cilmu-Daahirka* ayaa uu garanaayay, *Khadir* na *Cilmu-Baadin* ka'. Sidaa awgeed, waakii *Khadar* doonta dillaaciyay, dabadeed na uu *Muuse* ku yidhi, Waar maxaa aad doonta islaameed u dillaacinaysaa? *Khadir* na waxa uu ugu jawaabay, Saw kuma odhan wax ba ha i weyddiin… Ugu danbayntii waakii Nebi *Muuse CS—e* u adkaysan kari waayay waxa dhacayay ee sidaa *Khidir* kaga hadhay. Markaas haddii sidaas oo kale aad is tidhaahdo sheekha wax weyddii, uma adkaysan karaysid cilmiga laguugu jawaabaayo ama waa aad ku wareeriye afkaaga hayso ayaa ay igu yidhaahdeen... [15]

---

[15] *Masaladan tusaalaha looga dhigay ee lagu lumiyay, asalka qisada Eebbe Qur'aanka ayaa uu kaga hadlay, siiba ahaanna juska 16-aad; suuratu Kahfi. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu Nebi Muuse khudbad jeediyay aad u cajiib ah. Markii Nebi Muuse khudbaddii uu dhammeeyay ee uu dhaqaaqay, ayaa uu ka daba tagay nin meesha taagnaa. Ka dib na Nebi Muuse ayaa uu ku yidhi, Muusaw khudbaddan aad jeedisay waa mid cajiib ahe, ma u malaynaysaa in uu dunida joogo qof kaa cilmi badani? Nebi Muuse CS, waxa uu ku jawaabay Maya, anaa ugu cilmi badan! Arrintaas Alle waa ku canaantay Nebi Muuse, waxaana uu ku yidhi maad tidhaahdid, 'Allaahu Aclam…' Waxa kaa cilmi badan addoonkayaga Khadir la yidhaahdo, oo wax aanad garanayn ayaa uu garanaaya.. Nebi Muuse CS, waxa uu jeclaystay in uu ninkaas loo sheegay barto,*

dabadeed na Alle ayaa uu weyddiistay in uu barto addoonkiisaa ka cilmi badan. Alle waa uu u tilmaamay Khadir, halka laga helo iyo sifihiisaba Nebi Muuse. 'Bax – oo kalluun qaado, markaas halka aad kalluunkaas ku waydo/noolaado ayaa aad ka helaysaa Khadir ayaa Alle ku yidhi Nebi Muuse. Muddo markii ay socdeen, ayaa ay meel ku nasteen Nebi Muuse iyo khaaddimkiisii Yuushac Ibnu Nuun. Markaas meel badda agteeda ah ayaa ay ahayde, Yuushac waxa uu arkay kalluunkii dubnaa/shiilnaa oo inta uu biyihii badda halabsaday, ka dib na sidaas ku galay badda isaga oo nool. Waa uu hilmaamay in uu Nebi Muuse u sheego wixii uu arkaayay, waana ay ka soo tageen meeshii. Muddo kale haddii la socday ayaa uu Nebi Muuse ku yidhi, "Innoo keen qadadeennii waa aynnu daalnaye…" Yuushac ayaa ku yidhi Nebi Muuse, "…Halkii aynnu yar jiifsannay ayaa aan arkaayay kalluunkii oo inta uu noolaaday biyaha galay; u sheeg ayaa aan is lahaa se waxa i illawsiiyay shayddaan…" Nebi Muuse ayaa ku yidhi "Inna keen…" Halkii uu kalluunku badda ka galay ayaa ay yimaaddeen, ka dib na waxa ay arkeen halkii kalluunku maray oo raad la arkaayo oo qallalan uu ku sameeyay biyihii. Sidii ay raadkii u soo hayeen ayaa ay la kulmeen Khadir. Nebi Muuse waa uu aqoonsaday Khadir, ka dib na waxa uu ku yidhi, "Ma ku raacaa si aan wax kaaga barto waxa lagu baray?" "Samir ma awooddid, waayo wax aan samayn doonaa waxyaabo xaqaa'iqdoodu adiga kaa qarsoontahay, daahirkooduna uu kula qaldanyahay, runtooda marka laguu sheegana adigu aad fahmi doontid…." Nebi Muuse waxa uu ku jawaabay, "Waa aan isku dayayaa waana aan sabrayaa…" Saddex arrimood ayaa markaa uu Khadir Nebi Muuse ku imtixanay, ta koowaad waxa ay ahayd:

Doon ayaa waxa ay badda ku soo martay Khadir iyo Nebi Muuse. Doontii Khadir waa aqoonsatay, waxaana ay ku qaadday si lacag la'aan ah. In muddo ah markii ay socdeen, ayaa uu Khadir doontii ka dillaaciyay loox, dabadeed na Nebi Muuse ayaa ku yidhi, "Ma waxa aad doonaysaa in aad dadka doonta saaran qarqisid?" Khadir ayaa ugu jawaabay, "Hadda saw kuma odhan ma sabri kartid?" Nebi Muuse ayaa yidhi, "Markan ii cudur-daar waan illaawaye…" Waa ay socdeen, mar kale ayaa ay ku soo baxeen wiil yar oo wiil kale la ciyaaraayo, markaas mid ka mid ah wiilashii ayaa uu Khadir kurka ka gooyay! Nebi Muuse ayaa inta uu yaabay ku yidhi, "Ma waxa aad dilaysaa naf aan waxba galabsan oo daahir ah?" Khadir ayaa ugu jawaabay, "Saw kuma odhan ma sabri kartid?" Nebi Muuse ayaa ku jawaabay, "Ii cudurdaar markanna, mar danbe haddaan wax ku weyddiiyana iga dhaqaaq…"

Ka dib waa ay is raaceen haddana, waxaa ay u soo hoydeen reer meel yaalla, ka dib na wax ay ka codsadeen soor, waa se laga seexday oo waxba ma aanay siinnin. Ka dib iyaga oo sidii qadoodi u ah, ayaa ay arkeen darbi xaafadda ah oo soo dumaaya, ka dib na Khadir ayaa toosiyay derbigii. Nebi Muuse inta uu yaabay ayaa uu ku yidhi, "Ma iyaga oo aan wax ba inna siin oo innaga seexday ayaa aad axsaankaas u samaynaysaa, ugu yaraan waxa ay ahayd in aad ka qaaddid khidmad yar oo ay iska bixiyaan…" Khadir ayaa markaas Nebi Muuse ku yidhi, "Way dhammaatay saddexdii weyddiimood, waxaana la gaadhay xilligii aan kala hadhi lahayn, se inta aanan kaa tagin waxa aan kuu sheegayaa saddexdii masalo iyo xaqaa'iqdooda rasmiga ah.

Ta koowaad ee Doonta haddii aan ku horreeyo, waxa jira nin boqor ah oo daallin ah, waxaana uu kaxaystaa doonyaha dadka kuwooda wanaagsan, kolkaas si aanu doonta u moodin mid wanaagsan ayaa aan looxa uga jeexay; doontana waxa lahayd qolo masaakiin ah, markaas waxa aan door biday in aan ceeb u sameeyo doonta, si aanu ninkaasi u qabsannin….

Ta labaad ee wiilka yar haddii aan kuu sheego, wiilkan yari haddii uu weynaado gaal ayaa uu noqon lahaa, hooyadii iyo aabbihiina dad wanaagsan ayaa ay ahaayeen, markaas iyagana gaalnimo ayuu hadhaw ku sababi lahaa, markaas sidaas ayaa aan uga dilnay, ilmo ka wanaagsan ayaa Alle na ugu beddelayaa.

Ta saddexaad ee darbiga ayaa timid. Ilmo agoon ah ayaa darbiga lahaa, aabbahood na nin wanaagsan ayaa uu ahaa, markaa darbiga lacag ayaa ugu jirtay carruurta, sidaa awgeed haddii aanan toosin lahayn lacagta ayaa laga arki lahaa agoonta….” Qisooyinkaas oo dhan haddii uu sidaas u furfuray, ayaa uu Nebi Muuse ku yidhi haddana, “…Waxaas oo dhan waxa aan ku sameeyay waxyi iyo amar Ilaahay, se anigu wax aan kaliday gaadhay ma ahayn….” Waxa loo sheegay Nebi Muuse haddii uu sabri lahaa, in uu heli lahaa khibrad iyo aqoon aad u heersarraysa.

Haddaba, arrintan Khadir iyo Nebi Muuse ayaa ay midda qolyaha khurfaad layaasha ahi si qaldan u rogaan, taas ayaana ay uga faa'idaystaan hadba sida ay iyagu rabaan. Waana taas ta lagu lahaa, Haddii aad aragto sheekhaaga oo khamri cabbaaya, khamri ma aha e, cilmu sir ayaa ka danbaysa aanad fahmayn. Adiga ayaa khamri moodaaya e, isaga waa u cibaado; waxbana ha weyddiin… Waxa ay ku andacoodaan in Khadir uu ahaa Wali/Awliyo, sidaa awgeed na uu Waligu ka

Sidii ayaan ku aqbalay. Afkayga ayaan xidhay, sidii ayaanan ninkii wadaadka ahaa arday ugu noqday. Muddo shan sano ah haddii aan wax ka baranaayay, aad na loola dhacay daacadnimadayda iyo wanaaggayga, ayaa waxa dhintay wadaadkii u sarreeyay dariiqadii aan ka tirsanaa, kaas oo ahaa *Qudab*. Macnaha *Qudab/qudbi* waxa aan ka wadaa, fariiqa walba afar Qudbi ayaa ay dunida ku leedahay, markaas fariiqadayadan qudbiga ay hoos tagaan adduunka oo dhan ayaa uu geeska bari u qaabilsanaa! Markaas uu Qudbigii dhintay, ayaa aniga waxa la ii soo bandhigay in aan halkii uu banneeyay buuxiyo. Waxaana la ii raaciyay in aan buuxiyo shuruudo, si aan u qabto derajadaas. Markaas *'ictikaaf ayaa aad samaynaysaa*' ayaa uu igu yidhi sheekhaygii, waxaana uu ii raaciyay in aan doorto shan aayadood oo Qur'aanka ka mid ah si aan ugu cibaadaysato!

Arrintii waan aqbalay, waxaanan doortay shan aayadood oo middiiba toban qaaf "*Q*" ay ku jiraan. Markaas ayaa uu igu yidhi sheekhaygii, 'Waa aad heshay middaan, laakiin sidee ayaa aad ugu cibaadaysan ma taqaan?' markaa ayuu iisoo bandhigay tirooyin maalmo

---

cilmi sarreeyo anbiyada! Waana halka ay ka lahaayeen, 'Cilmu Baadinka waxa loo iftiimiyaa kaliya awliyada, halka cilmu daahirka ay ka taqaanno anbiyadu! Waana dariiq dhakran oo lagu dago hadba ciddii jidka khurafaad layaasha raacda. Waxa se culimadu ay isku raacsantahay in Khadir uu ahaa Nebi Ilaahay. Qisadan ayaa lagu leexiyay ninkan Xaamud; ila soco…

ah, kuwaas oo kala badan, sida ay u kala badanyihiinna u kala hawl yar, sida ay u kala yaryihiinna u kala hawl badan. Waxa ay ahaayeen tirooyin kala wada dhiman, waxaana aan doortay 41-cisho, markaas qol yar oo mutulle ah, wax daaqad iyo iftiin ah na aan lahayn, magaaladana u jira illaa saddex KM, ayaa la rabaa in la i geeyo oo aan ku cibaadaysto kaw iyo afartankaa cisho. Markaas qolka marka aan tago, waxa aan la tagayaa shantii aayadood ee min tobanka Qaaf ay ku jireen. Markaas aayadihii uun ma akhrinaayo—e' waxa uu igu yidhi, 'Marka aad aayad akhridaba wax baad dhex galinaysaa! Markaas waxa uu ii sheegay magacyo. "*Bismillaahi, Bi-xaq'qi hebal, bi xaq'qi hebal*…" Sidaas dheh ayuu igu yidhi, markaas magacyo aanan imminka garanayn ayaa uu ii sheegsheegay. Waxa kale oo uu igu yidhi, *Aayadaha* dib dib ayaa aad u soo akhrin…! Waxa kale oo uu igu yidhi, Qu'aanka *xarafxaraf* ayaa aad dib ugu soo akhriyaysaa! Waxa uu ku daray oo kale, magaca Nebi *Muxammed* CSW, *Abuubakar*, *Cali* iyo magacyo kale. Magacyadan kale waa ROOXAANIYIIN ayaa uu igu yidhi. Markaas ma aan aqoone, se magacyada jinka kuwooda ugu waaweyn qaarkood ayaa ay ahaayeen waxaas Rooxaaniyiinta uu markaas iigu sheegay; dib ayaanan ka wada ogaaday. Magacyadaas ayaana aan *Qur'aanka* la dhex galgalinayaa…

Sidii ayaa aan ku qaatay awaamiirtii sheekha. Markaas waxa uu igu yidhi, 'Qolkaasaad tegaysaa, kaw

iyo afartankaa cisho cid isma arkaysaan, dibadda uma soo bixi kartid, wixii aan ku idhaahdo samee ayuun baa aanad samaynaysaa…' Markaa habeen badh ayuu i keenay qolkii yaraa—oo magaalada illaa saddex KM ka fogaa, meeshuna waa iska tuule yar. Qolkii ayuu i galiyay, waxaana uu i siiyay 123—hal oo timir ah, iyo caagad biyo ah. Maraas waxa uu igu yidhi, 'Timirtan kaw iyo afartanka cisho ee aad meesha ku jirto, saddexda wakhti min hal ayaa aad cunaysaa, inyar oo biyo ah na waad ku kabbanaysaa; isaka na jir in aad tirada qaladdo!' Waxa kale oo uu igu yidhi markii meesha uu i keenay, 'laba rakcadood ayaa aad tukanaysaa, labada rakcadood na adiga oo qaawan ayaad tukanaysaa, dib danbana intaas aad meesha ku jirtid wax salaad ah uma tukanaysid!' markii aan yaabay, ayaa waxa uu igu yidhi, 'Waar meesha ma cid baa joogta ku arkaysa oo aan Ilaahay ahayn; maxaa ay tahay haddaa sababta aad la baqaysaa? Maro kaste haddii aad xidhatid ma kol ayaa aad Ilaahay ka dhuuman kartaa?' Sidii ayaana aan ku aqbalay taas na!

Midda kale, labada rakcadood ee aan tukanaayay waxa aan akhrinaayo xataa isaga ayaa ii sheegay sheekhu, waxaana uu igu yidhi, 'Midda hore *Faataxa* iyo *Qul-Yaa-Ayuhal-Kaafiruun*' ayaad ku akhrin, midda danbana *Faataxada* iyo *Qul-Hu-Walle'* ayaa aad ku akhriyaysaa!' Intaas markii uu ii sheegay, ayaa uu

haddana igu yidhi; 41-ka cisho markad dhammaysato, laba imtixaan ayaa ku qabsan doona:

1- *Cabsi!* Aad ayaa laguu cabsi galinayaa, waxa kuu iman doona waxyaabo xayawaanno ah, wax sanqadhaya iyo waxyaabo badan oo cabsi leh. Markaa iska jir in aad cabsatid, haddii waxaas aad ka cabsatid, ugu danbaynta waa aad waalanaysaa!

2- *Rooxaan*: qodobka labaad na waxa weeyaan, marka maalmuhu kuu dhaammaadaan, r*ooxaan*[16] ayaa kuu imanaysa, waxaana ay kuu dhigayaan shuruudo, markaas cilmiga ay kuu keenayaan waa cilmi la xidhiidha *Baadinka*, oo ma aha cimigii *Daahirka* ahaa ee anbiyada ama muuqanaayay, markaas wax walba oo lagu yidhaahdo '*Haye'* dheh, iskana jir haddaad ka hortimaaddo meesha waa aad ka baxaysa; waanan kuu sheegay in aad waalanaysid!

Muddadii kaw iyo afartanka ahayd markay ii dhammaatay, ee aan u soo adkaystay wixii oo cabsi ahaa. Qur'aankiina aan wali sidii ugu ciyaaraayo, salaad na aannaan is aqoonnin, meesha dhexdeedana aan ku dhex saxaroodo oo ku dhex kaadsho, ayaa habeenkii tiradu iga idlaatay waxa ii yimid wax xagga danbe bahal/*faras* uga eeg, wajigiisana inta gabadhi qurux

---

[16] Rooxaaniyiin/Rooxaan, waxa uu iigu sheegay sheekhu in ay yihiin malaa'iig, waa se qaar ka mid ah jimanka oo waxoogaa awood ah leh, iyaga ayaa na magacyada caynkan ah aadamaha u sheegta kuna marin habaabiya!

leedahay u qurxoon! Markii uu ii yimid, waxa uu igu yidhi, "Anigu waxa aan ahay malag uu Alle kuu soo diray; *Rooxaani* ayaan ahay. Ilaahay baa *raalli* kaa noqday, cibaadadaadana waa uu aqbalay, aniguna bushaaro ayaa aan kuu wadaa…!" Markaa ayaan ku idhi, 'Waa maxay bushaarada aad ii waddaa?' waxa uu iigu jawaabay, "Waxa aan kuu wadaa in *addoonnimadii* aad ka baxday, *waajibaadkii* oo dhanna lagaa kor qaaday, sidaa awgeed, adigu cilmu *Lawxu Maxfuud* ka ayaa aad dhuganaysaa, Rabbigaana si toos ah ayaa aad ula xidhiidhaysaa!" Intaa marka uu igu yidhi, ee uu igu yidhi Ilaahay ayaa aad ku xidhiidhsantay ayaa uu haddana ii soo bandhigay shuruudihii la iga rabay! 'Waa maxay shuruuddu?' ayaan ku idhi, "Waa in aad Ilaahay caydo ayaa uu igu yidhi!" *Subxaannallaah!* Waa ninkaygii *waliga* ahaa! "Waa in aad Qur'aanka *ihaanaysato*—oo aad meelo wasakh ah ku qorto, oo aad wax wasakh ah ku qorto, oo aad ugu ciyaarto sidii aad imminka ugu ciyaaraysay!" Shuruudihii ayaa uu ii sii waday, waxaana uu igu yidhi, "Waligaa waa in aanad *Jimce* tukan, waa in aanad *Imaam* noqon, waa in aanad *safka hore*—ee salaadda waligaa ku tukan masjidka, waa in aanad salaad *Casar* waligaa tukannin, waa in aanad soon *soomin*…!" Shuruudahan oo dhan ayaa la i hor dhigay, markaas khasab ma aha in aad shuruudahan markaas wada fulisid, waxa se khasab ah in aad shuruud ka mid ah aad markaas fulisid ama qaadatid, shuruudaha kalana waa

qaar hadhaw marka aad u baahato in ay kuu kaalmeeyaanba aad mid u fulinayso, anigu markaas shuruuddii aan meesha ugu fuliyay waxa ay ahayd, *(Waligay in aanan Soomin!)* Markaas toddoba iyo toban sanno oo aan la shaqaynaayay waligay hal maalin ah na kama aan soomin Ilaahay dartii! Haddana waxa aan ahaa *Qudbi/Sheekh* ay dadku ka barakaystaan—oo walinimada iyo karaamada halkaas ka bilaabmi doonta ay waddamo kala duwan uga yimaaddaan dadku!

Intaasi markii ay dhammaatay, waxa iga soo ifbaxay arrimo mucjisooyin ah oo yaab leh. Waxa ugu horraysay ee la ii fududeeyay in halkayga tallaabo ay gaadhi karto 40km meel ii jirta markiiba! "*Cirka fiiri"* ayaa uu igu yidhi, dabadeed na waxa aan arkay xuruufta carabida ah oo samada ku qoran, kuwaas oo xaraf walba ay hoos taallo astaan la leeyahay waa sirta xarafkan. Xuruuftan dhan kaste haddii la iskugu daro oo loo tiriyo waxa ay u ahaayeen shan iyo toban! Illaa imminka ma aqaanno shan iyo toban waxa ay u taagnaayeen, laakiin waxa aan arkaa dadka qaar isticmaalaaya! Waa xuruuf dhan marka loo tiriyaba tiro dhammaystiran samaynaya, dhanka kale haddii loo tiriyana hadal macno leh samaynaaya! Ka dib sheekhii i keenay meesha ayaa ii yimid oo meeshii iga kaxeeyay. Imminka se *Wali* ayaa aan ahay! Waxa i sugaysa ummad aan la qiyaasi karin oo iskaga kala timid wadammo aad u badan, waxa ay sugayaan *waliga* soo baxaya oo aniga

ah, kaas oo qaban doona shaqadii uu hayay waligii hore ee fariiqada ka geeriyooday! Dadku meelaha ay iskaga kala yimaaddeen waxa ka mid ahaa dalka *Marooko*! Waxa ay sugayeen karaamadayda iyo barakadayda!

Waxyaabaha aan la soo baxay ee yaabka ku noqday dadka waxa ka mid ahaa, aniga oo la isoo galbinaayo oo la ii soo wado meeshii aan ka talin lahaa, ayaa waxa aan soo maray dhulal ay ku yaalleen illaa siddeed *ceel*. Dadka oo dhammi waa i garab socdeen, iyagu se way ka leexanayaan ceelasha, aniga se inta ulo dhaadheer oo qasab ah la ii dulsaaray ceelasha ayaa aan iskaga dulsoconayay. Ul kaste oo aan ku dhaafo ceelba dadku waa la yaacayaan oo magaalo ayaa la gaynayaa, waana laga barakaysanayaa oo '*sheekha ayaa ku dul socday'* ayaa la leeyahay. Indhahooda ayay se ahayde, aniga waxa ila socday *Sahsahoobi* oo ahaa shayddaankii suuradda gabadha iyo midda xayawaan isku soo yeelay ee iigu yimid qolkii aan ku jiri jiray. Shayddaankani waxa uu hoggaamiyaa oo dhammaantood ba ii wada shaqaynaaya *286* shayddaan, oo nooc walba leh! Markaa markan aan ceelasha dulmaraayo, waxa gacantiisa ii saaraaya ceelka Sahsahoobi, gacntiisa ayaana aan ku soconayaa, dadku se ma arkayaan oo waxa ay u haystaan in aan ku dulsocdo ulahan *Qasabka* ah ee ceelka la ii kor saaray! Sidii ayaa la igu soo galbiyay, waxaana la i keenay maqaamkaygii iyo magaaladii la igu wada sugaayay, taas oo iyana si

ballaadhan la iigu soo dhaweeyay. Sidii ayaa aan hawshaas ku galay, *wali* ayaa aan u noqday ummad dhan, waxaana ay ii baryaan sida loo baryo *Rabbiga* weyn ee guud ahaan kawnka iska leh!

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa waxa dhacday, tuulo ka mid ah dhulkan aan imminka sheekha u ahay, ayaa galab islaan da' ahi ay ka carrawday. Reerkeeda oo miyi ah ayay u dheelmatay. Meel kayn ah oo jiq ah marka ay marayso, waxa dariiqii isku taagay bahal *Yey* ah. Xaggani waa kayn, xaggan kalana waa kayn, meeshu waa wada jiq oo meel ay u baxdo ma laha, kolkii ay nafta u yaabtay ayaa waxa ay tidhi, "*Sheekh Xaamudaw i badbaadi…"* Ka dib na waxa cirka ka soo degay anigii, *Yeygii* oo sidii u taagan ayaa aan cirka kaga soo dhacayoo, inta aan dhabarka qabtay ayaan samada ula duulay, islaantiina waxa aan u sheegay in aanay bahalkan dib u arki doonin, isaguna aanu sii noolaan doonin ba ee aan dunida waydaarin doono! Islaantii farxad iyo riyaaq ayaa ay gurigeedii ku tagtay. Galabtu jimce ayaa ay ahayde, warkii ayay dadkii oo dhan u wada sheegtay, anna waxa ay go'aansatay in ay baadifad i siisa—oo, baladan ka bedbaadshay ay iiga mahad celiso.

Neef adhigeedii ka mid ah ayay soo kaxaysay. Dib ayaa ay axaddii ugu soo laabatay magaaladii. Maqaamkaygii ayay timid. Markas marka aad *Qudbi* tahay si fudud laguuguma soo gali karo—e, in muddo

ah haddii dibadda lagu hayay, ayaa waxa ii yimid *Sahsahoobi*, ka dib na dhankayga inta uu soo fadhiistay ayaa uu sheekadan dhegta ii saaray. *'Islaanta* neefka wadata ee halkaas fadhida, waxa dhacday jimcihii la soo dhaafay ayaa iyada oo reerkeedii ku sii carraabaysa, aniga iyo laba kale oo shayaaddiinta ka mid ahi aannu u tashannayoo, midi waxa uu iska dhigay Yey, dariiqa ayaana uu istaagay, markii ay nafta u yaabtay, ayaa uu mid kale cararay oo qalbigeedii ayuu magacaaga ku soo riday oo '*Sheekh Xaamudaw'* ayaa ay tidhi. Markaas ayaan anna suuraddaadii inta aan isku yeelay, aniga oo khamiis cad xidhani aan xagga sare kaga soo degay! Ka dib sidii ayaa aan ku qaaday kii markii hore ba aannu u dirnay: arrintaa waxa aannu u samaynay si sumcaddaada iyo aaminaaddaadu ay kor ugu sii kacdo!

Waxaas aanan shaqada ku lahayn ee haddana la iigu abaal gudaayo ayaa dhacday, saa waxa kale oo uu iiga sheekeeyay islaanta iyo xogta nolosheeda oo dhan, magaceedii oo saddexanna waa uu ii sheega—saan idhi, 'Ii soo daaya *Xaaji Batuul*…' Markii la soo daayay ee ay dadkii oo wad fadhiya soo dhex istaagtay, ayaa aan ku idhi, *'Soo dhawaw Xaaji Batuul!* Islaantii ayaa inta ay yaabtay igu tidhi, "*Oo magacaygana* miyaa aad taqaannaa sheekh?" markaa ayaa aan ku idhi, 'Sidee ayaanan kuu garanayn, sawnigii ku badbaadiyay Jimcihii la soo dhaafay maha; wixii dhacay bal dadka la wadaag!' Ka dib na qisadii ayaa ay dadka uga sheekaysay, aniguna

waxa aan qisadaa ku helay sumcad iyo aaminaad aan cid suuraysan kartaa jirin. Markaas qisooyinka sidaas ah waxa loo samaynaayay si aniga aaminaadda ay dadku i aaminsanyihiin inaan *Wali* ahay kor loogu sii qaado. Sidii ayaa ay ummaddii oo dhammi warkaygii u qaadaa dhigtay. Waxa la aaminay inan xataa ka karaamo badanay wadaadkii hore ee jagadan ka geeriyooday.

Arrimaha aan dadka kaga yaabsan jirnay waxa ay ahaayeen arrimo aan qofka caadiga ahi suuraysan karin. Waa in aan dadka ku qancinno in awliyadu ay duusho, qof dhintay soo noolayn karto, wax walbana ay ogaan karaan, sidaa awgeed, awliyadu waxa ay isku dhigtaa in ay yihiin dariiq loo sii maro baryada Eebbe laga rabo! Halkii Alle laga baryi lahaa, wax la baryayaa wadaad aniga oo kale ah ama dhintay. Waxa ay dadku naga dalbayaan waxa jawaabteeda naga caawinayaana waa shayaddiin. Markaas mar walba oo dadku na baryaan ama wax naga dalbadaan, annakuna jimanka ayaannu wax ka dalbanaynaa oo aan sii baryaynaa si uu hawshaa noogu qabto. Masalan qofkii wax naga dalbaday oo fadhiya ayaan ku dhihi, *'yar sug laba rakcadood ayaa aan tukanayaaye'* ama aniga oo aan odhan ba ayaa aan gali laba rakcadood. Labada rakcadood in aan Alle dartii u galay wax na kaga dalbaayo ama salaatu Xaajo ayay dadkani moodi, laakiin xaqiiqadu sidaas ma ahayn. Labada rakcadood dadkani ma arkayaan cidda aan u sujuudaayo—e, shayddaan ayaa inta uu kolba

suuraddu rabo isku soo yeelo, anna aan ku sujuudayaa cagihiisa! Markaa arrintaa *Qurbaan* ayay yidhaahdaanoo, waa raalligalin aad u samaynaysid jinka, kolkaas ayaa uu kuu adeegayaa adigana oo hawsha kuu qabanayaa!
Shuruudihii aan ku saxeexay qolkii yaraa, mar walba oo arrin aan dalbado in la iga caawiyo, waxa aan fulinayaa shuruud ka mid ah, amaba qaar kale oo markaas la igu amro. Masalan iyada oo dadku i baryaaya oo ii fadhiya, ayaa aan iska dhigi qof suuliga tagay oo soo waysaysanaaya, kolkaas ayaa halkii aan biyo ku soo waysaysan lahaa, waxa aan ku soo waysaysan kaadidayda! Aniga oo kaadidii iga da'ayso ayaa aan soo laaban, kolkaas ayaan kutubka *Qur'aanka* ah soo qaban oo aan dhabtayda saari! Waxaas oo dhan waxa loo samaynayaa waa amar shayddaan[17].

---

[17] *Sheekadan markii uu ka sheekaynaayay ninkan gadaal sheekha ka noqday, waxa aan xusuustay sheeko la iiga sheekeeyay oo deegaanka Laascaanood meel u dhaw ka dhacday. Wax jiray baa la yidhi nin xeraw ahaa oo dariiqo haystay, ninka subaxdii ayaa la qaadi jiray oo inta magaalada laga saaro, ayaa waxa la gayn jiray meel kaymaley ah oo jiq ah. Halkaas ayuu odhan jiray, "waan ku cibaadaysanayaa" oo gaadhka lagaga hayn jiray maalinta dhan. Wax ay sidii ahaataba, aadame wax qarsoon in ay ogaadaan laga raacye, dharaartii danbe ayaa nin ka mid ah ragga deegaanku waxa uu damcay in uu arrinta wadaadkan iyo kaynta waxa uu ka sameeyo wax ka ogaado. Waa uu u soo dhuuntay, raggii kaynta gaadhka ka hayayna waa iska il-qariyay. Geedlaydii ayuu soo dhex galay. Saa waxa uu*

markiiba isha ku dhuftay ninkii wadaad isku sheegga ahaa oo inta uu is qaawiyay, sidii uu ku dhashay isaga oo ah, oo sare taagan, haddana isla dhacaaya kaadidiisa inta uu baabacadiisa ku shubto sida awrta ugu dhibi-shaxanaaya! Yaab ayaa uu Alle u keenay ninkii, waxa uu arkaayana waa uu rumaysan kari waayay! Gadiid dhan ayaa uu daawanaayay bal waxa meesha ka socda iyo sidii uu dhabnimadooda uga salgaadhi lahaa. Saa wixii ishiisu qabanaysay wax ka duwan ayaa uu arki waayay! Xaqiiqsay haatan arrinta uu meesha ka sameeyo ninkani in ay tahay waxaas aan cidina rumaysan karayn. Inta uu aadyar iska gaatifay, ayaa uu xidhkii si dhuumasho ah kaga baxay, isaga oo dheg waliba ay jaan leegtahayna wuxu ku laabtay magaaladii.

Mar kale aadame wax ba ma qarin karo e, ninkii warkii waa hayn kari waayay, waxan uu arkay in aan cid ka rumaysanaysaa jirinna waa uu is dareensiiyay. Saa muddo ayaa uu fikiray. Jabba se waa ka danbeeya e, marka ay qaar sheekha soo hadal qaadaan ee—"waa Awliyo, karaamuu leeyahay" iyo waxaas ay dhuraan, ayaa isna uu odhan jiray, "Awliyadu ma tan isku dhibi shaxata ee kaadideeda ku waysaysataa?" dad badan ayaa arrintaa uu kaga xanaajin jiray, ugu danbayn se sheekadii ayaa uu daaha ka qaaday oo ka sheekeeyay ninkii. Markii ayaa dadkii ku soo wada boodeen, "Waar bal waxa aad ku hadlayso day, waxaasi ma wax suurtogal ah baa? Waar yaan karaamada sheekhu kugu dhicin…" adigu waan la gacan saarin uun ninkii. Saa intaas uun lagagama hadhine, kuwan canaantay imminku waa dadkii ninkan wadaad isku sheegga ahi uu quluubtooda xadaye, waxa caadi ugu yimid ninkii shayaaddiin ka mid ah kuwii u shaqaynaayay ninka wadaadka ah. Mid ka mid ah ayaa

Waxa dhici jirtay in dadku ay ii yimaaddaan, halka aan gaadhay, waxa ay igu odhan jireen, "Sheekh hebal/hebaalyo oo dhintay/tay, ayaa aannu doonaynaa inaad arrintiisa wax nooga sheegto, in uu bes u dhintay iyo in ay cidi dishay…" Kolkaas ayaa aan ku odhan jiray, 'Ma sidaasaa. Inna geeya qabriga'! Dadkii oo yaabban, ayaa aannu imanaynaa qabrigii. Markaas waxa

---

dhirbaaxo qaadayoo, dhabanka ayaa uu ninkii ku jiiday, saa inta uu afkii qalloocsamay, dhareer mooyiye wax kale laga waayay!

Dadku ma arkayaan ninkan iyo cidda dishaye, markiiba waa kuwa yidhi, "Bal eeg wakaas afkii qalloocsamaye, immisa ayaa aanu lahayn waar sheekha fadeexadda iyo beenta ka daa yaan karaamadiisu kugu dhicine…" Ninkii ayaa haddana lala yaacay, sheekh iskusheeggii ayaa loo geeyay. Aad ayaa loogu calaacalay loogana durraantay in uu cafiyo, imminkana uu sidiisii hore ku soo celiyo ninka, isaguna aanu dib u aflagaaddayn doonin sheekha! Ninkii waa yaabbanyahay, waa se uu khasbanyahay oo daawo ayaa imminka ugu daran! Sidii ayaa uu sheekhii ku aqbalay ergadii, aadyar ayaa uu haddana inta uu wax akh akhriyay uu dhabankii, dhinicii iyo afkii qalloocay uu ka dhirbaaxay, saa ninkii hadal ka soo bixi la'aa, afku qalloocay, dhareerkana daadinaayay uu hal mar fay u noqday! Soomaalidu waxa ay ku maahmaahday, "Wadar iyo waaxid, waaxidkaa waalane" ninkii wuxuunbuu isku qaatay in uu isagu waalnaa oo wax kale ay indhihiisu isku sawireen, sidii ayaana uu ku aamminay wixii dadku markaas aaminsanaayeen. Waa sida la iigaga warramay qisaduye, hadda arrimahynu ka sheekaynaynaa waa u caddayn ba dhacdadan lafeeda…

aan raadinayaa qareenkii jinka ahaa ee qofkan dhintay. Markaa si qareenkii la iigu soo helo, waxa aan bixinayaa qurbaan, waxaana aan siinayaa/u samaynayaa ka iiga masuulka ah qareennada jinniga ah. Kii ayaa iisoo helayaa qofkan dhintay qareenkiisii jinka ahaa ee la socday. Qareenkii jinka ahaa ayaa aan haddana u samaynayaa waxa uu rabo. Kolkaas ayaa ay arrimuhu iskugu kay toosayaan. Qabrigii ayaan imanaynaa, saa inta aan halkaa istaago, ayaa aan odhanayaa, *'Waryaa hebal/laayo…'* markaas ayaa qareenkii oo iska soo dhigaaya qofkii dhintay waxa uu qabriga ka dhex odhanayaa, *"Waan ku maqlaa sheekh; hee…!"* Dadkii ayaa anfariir u dhiman gaadhaaya, saa waa karaamo ay iga aamineen iyo buruud sarreeya e, waxa aan haddana ka waraysanayaa xaaladdiisa, iyaga oo maqlaaya ayaa uu iiga warramayaa waxa uu ku suganyahay. Kolkaas ayaa si ay dadku ugu qancaan waxan aan sheegaayo, waxa aan ku odhonayaa, "*Soo istaag…!"* Ciiddii ayaa sidii ay wax ka soo baxayaan kala daad daadanaysa, oo siigo samaynaysa, saa wax la dhawraba, waxa mudh ka soo odhanaaya hebal/ heblaayo oo sideedii/sii ah! Dadkii ayaa aad u sii yaabaaya, kolkaas ayaan ka waraysanayaa in ay cidi dishay iyo in uu bes u dhintay. Xogtii laga rabay oo dhan marka uu sheego iyada—oo dadkii arkaaya oo maqlaaya, ayaa aan ku amrayaa in uu xabaashiisa dib ugu noqdo. Dadku iyaga oo sidii u arkaaya ayaa uu ku noqonayaa qofku qabrigiisii! Anigu

markaas laba arrin ayaa aan helaayay, shayddaankuna laba arrin. Anigu waxa aan helaayay sumcad iyo aamminaad aan dadka ka dhex kasbado ayaan helaayay, shayddaankuna waxa uu helaayay darajooyin maaddaama uu i dullaystay, waxa kale oo uu helaayay in ummad dhan uu yaqiintoodii iyo diintoodiiba khalkhal galiyay, dadkii maciisa ahaana soo bataan.

Waxa kale oo jirtay, in dadka aan ka dhaadhicinaayay in aan qaybka wax ka ogahay, taasi na waxa ay ahayd beentii ugu fashilsanayd ee aan sheegaayay, se dadku ma ahayn kuwo aqoon badan lehe, wixii aan idhaahdo si qumman ayaa ay u qaadanayeen. Masalan qof ayaa ii imanaaya oo, isaga oo naf isoo biday marka uu xaruntayda imaaddo, ayaa inta aanu hadalba waxa aan dadka ka hor sheegayaa magaciisa oo dhammaystiran, xogtiisa shakhsiga ah oo dhammays tiran, waxa uu u socdo oo dhammaystiran, illaa xataa waxa uu ku fikiraayo markaas ayaa aan sheegayaa! Arrintaasi dadka mucjiso iyo amakaag ayay ku noqonaysay. Waxa ay ii qaadanayeen wali wax walba ogaan kara. Waxa ay rumaysteen in aan qaybka daalacan karo. Balse anigu arrimaha qaybka waxba kama aan ogayn, qayb na ma ahayn waxan aan sheegaayay. Waxaana hubaal ah in aanay qaybka cidina

wax ka ogayn; kana ogaan doonin Alle kalidii mooyaane.[18]

Arrintan se dadka aan ka dhaadhicinayaa sida ay u dhacaysay ayaa aan idiin sheegayaa. Waxa jira aslan ba

---

[18] *QAYBKU: Kaliya waa wax uu Alle uuni ogyahay, xataa jimanka iyo wixii la halmaalaa waxba kama ogaan karaan. Aynu soo qaadanno bal dhacdadii Nebi Saeleebaan iyo Jimanka dhex martay. Nebi Saleebaan CS – e waxa uu ahaa nebi Ebbe doortay oo uu mulkisiiyay wax aad u badan, waxyaabaha awooddooda la siiyay na waxa ka mid ahaa in uu jinku xataa u shaqayn jiray. Haddaba, markii ay soo dhawaatay geeridii Nebi Saleebaan, waxa uu jimankii u shaqayn jiray ka codsaday in ay u dhisaan qasri quraarad ah oo uu ku ictikaafo kuna cibaadaysto. Waxa ay dhiseen jimankii meel aad u qurxoon. Nebi Saleebaan markii uu soo baxay – ee uu arkay meeshii ay dhiseen aad ayaa uu uga xanaaqay, waxaana la sheegaa in uu canaantay ka dib na dib uga laabtay. Mar kale ayaa ay dumiyeen kii oo hadda na mid kale ay dhiseen, kii na waji aan faraxsanayn ayaa ay nebiga ka arkeen. Ka dib na waa ay dumiyeen oo mid kale ay dhiseen. Ugu danbayntii waa uu geeriyooday nebi Saleebaan, markaa qisada aynu u soconno ayaa ah in ay jimankii ka qoomammeeyeen in aanay qaybka waxba ka ogayn, haddii ay ka ogaan lahaayeenna aanay waxaas oo hawl ah gali lahayn. Iyaga oo ka xumaaday geerida sida dhaw ugu timid nebi Saleebaan, iyo hawshii dhibka badnayd ee ay ka muteen dhisidda goobtii cibaado – ee uu ku amray! Haddaba, qisadaas oo kaliya ayaa innagaga filan in aanu jinku qaybka waxba ka ogaan karin, qisadan oo marka uu jinku qoommamoonaayo lagaga warramay suuratu Saba, aayadda 14.*

in qof walba ay la socdaan laba qareen; qareen jin ah iyo mid malag ah. Labadaas qareen qofku xataa waxa uu ku fikiraayo waa ay la ogyihiin, maxaa yeelay waa ay ku lammaanyihiin. Anigu markaas waxa aan la shaqaysanayay qareenka jinka ah, oo jinniga arrimahaas ii qaabbilsan ayaa warka iiga soo tabinaaya qareenka qofkan. Markaa subaxdii oo kale ayaa ay qareennada noo shaqaynayaa waddooyinka nagu soo aaddan oo dhan ay istaagaan, qof walba oo dariiqaas maraaya waxa ay weyddiiyaan waxa uu u socdo, markaa qareenka yidhaahda, '*qofkani sheekha ayuu u socdaa'* ayaa aan weyddiinnaa waxa uu qofkani rabo—oo dhan, haddana isla isaga ayaannu weyddiinnaa xogta qofka oo dhan. Intaas marka aannu helno, waxa aan u raadinayaa xogtii qofkani uu u socday halkii laga heli lahaa, ama wixii lagu furdaamin lahaa. Masalan qof ayaa kuu imanaaya, waxa aad ku odhanaysaa, '*Waa lagu sixray!* Gurigaaga, qolka saas ah, laabkiisa caynkaas ah, sibidhka hoostiisa, oo sariirtaada madaxeeda ah, waata sixirka laguugu aasay!' Waa aad isku soo raacaysaan qolkii, sidii aan sheegaayay iyo wixii aan sheegaayay ayaa laga soo saarayaa meeshii, qofkiina waxa uu rumaysanayaa in la sixray oo arrintu dhab ay tahay!

Haddaba, qofka in la sixraa waa ay dhacdaa oo waa baab kale e, laakiin arrimaha noocan ah inta badan annaka ayaa samayn jirnay, waxaana aan u kaalmaysan jirnay jinka. Waxa aannu ka rabnaa in dad ka aannu

kasbanno aaminaaddooda, wixii aan u sheegana ay si fudud ku rumaystaan ama u qaataan. Masalan waxa dhici karta arrimo kuwan ka culus in aanu sheegi jirnay, sida roobku xilligaas ayaa uu da'ayaa. Arrintaas iyana sida lagu keenaayay maaha in qaybka wax laga ogyahay, se jimanka ayaa waxa ay war u doonayaan samada. Waa ay is korkoraan, illaa ay ka maqlaan malaa'iigta wax yar oo kooban. Haddaba, jimanku waxa ay soo maqlayaan masalan in roobka la soo amray xilliga uu da'aayo. Kalmaddaas marka ay maqlaan, ayay boqollaal kale oo beeno ah ku sii darayaan, sidaas ayaan anna dadka ugu sii gudbinayaa, taas ayaana aanu qayb ka dhigaynaa!

Waxa haddaba is weyddiin leh, arrinta ay makhluuqaadka Eebbe abuuray ogyihiin qayb ma tahay mise maaha? Dabcan qayb ma aha, waana war makhluuqaadka qaybtii loo sheegay oo la hayo, kii ayuunbaannu annana markaan jinka dirsanno inyar oo ka mid ah ay nooga keenayeen. Arrimaha in qareennada iyo guud ahaan jimanku noo fududeeyaan mooyiye, wax kale oo xagga Rabbi ah oo karaamo ay nooga imanaysay ma ay jirin! Haddii markaas aad aragto nin *wali* sheeganaaya, ama ay dadku ka dabiib dalbayaan, oo sheegaaya xogtaada oo dhan, waxa aad u socoto iyo wax kaste oo kugu saabsan, wax ba kaas ha ku daalin waa *faalalaw* aan cidhib wanaagsan iyo raad toona lahayne. Haddii 'wax kaste i weyddii' uu ku yidhaahdo, oo aad weyddiiso, intooda ugu badan in uu kaaga

jawaabo ayaa suurto gal ah, adna inta aad ku gadsoonto aad rumaysatid arrimihiisa oo dhan. Balse waxa aad ogaataa waxa aad weyddiinaysaa waa wax aad adigu ogtahay! Haa, waa wax aad adiga laftaadu ogtahay. Sidaa awgeed, wixii aad ogtahay qareenkii jinka ahaa ee kula socday na waa ogyhay, sidaas awgeed ayaa isna uu u ogaanayaa. Bal haddaba taas beddalkeeda waxa aad samaysaa wax aanad adigu xataa ogayn weyddii, waxa dhab ah in aanu isaguna wax ba garan doonine! Masalan quruurux xantoobi, adiga oo aan tirin 'waa immisa xabbo quruuruxan hayaa?' ku dheh, ma dhici karto in uu garto tiradooda!

Waxyaabaha dadku ay inta badan rumaystaan ee aan samayn jiray waxa ka mid ahaa, *'Aw hebal waa uu duulaa'!* Taasi waa hubaal in aad dad badan ka maqashay. Waxa kale oo jira salaadaha qaarkood in aad dhahdid waxa aan ku soo tukanayaa Maka, saa iyaga oo ku arkaaya dadkani aad caadi u duulaysid! Waxa hubaal ah in ay amakaag tahay in aad aragtid qof duulaya, waxa se ka sii amakaag badan, in aad qofkaas awliyo nimo u run san waydo—oo aad tidhaahdo, 'Beenaale ayaa aad tahay!' Taasi waa mid qariib ah oo ay yartahay cidda nagula soo dhici kartaa. Waatii la iga saxeexay in aanan waligay soomin markii aan qolka yar ku jiray, waxa haddana shuruudaha kale ka mid ahaa in aanan tukan salaad casar ama mid subax, waxa kale oo aad ogaydeen in aan la ii oggolayn in aan cid tujiyo; xataa safka hore

in aan ku tukado waxa uu iga ahaa mamnuuc! Haddaba, salaadda casar oo aan la ii oggolayn marka ay gaadho, ayaa aan odhan jiray, *'waxa aan ku soo tukanayaa Maka'* iyaga oo i arkaaya ayaa aan duuli jiray oo ay i waayi jireen dadku! Mid ka mid ah Cifriiddada ayaa inta uu i qaado, waxa uu i gayn jiray badaha ama meelaha waaweyn ee guddaafadaha qashinka ah! Halkaas ayaannu joogi jirnay inta salaadda laga soo baxaayo, saa intaas ka dib ayaa aan ku soo laaban jiray meeshaydii.
Waxa aan xusuustaa markii aan ku cusbaa, ayaa maalin maalmaha ka mid ah la i qaaday. Jimanku waxa ay mar walba isku dayayaan annakayagaa u shaqayna in ay na khiyaameeyaan, sidan aan idiinku sheekaynayana arrintu uma wada furnayn, se waa mid aan mar ba in sii ogaanaayay, se aniga waxa la igu qanciyay markii hore in aan *wali* Ilaahay ahay, waxan aan samaynayaa na ay raalli ahaansho Alle iyo karaamo ay tahay! Maalintaas aan idiin carrabaabay, markii la i qaaday ayaa la i geeyay cirka, waxa aan maqlayaa sanqadha *Gig, gig*... leh, *'maxay tahay?'* haddii aan su'aalayna, *"Albaabkii Kabcada ayaynnu garaacaynaa oo waa la innaga furayaa"* ayaa la igu yidhi. Wax aad mooddo sanqadh albaab furmaaya ah ayaa baxday, markaas ayuu igu yidhi, *"albaabkii kacbada ayaa la innaga furay!"* waxaasina wax jira ma ahayne, aniga ayuu doonayay inu yaqiintayda ku haysto shaydaanku!

Sheekadan uu *Xaamud* ka sheekeeyay ayaa aan mid ku xusuustaye, laba wadaad oo socoto ah ayaa reer u soo hoyday. Iyaga oo marti ah, ayaa uu wiil dhallinyaro ahi isna martidii ku soo saddaxeeyay. Habeenkii ayaa neef loo qalay, saa markii ay odayaashii daribtii isla dhaceen, wiilkii yaraa oo aan wali hamuun goynin ay hilbihii kale yidhaahdeen 'ha innoo xarkagaan'[19] oo muskii ardaaga ayaa ay ku laydhiyeen. La iska seexay, wiilkii na wax uu sameeyo garan waa oo culimada ka xishood. Saa saq badhkii ay gaajo ba'ani qabatay wiilkii, isna markii uu indhah kala qaaday ba hilbihii xarkagaayay dhaayaha saar. Labadii wadaaad oo khuurada laba jaraaya hadddii uu arkay, ayaa inta uu kacay hilbihii uu iskii uga dhergay! Kolkii subaxdii waagu beryay, ayaa ay labadii wadaad oo aan xaggii hilbahaba eegini ay war iskula asbaxeen. Mid kood ayaa sheekada ku dheeraystay—oo, saa waxa uu ka sheekeeyay in jasadkiisa uuni uu meesha jiifaye, ruuxdiisu ay xaramka ku soo tukatay

---

[19] *Xarkag: Hab dhaqameed ay Soomaalidu lahayd, kaas oo hilibku marka uu baruur bato, siiba ahaanna hilibka idaha – ee dhulka kulaylaha ah lagu cunaayo, ayaa inta lafiha meelo yaryar laga dalooliyo waxa la sudhaa oodo ama dhigaha aqalka, ka dib na waa la soo laalaadiyaa, taas oo laga na dhawraayo in ay qudhaanjadu gaadho. Hilibkaas marka ay laydhu ku dhacdo waa uu qallaalaa, waxaa na qallalkaas la yidhaahdaa, Xarkag, waxaa na uu hilibkaasi yeeshaa dhadhan aad u macaan oo bilaa laqanyo ah.*

salaaddii subax! Kii kalana intaas in leeg ayaa uu sheegay. Saa kii yaraa marii uu sheekadoodii ka yaabay, inta uu soo kacay ayaa uu ku yidhi, "Culimo waa runtiine, intii aad maqnaydeen ayaa aan soo kacayoo, markii aan idin waayay, ayaan anna hilbihii halkan saar naa iska cunay—oo aan is idhi malaha culimadii waa socdaaleen…" Amakaag iyo afkalaqaad ayaa labadii wadaad arrintii ku noqotay, saa inta ay dhaayo yaxyaxsan ku fiiriyeen hilbihii, ay niyadda ka guhaameen wiilkii, wax ay af ka yidhaahdaanna waa ay kasi aqoon waayeen, ka dibna waa ay iska aamuseen!

Sheekooyinka nolosha *Xaamud* ku saabsanaa waa iska sida oo kala—e, bal hadda aynu sii wadanno warkiisii. Aniga iyo shayddiinta aan hoggaaminayo ee jin iyo insi ba lihi waxa aannu mujtamaca muslimiinta ah ku haynay hagardaamo iyo weerar joogto ah. Waxa jira dad la sixro, kuwaas oo loo adeegsado shayddiin jin ah iyo kuwo insi ah labada ba. Qofka muslimka ah waxa lagu ilaaliyay adkaar subax, galab, habeen, hurdo, hoy galis, hu' xidhasho, hadhimo cunis iyo mar walba loo sheegay in uu laasimo. Waxa kale oo intaas dheer in qofka daahirsanaan iyo nadaafad ay diinteennu ku boorriysay, intaa haddaba qofkii sidiisa ula yimaadda ku na toosnaadaa waa midka isagu badbaaday. Qofka hadda ba isagu intaa seegay ama sagsaaga, waa mid iska fayday ama iskaga tagay gabbaadkii la yidhi cadawga kaga

dhuumo. Qofka caynkan isaga arrintiisu ma cusla, haddii ay soo weeraraan ciidammadaas loo soo dirayna, si fudud ayaa ay uga salgaadhi karaan ujeeddadooda!

Haddaba, waxa jira qof muslim ah oo inta aynu ka soo sheekaynay ama loo jideeyay ba si wacan ugu toosay. Qofka caynkaa ah waa ay adagtahay weerarkiisa in lagu guulaystaa. Iyada oo ay sidaa tahay, hadda na waxa jira in aan mar naba sidaas lagu daynayn qofka—e, weerarro isdaba-joog ahi ay ku soconayaan. Marka ugu horraysa ciidammada jimanka ah ee qofkaa loo diraa kolka ay xaggiisa aadaan, inyar marka ay u jiraan ayaa ay waayayaan muuqiisu meel uu jaan iyo cidhib dhigay! Iyaga oo faro-madhan waxbana aan soo fulin ayay nagu soo noqon jireen! Marka kuwaasi ka soo quustaan, waxa aannu u diraynaa qolada labaad oo iyagu ka awood badan kuwan marka hore soo laabtay. Qoladii labaad qofka sidaas isku ilaaliyay, ee adkaarta iyo waysada ba dhawrtay marka ay xaggiisa aadaan, wax yar marka ay u jiraan ayaa ay sidii kuwii hore oo kale waayayaan muuqiisa! Qoladani se waa ay ka awood badnayd kuwii hore—e, codkii qofka ayaa ay maqlayaan, waa se laga indho saabayaa! Iyaga oo faro-madhan ayay iyagu na nagu soo laabanayaan! Markaas ayaannu hadda na diraynaa qolada saddexaad oo iyagu labadii hore ba ka awood badan. Qoladani marka ay qofkii ku dhawaato, iyagu waa ay arkayaan, waana ay maqlayaan codkiisii, se marka ay ku sii dhawaadaan,

waxa ay indhaha saarayaan *malaa'iigta* xoogga-waaweyn leh ee ilaalinaysa qofka! Iyaguna way soo laabanayaan, kolkaasaan ku odhan, *'haye maxaad soo qabteen?'* markaas ayay odhanayaan, 'ninkii aad noo dirteen malaa'iig waaweyn ayaa ilaalinaysa'! kolkaas ayaa aan ku odhanayaa, 'oo saw idin ba malaa'iig ma tihidin, waa maxay sababta aad uga soo noqoteen?' kolkaas ayaa ay odhanayaan, 'waa malaa'iig naga *waaweyn*, waa na aannu ixtiraamaynaa…'!

Arrinta caynkaas ahi marka ay socon waydo, qofkii xaalkiisu waa uu adkaaday, in dhan kale looga wareego ayaana lagamamaarmaan noqonaysa. Halkaa marka ay xaaladdu tahay, waxa aannu diraynaa jin lagu magacaabo *Walhaan*. Jinkani waxa uu qofka ku dedaalayaa in uu ka illawsiiyo adkaarta iyo acmaasha wacan ee qofka xijaabka u ahayd. Muddo ayaa uu daba soconayaa, haddii se uu u taag-waayo in uu wax illawsiiyo, waxa aannu u diraynaa jin kale oo *Khinsab* la yidhaahdo. Jinkani waxa uu ka shaqaynayaa sidii uu qofka khalkhal uga galin lahaa cibaadada! Masalan waxa uu ku tashuushadaynayaa in waysada uu badh illaaway, adkaarta in aanu inteedii odhannin, in aanu daahir ahayn, waxyaabahaas oo dhan ayaa uu ku dedaalayaa in uu qofka maskaxda kaga furo! Waxyaabaha aad ku garan karto in qof Khinsab ku daba jiro uu yahay qofkad aragtaa waxa ka mid ah; immisa qof ayaa aad aragtaa oo marka ay salaadda xidhanayaan ku soo

celceliya, *'Allaahu akbar'* iyaga oon si fudud u xidhan karin salaadda ee kolba *'a, a, al, laa, hu, hu, ak, ak, ak, b, b, ba, bar...'* ku celcelinaaya. Hadda gara—oo qofka aynu ka hadlaynaa ma aha qof haghago/shigshigo leh, ee waa qof sidiisa kale caadiga ah, se marka uu salaadda galaayo dhibkaasi haysato. Qofka caynkaas ah haddii aad tahay ama aad aragto, jinka *Khinsab* ayaa ay u badan tahay in uu ku dabajiro e, waa in aad ku tidhaahdaa *'iska dhaaf ku celcelinta—oo hal mar xidho salaadda'*! qofku isma oga, waxaana uu is odhanayaa uun caadi wali salaaddii uma aad xidhan!!

Jinkaa *Khinsab* la yidhaahdo iyo *Walhaan* waa kuwa ugu danbeeya ee qofka weerarrada badan ku soo qaada. Waa kuwo inta badan qofka ku lammaan. Khinsab waxa kale oo shaqadiisu tahay in qofku hamaansado, waana sababta rasuulkeennu CSM u yidhi, "Midkiin marka uu hamaansanaayo afka gacanta ha saaro inta uu awoodo…" waxa la diidayaa in qofka ay afka shayaddiintu ka galaan, waana jinkaas aynu magaciisa soo sheegnay ninka arrintaa ka shaqeeyaa, waxaana aad ku garanaysaa, hal qof marka uu hamaansado, inta meesha wada joogtaa ba in ay wada hamaansato ayaa aay u badantahay, meeshaas na *Khinsab* ayaa jooga e, inta aad afka gacanta saarto in aad jinka iska naarto ayaa habboon. Waxa kale oo jira, isla jinkan aynu ka sheekaynaynaana uu dadka gayaysiiyaa, in qofka niyaddiisa uu ku shubo, '*nijaastii wali iskamaad*

daahirinba!' waxa laga yaabaa in aad aragto qof maanta oo dhan suuliga ku jira, marka uu is yidhaahdo soo bax ba, waxa uu moodaya in wali wasakhi ka socoto xubinta saxarada ama kaadida, waa kaa ku noqonaaya uun in uu daahir ka dhigo. Illaa qofkaasi uu ku sigto in uu salaadda kaga daaho ama kaga hadhaba jamaca arrintaa darteed! Haddaba, arrinta caynkan ah dawadeedu na waa sidii ta hore oo kale, waa in aad naftaada u sheegtid in aad daahir tahay, waa marka tashuushka caynkaas ahi kugu furanyahaye. Waa in aad go'aan qaadataa. Matalan nafta ayaa ku tidhi nijaas ayaa halkan kaaga duushay, ha ku sii mashquuline, halka ugu dhawi waxa weeye in aad biyo badan sii raacisid; waa haddii aad tahay qof shaki caynkaas ahi ku dhacay—oo arrintaa u maare la'aa...

Maaddama aan ahaa *Wali* ay dadka oo dhammi ka barakaystaan, waxa la ii keeni jiray dad xanuunsanaaya, kuwaas oo la iiga codsan jiray in aan dabiibo. Dadkaas waxa aan u samayn jirnay qardhaaso, waxaana aan siin jiray biyo aan u sheegay in aan cashar ku tufay, kuwaas ayaana aan ku odhan jiray isticmaala. Haddaba waxa is weyddiin mudan, ay tahay na in aan idiin yar iftiimiyo waxa aan samayn jiray. Ugu horraynba waraaqda waxa aan ku qori jiray aayado Qur'aan oo wada *badh-go'an!!* Haa, waa ay wada badh-go'naayeen, sababta oo ah, waxa aayadahaas aan ka jari jiray xarfka u danbeeya, sidaas na waxa ay ku samayn jireen macno aan ahayn kii ay sideen, ama macnuhu ba

waa is beddali jiray! Taasi waa ta qur'aanka aan meesha ku qoraayo u gaarka ah, waxa se iyana jirtay, warqadda aan wax ku qorayaa waxa ay ahayd mid nijaasaysan! Ha yaabin, waa dhici kartaa in aad qariibsato, se *shahwadda* ragga, *dhiigga* dumarka iyo waxyaabo waxaas la mid ah oo aad u liita ayaanu warqadda marin jirnay, kolka intaas aannu u dhammayno, waxa aannu ku xigsiin jirnay in aanu sawir ku sawirno, sawirkaas oo ah xiddig, saddex-gees, xiddig lix geeslay ah, ama sawir u eeg fargalka meherka ee dadka reer galbeedku xidhaan oo kale. Intaasi marka ay sidaas iskugu dhammaato, waxa aannu ku shaqli jirnay qardhaasta harag, haraggaas oo inta badan ah harag aan daahir ahayn laftiisu! Haa, harag *Ey* ma mid *Doofaar* ayaa aannu ku jaxaasi jirnay, qofka haddii qardhaasta loo jaxaasana, waxa uu u haystay tii ugu sarraysay in ay tahay, waxaana laga ilaalin jiray dayaca iyo wax walba oo dhib u keeni kara qardhaastaas. Xad waxa la gaadhay aan lagu dhici karin in la fiiriyo bal waxa gudaheeda ku jira qardhaastaas! Intaasi sidaa kolka ay u dhacdo, waxa qofka qardhaastaas xidhay aqoonsanaaya jimanka, sidaa ayaana uu ku noqonayaa mid diwaan-gashan!

Calaamadaha Sixiroolayaasha

1- Qofka sheega magacaaga markad u timmaadid. Marka aad sidaas ula soo joogsata ba qofku haddii uu magacaaga oo saddexan sheego, ka dib marka aad weyddiiso sababta na uu ku yidhaahdo 'Awlio ayaa aan ahay' waa beenaale—e waa sixiroole daallin ah.

2- Qofka ku weyddiiya magaca hooyadaa. Magaca hooyadu inta badan waa ka lagu sameeyo sixirka, kolkaa haddaad aragto nin/adh wadaad sheeganaaya oo magaca hooyadaa ku weyddiiya, waa sixiroole e' wax ba ha u sheegin. Aslan ba na ma fiicna magaca hooyadaa in aad cid walba u sheegto wax daruuri ah oo lagamamaarmaan ah mooyaane.

3- Haddaad aragto qof dadka kitaabka u rogroga. In badan ayaynu aragnaa qof leh 'kitaabka ayaa aan kuu eegayaa'! bal adigu is weyddiiyoo kitaabka maxaan qur'aan ahayn ee ku yaalla? Waa mid ka mid ah astaamaha sixiroolayaasha ee dadka qaldaaya! Marba bogga uu qur'aanka furo, aayadda ugu horreeya, xarafka ugu horreeya ayaa uu kaaga eegayaa burjigaaga.

4- Kuwa ama lacag ama wax kale dadka u soo quba. Waxa jira niman dadka ku harqiya lacago aan la aqoon meel ay ka imanayaan. Qaar ayaa laba sinxi inta ay isku

daboolaan lacag caadi ah kaaga soo saaraaya! Astaamaha caynkaas ah, ama kuwa kale ee jidhkooda wax mucjiso ah ka muujiyaa waa saaxiriin!

5- Mid leh '*salaad heblaayo ayaa la—i qaadaa..*! Waxa laga yaabaa in aad taqaannid nin leh 'salaad heblaayo waa la i qaadaa oo xaramka ayaa aan ku soo tukadaa'! kuwa sidaas lihi na waa laba nooc inta badan. Qaar halkoodii iyaga oo fadhiya odhanaaya ruuxdaydii ayaa ku tukanaysa meel heblaayo, bartaas na aan salaadda uga kacayn, iyo kuwo iyaga jidh ahaan iyo ruux ahaan ba adoo arkayo la qaadaayo, kuwaas oo dadka u sheegaya in meel heblaayo ay salaadda u aadayaan! Labadaas nooc ba waa sixiroolayaal! Waxaana hoosta ka galaaya oo qaadaaya jimanka qaarkood oo ah kuwa la shaqaysta, inta salaadda lagu jirana waxa ay gaynayaan badaha ama guddafadaha qaarkood!

6- Qof ku odhanaaya, 'xoolo caynkaas ahi saw kaama maqna, saw neef caynkaas ahi kuma jiro, saw sidaa kale maaha?' amaba wada sheegaya dhammaan ba xaaladdaada mid caafimaad iyo mid kugu xeeran ba, isaga oo laga yaabo in uu gaadho illaa yaraantaadii, ha ku daaline iskaga tag waa sixiroole kaasina—e!

7- Qofka sameeya xirsi-xidhyada, kuwaas oo leh calaamado! Waxa jira wax dadku ay sameeyaan oo Xirsi-xidh la yidhaahdo. Aad ayaa uu u kala heerar sarreeyaa xirsi-xidhku. Mararka qaar xoolo lumay ayaa la yidhaahdaa *'waa loo xirsi-xidhayaa'* halka dadka qaar na ay ka yidhaahdaan, *Nabaadiinno-xidh!* masalan waa xoolo kaa lumay, kuwaas oo la odhanaayo 'sheekh hebal ha innoogu xirsi-xidho—e, innoo doona...' waxaana la aaminsanyahay in sheekhu karaamadiisa ku xijaabaayo xoolaha, sidaas na ay bahal iyo dad-xun labada ba ay kaga badbaadayaan. Habka caynkaas ahi waa ka ugu fudud, se waxa jira *xirsi-xidhyo* aad uga awood badan habka noocan ah, kuwaas oo gaadhsiisan illaa xabbadda dhacda in la iskaga xidho, ka dib na aanay xabbaddaasi sinaba kuugu dhacayn! Sidiisa ba markaa waxa la xirsixidhaayo waxa loo dirayaa waa jin, isaga ayaana isku gadaamaya, wixii dhibi lahaana ka ilaalinaaya; dad iyo duunyo wixii loo xirsi-xidhaba!

Sheekh *Xaamud* oo waxan oo cilmi ah innooga sheekeeyay markii uu toobad keenay ka dib, ayaa wuxu ka sheekaynayaa mar uu safar ugu baxay waddanka *Maali*. 'Waxa aan arkay in waddanka *Maali* uu aad ugu badanyahay Xirsi-xidhku, waxa ay gaadheen heer illaa dhibta qof kale u gaysan lahaa uu iskaga xijaabo qofku! Arrinta sidan ahi mid sahlan ma aha. Lama odhan karo *'Xirsiyadu waxba ma xijaabaan'* se waxa sax ah in la

yidhaahdo, '*Xirsiyadu/Xijbiyadu waa shirki'!* Haa, sidaa ayaa labada ku qumman sax na ay ku tahay, waayo waxan shayddiin ayaa ka shaqaysa oo qofka iyaga ayaa difaacaya! Waddankii markan wax yar joogay, waxa aan maalintii danbe ka istaagay masaajid jamac badani ay iskug yimaaddeen, Eebbe na si weyn loogu caabudaayay. Dadka dhulkan deggani *Xijbiyada/ Xirsiyada* waxa ay u yaqaannaan wax bannaan oo diiniyan aan wax dhib ah lahayn. Masaajidkii markii aan ka istaagay, ayaa aan dadkii ku idhi, 'Waar dadaw *Xijbiyadu* waa shirkiye iska daaya oo Allihiin ka baqda, wax bannaan ma aha arrintaasi, waana wax aan wax ba idin tarayn…' Hadalkii aniga oo wata, ayaa ay dadkii bilaabeen waxoogaa guux ah. Iyada oo sidaas ah, ayaa nin ka mid ah dadkii jamaca ahaa istaagay, waxaana uu yidhi, "*Xijbiyadu* waxba ma taraan ayaa aad iska leedahaye, bal aniga middidan i karsii, *Xijbiyo/Xirsiyo* ayaa ii xidhane"! ninkani inta uu toorray iska soo jaray, ayaa uu jidhkiisa sidaa ugu taagtaagayaa, se wax ay ka qaadaysaa ma jirto, dadku na waa ay wada arkayaan! Si walba mindida waa iskula dhacayaa, se wax ay yeelaysaa haba yaraato—e ma jirto!

Arrintii ayaa adkaatay! Dadkii markii ay isla kaceen ayaan ku idhi, 'Waar horta anigu nin qariiba ayaan ahay—oo magaalada ku cusub, haddaad doontaanna waa aad i dilaysaan, se *Xirsiga* ninkaas ku xidhan waxa furaaya kitaabkaas *Qur'aanka* ah ee

masaajidka idiin yaalla. Haddii kitaabkaasi furi waayo aniga ayaa danbiile ah, hadii kala na in waxan aanu xaq ahayn ayaa idiin soo bixi doonta! Waayo kitaabka waxa ku qorani waa *Qur'aankii* Alle oo xaq ah, xaqu na xaqa wuu xoojiyaa, laakiin qur'aanku haddii uu buriyo waa shirki...' markaas ayaa ay igu yidhaahdeen, "Ma *Qur'aanka* ayaa aad ku burin kartaa xirsiga?" '*Haa'* ayaan ugu jawaabay! "Hayee samee aan aragno—e..." ayay yidhaahdeen! Markaas ayaan ku idhi, 'Adiga mindida kuma galin karo oo waa la i qabsane, iska soo fur xirsiga kuu xidhan, hilib xoolaad oo aan ku xidhnana keena...' Intii ayaa la sameeyay. Ninkii inta laga soo furay, ayaa lagu xidhay lug hilib ah oo suuqa laga keenay. Mindidii ayaannu si walba ku nidhi, kari na wayday markaas. Kolkaasaan ku idhi, 'saw si wacan uma aragtaan' in xirsigii u xidhanyahay?' "*Haa*" ayay yidhaahdeen. Kolkaas ayaa aan ku idhi, 'haddaba saddex qof ayaa aan u baahanahay iyo mu'addinkii masjidka'! Intii ba waa diyaar. Saddexdii ayaan mid ba suurad in uu akhriyo ka codsaday: *Wasaafaad*, *Baqara* iyo suuratu *Dukhaan* mu'addinkii na waxa aan ku idhi ku celceli eedaanka. Hilibkiina halkiisii ayaa uu yaallaa, qof walba oo masjidka fadhiyay na waa marsiin kari waayay mindida markii hore, waana la wada arkaayay!

Anigu halkan ayaa aan fadhiyaa, waana aan aamusay, xataa haddaad is leedihiin waxbuu hoosta ka akhrin doonaa aan afka kala qaado ayaan ku idhi.

Cabbaar ayaa sidii loo waday *Qur'aankii* iyo eedaankii ba. In door ah markii ay wadeen ayaa aan ku idhi '*joojiya'*, markii la joojiyay ayaan ku idhi 'eega in cadkii jarjarmo' aadyar ayay mindidii dhan walba u dhex qaadday cadkii! 'Bal ka daaya oo cabbaar aan sugno' ayaa aan ku idhi haddana. In door ah kolkii la fadhiyay, ayaa aan ku idhi haddana 'bal eega in uu jarjarmo cadkii...' waa la isku dayay, mise sidiisii hore ayaa uu ku noqday, mindidii na waa ay kari wayday! Markaas ayaan ku idhi kuwii hore, 'iska fadhiista idinku. Bala afar kalaw kaalaya'! Afartii danbe ayaa aan haddana sidii shaqada ugu qaybiyay, kuna bilaabe *Qur'aan* akhriskii iyo eedaankii! Cabbaar haddii ay ku wadeen ayaa aan ku idhi, 'ka daaya bal aynu eegno—e'! waa aannu eegnay, mise aad yar ayuu haddana jeexjeexmay hilibkii!

Dadkii waxa ay u go'een yaab, waxaana ay i weyddiiyeen sababta, kolkaa ayaan u sheegay in *Xirsiga* uu ilaalinaayo jin, sidaa awgeed na uu isagu isku dhigayo markan ay mindidu kari la'dahay. Markan kale ee qur'aanka iyo eedaanka cabbaar la wadana uu meesha ka cararaayo jinku, sidaa na uu xirsigii ku furmaayo; suurtogal na ma aha meel *Wasaafaad*, *Baqara* iyo suuratu *Dukhaan* iyo *Eedaan* ka socdo in jinku uu hawl ka sii hayo, amaba uu joogi kara ba! Dadkii waxa ay rumaysan waayeen in *Xirsiga* uu jinku ku shaqo leeyay, ilaaliyo ama meel uun xidhiidh kala leeyahay. Kolkaas ayaa ay yidhaahdeen, "Marka hore ba *Xirsigu* waa *Qur'aan* iyo

ducooyin warqad lagu qoray oo qardhaas laga dhigaye, maxaa jinka isaga meeshaba keenaaya?" intaa kolkii ay isku raaceen ayaan ku idhi, 'saw ma hubtaan in qardhaastan *Xirsiga* ah waxa ku qorani uu qur'aan yahay?' "*Haa*" ayay yidhaahdeen, kolkaas ayaan ku idhi, 'Waxa aan bixinayaa kun lacagta waddankiinna ah haddii waxaas meesha ku qorani uu qur'aan sax ah noqdo'! Halkii ayaa lagu furfuray Xirsigii, waxaana ugu horrayntii ba laga soo saaray sawir afar gees ah oo warqadda ku dhex sawiran! Sawirkii ayaa aan ku idhi, 'Xaggee ayuu sawirkani qur'aanka kaga jiraa? Bal sii wada…' Waxa la furay warqaddii qur'aanku ku qornaa, waxaana la akhriayay suuradihii meesha ku qornaa. Dhammaantoodba waxa ay noqdeen kuwo la qalqalday iyo kuwo wax laga reebay ama wax lagu daray! Waannu tirinnay aayadaha dhiman inta ka maqan, waxaa na ay noqdeen sagaal xaraf! Sidaas ayaa dadkii goobta joogay iyo ninkiiba arrintii ay uga toobbad-keeneen!

Haddaba haddii aan si fiican u barannay astaamaha lagu garto saaxiriinta, waxa kale oo aan doonayaa in aan isla barano siddeed astaamood, kuwaas oo dhammaantood ba ka baxsan sifaha caadiga ah ee dadka lagu arko. Siddeeddan sifo hadda ba mid waliba waxa ay ku qorantahay magaceedii carabiga ahaa, maaddaama aanay dadka Soomaalida ahi wada garanayn astaamahan, ma aha dhammaantood ba qaar ay eray-bixiyeen dadkeennu. Sidaa awgeed, waxa aan doonayaa sidaa ay yihiin uun in lagu barto, waxaa na ay tahay muhiimadda meesha innoogu jirtaa in dadkeennu ay kala bartaan siddeeddaa sifo dadka la yimaaddaa waxa ay kala yihiin. Sifooyinkan qaar waxa khaas u leh anbiyada Ilaahay oo kaliyaata, balse waxa inta badan sixiroolayaashu ay sheegtaan dhammaan sifooyinkan kuwooda wanaagsan, sidaa awgeed, waa muhim in qodobbadan aad aad ugu dhug yeelataa, waliba na aad dhawr mar akhridaa oo kala barataa, mid walba na aad ogaataa sifahooda iyo cidda iska leh:

1- IRHAAS: Arrintani waa ta anbiyada inta aan la soo dirin mucjisooyinka ka sii muuqda—ee lagu garto. Badanaa sida aynu wada ognahay anbiyada Ilaahay waxa lagu arkaa inta aan la dirin ba waxyaabo amakaag leh oo dadka markaa ay la noolyihiin ka yaabisa. Masalan haddii aynu ka soo qaadanno arrimihii mucjisada ahaa ee nebi Maxamed lagu arki jiray markii uu yaraa. – Nebi Maxamed CS intii aanu nebiga noqon isaga—oo yar ba waxa salaami jiray dhirta, sida oo kale marka uu safro waxa hadhayn jiray daruur isaga u gaar ah dadka kale na aanay la qabin. Waxa kale oo looga soo joogay nebi Maxamed CS in isaga oo yar—oo carruur la ciyaaraaya ay laba malag u yimaaddeen, ka dib na inta ay laabtiisa jeexeen oo wadnihiisa ay soo saareen ay maydheen, markii carruurtii argagaxday ee ay qayliyeen na, nebigaanna laga waayay wax dhaawac ah oo markaa la arki karo!! Arrimaha noocani ah waxa gaar u leh anbiyada, waxaa na lagu arkaa inta aan la dirin ka hor.

2- MUCJISA: *Mucjisadu* waa arrimaha la yaabka leh ee aan qofka caadiga ahi samayn karin. Mucjisada waxa gaar u leh *anbiyada*, waxaana mucjisadooda ugu weyni ay anbiyada noqotaa hadba qoomka loo soo diro waxa ugu weyn—ee ay ka danbeeyaan, waxaa wax ka yaab badan ayaa uu nebigii markaa qoomkaa loo diraa uu la yimaaddaa. Masalan Nebi *Muuse* Cs markii loo soo

diray *Fircoon* iyo qoomkiisii, waxa markaa aad u sarreeeyay—oo la iskuna ixtiraami jiray cilmiga sixirka, markaa saaxiriintii ku xeernaa Fircoon waa kuwii sixirka daadiyay markii la isku burji dhiganaayay, nebi *Muuse* na waatii ushiisii maska ku noqotay—ee ay askaxooda gurtay! Arrinta caynkan oo kale ah na waxa la yidhaah daa *Mucjiso*. Nebi kaste oo Alle doortayna waxa uu leeyahay mucjisooyin gaar ah oo la siiyay.

3- KARAAMA: *Karaamadu* waa arrin ka dhacda dadka wanaagsan ee saalixiinta ah, kuwaas oo ku toosan diinta uu Alle raallida ka yahay. Qofka karaamo yeelanayaa waa in uu ahaado mid cibaadadii iyo cafiifnimadii wanaagsanayd ay ka muuqato. Masalan ninkii la odhan jiray *Jurayj*, waxa uu ahaa nin caabid ah oo diinta Alle u go'ay. Isaga oo dadka oo dhan ka saahiday, meel yar na ka dhistay waab uu Alle ku caabudo, ayaa markii ay dadkii deegaankiisu u taag waayeen ninkaas, waxa markii danbe gabadhi tidhi, "Anaa fidnayn doona Jurayj" gabadh ka mid ah kuwa xunxun ee jidhkooda ka ganacsada. Gabadhii markii ay muddo ku noqnoqonaysay *Jurayj* ee ay u taag wayday, ayaa inta ay iskaga tagtay waxa ay isku dhiibtay nin kale oo xoolo jire ah. Marii ay uur qaadday ee la weyddiiyay cidda uurka leh na, waa tii aadyar iska tidhi, "Jurayj ayaa aan u sidaa wiilkan"! Arrintaasi markii ay dhacday ee *Jurayj* lagu soo yaacay, wixii loo haystay na loo sheegay

Jurayj, waakii isaga oo aan wax kale qaban inta uu gujiyay wiilkii yaraa ku yidhi, "*Waar yaa ku dhalay?"* markaa waakii wiilkii yaraa hadlay ee aabbihii sheegay-arrinta sidan oo kale ah ayaa iyada na waxa lagu magacaabaa *Karaamo* waxaana u shardi ah in qofka sifadan loogu marag furi karaa uu yahay mid aad u cibaado badan, aan sheeganna fadli gaar ah oo dadka uu dheeryahay iyo nebi nimo midnaba.

4- MACUUNA: Gurmad/ waa arrin uu Eebbe siiyo dadkiisa wanaagsan, waana arrimaha dadka qaar ay is odhanayaan ma dhacayso, ayaa Eebbe uu si fudud wixii u siiyaa. Masalan dadka qaar oo illaa immina aynu aragno iyaga oo uu ku dhacay xanuun xumi, xanuunnadaas oo ay dhakhaatiirtu sheegaan in ay yihiin kuwa aan laga bogsan, ayaa marka uu qofkaasi Alle baryo ama uu sadaqo la baxo Eebbe uu ka qaadaa xanununkii, illaa dhakhaatiirtii markii hore ku sheegtay ay yidhaahdaan, "Waligaa ba xanuunkani kuguma dhicin"! Arrinta caynkaas ah na waxa lagu arkaa dadka saalixiinta ah ee Alle ka cabsiga iyo sadaqada badan...

5- AL-IHAANA: Ihaana waa arrin ka dhacda dadka Eebbe ku kufriyay—ee ka fogaaday. Dadka sidan ahi waa kuwa sheegta awliyonimada ama nebinimada ba. Tusaale ahaan ninkii la odhan jiray *Musaylamatu Kaddaab*, ayaa nin ka mid ahaa dadkii rumaysnaa oo

cawarnaa uu ku yidhi, "Ishan ii hagaaji, nebi *Maxamed* ba asxaabtiisa gacanta inta uu mariyo ayaa ay ishu u hagaagi jirtaye". Musaylama ayaa ninkii soo kaxeeyay oo ishii candhuuf kaga tufay, ka dib na ninkii labadii indhood ba waa uu belay! Markaa *Ihaanadu* waa arrin lagu rogo isla kuwii is yidhi sameeya, waana arrimaha ku dhaca inta badan saaxiriinta iyo kuwa xadgudbay ee hadda na dadka u sheegta in ay awliyo Alle yihiin!

6- AL-ISDIDRAAJ: Arrinta caynkan ahi waa arrin ka dhaca weeyaan dadka sheegta Ilaahnimada ama awliyonimada. Dadkaasi waxa ay samaynayaan waxyaabo yaab leh—oo dadka maangaabka ah ay ku duufsanayaan. Tusaale ahaan nin sixiroole ah ayaa waxa uu dadka iskaga dhigayaa in uu siin karo wax badan oo ay u baahanyihiin; sida ninka la yidhaahdo *Dajaal-Cawr* arrimaha uu la imanaayo—ee ah in uu dadkii rumeeyana uu galinayo janno wax uu ku sheegaayo, kuwa diidana uu galinaayo meel uu naar ku sheegaayo. Sida oo kale in uu kuwa raaca u shubaayo wax roob oo kale ah, dadkooda iyo duunyadooduna ay barwaaqoobayso! Masalan in uu duufsanaayo oo xataa qofka muslimka ah ee is yidhaahda waxan uu sheegayo bal dhegayso uu u helaayo awood uu ku lunsado. Waxyaabaha caynkaas ah ee awoodda aadamaha saxda ah ka baxsan ayaa la yidhaahdaa *Al-Isdidraaj*…

7- SIXIR: Sixirku waa arrin inta badan barasho la xidhiidha—oo dadka qaar ayaa u banbaxa sidii ay u baran lahaayeen. Laba dariiqo mid ayuun baana lagu bartaa, in uu qofku toos uga barto shayddaanka oo sidaas u hadhaw saaxir ku noqdo, taas oo lafteedu dhawr dariiq ku timaadda, ayna ka mid yihiin in qofku had iyo goor aanu daahir ahayn, uskag badanyahay, cibaadaddana uu ka dheeryahay. Marka caynkaasi ay jirto waxa laga yaabaa in shayddaanku uu siyaabo tallaabo tallaabo ah uu qofkaas xidhiidh ula soo sameey. Mar kale waxa uu qofku ku bartaa sixirka si toos ah, isaga oo saaxir hore ka baranaaya, ama si toos ah ba buugta sixirka laga qoray uga dabqaadanaaya.

8- ISHA: Ishu waa mid ka mid ah uun awoodaha uu Ilaahay siiyo dadkiisa qaar, waxaa na ay u badantahay in lagu fidnaynaayo qofkaa ishiisa la siiyay ee halista badan. Ishu waxa ay ku timaaddaa laba nooc mid uun, midi waa xasad, midi na waa mid amakaag iyo dhaygag ay ishiisu ku dhacdo, markaa qofka caynkan ahi marka uu wax la amakaago ayaanu odhanayn, *'Masha Allaah'* waa qofka kaasi inta badan aan is ogayn, se leh awoodda Isha. Markaa qof walba waxa la gudboon wax kaste oo uu la kulmo—oo cajab galiya in uu, "Masha Allaah" yidhaahdo, xataa naftiisa na ha ahaatee. Nooca labaad ee *Ishu* waa mid xasad ah, waa na ta aadka u

dhibta badan, lagana yaabo in uu is ogyahay ba qofkan wax ilaynayaa—oo arrintaa si u-kas ah u samaynaayo.

Inyar aan dib ugu noqonno sheekadii *Sh. Xaamud Aadam*, waxaa na aad mar walba xusuusta ku haysaa in uu *Xaamud* arrimahan aynu hadda ka sheekaynayno uu ka toobbad keenay, Eebbihii na uu u laabtay oo imminka uu sheekh weyn oo saaxiriinta iyo jimanka ba la dagaallama uu yahay! Dhinacyo badan ayaa uu sheekhu wax innooga sheegaye, aan inyar ku noqonno laba arrin oo midi ay tahay gabagabada sheekadeennan—oo ah sidii uu ku toobad keenay iyo sababtii uu Alle ku soo celiyay. Ta kale na waa mid uu ka sheekeeyay intii uu saaxirka ahaa, dadku se ay waliga u haysteen! "Haddii aan ka warramo waxa jiri jiray oo dabcan dalkeennan *Soodaan* na aad caan uga ah *Xadratu Nabawi* taas oo badankiinnu in aad garanaysaan laga yaabo. Waxa weeyaan in masaajidka la odhanaayo waxa innoogu imanaaya *Nebi Maxamed* CS. Waa la istaagayaa, markaas ayaa la odhanayaa*, "Marxabba yaa marxabbaa bil Mustafaa…"* taas oo loola jeedo in uu nebigu yimid oo waa soodhawayn. Waxa yaab leh, haddii masjid kale aad weyddiiso in ay nebigii arkeen, iyagu na waxa ay ku odhanayaan, *"Haa wuu noo yimid*"! Sida aad la socotaan dariiqada aan qudbiga ka ahaa waxa aanu fidin jirnay maro weyn oo furaash ah, waa meel qaadaysa illaa lix

qof, maradaa na waxa loola jeedaa in uu halkaa nebigu soo fadhiisanaayo!

Markaa waxa la akhriyaya oo lagu dhawaaqayaa dikri, *'Laa-Ilaaha Illalaah, Laa-Ilaaha Illalaah'* ayaa lagu celcelinayaa. Markaa marka ay dadku sidaas leeyihiin, ee ay ku celcelinayaan, annaka intayada sarsare—ee saaxiriinta ahi waxa aannu leenahay ama aannu ku celcelinaynaa dikri kale oo khaas ah. Marka hore waxa aannu leenahay, *Allaah, Allaah, Allaah*…' intaa marka aannu ku celcelino, dadkii na ay ku celcelinayaan, *'Laa-Ilaaha Illalaah, Laa-Ilaaha Illalaah'* ayaa hadda na aanu mar kale dikrigii wareejinaynaa, waxaana aannu akhriyay naa magacyo iyo waxyaabo kale oo diinta ka baxsan, lagu na soo dhawaynaayo ama yeedhaayo shayaddiinta. Taa marka aannu waxoogaa wadno, ayaa aannu iska tuuraynaa kalmaddii markii hore aannu ku celcelinaynay ee *Allaah, Allaah, Allaah*...' ka dib na dadka ayaa odhanaaya, *'Hu' hu' hu' hu*… intaa marka ay iyagu ku celcelinayaan, annaku na aannu meeshii ka saarnay magacii Alle, ayaa hadda na aannu odhanaynaa, *'Qud, qud, qud, qud…'* ka dib na waxa isku xidhmaaya, *'Qud, hu', qud, hu'*…' cabbaar sidaas marka loo wado waxaas, waxa gebi ahaan ba ka baxaaya meesha xuskii iyo dikrigii Alle, ka dib na waxa isku dubbadhacaaya cod reen leh oo xamaasad iyo mirqaan leh, annaku na markaas ayaa aannu raacinaynaa oo akhriyaynaa

waxyaabihii aan sheegeeyay—ee jimanka aannu ku xoo xaadirinaynay!

Marka ay xadradu sidaas isku qabsato, ayaa waxa noo imanaayay suuradda nebi *Maxamed*! Waxa soo galaaya nuur iftiin ah oo hadda na qof u qaab eeg, oo iftiin iyo akhtar ah. Aniga oo ah sheekhii dariiqada ayaa soo dhawaynaaya nebiga oo gacan qaadaaya. Waa aan fadhiisinayaa! Ka dib yaa ku xiga ma taqaannaa? Waxa ku xiga afartii khulafaa-u-raashidiin! Waxa soo galaaya *Abuubakar*, hadda na *Cumar*, hadda na *Cismaan*, hadda na *Cali*, dhammaantood marka ay fadhiistaan nebiga iyo afartii saxaabi ee kale, ayaa aan anna la fadhiisanayaa, hore na waxa aan idiin ku sheegay in aanu diyaarinnay meel la fadhiisto—oo qaadaysa illaa lix qof! Arrimaha caynkan ahi waa kuwo aanu samayn jirnay, illaa hadda na dariiqyo badan oo dalkeenna ahi ay adeegsadaan. Runtii waa arrimo aanay wax ba ka jirin marka dhab loo eego, se waa wax ay shayaaddiinta jinka iyo kuwa insigu ay isku kaashadaan, dadka na ay ku fasahaadiyaan; dhammaan waxa aannu soo dhawaynay na waxa ay ahaayeen jiman iyo Caraafiid!

Xaamud Aadam arrimahan amakaagga leh oo dhammi waa waxyaabo uu soo wada maray, xaqiiqadoo da na uu imminka innooga wada sheekeeyay. *Xaamad* waxa uu bixiyay waraysiyo badan iyo muxaadirooyin uu kaga sheekeeyay waxan aynu ka qornay iyo in ka badan oo

aanan soo wada qaadan. Hadda ba, isla garannay arrimo badan oo dhinacyo kala duwan taabanayaay—e, aan ugu danbaynta ku soo afmeerno sheekadan jahwreerka badan sidii uu *Xaamud* ku toobad keenay iyo sababtii fududayd—ee Alle uu ugu gargaaray. Sidii aynu hore ba sheekada *Xaamud* ugu wadnay, imminka na isaga ayaa uun afkiisa innoogaga warrami doona; waxaanu yidhi, "Muddo aad u dheer markii aan ku dhex jiray sixirka iyo hawlihiisii, dadkii igu xeernaana aan u ahaa wali ay ka barakaystaan dawo na ay ka soo raadsadaan, ayaa maalin waxa ii yimid nin dhallinyaro ah, ninkaas waxa ku dhacay jacayl jiho walba ka lumiyay, waxaana uu naftiisa oo dhan u bixin karaa gabadh aan iyadu na oggolayn, reerkoodu na aanay la oggolayn! Ninkii yaraa ayaa iga codsaday in aan oggolaysiiyo gabadhaas iyo reerkeedaba, waxaana aan siiyay *wax*, waxaana aan jacayl xad-dhaaf ah u galiyay gabadhii iyo hooydeedii diiddanayd ba wiilkii! Waxa aan xusuustaa oo aad na qalbigayga raad ugu reebay, damqasho saa'id ah na igu yeeshay waa markii aan arkay gabadhii oo wiilkii iska raacday oo laga reebi kari waayay, iyo gabadha hooyadeed oo curyaan ahayd, iyadu na u sii siqaysa oo u gurguuranaysa xagga wiilkii markii hore lagu kari la'aa araggiisa; cagahana ka dhunkanaysa wiilkii!

Arrimahaas oo dhammi iyaga—oo jira, waxa ii yimid gabadha aan sixray ninkana aan jeclaysiiyay aabbaheed. Waa nin akhyaar ah oo aannu saaxiib na

ahayn ninkani, ka dib na waxa uu isna iga codsaday in aan gabadhiisa nacsiiyo wiilkan ay jeclaatay—ee isaga oo aan loo meherin ba ay daba ordayso! Mar kale ayaa aan damqaday, se waxa aan hadda na ku sameeyay sixir kale oo is nacsiin ah, waxaana aan arkay is nacii hore mid ka sii xoog badan oo meeshii dhex yimid, markaas oo uu hadda na ii soo dacwooday wiilkii ay gabadhu nacday! Arrintaas ayaa waxa ay naftayda ku yeelatay raad iyo damqasho aad u weyn, wax ay dhacdadaas iyo sida aan u noolahay ba ay maskaxdayda wareeriso, ugu danbayntii waxa aan go'aan ku gaadhay in aan faraha ka qaado hawshan aan muddada 17-ka sanno ah aan soo waday! In kaste oo markii aan ka baxay ay jimankii igu soo qaadeen weerar aad u culus, hadda na waxa iskay garab taagay mid ka mid ah dadka wanwanaagsan—oo igu adkeeyay in aan adkaarta laasimo, wax baqasho ah na aanay iga helin jimanku. Sidii ayaana aan yeelay, muddo aad u badan illaa hadda na weerarka jimanku waxa uu ahaa/yahayna mid joogto ah, Alle se wax ba iguma yeelin illaa hadda, waxaa na aan ballan Alle ku qaaday in aan wixii karaankayga ah aan ummaddayda u bayaamiyo arrimaha jimanka iyo saaxiriinta, intii aan hore u sameeyay na Alle danbi dhaaf iiga dhigo….[20]

[20] *KAAHIN: Waa ninka ka warrma waxyaabaha soo socda – ee aan dhicin, waxaana uu sheegtaa in uu qayibka wax ka ogyahay ama uu wax ka sheegaayo.*

3.FAALALAWGII 2-AAD.

Sheekh *Daa'uud Maxamed Faarax* oo u dhashay dalka Yaman ayaa aynu isna wax yar ka warrami doonnaa noloshiisii intii uu saaxirka ahaa, dadka markaa uu la noolaana ay u haysteen nin wali Ilaahay ah iyo caalim weyn oo dadka dabiibaa! Sheekh Daa'uud cimrigiisa marka laba loo qaybiyo meel ahaan ayaa uu arrimaha sixirka ku soo qaatay, ugu danbayntii se waa uu ka toobbad keenay; ila akhri qisadiisa..

CARRAAF: Waa ninka ka sheekayn kara waxyaabo hore oo dhacay, ama waxa uu ka warrami karaa wax meel aanad adigu wax ka ogayn ka dhacaaya!

Daa'uud Maxamed Faarax waxa uu asal ahaan ka soo jeedaa dalka *Yaman*, aabbihii *Maxamed Faarax* ayaa ahaa saaxir weyn oo deegaanka ka caan ahaa. Se waxa uu caan ku ahaa—oo dadku ay u yaqaanneen in uu yahay nin awliyo ah! Haa, karaamo ayaa uu sheeganaayay *Maxamed* muddo aad u badan. Wax uu odaygii hawshaa wadaba, ugu danbayntii waa uu gaboobay oday *Maxamed*. Se isaga oo wali hawlihii sixirka ku dhex jira, ayaa waxa u dhashay wiil, waxaa na uu wiilkii u bixiyay *Daa'uud*. Markii uu muddo yar jiray *Daa'uud*, ayaa waxa uu aabbihii u hibeeyay shayaaddiin tii! Hibaynta waxa aan ka wadnaa in uu wiilkaas siiyay qoladaas shayddiinta ah oo uu hadyad uga dhigay! *Daa'uud* waxa lagu bixiyay sifahaas aynu soo sheegnay, markii uu wax yar jiray na waxa dhintay aabbihiisii saaxirka ahaa—ee *Maxamed*. Geeridii aabbihii markii ay muddo ka soo wareegtay, ayaa jimankii bilaabeen in ay *Daa'uud* si toos ah ula soo xidhiidhaan! Dariiqyada ayaa ay bilaabeen in ay kula hadlaan iyaga—oo suurad aadame isku soo yeelaaya. Isaga wali arrimahani uma bilawna, hooyadii oo se ahayd gabadh wanaagsan, waxa uu ninkeedu ku sugnaa—ee ku baxay na aan raalli ka ahayn, ayaa wiilkeeda ka ilaalin jirtay in uu maro dariiqii aabbihii maray oo kale. Wixii uu aabbihii kutub, buug iyo qoraallo uu ka tagay waa ay ka ilaalin jirtay hooyadu wiilkeeda. Wax arrintu ay sidii ahaataba, maalinkii danbe ayaa *Daa'uud* waxa uu ka safray magaaladii uu

joogay, waxaana uu fuulay ama uu kaxaystay dameer. In muddo ah markii uu socday dameerkii na uu iska saarnaa, ayaa uu dhengad ku dhuftay dameerkii si uu tallaabada u kordhiyo. Markii uu socod hagaagsan ka waayay—ayaa uu haddana mid kale u celiyay! Intaasi markii ay dhacday, ayaa dameerkii inta uu *Daa'uud* soo fiiriyay—oo uu cod dumar mid u eeg kula haday ku yidhi, "Waar dee naga daa ushaada, malaha *Dameer* ayaad noo haysataaye; bal mar danbe ii celi adigu usha!" *Daa'uud* ayaa inta uu markii hore argagaxay, uu hadda na si cadho leh ushii ugu jiiday dameerkii!

Hal mar ayaa uu madaxa dhulka ku dhuftay, dameerkii uu dhengadaynaayay na uu waayay! Saskii iyo naxdintii ku dhacday ayaa uu cabbaar la amakaagay, ugu danbayntii na meesha iskaga kac. Maxaa se ay kuugu taallaa, *Daa'uud* markii uu kacay ba xuskiisii fayoobaa lama uu kicine, isaga oo miyirkiisii waayay—oo waashay ayaa uu meeshii ka tagay! Sidii ayaa uu ku waashay ninkaasi, waxaa na uu waalnaa muddo dhawr sanno ah. hooyadii ayaa guriga lugta kaga xidhi jirtay si aanu u baxsannin, inta uu xidhnaana habeen walba waxa u iman jiray qolo shayaaddiin ah. Halkaas ayaa ay iska barteen *Daa'uud* iyo qoladaasina. waxa ay cunayaan ayaa uu la cuni jiray isaga oo waalan, wax kaste oo ay falayaanna waa uu la fali jiray. Sida uu ka warramaayo, xataa hilbaha xoolaha bakhtiga ah ayaa uu la quudan

jiray qoladaas. Sidaas ayaa na uu xaalkiisu muddo door ah ahaa, heerkaa na waa uu kaga sugnaa nolosha!

Ugu danbayn ninkani waa uu bogsaday, markii uu xuskiisii u soo noqday na waxa uu isku dayay in uu masjidka galo, waxa se lagu qalqaalliyay in uu dhaxlay karaamadii aabbihii oo ay ka muuqato isaga na—e, in uu dadka u noqdo wadaad cilmigii aabbihii ku dabiiba. Halkaas ayaa uu *Daa'uud* ka galay markaa gacantii cadawga—ee uu muddada dheer ku dhex asqoobay. Waxa la baray kutubtii sixirka qaarkood, ugu danbayntii na waxa loo kaxeeyay khalwo, si uu gaar ula noqdo waxa lagu faral yeelay—oo uu dadka ugala fogaado! Dabcan khalwada in aad wada garanaysaan ayaa aan rejaynayaa, waana tii sheekh *Xaamud* aynu sheekadiisa ku soo barannay. Afartan maalmood ayaa uu khalwadii ku jiray *Daa'uud*, muddadaas na looma oggolayn in uu maydho, tukado ama ugu yaraan xataa uu waysaysto! Waxa kale oo intaa dheeraa in lagu amray in uu kitaabka qur'aan ka ah inta uu goglado uu ku dul fadhiisto, ku socdo—oo uu kabo ka dhigto, ama si kaste oo foolxumo leh ba ula dhaqmo *Qur'aanka* barakaysan!

Afartankii markii uu dhammaystay waxa u yimid jin ka mid ah jimanka waaweyn, sida uu sheegay *Daa'uud* na waxa uu isku soo ekaysiiyay sheekh weyn oo caalim ah, haybad leh, gadh cad oo dheer leh, timo dhaadheer oo cadcad na leh, ayna ka muuqato sifo culimonimo oo loogu soo joogsan karaa! Halkii markii

uu iigu yimid ayaa uu iigu bushaareeyay in karaamo iyo mucjisooyin aan heli doono, dadka laabahooda iyo dhexdooda na la ii galiyay jacayl iyo raalli ahaansho! Waxa kale oo uu intaa iigu daray in sidii aabbahay oo kale aan noqon doono caalim dadka dabiiba! Dadka aan caalimka u sheeganayaa si ay ii aaminaan, waxa aan xidhan jiray dharka culimada *Yaman* lagu yaqaanoo—ee khamiiska, tusbaxa yar iyo wixii la hal maala leh. Sidaas ayaa aan ku noqday sixiroole weyn, se dadku ay caalim u yaqaannaa. Waxa aan sida caadada ah ba ku xidhi jiray qof walba oo ii imanaaya shuruud iyo qurbaan, kuwaas oo qaar na aniga la ii samaynaayo qaar na aan shayaaddiinta aan u samaynayno!

Arrimihii yaabka lahaa ee ninkan soo maray intii uu sixiroolaha ahaa waxa ka mid ah sida uu sheegay. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa aniga oo dadka siraaya oo indhahooda iyo dareenkooda ba ku ciyaaraaya, mindi na inta aan soo qaado caloosha aad iskaga cadaadinaaya, dadku na ay aad u yaabbanyihiin oo ay i daawanayaan, ayaa waxa ii soo galay wiil iyo gabadh wada socda, markaa wiilka yari waxa uu akhriyaayay *Aayatulkursi*, sidaadii uu iigu soo galay—ayaa ay jimankii mindida iskaga kay dhigaayay kala yaaceen, ka dib na mindidii ayaa igu baxsatay, waxaa na layla cararay dhakhtarka—oo caloosha ayaa ay mindidu si xun u dhexqaadday! Dadkii ayaa argagaxay, isagii na waxa la dhigay cusbitaalka, halkaas na waxa uu yaallay

muddo bil buure ah! Waxaasi markii ay dhaceen, ayaa *Daa'uud* waxa uu jimankii la shaqaysanaayay weyddiiyay waxa ay u kala yaaceen—ee ay mindidii ay iskaga dhigayeen ugu sii daayeen markii uu wiilku soo galay! Ka dib na jimankii waxa ay ugu jawaabeen, *"Maya, annaku wiilka kama aannaan yaacin, waxa se innoo soo gashay oo la socotay gabadh aan daahir ahayn—oo dhiiggii caadada lahay!"* Warka sidaas ah ayaa ay *Daa'uud* ku qanciyeen jimankii, se markaa qalbigiisa waxa ku abuurmay shaki!

Inkaste oo *Daa'uud* uu muddo door ah ku soo dhexjiray hawshan, ugu danbayn Eebbe ayaa wanaagga waafajiyay—oo qalbigiisii ayaa hadba diida ku sii nagaanta hawsha caynkan ah. Sida uu ka warramay ninkani, waligii habeen ma uu seexan jirin oo jimanka ay wada shaqaystaan ayaa habeenkii u iman jiray, waxaa na ay dadka muslimiinta ah laylkii oo dhan u diyaarin jireen dhagartooda, fasaadkooda iyo sixirrada ay ku dhibayaan dadka! Habeenkii danbe ayaa uu dareemay daal badan, waxaa na uu u baahday hurdo. Kolkaas ayaa uu ninkii guriga lahaa uu ku yidhi, "Ninyahaw meel aan seexdo ayaa aan u baahanahay". Ninkii ayaa arrintaa la cajabay, waayo muddo sannaddo ka badan oo uu yaqaannay waligii ma uu arkin iskaga oo meel la seexdo raadinaaya, ama ba habeennimo seexanaayaba! Ugu danbayntii waa la siiyay meel uu seexdo, waxaana uu galay hurdo aad yaabayso oo daal iyo riyooyin badan. Isaga oo wali hurda, ayaa uu *Daa'uud* ku riyooday

isagoo dhintay! Haa, isago dhintay—oo dhammaan shuruudihii maydka la marin jiray la marinaayo! Waxa se yaab lahayd, in isaga—oo mayd ah, waa riyada dhexdeediiye, in uu haddana maqlaayay dadka hawshiisa wada oo isku leh, "Ama ha dhinto ama ha noolaado—e, hore innooga aasa waxa waa saaxir xun oo aan khayr lahayne; alla maxaa uu dad dhibay, maxaa uu dhagar gaystay, maxaa uu...!"

Arrimahaa isaga oo innooga sheekaynaya waxa uu yidhi *Daa'uud*, "Halkii ayaa la iga qaaday, waxaa na la i geeyay xabaashaydii. Markii iilka la igu riday, ugu horrayntii ba waxan ka argagaxay madawga iyo cidhiidhiga uu iilku leeyahay! Marba marka ka sii danbaysa iilku waa uu sii madoobaanaayay, aniga oo aad u naxsan ayaan markii danbe maqlay sanqadh aanan waligay hore u maqlin iyo wax aad mooddo onkod oo igu soo socda! Cabsi intii aan adduun ka ku noolaa aanan waligay arkin ayaa i gashay markaa. Wixii waa uu soo dhawaaday, ugu danbayntiina waxa ii soo galay laba nin oo codkooda aad onkod iyo hillaac mooddid! Waa ay ila hadleen, waxaa na ay igu yidhaahdeen, "*Rabbigaa wa ayo?"* uma aan jawaabin! Kolkaas ayaa ay hadda na igu yidhaahdeen, "*Diintaa waa tee?"* uma aan jawaabin haddana! Markaas ayay mar saddexaad i weyddiiyeen, *"Nebigaa wa ayo?"* markanna uma aan jawaabin! Intaaba markii ay jawaab iga waayeen ayay yidhaahdeen, "*Waar ma tukatay?"* kolkaas

ayaan ku idhi, '*maya*'! markaasay yidhaahdeen, *"Kac—oo tuko imminka…"* Aniga—oo is leh kac, ayaa hadda na ay igu yidhaahdeen, "*Waar daahir ma tahay?"* kolkaasaan ugu jawaabay '*maya*'!

Intaasi markii ay dhacday, ayaa ay iga tageen labadii nin, waxaa na ay ii keeneen biyo weel ku jira oo ay *"ku maydho kuna waysayso"* igu yidhaahdeen! Biyihii ayaa aan eegay, mise wallaahi baan ku dhaartaye, waa biyo dubka iyo diirku ku kala tagayaan haddii aad korkaaga taabsiisid kulayl aawadeed! Aniga oo la fajacsan waxan jira, cabsi awgeed na uu wadnugu ila gariiraayo, ayay xagga hoose igaga timid gacan aad u xoog weyni, ka dib na gabigaygiiba inta ay i qabatay ayaa ay biyihii baylka ahaa i quusisay! Qaylo ayaa aan cirkaa iskula booday, waana aan kala joojin waayay qayladii—oo biyaha baylka ah ee la igu hayo ayaa sababay! Qayladaydu waxa ay ahayd shaw mid xad ka bax ahe, waxa isku soo yaacay dadkii guriga ila degganaa oo dhan, waxaana la iigu yimid qolkaygii aniga—oo ka qaylinaaya! Dadkii ii yimid ayaa i weyddiiyay waxa i helay—ee aan la qaylinaayay, anigu na waxa aan u sheegay in aan wax dhib ahi jirin! Markii ayaa ay dadkii iga kala tageen, anigu na waxa aan niyadda iska idhi, 'ninyahaw malaha caawa jimankii ayaa sidan kuu galaaya—oo cibaadadoodii iyo hawshoodii shaqo—ee aad ka seexatay weeyaan!'

Ma sii shu'aysannine, inyar markii aan fadhiyay ayaa waxa i qabatay dhaxan iyo xummad—oo degdeg inta aan dib ugu jiifsaday, ayaa aan haddana galay hurdo aan caadi ahayn! Markii aan ku laabtay hurdadii, mise labadii nin haddana waa ay ila taaganyihiin! Inta ay i qabteen—oo ay i kaxeeyeen, ayay i geeyeen meel buur ah, waxaana ay i dul istaajiyeen biyo bayl ah oo kulayl awgood is laba rogaaya! Waxa ay igu amreen in aan biyaha caynkaas ah ku waysaysto, waa se wax aanan awoodi karin! Aniga oo halkii ku rafaadsan, ayaa waxa aan arkay aabbahay oo meel ii dhaw jooga –*dabcan aabbihii waxa uu dhintay isaga oo Daa'uud aad u da' yar, imminakana waxa uu wiilkiisii ku dhex arkayaa waa riyada*-aabbahayna waxa loo ciqaabayaa sida aniga la ii ciqaabaayo—o kale! Biyo aad u kulul oo uumiga ka baxaya karkoodu uu haadda dul marta soo daadinaayo ayaa *"ku waysayso"* lagu leeyahay! Aabbahay kolkaa waa uu ii dhawaaqay, waxaana uu igu yidhi, *"Waar Daa'uudaw wakhiti baad haysataa, waar aabbe iskaga bax waxa aad ku jirto oo soo tuko. Waar aabbe salaadda soo tuko…"* aabbahay oo sidaas iila hadlaaya oo igu qaylinaaya ayaa aan isla booday markaa, ka dib na waxa aan ka dhex toosay qolkaygii oo aan soo sare fadhiistay! Halkii ayaa aan sare fadhiistay, waxaana aan naftayda u sheegay in waxan ay aragtay kaliya aanay ahayn riyo—e, ay tahay farriin dhab ah oo igu socota, waxaa na aan ballan ka qaaday inan faraha ka qaado waxan ku jiro.

Waa aan kacay, waana aan soo maydhay, waxaana aan tukaday labadii rakcadood—ee noloshayda ugu horraysay ee aan Alle dartii u tukado! Intaa markii aan sameeyay, ayaa ay dhammaan ba jimankii iska soo xaadiriyeen qolkaygii! Markii hore waxa la igu bilaabay sasabaad iyo sabaalayn, waxa qolkaygii la soo tubay tiro naago ah oo jiman ah, dhammaantoodna wada qaawan! Waxa la damcay in xaggan aan u dhaqaaqayo la iga hakiyo, waxaa na aan talo saartay Alle, go'aan na waxa aan ku gaadhay in aanan sinaba uga laabannin jidkan saxda ah ee aan hadda cagta la helay. Kac ayaa aan is idhi markii salaaddii subax la addimay, si aan u aado salaadda, markaas ayaa ay jimankii jidhka oo dhan i burburiyeen, waxaana aad moodaysay in ay lafaha ba iga gureen! Alle ayaa aan talo saartay—oo waa aan kacay. Markii aan kacay, ayaa aan ku idhi wiil yar oo ii shaqayn jiray, "waar waysada innoo biyee oo inna mari aynu salaadda jamaca ku gaadhno e'!' Kii yaraa hadalkaygaasi lamafilaan iyo fajaciso ayaa uu ku noqday, waa uu anfariiray, ugu danbayn se waysadii ayaa uu ii biyeeyay waana aannu soo aadnay masjidkii!

Salaad subax oo aan Alle dartii u tukado waa tii iigu horraysay. Halkaygii ayaa aan ku tukaday, ka dib na waxa aan ku laabtay goobtaydii. Halkaa marka xaal maraayo ayaa ay jimankii igu soo qaadeen weerarro faro badan, waxaana ay iigu hanjabeen haddii aan ka joogsan waayo halka aan ku socdo in ay i dili doonaan ama ay

ubadkayga iyo ooridayda ay dagaal xun la gali doonaan! Waa aan ugu calool-jileeci waayay waxaas oo dhan, kolkaas ayaa ay hadda na is yidhaahdeen ku xodxota oo hunguri galiya, waxaa na ay ii sheegeen in ay i dallacsiin doonaan, awal horena dalka *Yaman* ayuun baa arrinkaygu ku koobnaaye, in warkayga ay ku baahin doonaan dhulka carabta oo dhan illaa meelo ka mid ah Afrika! Waxaas oo dhanna waa aan ka diiday haddana. Maalinku waxa uu ahaa maalin *jimce* ahe, markii la gaadhay salaadii jimce, inta aan iska maydhay waxa aan iska aaday masjidka. Markii aan sunnaystay, ayaa aan iska dhegaystay khudbaddii maalinkaas ee uu sheekhu noo jeedinaayay. Alle amarkii, sheekhu waxa uu maalintaa khudbadda kaga hadlaayay saaxiriinta iyo dhibaatada ay bulshada ku hayaan. Sida oo kale waxa uu sheekhu ka warramay xukunka shareecada ee sixirka, dhibtiisa if iyo aakhiroba leh ee aan laga gayoonayn ayaa uu ku dheeraaday, aad ayaa na ay aniga arrintaasi ii taabanaysay iyada—oo aan dadku i ogayn!

Aad ayaa aan u didsanaa, sheekhu waxa aad moodaysayba in uu aniga iga hadlaayay, aad ayaana ay ii soo jiidatay runtii, ugu danbayntii markii salaaddii la tukaday, waxa aan u tagay sheekhii, waxaana aan ku idhi, *"Sheekh khudbaddaadii maanta waxa aad moodaysay in aad aniga uun iga hadlaysid!"* sheekhii waa uu amakaagay, waana uu isoo dhaweeyay, halkii ayaana aannu ku wada sheekaysannay, ugu danbayntiina waxa uu ii sheegay oo

igu adkeeyay in aanan arrintaa ku laabannin, Eebbe na aan u toobad keeno, hanjabaadda yar shayaaddiintana aan Rabbi ka magan galo. Sidii ayaan faraha kaga qaaday baabkii aan muddada dheer ku dhex jiray, waxaana maalinkii danbe aan arrintayda u sheegay xaaskaygii oo uur lahayd. Aad ayaa ay runtii iyaduna ugu faraxday, waa ay isoo dhawaysay waxaana ay ii sheegtay in aanan ka cabsannin hanjabaadda yar ee jimanka aakhiradayadu na aanay xumaannin! Toos ayaa aan markaa uga goostay shayaaddiintii xidhiidhka, waxaana aan noqday qof caabid ah oo Allihii ku toosan, waxaanan u badheedhay dagaalkii ay markaa ka dib igu soo qaadayeen shayaaddiintu!

Dhawr goor ayay *Daa'uud* ahaan iigu hanjabeen in ay i dili doonaan, ama ay layn doonaan ubadkayga iyo dadka igu xeeran oo dhan. Waxaas oo dhan uma aan joojine, Alle ayaa quluubta ii adkeeyay. Wax ay sidii ahaataba, weerarkii ayaa markaa igu bilwday, waxaa na Ilaahay ku sababay qoladaas cadawga ah wiilkaygii *Diyaa-u-diin* ayaa ugu horreeyay oo ay si xun u galeen isaga—oo markaa sagaal jir ahaa. Wiilkaygu inta uu gabigiisuba wada bararay, ayaa ay labada indhood na ay dibadda yimaaddeen, ugu danbayntii na sidaas ayaa uu ku geeriyooday! Waxa ku xigay walaalkay *Cammaar* oo isagu na lix jir ahaa, isaga na qoladaas ayaa Ilaahay sabab uga soo dhigay. Wax ay hawshii wadaan ba, muddo sannad ah ka dib ayaa ay haddana u yimaaddeen

gabadhaydii oo markaa uur sagaal bilood ah lahayd. Gabadhii waxa laga furay dhiig aan caadi ahayn—oo aan kala joogsi lahayn! Meel kaste oo dhakhtar ah ayaa aan marinnay, ka dib na waxa ay wada yidhaahdeen dhakhaatiirtii, *"wax cudur ah ma hayo gabadhan"!* Markii aanu dhakhaatiirtii ku daalnay, ugu danbayntii waxa aan geeyay meelaha *Qur'aan* saarka, sidii ayaana ay ugu danbayntii ku hoyatay xaaskaygii na! Waxaas oo dhan ba waxa aan Alle ka baryayaa in uu danbi dhaaf iiga dhigo—oo gefkaygii aan hore u galay uu igaga tirtiro. Aniga laftaydu waa aan suuxaa illaa imminka oo marar ayaa aan dhacaa, se falkaas xun ee aan ka toobad keenay in aan ku laabto lagama yaabo, wax aan Alle qaddarin na in aanay igu dhacayn waa aan yaqiinsahay, markaa waxa ay rabaan ha falaan jimanka iyo shayaaddiintu…

Cutubka4aaD

4.SANAN IYO SIXIR

Cutubkani waxa uu ka warramayaa cilmigii ay Soomaalidu u lahayd aqoonta kala geddisan ee ku saabsan caalamka sixirka, Tafaafulka, Faalka, Asmada, Shurugga, Qataarka, Raadgurka, Isdhaafiska Iwm.

Cutubkan guud ahaan waa mid aan qoraalkiisa soo xigtay, waxaana aan ka soo qaatay mareeg Internetka ku jirta oo la yidhahdo, *https://arcadia.sba.uniroma.31t.* Qoraalka waxa aan ku sameeyay dib u qaabayn, waxa kale oo aan ku sameeyay in aan meelaha qaar isku soo koobo, si wixii faham ah aan soo dhaweeyo. Qofka qoraalka qoray waxa uu ka qoray waraysi muddo aad u horraysay laga qaaday niman odayaal ah oo magacyadooda ay ka mid ahaayen, *Aw Daahir Afqarshe, Fiqi Buraale, Ciise iyo Axmed Nuur* oo wariye na ahaa—oo bernaamijka isagu daadihinaayay, dhanka kale na laftiisu ahaa nin waayo arag ah oo odayaasha sheekada la deexaaminaayay.

Bernaamijkan waxa lagu qabtay istuudiyaha Radio *Muqdisho* milay lagu qiyaasay 1980- kii! Odayaasha waraysiga laga qabtayna waxa ay ka wada tirsanaayeen *Akadamiga Cilmiga Fanka Iyo Suugaanta* ee magaalada *Muqdisho.* In kaste oo si aqoomaysan waxa la qabto iyo kala duwanaanta hawlaha laga sheekeeyay aad aan loogu dhaadhacyn, haddana waa bernaamij si kor-ka-xaadis ah uga hadlaaya aqoonta kala duwan—ee ay Soomaalidu u lahayd waxan guud ahaan aynu isku nidhaahno Sixir ama Faal. Maaddaama buuggu ka warramayo arrimo badan oo Soomaalidu ay u haysatay wax bannaan, qofka Soomaaliga ahi cutubkan waxa uu ku barananayaa waxyaabo badan oo laga yaabo deegaankiisa in laga adeegsado, loo na haysto wax aan qalad iyo qallooc ku jirin; haba qaldanaadaane!

SANAN IYO SIXIR

Wariye: 'Maantana waxa dooddeennu ahaanaysaa odayaalow caadooyinka la baasaysto ee ay Soomaalidu baasaysato. Doodda waxa ka qayb galaya, *Aw Daahir Afqarshe, Fiqi Buraale, Axmed Nuur Yuusuf* oo isaguna qaybtiisa ka qaadanaya. Dooddeennu maanta waxa ay ku saabsanaanaysaa qodobka aynu astaynay oo ah: Caadooyinka la baasaysto. Sida aynu uga doodaynaa waxa uu noqon doonaa hadba wax baynu qaadaynaa waxaas aynu kaga doodaynaa, nin waliba sida ay la ahaato ayaa uu ka soo jeedin doonaa doodda uu toos uga qayb qaadan doono. Ha iigu horreeyo *Aw Daahir Afqarshe.* Daahirow *Tafaafulka, Sixirka, Shurugga* iyo waxyaabahaa ay Soomaalidu sheegto; erayadaasi maxaa ay kala yihiin ama aad noogu kala sheegi lahayd?,

Daahir, "Waxa aan jeclaan lahaa in aad marba mid i weyddiiso yaan kala illaawine; iigu noqo—oo marba mid i weydiiyoo waxaad tiraahdaa kaas maxaa uu ka daawo yahay imw?" Wariye, "Maya! Waxa aannu jeclaan lahayn in aad noo guud marto, *Tafaafulka, Sixirka* iyo *Shurugga* waxa ay kala yihiin. Waxyaalaha marka u horreeya bal horta innoo guud mar oo inoo kala sooc, waayo waxa jira in qoloba ay si u taqaanno gobollada Soomaaliyeed magacyadaas aynu sheegnay".

TAFAAFUL:

Daahir, "*Tafaafulka* waxa la yiraahdaa waa waxan marka la kala macneeyo waxa ka soo dhex baxa, sida faalka oo kalena ka soo qaad. Marka uu ninkii faaliyaha ahaa wado, wado, wado oo isu soo minguuriyo isu soo mooreeyo waxa soo hara ayaa uu yiraahdaa, '*sidaa iyo sidaa ayaa ay noqonaysaayoo, faalkii halkaa buu ku soo ururayoo…'* Macnaha uu u jeedaa waxa weeye tilmaan waxaa uu bixiya markii ugu dambeeyay arrintu..."

Wariye, "*Fiqi Buraalow* adiguna *tafaafulka* maxad ka odhan lahayd? Maxaa u sadaqad ah oo markaa la oranayaa u sameeya tafaafulka caynkaa ah?"

Fiqi Buraale, "*Tafaafulka* waxa la yiraahdo Soomaalidu inkaste—oo qolo waliba ay si u taqaanno, waxa Tafaaful la yiraahdo waxa weeye sidaa *Aw Daahir* u sheegay, ha ballaadho hadhow—oo wejiyaal fara badan ha yeesho, laakiin waa wax la cunsur guurinayo. Bil matal geel baa nin ka luma, nin baa u faaliyay, tiradii weynayd baa uu qabsanayaa, waxa uu odhanayaa *'maxaa min adduunya ah, maxaa ilma ah, maxaa moora ah?'* markaa ayay wax markhaati u dhigayaan. Markhaatigaas ay yiraahdeen '*haddii sidaas la yeelo xoolihii waa la helayaa'* ama marka horeba waxa uu odhanayaa '*xoolaheennii ma noola oo heli mayno'* taas waxaa weeye sidaas—oo waa *Tafaaful.* 'Wax caynkaas ah haddii aynu qalno, haddii

aynu doorada/digaagadda midabkaas leh saas ah u dilno, haddii aynu neefka saas ah samayno…'

Wariye, "Markaa waxa weeye *Tafaafulka* wax is dhaafin oo cunsurguuris ah... '*Waxbuu wax ku cusurguuriyaa baa aad leedahay?"* "Haa, wax baa uu wax ku cusurguuriyaa, dabadeedna kii u dambeeyay baa tilmaan bixiyay…" Wariye, Oo tafaafulka micnihiisa waxbaa la isku cusurguuriyaa ama faal ha noqoto ama wax kaleba haa noqotee, waxa aad leedahay 'waa wax inta la rogrogo oo xagga laga deyo oo la fiiriyo oo loo miila dayo, oo loo minguuriyo ayaa markaas lagu cusurguuriyaa—oo waxaa lagu qawimaa waxaan waxaasay noqon hayaan?' Fiqi Buraale, *"Sidaa weeye..."*

SIXIR:

Wariye, "Aan dib ugu noqdo *Daahir*. Daahir Af Qarshow *Sixirka* waa aannu maqalnaa oo waxaa la yiri 'waa wax caan ah oo adduunka oo dhan laga yaqaanno, sixirkuna waa fara badanyahay, nin *Frazier* la oran jiray oo Ingriis ahaa wuxu uu yiri, '*Adduunku waxa uu soo maray saddex heer*: Heerka koowaad wuxu yahay; adduunku markii ugu horeeyey diintii ugu horeysay ee soo gasho waxa ay ahayd baa uu yiri sixirka, *Marxalatu-Sixir* wax la yiraahdo iyo *Marxalatu-Diin* iyo *Marxalatu-Cilmi*, saddexdaa marxaladood ayaa uu adduunka u

qeybiyey. Annagu sideen u aragnaa sixirka, maxaa uu ku kala geddisanyahay *Daahir Af Qarshe?"*

Afqarshe, "Waxa uu kaga gedisanyahay, waxaa weeye cilmi jira oo la jirrabay oo laga shaqeeyay oo kutubta lagu qoray oo socday oo macaamiladooda la yaqaan oo wax lagu laayo oo wax lagu kharribo—oo dabadeed dadka Islaamka ah diintooda ay diiddan tahay! Sida innaga xaggeenna uu ugu xoog weynaan waayay sidaa weeye. Culumadeenna kutubbada ku dhaadheer ee cibaadada ku wanaagsan ayaa ka dhaacisay dadka islaamka ah ee ay madaxda u yihiin waxyaalahaasu guuldarrada ay leeyihiin ama sida aanay diintuba u oggolayn, sidaas baana aynu uga howl yareysannay, laakiin waa wax khatar ah oo dunida caan ka ah oo qolo waliba ku shaqeysato innagana inkasta oo nalaga waaniyay haddana raad badan waa innagu leeyahay *Sixirku.* Inkastoonan annagu ragga ku macaamilooda ahayn, haddana sida wax loogu qabtaa waa fara badanyihiin, sidaa awgeed ayaana ay u yihiin waxani wax cilmi ah oo jira oo mararka qaarkoodna aad oranayso *'waryaa dee waxan lagama maarmi karaba'* marka aad aragto sida wax loogu farsameeynayo oo uu kaaga dhaadhicinayo, laakiin dee diinta ayaad ka cabsanaysaa"

Wariye, "Aan u wareego *Fiqi Buraale,* sixir Soomaalidu siday ugu dhaqanto bal wax nooga sheeg…" Fiqi Buraale, "Bahalkan *Sixirka* la yiraahdo horta Soomaalidu waa ay necebtahay asalkiissaba, waxa

ay yidhaahdaan '*Diinta ma waafaqsana qof wax sixra,* wax sixir ah na ma oggola diinteennu, hase ahaatee misna dad ku dhaqmaa waa ay jiraan. Misna Soomaalidu waxa ay tidhaahdaa sixirka kan wax kastaba ha loogugu qabto oo si kastaba ha ahaatee, sixir waxaa ah niyaddaada! Haddii niyaddaada aysan gelin sixirkaas wax buu ku yeeli karaa, wax kaste ba ha laguugu qabto—e oo aad tidhaahdo, *'Bismillaahi Raxmaani Raxiim'* wax alle iyo wax uu kaa tarahayaa ma jirtaa la yiraahdaa. Diinteennu ma oggola in wax la sixiro, hase ahaatee misna waxay yiraahdaan *'sixirka hadba qofba sida ay niyaddiisu tahay ayuu sixirku u qabtaa'!* Sixirku waa wax yaab leh, waxa aan maqalnaa 'hebel waa sixranyahay, hebel waa la i sixray, hebel wadaad fulaan ayaa sixray…' Sixirka dadka ku shaqaysta Soomaalidu magacya badan ayaa ay u taqaannaa, waxaana ka mid ah, *Faalallaw, Kuhaan, Kitaabgaablow, Afar-faalle, Sixirow* na waa dhahdaa… Bal ereydaas maxaa aad ka odhan lahayd *Aw Daahir aw?"*

Aw Daahir Afqarshe, "Kitaab-gablow iyo Afar-baallahaas oo dhan waxaa looga jeedaa waa ragga cilmiga aan aad u barannin oo ku cabsaneynin baa looga jeedaaye, ninkii intuu *Qur'aanka* bartay, oo cilmigii bartay, oo micnihii ogaaday nin waxba sixraaya ma ahee waa ka tagayoo kaasi waa dhaafay. Ninka kan ee kitaab-gaablowga ahi dabadeed waa ninka *maddiidada* sameeya oo haweenka qardhaaska u dhiga oo *'waxan ninkaa kugu jeclanaya*' yidhaahda, dabadeed marka

guryaha laga baxee raggu shaqo tago, inta uu xaafadaha u dhaafo odhanaya *'waxaan ahay wadaad xaaladdaas ku shaqaysta'* oo isaga waa intaa meheraddiisuba! Hore na waa looga hadlayoo mar allaale marka uu arko ragga culimada ah ee waaweyn ayuu kitaabkiisa iska qaadanayaayoo baxsanayaa. Kitaab-gaablow waxaa loo leeyahay waa nin aan cabsidii diintu ku jirin wax na yar bartay ama bawsaday ba. Sayid Maxamed oo ninkaas Kitaabgaablawga ah ka hadlaayay na waxa uu yidhi:

Masalagaab wadaad ahi wuxuu, macajillaystaaba
Madiiddaan akhrinaya wuxuu, malab ku daaqaaba
Goorti muftiga loo tagaa, mawdku ka adeegi!

Anna waxan xasuusnahay gabay uu tiriyay ninkii *Gaadataa* la odhan jiray mar la la yidhi, 'Gaadatayaw waxad tahay faallalow. *Gaadatayaw* diin mataqaannid—ee waxa aad tahay kitaabgaablaw. Waxa aad sidataa waxa la yiraahdo *Dayrabi*! *Gaadatayaw* waxaad taqaannaa xadgudbka oo naagaha waa aad eridaa. *Gaadataayaw* bakhayl baa aad tahayoo waxaa ugu daliil ah in aad tahay bakhayl, gooni baad u degtaa! Markaas baa uu gabyay oo waxa uu Gaadataa yidhi,

Deyrabi kitaab buu sitaa, diinta gabal weeye
Naaguhuu dilaa waa eryaa, damac ka waa weeye
Docdaasuu dawaarayn hayaa, daaqsin badi weeye,

Faalkuu dabbaalrogahayaa, dood nin raga weeye
Afartaa wixii lagu daraa, xan iyo duuf weeye!

Wariye, "Maxaad Fiqi Buraalow ku dari lahayd intaa uu Aw Daahir innala wadaagay?" Fiqi Buraale, "Ninkan horta kitaab gaablow la yiraahdo magac uun baa u baxay, kitaab gaablow carabtuba waa ay tiraahdaa calashaan kitaabkan *Macsharalfalag* macsharafalagaas waa ay ka faaliyaan oo faalkaas hadba wixii ka soo baxa ayaa ay ilmeeyaan oo mooreeyaan oo isu minguuriyaan waa kow. Waxaana taas oo kale aniga aan ku arkay aniga oo *Mombaasa* jooga oo ay tahay saddex iyo afartankii 1943 ayaa nin *Hindi* ahi meel istaagay, markaasaan u soo dhowaanoo annagoo u jeedna ayaa waxa uu duuduubay maro macawiis ah, macawiistii marku duuduubay sida dabashabeeliska carruurtu markay dhurwaa iska dhigaysoo ay dabada isaga xirto maro intay af dhuuban u samayso labadaa sinood ku xirto sideedii ayaa uu u galay, annagu waannu u taagannahay markaas, waxa uu yiri (Af aanan aqoon buu ku hadlay, hadba gees buu jeedsadaa) Adigu ninkii wax uu sameeyayba, indhaha naga sixiryaayaa wax kale sameeyayaa mooyiye, maradii waxa ay noqotay *Gungume* iska soconaya! Taa waan u soo taagnaa aniga. Waxaanu markaa u qaadannay ninkaan indhihiinu sixraye maradii isma bedelin, maradii buu misna soo qaatayoo sidii mas buu ka dhigatay oo saa u duuduubay

oo saa u nuuxnuuxsatay, horta taa waan soo joogay aniga. Mid kalena wada aragti baynu ka wada nahayoo, nimanka kan riwaayadaha sameeya ee ama Hindiga ka yimaadda ama meel kale ka yimaadda oo la yiraahda waa *Bincalwaan*, Cadanna waan ku arkay, halkanna waa ku arkay kuwaa Bincalwaanka waxa ay sameeyan toorrey bay is geliyaan *buc*! Markaasay iska soo gurayaan xiidmihii oo saa u darandoorrinaaya, dhiig baa ka soo boodaya dadka oo saas u wada daawanaya ayuu misna saa u dhirbaaxayaa, waxa uu odhan, *'waan ceshanayaa'* indhuhuu sixrayaa baan iri. Waxaas Soomaalidu waxa ay tirtiraahdaa haddaad akhrido *Yaasiinka* markaa waxaasu kuu muuqan maayaan oo jiri maayaan ba! Waxa kale oon joogay Shineemada "*Banaadir*" la yiraahdo nin yiri 'kusheertan ka samaynayaa oo dadka aan sheegayay oo Hindigaas ah qaar baa uu ukun ka soo daadiyay. Saacad baa uu nin ka kala jebinayaa hadhowna markaasuu u xirayaa; wax uu ku xirayoo ma ogi! Waxaasoo dhan waxaa weeye waa wada sixir iyo indhaha la is dhaafsiiyo, inkasta oo ay jirto wax turuuko la yiraahdo oo khayaanno la yiraahdo oo artiistaha uu leeyahay. Ninkan la yiraahdo *kitaabgaablowga* haddaynu u noqonno horta nin meel fog jira ma aha, laakiin waxa weeye nin xun oo waxaas aamminay oo ku isticmaala, ummadda diinta taqaanna ayaan jeclayn, ha na tilmaamo oo ha la yiraahdo 'kaas waa sixirrow, kaas waa kitaabgaablow, kaas waxaa weeye faalallow, kaas waxaa

weeye mid xun lagu tilmaamo Shuruglow'. Waxaa uun la yiraahdaa waxwalba waxaa ka adag markaad tiraahdo ama *Yaasiinka* aad akhriso ama aad tiraahdo *Bismilaahi Raxmaani Raxiim*, hase ahaatee ninkaasu nin diintu jeceshahay ma aha.

SHURUG/kuhaan,faallalaw:

Wariye, "Halkaa haddii aynu ku dhaafno ninka la yiraahdo kitaabgaablowga wixiisi iyo sixirkiisi eraygaan la yiraahdo *Shurug*, *Shuruglow* iyo *Fulaanful* ama *Kuhaan* bal maxaa aad odhan lahayd Daahir Af Qarshow?" Aw Daahir Afqarshe, "Inta oo dhammi waa isku wada nooc ee qaarba magac ayaa uu dadku u yaqaannaa, waxa lagu shaqaynayaana waa wax aynu ka soo hadalnay iyo inta aynaan gaarin oo wixii uun baa dabadeed qofba si gooni ah u shaqaynayaa oo uu wax uga arkayaa, dadkiina markaa halkaa ka raacayaan oo halkii ka wadanayaan hawshoodii oo raadsanayaan Kitaabgaablowgii. Magacyada uun baa kala duwanoo waa isku nooc qudha ficilladu".

Wariye, *Shuruglow, Faalallow iyo Fulaanfulow maxaa ay kala yihiin?* Magacyadaas iyaga ah, marka la yiraahdo Kuhaan waa magac meel buuna salka ku hayaa. Ninka la yiraahdo Fullanfullow sow ma ahayn magaciisa waa Kuhaan waa isku hal. Bilmetal waxaa la sheegi jiray nimanka magacyadooda ma hayee; col baa

duulahaya, culkuu ku duulaayo inta aan la gaadhin baa la leeyahay, *'yaa kuhaan yaqaanna?'* 'yaa faal yaqaanna?' Raggii markaa soo baxa baa la isku jirrabayaa, ninka ay isugu gudho ayaana markaas la dooranayaa. Bil metal waxaa ka mid ah reerka kan halkan *Afgooye* dega iyo reeraha *Marka* dega ayaa waa colloobay. Qolaba waxa ay haystaan laba nin oo baas leh. Markaasaa waxaa la yidhi, 'Nimankaas reer *Afgooye* waa ay soo duulayaan (waa nimanka *Geledi* la yiraahdo) maxaynu yeelaynaa?' 'Dee waa in nimankaas la iska celiyaa', 'waa tahay'. 'Qare ii soo gura' buu yiri ninkii faalallawga ahaa. Qaarihii buu soo guray. Habeennimadii baa la tallaalay subaxiina waa ay soo baxeen qarihii/xabxabkii oo dhammi! Nimankii ka soo duulay meesha la yiraahdo Gelidi qarihii baa ay cuneen, markaas baa ay wada seexdeen! Markaa kaasiba waa kuhaan, magaranaysaa cuskanaya sixir, faal iyo wixii kale ee la hal maala…

ISDHAAFIN

Wariye A. Nuur, "Halkaas aynu ku dhaafno ereyadaas. Waxaynu u gudbaynaa wax aan ka sii fagayn oo la yiraahdo *Isdhaafid/Isdhaafis*. Waxaynu maqalnaa 'hebel baa hebel la dhaafiyay'. Sidee baa ay ku suura geli kartaa waxaas ma dhacaan se? Ma maqasheen, maxaa ay yihiin? 'Hebel baa hebel la dhaafshay'. 'Hebel baa isagoo dhiman lahaa hebel lagu beddelay', 'wadaad hebel oo kitaab-gaablow ah baa helay'. Markaa innagoo aan ka eegaynin dhinaca xagga Diinta sida Ciisa inna yiriba, waxaan u eegaynaa innagu siday fikraddeenna ka qabno iyo dadku siduu u arkayo ninkaan ninka lagu beddelay oo la yiri, 'hebel oo dhiman lahaa baa hebel inta wax la tafaafulay wax la gowracay neef la qalay wax la sasameeyay, qardhaas la qoray, casharo la qorayoo ciid la gaddiyaayo, geed la gooyay oo wax la qabqabtayoo wax la sameeyaba sixir iyo tafaaful shurug iyo belo wax kastaba la sameeyay, hebel baa hebel lagu bedelay oo hebel baa meeshii hebel ka dhiman lahaa ka dhintay isagu! Taasna Daahir bal adna wax ka dheh?"

Aw Daahir Afqarshe, "Arrinkaasuu horta waa la wada maqashiisanyahay wax qarsoonna ma aha, laakiin sidii aan warkii oo dhanba aan u sheegnay, Soomaali weyn meel meel uun yar ma aha—e laguma dhaqmo cilmigaa. Soomaaliweyn way ka tagtay—oo waxa ay aqbashay culimadii oo ka warrantay waxa kani

in aanu bannaanayn oo marka dabadeed dadka ka bukoodo sadaqad iyo qur'aanka ayay ku daaweeyaan sida ay diintooda u sheegtay. Laakiin marka aad timaaddo dhulkan webiyaashu u dhowyihiin iyo dhulka beeralayda ah iyo waxyaalahaasoo hadba la tilmaamaa oo la yiraahdo waxyaalahani waa ay jiraan Soomaali weynse wuu ka dhex guuray waxyaalo saa oo kale ah. Aan ku noqdo ee geedkaan la yiraahdo *Isdhaafinta*, qolooyinka beeralayda ah iyo qoolooyinka xeebaleyda ah dadka magaalooyinka deggan ayaa uu aad ugu badan yahay, waa se runtaayoo dadka xoolo dhaqatada ah waa uu ku yaryahay. Sababta oo ah dadka waxyaalahaa sameeya aalaba ma tagaan. Haddana waxa sameeya nimanka saldanooyinka haysta. Waxa aan sheeko ku maqlay, boqor *Cismaan* baa waxa uu damcay in uu aaso goortu maqlay in Talyaanigu geeddi ku soo yahay, markaasaa uu arlo dhan xirmeeyay oo waxa uu yidhi, '*lama mari karo'* inta uu askar dhigtay. Markaasaa inta wanan iyo xoolo la qalay, xoolihii raadkooda qaar la lumiyay, sida oo kale la qasaasacay, qaar meelaa laga sarsaray! Waxa la yidhi, '*Boqor Cismaan waa uu tafaafulanayaa'*. Waxa uu isugu ka rabaa tafaafulkaas siduu dahabkiisa u badbaadsan lahaa oo dhulkaas uu ku aasanyahayna aan loo tegi lahayn. Markaasaa dhowr bilood aan la marin dhulkii dahabka uu ku aasay, dadkii oo dhan baa wada baqay, xataa dadkii culimada aan moodaynay ayaa arrintii in ay hubsadaan xataa ay ku

adkaatay, waxaana dhegaha loogu riday—oo la yidhi, 'Boqorku waxa uu rabaa cimrigiisii baa soo gaabtayoo, in uu isku beddelo nin kale oo faalku u qabtaye ha laga cararo aagga boqorku joogo', markaasaa lagaba qaxay oo dadkii oo dhan ka wada carareen aaggiiba!

Wariye, "Runtaa weeye oo waa ay ku badantahay arrintani dadkaa aad ka soo sheekaysay Aw *Daahiaw*... Haye adigu *Fiqi Buraalow* maxaad ka odhan lahayd arrintaa? *Fiqi Buraale*, Taa anigu waxa aan ka oran lahaa horta ma maqal mise arag? Maqal waa aan maqlay. Sheeko ahaan baan u maqlayoo qof weli qof la dhaafiyay anigu indhahayga ma saarin, eraygaasu aad baa uu u ballaaranyahay. Waxaa la yiraahdaa nin baa bukoonaya, wadaad tafaafullowgaasaa loogu yeerayaa, wadaadkii marka uu meesha yimaaddo waxa uu oranaahayaa *'kafan ii soo tola'*, kafantii baa la soo goynayaa, neef baa la qalayaa, waa la cucubayaa, marka la cucubo, neefkii oo la kafay oo kafantaa lagu waxeeyay ayaa la aasayaa' baa la yiri. Kii markaas la aasay oo neefkaas loo waxeeyay waa qof kale, qofkaas isma oga, wixii oo aasan waxna la sameeyay ayaa neef kale oo la rabo gaarkiina wax loogu akhriyay la qalayaa, markaabaa hilbihiisa wax laga siinayaa qofkii wax loo qabtay, markaa waa dhintaa baa la yirahdaa qofkii wax loo qabtay, kii kale ee xanuunsanaayay na markaas baa uu soo kacayaa! (Anigu indhahayga ma saarin ee

sheekaan ku maqlay)[21]. Wariye, Oo isdhaafiska sidaasaa la yiraahdaa? Haa qof qof la dhaafiyay qof kale weeye!

---

[21] *Isdhaafis: Isdhaafisku waa arrin la xidhiidha arrimaha sixirka, waa na arrin khatar ah, sida dadkii hore aan ka maqli jiray na culimad sidata ama haysata kibtaab la odhan jiray Kitaab Case ayaa arrintan fali jirtay. Waxa la sheeegaa in laba qof la isku kala waydaarin karo cudurro, arrimo kale iyo xataa ugu danbayn nafta! Haa, xataa Nafta in qofka qof kale oo la burji ah loo dhaafin karo ayaa ay qabaan dadku. Waxa aan xusuustaa sheeko muddo hore aan ku maqlay baadiyaha, taas oo ku saabsanayd Isdhaafiska waxan la yidhaahdo. Waxa la yidhi nin oday ah ayaa aad u xanuunsaday, waxaa na uu xanuunkiisii gaadhay in jihada loo dhigo – oo nafta laga eego. Muddo markii uu sidaas ahaa, ayaa markii danbe waxa loogu yeedhay oday deegaanka ka caan ahaa – oo Kitaab Case sitay, odaygii baa kitaabka u eegay ninkii, ka dib na waxa uu sheegay in uu furdaamo leeyahay –Furdaamo/mis waa in qofka waxa hay acid kale lagaga wareejin karo- Ka dib na waxa uu sheegay in ninkan ay laba qof Furdaamo u yihiin; 1- Wiil uu dhalay oo bah-gooni ah, dabcan sida oo kale na madi ahaa. 2- Mid ka mid ah xaasaskii uu qabay, wali ba na ahayd tii uu gurigeeda yaallay!*

Arrinkii markii uu ninkii sheekha sheeganaayay uu sheegay, ayaa gaar loo faqay – oo odaygii baa lagu yidhi, "Wiilkaaga iyo xaaskaaga iyama ayaannu ku dhaafinnaa?'' odaygii na kama laba labayne, 'gabadha' ayaa uu yidhi! Halkii ayaa hadda na waxa uu yidhi, "wanka caynkaas ah ha la qalo, beerkiisa ha la shiilo, ka dib na beerka oo shiilmaaya dabkana saaran saddex goor ha ku dul wareegto gabadhu, hal mid oo ka

Wariye, Isdhaafiska waxa isdhaafinahaya baad leedahay wadaadka kutubarogay. Waxaad leedahay marka uu kitaabka fiirsho waxa uu ku arkayaa oo yiri, '*waxaasaan arkayoo, hebel hebel haddii la dhaafsho hebel waa bogsan doonaa'*. Saasuu ku dhammaynayaa!

QATAAR:

Wariye, "Aan ka gudubno isdhaafiska aanan u gudubno waxa kan la yiraahdo *Qataar*, Qataarkaas waxa uu ku badanyahay beeralayda, waa wax caan ah, Soomaali oo dhammi waa ay wada maqashaa waa la yaqaan, aad baa looga cabsoodaa... Wiil baa gabar jeclaanayaa baa la yiri, marka uu gabadha uu jeclaado haddii gabadha yari ku diiddo oo ay gabadha wiilkaa diiddo, ninka qataarka

---

mid ah na afka ha galiso beerka – iyada oo aan calaalinayn liqayn na, mid kale na halkaa kabta iyo cagta u dhaxaysa ha galiso, sidaa na ha ugu wareegto saddex mar beerka – oo dabka saaran! Sidii ayaa gabadhii loo sheegay in ay samayso, waa na ay samaysay iyada – oo is leh ninkaaga ayaa kuu bogsan doona maaddaa ma sidaas uu sheekhii yidhi, ma se oga waxa lagu faqay iyo waxa lala damcay mid na iyadu!' sidii markii ay samaysay gabadhii, ayaa ay wareeggii u danbeeyay markii ay maraysay ay dhan u dhacday, xanuunkii ninkeeda ku taagnaana iyada ayaa lagu wareejiyay, ninkii na wa uu soo kacay, cabbaar ka dib na gabadhii waa ay u geeriyootay arrintaa shayaaddiintu ka shaqaysay!!

sameeya ayaa uu u tagayaa, geed baa uu u soo qaadayaa, geedka qodax buu ka soo qaadayaa ama geedkuu wax ku mudayaa, geedkaasuu qataarayaa. Qofku gabadhu jeclaa halkaasay qaylo afka wadhanaysaa; in uu ka aarsado ayaa uu rabaa, saas baa uu u galayaa baa la yiri. Markaa qataarka cilmigaas ayay ku sheegaan. *Daahir Afqarshow* maxaa aad qataarka ka maqashay, maxaad se u malaynaysaa ama u arkaysaa?"

Aw Daahir Afqarshe, "Waxan u arkayaa. Horta anigu weligay ma aanan aqoon illa aan imid *Banaadir*, Soomaaliweynta kalena badi ma taqaan saan markii horeba kuu tilmaamay, waxyaalaha dhan waxa ay ku badanyihiin webiga jiinkiisa, beeralayda iyo xeebaha. Waxa oo dhanna cilmigii baa kala jaad ah—uune waa isku wada mid oo weligiibaa lagu soo dhaqmayay—oo waxna lagu layn jiray, waxna lagu raadinaayay, wax jirana waa uu yahay. Cilmiyaasha aynu ka sheekaynaynaa wax jira na weeye. Kii hore ee aynu ka baxaynay waxaa iigu war dambeeyay oo imminkana lagu macaamiloon laakiin aad loogu sheekayn jiray kitaab xeebaha ka yimid oo *Nugaal* tagay oo la yiraahdo **'***Warrame'* oo yarad loo qaatay; niman wadaaddo ahi markii ay arkeen in lagu dhaqmi karayo oo uu yahay kitaab wax weyn taraya, sheekooyinkiisuna ballaaran yihiin sida wax looga soo dhexsaaray. Ninkii haystay kitaabka ayaa nin bukaan ah loogu yeeray oo uu jecelyahay, markaasuu wax u sameeyay wadaadkii.

Markuu hawshii dhameeyay baa uu iska tagay, wadaadku faras baa uu ku joogay ee gurigiisii buu iska qabtay. Qolo kale oo doonaysa wadaadkii baa gurigiisii timid, ka dib wiilkiisii curad ayay aabbahood u direen si uu ugu yeedho. Wiilkii curad oo ordaya ayaa yimid gurigii uu wadaadku wax ku soo dabiibaayay, se uu ka tagay mar dhawayd. Garab bisil oo uu wax ku sii akhriyay wadaadku, reerkana uu ku yidhi, '*qofka idiinku horreeya ee idiin yimaadda siiya'* ayaa wiilkii yaraa la siiyay, wiilkiina garabkii markii uu cunay halkii baa uu ku xijaabtay! Kitaabkii maalinkaa ka dib laguma shaqaysan oo wax dambe laguma qaban… Haddeer Warqabaa la yiraahdaa ninka hayana waaban aqaannaa, kitaab meel weyn markii hore lagu qaadan jiray waa uu ahaa haddeerna waa laga baqay oo meel buu yaallaa[22]".

---

[22] *Sheekooyinka Kitaabka Warqabe waxa ka mid ahaa sheekooyinkiisa caanka ah – ee laga wariyay, "Beribaa xoolo faro badan waxa laga dhacay deegaanka Nugaaleed. Ka dib markii xoolahaa lala cid galay ayaa waxa loo tagay wadaadkii Samatar oo kitaabka Warqabe ahaa haystay, waxaa na lagu yidhi,'maanta haddii aan kitaabkaagaas loo aayin dee goorma ayaa loo aayi doonaa?' Hadalkaa markii ay maqleen nimankii xoolaha dhacay waxa laga sheegay, 'saddex arrin xoolahooda ma ugu celinnaa reer Nugaaleed:*

1- *Kitaabkii Sheekh Samatar ee Warqabe,*
2- *2- Dal aqoonnimadii Dalcasar*
3- *3- Taloxumadii Muuse Hayl' arrintii baa 'haa' iyo 'maya' noqotay.*

Fiqi Buraale; "Waxa la yidhi horta *'been fakatay runi ma gaarto*'. Waxan anigu qabaa waxa kan horta ha jireen, laakiin wax walba sida ay niyaddaadu tahay in ay noqoto ayaa aan anigu qabaa. Sababtu waxa ay tahay haddii adiga oo gurigaaga jooga oo naagtaadu ayana fal aqoon, oo carruurtaadu fal aqoon, oo wadaad laga shakisan yahay uusan iman—oo soorta laguu soo dhigay aad ka wiswisto oo shakiba kaa galo dee (waad sixrantaa)! Haye iska daa taas; waa saan anigu qabo! Haddaad socoto oo adiga oo soconaya meel dariiq ah oo aad mari lahayd aad ka shakido, haddee col baaba jooga ee waxaa la yiri waad ka shakiday iska daa waa lagugu dilayaayee. Haddiise aadan ka shakin oo meesha

---

Nimankii reer Nugaaleedka ahaa iyo wadaadkoodii Samatar isa soo raace iyaga – oo kitaabkii Warqabe na sita, ka dib na wadaad Samatar ayaa yidhi, 'Aniga waxa aad iga taqaannaan in socodka aan idiin fududeeyo aad na socotaan habeenkii' !Waxa uu wax ku qabtay cidaaddii[22] *aynu wax ku cidaadan jirnay ee marada ahayd ee madoobeyd. Qarqarihii uu wax ku qaadan jiray saabkii iyo waxaasu wax ku riday, ka dib waa la socday uun habeenkii, illaa deegaankii la soo gaadhay, oo markii la hubiyay in deegaanku uu kii loo socday yahay ayaa uu wixii ka soo saaray meeshii uu ku riday! Arrintaa markaa waa ay ku guulaysteen kitaabkii Warqabe iyo sheekh Samatar ba reer Nugaaleed, waana kitaab caan ah oo illaa hadda laga heli karo meelaha qaar...*

shaki uusan kaaga jirin boqollaal kun haddii ay fadhiyaan waxba ku gaari maayaan! (Waan jarribay anigu taas na). Haddaba waxaa la yiraahdaa tan kale ee aad ka sheekaynaysid haddaan u soo noqdo, waxa la yiraahdaa *Qataar*; waa say yiraahdaan nimanka falakiga sameeyaa, dadka aad arkayso qof weliba geed baa uu leeyahay oo la buruud ah, waa tan la yiraahdo marka uu qofku dhintana *'caleenyihiisaa soo dhacda'!* Soomaaliduna waxa ay tiraahdaa '*caleentiisa hebel caddaatay'* markii wax lagu arko. Markaa waxa la yiri inta ay kitaabbada saa u fiiriyaan ayay ninka buruudkiisa eegaan, ninka burjigiisu ma ciid baa? Ma dabayl baa? Ma waxaa laga abuuray dab? Marka ay intaa hubsadaan ayaa ay geedkii raadkiisa ahaa doonaan, markaas ayaa ay geedkaas inta ay soo qaadaan mindi ku taagaan, geedkii waa dhawaaqayaa markaa, qofkii isaga ahaana meeshii baa nabar isaga taagayaa! Sheeko ayaan ku maqlay laakiin waxay ka dhacdaa arrintani dhulka dhooboyda ah ee badanaa dhulka kale laguma yaqaan!

Kan *Fiqi Samatar* xaggiisa ah waa jiray (aniga awowgay weeye). Waxaa jirtay nin *Cali Axmed* la oran jiray oo aannu inaadeer saddexaad nahay, ninkaas baa habeen la maray[23] (anigu taa waan joogay), markaasaa la yiri '*Fiqi Samatar ha loo yeero'*, Fiqi Samatar markaa ma joogo ee waxaa jooga walaalkii oo la oran jiray *Sheekh Nuur,* markaasaa la yiri *'Sheekh Nuur ha loo yeero ninka*

[23] *La maray: La durreeyay ama la derderay.*

xaalkiisa la bixin waaye'! Sheekh *Nuur* markii uu yimid baa uu yidhi, *'wankaa hebel la yiraahdo soo qabta'*. Wan galaalan baa la soo qabtay. Wax baa uu ku akhriyay wankii, markii uu ku akhriyay wankii waa la gowracay, ka dib inta la qaaday baa bannaan halkaas ah la geeyay wankii. *Gorgor Geeltoosiye*[24] leeg ama ka sii weyn; '*uu uu, uu'* Inta u soo yiri ayaa uu qaatay wankii gebigiisiiba! Marku qaatay bahalkii wankii ee uu la tagay ayaa ninkiina toosay, taa waa aan arkay aniga laakiin waxa uu akhriyay wax ba kama kasayn. Qataarku horta waa wax jira, waxa la yiri waa cilmi aad iyo aad u yaab badan ee dadka yaqaan ama dadkii laga sameeyay—ee arkayna waa ay rumeynayaan. Dadkii lagu sameeyay qaarkood waxa ay leeyihiin 'Illaa geedkii laga bixiyo misbaarkii ama wixii la geliyay bogsanmaayo qofkii la qataaray'! Afgooya dan reer *Afgooye* ayaa aad iyo aad ugu dhaqma, *'wallahi Qataar baan kugu taagayaana'* waa la yiraahdaa! Waa aan *Dhoobaydaa* ka shaqayn jiray na wa aan maqli jiray…

Wariye, "Bal *Ciisow* adiguna dhinacaaga maxaa aad ka oran lahayd *Qataarka* inta aynaan ka bixin?" Ciise, "…*Een Qataarka* sida uu u sheegayay *Fiqi Buraale,* sidooduba waxa ay runmaysanyihiin ama yaqaanniin in

---

[24] *Geeltoosiye: Nooc ka mid ah haadda waaweyn ee deegaankeenna laga heli jiray wakhtiyadii hore. Waxa lagu sheegaa in uu yahay bah Gorgor ka ka mid ah oo awood saa'id ah leh, in badann suugaanta Soomaalida waa lagu xusay.*

ruux walba uu leeyahay geed isaga mataan u ahoo qofkaas inta uu xanuunsanayo la xanuunsada, waxa uu jaclaysto la jeclaysta, waxa uu necbaysto la necbaysta—ayaa uu leeyahay ruux waliba ayay rumaysanyihiin! Waxa lagu sameeyo arrintani badanaana waa webiyada agagaarkooda, xaggaas baa na badanaa laga yaqaannaa. Anigu waxaan waayo-arag u ahaa oo aan u soo joogay magaalada *Kismaayo* nin ka shaqayn jiray dekedda magaalada, aahna dadkan reer Goleedka[25] ahaa oo diris aannu ahayn, ayaa goor casarkii ah shaqo ka yimid, gurigiisa markii uu yimid ayaa labadaa feerood isu yimaaddeen *'xiq, xiq, xiq'*! Ninkii waa uu neefsan waayay, waa xilliyada 1966-nadii, wax uu rafto, rafto oo rafto ba, qof ay qaraabo ahaayeen ayaa loogu yeeray. Nimankii waa ay isla garteen cudurka hayaa in uu yahay waxaa aynu shegayno oo *Qataarka* ah. Waa ay baxeen markaa nimankii. Magaalada marka baabuur yaryar oo tagaasi ah kuma ay badnayn, waxa ay qateen baabuur weyn oo ay ijaarteen. Waxa ay la soo aadeen magaalada *Jilib*. Subixii dambe, barqadii goor ay tahay (habeenkii oo dhan suu u rafanayay) barqadii goor dambe; kow iyo tobanka meelahaa ayaa ninkii la daayay—oo uu miirsaday, dhinac dhinac inta uu u dhacay ayuu neefsaday, ka dib na uu saa ku nafisay! Nimankii

---

[25] *Reer Goleed; dadka aan asal ahaan deggin magaalada Muqdisho ayaa dadka reer Muqdisho waxa ay ula baxeen magacyo badan – oo uu kani ka mid yahay.*

habeenkii dambe ayaa ay soo hoydeen. Waxa ay yiraahdeen 'nimankii ma lagu daayay saacaddaas iyo saacaddaas markay ahayd xanuunkii ma ku daayay?' '*Haa'* buu yiri ninkii, '*waa lagu Qataaray geedkii baan ka bixinnay musmaar ku taagnaa'* ayay yidhaahdeen! Ninka la kaxaynaayo ee wax dabiibayaa waxa uu ahaa oday *Aw Diinle* la yiraahdo oo subaxa Jimcada caado lahaa, waxa uu yeelaa bun baa uu marsadaa, jirkiisa oo dhan baa uu mariyaa, ilna waa uu la'aa odaygu, isaga laftiisu dekadda ayaa uu ka shaqayn jiray, subaxa jimcaad xataa haddey shaqo jirto ma aadi jirin dekadda! Bun buu marsanayaa, ciiddu ku galgalanayaa *(waa bacaad magaaladu*) waa magaala xeebeed kulul, se qorraxdaasuu fariisanayaa isagu isaga—oo bunkaa marsaday. Goor duhurkii meelahaas ah markii la gaaro waa iska meyrayaa bunkaas—oo salaaddiisa jimcaha ayuu aadayaa, caadina wadaaddada subax jimce sidaa baa ay yeelaan. Anigu midda ayaan goobjoog u ahaa, *Jubbada Hoose* aad baa looga yaqaan loogana cabsadaa, waxyaalaha sixir marka la yiraahdo kowaad ee la tilmaamo ayaana uu ka mid yahay *Qataarku*...

ASMAGAN/ASMO

Wariye, "Aan ka sii gudubno ee wax la yiraahdo *Asmagan*, aan ka hadalno. Asmaganka ama *Dhaw*, wax la yiraahdo. Asmaganka markaa iyada ruuxeedu waa wax la aaminsanyahay. Waa suurtowdaa in ay ka duwantahay sixirka laakiin iyada ruxeeda aad bay uga baqaan oo waa ay baasaystaan ninka *Asmaganka* yaqaan. Dadka Asmaganka yaqaan iyo *Asmada* waxa ay tahay *Aw Daahir Afqarshow* bal ku horree. Aw Daahir Afqarshe, Asmaganka anigu waxa aan u fahamsanahy in uu sixirkii hore uun la mid yahay ee magacu kala duwanyahay. Sida loo yaqaanna noocyo badan ay tahay. Markaa *Asmadanu* waa waxyaalaha uun dadka lagu kharribayo ee weligoodba rag ku samaysanayay ee ragna ka haray ee Rabbi yiri 'kaga ammaan heli maysid haddii aad waxaan ku macaamilooto' ragna weli caqli xumo awadood uu ula joogo qurusna ka dayayo wixii. *Dhowda* wax la yiraahdo iyada taasi waa ay ka duwan tahay oo waxaan u *aqannaa (Nin hadalkiisa qabuul ku leh oo haddii uu wax habaarana laga aqbalo haddii uu duceeyana laga aqbalo)*. Taa culimadeenna oo tafaafulka aqoonin ayaa iska leh oo wax karaamo ah oo ayagu ay iska leeyihiin; waa sharaf Ilaahay siiyay oo ay diinta ka dhex helaan oo waa kii *Sayid Maxamed* ba lahaa,

"Calimesa waxaa loo quweeyn, waa qob[26]*iyo Dhawe*
Wax munaafuq loo quursadaa, qaala beenta ahe!"

Deetana Munaafaq kama taggana kan diintii wax ku sixray—ee wax ku leeynayaana waa munaafaq uun! Kuwii Ilaahay qabka siiyayna waa kuwa Ilaahay baryay oo ka aqbalay baryadii. Marka taas aan halkaa kaga haro ee erayadaad igu soo bixisay aan u noqonno; tii aynu faallaynaynay labadii waa *Dhaw* iyo *Asmo*, Asmo waxaa la yiraahdo horta marka la sameeynaayo lug baa lagu istaagaa, markaasaa xagga jihada loo jeestaa! Asmada suuraddii ruuxeedii ayaa la akhriyaa, maxaa yeelay gaalada waxaa lagu akhriyaa baa la yiri *'Suuratul Al-Ancaam'* marka suuratul Al-Ancam aad akhrido iyo suuratu *Al-Bara* labadaa aad akhrido, kun *Yaasiin* haddii la raaciyo gaaladu waa ay jabaysaa. Sida calaashan qaalibka la yiraahdo ee *Islaamka,* se nin Ilaahay ka yaabiya kuma akhriyo *Asmo* Islaamka, maxaa yeelay way gubaysaa Asmadu qofka! Marka asmadaasu waa wax *Qur'aanka* ku dhexjirta, suurad weeye dhan ee ma aha faallalow wax loo tiirinaayo. Waxaa weeye suurad loo qaybiyay in ay wax gubto oo loo kala qaybiyay

---

[26] *Qob: Sharaf ama wax gaar ah oo uu qof si gaar ah u leeyahay – oo hibo ah. masalan waa qof ducadiisa na la aqbalo, habaarkiisa na la aqbalo, waxaa na uu u badanyahay qofkaasi in uu yahay qof xalaal cun ah, nadiif ah oo aan dhib badan na lahayn.*

Islaamka iyo gaalada, Islaamkana si gooni ah loogu isticmaalo, gaaladana si gooni ah loogu isticmaalo saan anigu sheeko ku maqlay, laakiin iyada oo la samaynayo oo markaa la wado mid waan arkay, midda calaashaan gaalada xaggeeda la leeyahay halagu akhriyo, *'suratul Al-Ancaam iyo Suuratul Al-Baraa'* ha lagu akhriyo' haddaaba masaajiddada laga yiraahdaa. Laakiin tan kale sheeko waxan ku maqlay marka la akhriyaayo qofka waa in uu xagga jihada u jeesta, lugna uu isku taagaa lugta bidixda ah, tan midigta ah na kor u qaadaa, waa na in ninkaas uusan ka yarayn afartan oo waliba wax ay u dheeryihin. Nin yar ma akhriyi karo haddii kale isagaa gubanaya qofka intaa ka yar ee akhriyaa; waa sida la yidhaahdo!"

Wariye, "Waa runoo bal waxa kan la yiraahdo *Asmada* iyo *Dhawdu* waa sida *Daahir Afqarshaba* u kala saaray, waana ay kala geddisan yihiin. Asmadu waa Qur'aan lagu ganayo cadow, Quraankaana laga soo saaraa, waana ay ka geddisantahay faalka. Dhowduna waa Qob/Afkuleeble uu nin Ilaahay siiyay qof uu karaameeyay oo qob leh. Waxaa kale oo qobtaa la yiraahdaa *Afkuleebe*, oo qofbaa wuxu habaaro ama uu u duceeyo waxaas dhanba dhacaan oo Afkuleeblahaasna waa la *yiraahda 'wixiisu waa kacaan oo waa la arkaa'!"*

RAADGUR/SAANQAAD/RAADQAAD

Wariye, "Kaa halkaa aan kaga baxno, oo aan u sii gudubno erayga shanaad oo ah *Saanqaad/ Raadqaad/ Raadgur/Saangur. Daahir Af-qarshow* maxaa aad ka oran lahayd aqoontaada?" Aw Daahir Afqarshe, "*Raadgurka* waxa aan arkay iyada oo lagu akhriyayo libaax, markaa waxa imminka aan ka soo sheekaynnay oo dhamina waa wax diinteenna laga wada dhex helay, dabadeed waxaan arkay culimadii oo cammuud ka qaadaysa raadkii mid na dhaafaysa *(talantaalli uga qaadaysa*) wax na ku akhriyaysa, dabadeedna haddii uu raadkiisa meel uun bannaan ah laga helo oo sidaa loo sameeyo la ogaaday in uu Ilaahay kaxaynaayo oo uu iska soconaayo bahalku. Tuugga iyo dadka caynkaas oo kale ah oo ayaguna edebdarrada wata waa la mid waana lagu sameeyaa. Raadqaadka waxaa looga jeedaa waa noocaas aan soo sheegnay weeye…

Wariye, "Marka la raadqaado maxaa ku dhacaya ninka?" Daahir Afqarshe, "Waxa ku dhacaya *masiibo* ayaa heleysa, illayn isagiiba waa daallinkaase oo dabadeed kaas waa kan *Qur'aanka* lagula dagaallamay… Wariye, "Waxa kale ee la yidhaahdo *Afturka* maxaa tahay, *Aftur*?" Aw Daahir Afqarshe, "*Afturkaas* waxaa weeye afkiisii baa la xirayoo in uu halkaas wax calaf ah ka helin libaaxaasu ama ciddaa lagu sameeyay ayaa ay ka daawo tahay...!

Bal arrimahaa *Fiqi Buraale* aan u dhiibno, isagaa si wacan kollay innoogu sii kala saariye…"

Fiqi Buraale, "*Raadqaad*. Raadqaadka saddex nooc weeye. Bil metel waxaa kuu joogsan waayay ilmo oo meel uun kaaga carara. Sida uu gurigiisa u joogo ayaa la waayaa uun, markaa arrinta caynkaas ah waa lagu joojin oo fariisin baa la yiraahdaa. Markaa waxa la sameeyaa saddex tallaabo oo uu qaaday qofku, ayaa waxa ciid laga qaadaa tallaabada hore, ta labaad baa la dhaafaa, ta saddexaad baa misna laga qaadaa, qofka saa la leeyahay waa qof la leeyahay ha kuu joogo yuusan calashaan guriga ka tegin, markaa ciidda sidaa kala duwan looga qaaday raadkii qofka ayaa wax lagu akhriyaa. Qofna waxa weeye qof la raadqaadayoo la rabo in la is dhaafiyo, markaa waxa jira laba qaab oo saanqaadka ah, mid baa la dhaafaa tan u horreysa ayaa la dhaafaa, tan labaad ee labada lugood is xigta ayaa ciiddeeda la qaadaa, taa kale ee iyada xigta iyada oo saddexaad ah ee aan ognahay ayaa la dhaafayaa, tan afaraad baa la qaadayaa, taasna waa kan la musaafurinayo ee la leeyahay '*Ilaahay ha ka kaxeeyo'* ama tuug ha ahaado ama cadow ha ahaado ama bahal ha ahaado. Waa taasoo Saan afarqaad baa la yiraahdaa. Markaa waxaa jirta iyaduna *shanqaad*. Shanqaadaas saddexna waa la qaadaa labana lama qaado. Kuwa iyaga waa qof la is dhaafinayo oo la yiraahdo, *'waa la saanqaaday'* meel uu joogsadaba ma laha. Waxaa la

yiraahdaa 'qofkaas waa hebel—ee is dhaafiyaa yaa la yiraahdaa' oo meel uu joogsado ma leh. Haddaba arrimaha saanqaadku way farobadanyihiin oo illaa kow iyo labatan baa ay gaadhaan. Saanqaadkan waxa lagu sameeyaa bahalaha, dadka aad gurigii ugu caalweydid oo lagu fariisinayo, mid aad musaafurinayso, mid aad ku afxirayso. Waxaa jirta misna wax la yiraahdo *Kaadishir*. Midda la yiraahdo *Raadqaadka* waa kii haddaarto *Daahir Af Qarshe* wax ka sheegaayay. Laakiin siyaalaha loo qaadaa walow kitaabkaan la yiraahdo *Waxwalba-oge* waxyaabihii aad nooga soo minguurisay ay aad u qiime leeyihiin, *Aftujtu* iyaduna waa jirtaa. Wax kaleeto oo iyana jirta wax la yirahdo *Burjigur*. Markaa Burjigurka qof baa magaciisa iyo magaca hooyadii la qaadayaa, markii la qaado ayaa la xisaabinayaa, markaasaa toddobo toddobo loo xisaabinayaa, oo loo tuurayaa. Marka toddobo toddobo loo tuuro ama saddex saddex baa loo tuurayaa, markaasaa magaciisa iyo magaca hooyadiina la isku darayaa, markaasaa wax laga soo sarayaa. Tiradii laga soo saray; taas baa markaa wax sheegaysa *Kaadishir*. Waxaa jirta iyaduna mid la yiraahdo *Afxir* ama *Afwaajin* oo lagu sameeyo bahallada iyo abeesooyinka dooxooyinka jooga…"

MARYAMAYN

Wariye, "Waa aad tahay, aan ugu sii gudubno waxa iyaduna la yirahdo *Maryamey/Maryamayn*. Maryameynta Aw *Daahirow* sidee baa loogu dhaqmaa, yaa ku dhaqma, maxaa dadku u ictiqaadsanyahay? Sideebuu dadku u arkayaa, maxay tahay? Waxtarkeedu muxuu yahay? Maxaa lagu qabtaa?" Aw Daahir, "*Maryameeyntu* waa ii maanta, bal adaa nin xeebeed ahaaye ma waxay tahay kuusha la ruxayo; illayn magacaanan hore u maqale. Haddii ay tahay Maryamayntu sida aan u malaynayo kuusha la ruxayo amase aleelaha afarta ah ee la rogayo '*qababax'* laga siinayo sidii debkii *Dul* iyo *Daabax* isu rogaaya. Aleela tuur kow dheh iyo Maryameyn way isu dhow yihiin wax yar waxoogaa ah bay ku kala geddisan yihiin, marka waxaan u dhiibayaa ninka la yiraahdo *Fiqi Buraale* oo ah ninkii looga ijaasa qaadan jiray arrimo badan…"

Fiqi Buraale, "Horta *Maryameyn* marka la yiraa iyo *Aleel-tuur* marka la yiraahdo waa wax iyada raacsan ilma ay iyada dhashay weeye. Haddee aleeshaa la tuuraya iyo turub laga faaliyo oo la yiraahdo 'gabadha Raanida agteeda halaga dayo' iyo waxaa horta waxaaa dhashay Maryamynta. Haddaba Maryameyntu waa wax uun faal ah, badanaana dumarku waa ay Maryameeyaan, ragguna waa ay *Faaliyaan*! Markaa *Maryameynta* inta ay saan u qabtaan iyagu, meesha raggu

calaashaan tiriyo oo minguuriyo iyagu saasay u qabtaan, kolkaa waxa ay yiraahdaan, *'Halkaa dhac, halkaa jab, run sheeg, faal Allow run sheeg*'. Weliba waxa ay dhahaan *'kuushu ma socotee idinkaa dhaqdhaqaajiya suxullada'!* Marka *maryameyn* saasaa la yiraahday oo wax uunbay sheegaan, waxa ay sheegaanna waxna run baa ay noqdaan waxna been. *'Sii bood, soo bood, boggayga taabo'*. Waxyaala saas ah baa ay tiriyaan… Raggii ka qayb gali jiray baa jooga—e, *Ciisaw* qudhaadu maxaa aad ku dari lahayd?"

Ciise, "Sida loo sheegay *Maryameyntu* waa faalkii dumarka. Raggu waa uu faaliyaa dumarkuna waa ay *Maryameeyaan*. Qaar tusbax ayaa ay lululaan, qaar kuul ayay lululaan, qaar waxa aan arkay dhiil yar lula. Waxyaalahaas oo dhan haddii ay waayaan waxyaalaha ay yiraahdaan waxaa ka mid ah, '*Sii bood, Boggayga soo taabo, soo dhaqdhaqaaq…'* waxa uu sameeyo shaygaas uu la hadlaayo ayaa uu kaga qiyaas qaadanayaa oo tilmaamaya wixii la warsaday ama wixii laga doonay".

IBRIIQXIDH/KURRAAS

Wariye, "Mid kale oo aan ka fogayn halkan baa aan soo xasuustay, saa waxaa la yiri, 'markii wax laguu sheego baad wax xasuusataa'. Waxaa jira xarig lagu xiro *Ibriiq* ama *Ibriiq-fiirin* ama *Kurraas-fiirin*… Aleeltuuridda iyo Kurraas-fiirinta sideeba loogu dhaqmaa, yaa ku dhaqma? Bal iyadana *Daahir Afqarshe* aan ku noqdo".

Aw Daahir Afqarshe, "Waxa weeye waxaas oo dhammi, meelba si baa looga yaqaannaa, qaarna ragga ku macaamilooda, qaarna haweenka. Waxaba kale oo jira qaar faalka roga—oo midka u soo hadhaya kaga bilaabaya, *Maxamed, Cali, Abuujahal!* Midka xiga dabadeed haddii saa la yiraahdo, *Maxamed* baa xigaya. Haddii *Maxamed* soo haro oo saddex goor uu saa u rogrogo—oo saddex *Maxamed* soo haraan, magacii Nebiga ayuu helay oo markaa dabadeed wixii sidaa ah kuwa faaliyaa waxay yiraahdaan, *'saddax xarig ninka aamini waaya Ilaahna ma aammino'*! Marka ay kuu faalinayaan faal noocaas ah baa jira, haddii ay saddex *Cali* ay soo haraan waa *Sayid Cali* oo waa mabruuk wixii la doonayay. Saddex *Abuujahal* haddii ay soo haraan waad kharaabaysaa! Haddii ay isku noqnoqdaan dhanna xoog ma yeelan. Waxan aad arkaysid waa wax jirrabaad ku jirto marmarka qaarna caqligu ku siinayo…

Kuwona waa kuwa fooxa shida ragga na qaybi waa galaan oo fooxbay shidaan. Wax kaleeto oo jira

wax la yiraahdo *Kurraas* kaas oo dadka wax xado oo tuugada ah la yidhaahdo '*waa la kurraas xiraa'*, kurraas-xir baa la yiraahdaa. *Kurraas* baa labada dhinac laga xirayaa (kuraasta waa kuradda biyaha Masaajiddaada looga shubto, kurraas xirta wax kale oo la yiraahdaa *Ibriiqxir*. Ibriiqxir baala yiraahdaa, markaasaa labada dhinac laga xiraa, laba nin baa saa loogu dhibaa labada gees baa ay ka qabtaan. Ibriiqaa geeska bidix baa loo jeedshaa. Markaa wax baa la akhriyaa, waxa ay akhrinayaani waa soo wareegtaa, haddii uu wareego, nin baa magaciisa lagu ridaa, ninkii *Ibriiqaa* magaciisa la wareego ayaa wixii qaba baa la yiri. Bal raggii ku shaqayn jirayna nin baa innakala joogee, maxaa *Fiqi Buraalow* oran lahayd? *Ibriiqxirka, Aleeltuurka*, bal waxyaalahaa noo kala saar?"

Fiqi Buraale, "Ninkaas la yiraahdo *Ibriiqxirka* iyo *Aleeltuurka* saan aniga u maqlay, horta Ibriiqa kanu waxaan tuug ahayn laguma sameeyaa la yiri. Marka wax la xado oo waxaas meel loo saaro la waayo laakiin dad la tuhmo ayaa dad badan la isku soo kiciyaa, markaa dadkaa badan la isku kiciyay Ibriiqaasaa markaa biyo lagu shubaa, laba xarig baa lagu kala xiraa marka wax baa lagu akhriyaa. Mid ninkii wax xaday ayuuba daba galaa, midna saasaa loo hayaayoo hadba ninka wax xaday meesha uu jiro ayuu afkiisa u jeestaa ibriiqa! Mid kale ee ka horreyn jirtay baa jirta, waagii hore waxaa jiri jiray wax '*Dab*' la yiraah, dab baa la shidi jiray, dabkaa

marka la shido oo tuug loola dan leeyahay, ama nin wax lagu tuhmay oo aan markhaati loo haynin yaa dabkaa la shidi jiray, haddaad run sheegayso ku dhaaro dabkan. Dabkaasuu marka mari jiray. Dabkaas marka uu maro haddii uusan wax qabinna dabkaas waxba yeeli maayo, haddii uu wax qabana dabkaasi waa uu gubayaa! Taasna waa la sameyn jiray ee waxay ahayd jirrabaadihii hore, laakiin ruuxaygu waxa aan ku arkay *Cadan* dhexdeeda *Aleeltuuridda*. Haweenkaasu guri bay fariistaan kuraasi baa ay dhigtaan oo waxu in ay run yihiin iyo in ayan run ahayn kala garan mayno—oo iyagu jarriba—aa iyo ma jarribinaa war kama hayo, hase ahaatee Aleeltuuriddan waxa u badan had iyo goor ku xiriirsan naagaha oo u taga iyo nin naaga jecel ayaa yaalaa u taga habarta waxaa samaynaysa e, faal caan ah oo weyn la islana yaqaanno ma aha. Turubka ruuxiisa dhowr bay tuuraan, *Raanida* iyo *Qulaanka* iyo *Baashiga* ayay tuuraan. Markaas gabadhu si noqoto wax baa ay ku sheegaan. *Baashigu* haddii uu si noqdo wax uun baa ay ku sheegaan, *Qulaankuna* waa la mid wax bay uun ku sheegaan".

Wariye, "Bal Ibriiqa, Ibriiqxiridda, ama Kuus-xiridda ama Aleeltuuridda intaa Ciisow adiguna maxaa aad ka oran lahayd? Illayn waayo-arag baad u tahay ruuxaagu, raggii tuuri jiray baanad ka mid tahaye?"

Ciise, "Anigu ma arag midda Ibriiqa ah, laakiin waa isla iyadii oo ka duwan baan arkay waayo araggayguna ahaa—*oo Jubbada Hoose* laga isticmaalaa.

Haddii tuugada nin tuhmo qof in uu wax xaday qof markhaati ahna loo helin sida uu sheegay *Fiqi Buraale*, waxa la yeelaa dad badan baa la isku soo uruuriyaa, wax la cuno oo raashin ah ama rooti ha ha noqdo ama canjeero ha noqoto ayaa wax lagu soo akhriyaa, waxaa la yiraahdaa dadka meesha isugu yimid ruux walba mar lee cantuugo, ruuxa tuugada galay, afka marka uu gashado ee liq uu maago waa uu ku joogsanayaa! Ruuxa uu raashinkaasu ku joogsaday ayaa wixii loo qabsadaa oo waa marag ma doonto dadka oo idilna waa wada rumaysanyahay marba haddii aad liqi waydo in aad adigu tahay ruuxa wax xaday! Middaa waan soo arkay. Tii dabka—oo isagana uu i xasuusiyay *Fiqi Buraale*, mar goobjoog uma aan ahayn laakiin midbaa la iiga sheekeeyay, ninkii sameeyay baan aqaan. Nin waxa uu ahaa *Ugaas* ah, waxa uu guursaday gabar dhallinyar ah oo qurux badan isaga oo nin da' weyn ah. Dad baa waxa ay yiraahdeen '*wiilkaaga curud baa naagtaada kuu daba mara'!* Hadalkiina waa uu fiday, odaygii waxa uu goostay markaa in uu dilo wiilkiisii, rag baa se kala taliyay oo yiri 'la dili maayo wiilka waa se la dhaarinayaa; dhaarta dhaar ugu xun ee lagu dhaarto ayaa na la dhaarinayaa'. Waa oggolaaday ugaaskii arrintaa. Ka dib taneg biyo ah ayaa dab la saaray, biyihii markay kareen ee ay rogmadeen ayaa wax lagu riday, wiilkii ayaa la yiri 'ka soo bixi lafta biyaha ku jirta rogmanaya iyada oo dabka saaran! 'Haddii aadan dembigaa gelin waxba ku gaari mahayaan, laakiin haddaad gashay gacantaada waa ay

ku haraysaa biyaha, waana lagu dilayaa isla meesha ayaa laguugu dilayaa'. Ninkii waa uu sameeyay shardigii, waana uu ka soo saaray gacantiisii iyada oo aan waxba gaarin. Siddeetan iyo kowdii ayaa uu ninkii waxa uu ku dhintay degmada *Waaberi*, magaalada *Muqdisho*.[27] Aw Daahir Afqarshe: Intaa aan wax ku sii daro ee horta tan uu ka sheekeeyay *Ciise* ee luqmadda la cunaya waxaa la yiraahdaa *Luqmatu Xajar* yaa la yiraahdaa xitaa iyada oo aan la cunin, qaarkood waxa ay sameeyaan inta ay kibista soo qaadaan ayay xaashi lagu dubaa in yar, markaa qofkii wax qabay marka uu waxaas dhadhamiyo, cunaha ayaa bararaaya! Luqmatuxajar baa la yiraahdaa. Tii dabkana sidii beynu ku dhaafayna…."

Horta aniguna aan ku darsado waxa kan la yiraahdo Dabqaadka. Dabqaadka innaguna xaggayaga waa jiraa, dabkoo waa la qaadaa, dabbaa la shidayaa, marka la shido baa ninka la tuhmay waxaa la leeyahay 'haddaadan been sheegayn Ilaahay wacadkii dabkaa ku qaad, oo haddii aad arrintaa beri ka tahay Ilaahay idinkii dabkaas baa aad ku qaadaysaa oo wax ba kaa soo gaadhi maayaan; haddii kale na dhibta dabkaasi waa uu ku soo gaadhayaa! Marka sidaas la dhaho qofku haddii uu dhibka gaystay waa uu ka joogayaa dabkaas, haddii kale na sidaas ayaa uu ku falayaa arrinkaa!

---

[27] *Ninkaas dhallinyarta ahaa ee markaa dhacdadaa sameeyay waxa lagu magacaabi jiray Unun waxaana uu ka shaqayn jiray Boostadii Xamar, ugu danbayntii se waxa uu ku dhintay degmada Waaberi ee magaalada Xamar.*



CABDIKARIIM MAXAMUUD CABDI "XIKMAAWI"

Waxa uu dhashay dabayaaqada sannadkii 1993-kii. Waa qoraa iyo bare suugaaneed—oo xiiseeya Afka, Fanka iyo Cilmi Falagga. Waana qoraaga qoray buugta ay ka mid yihiin; *Afshaxan, Foolaad, Looyaan, Likaaco, Dahsoon* iyo *Saqalayn* ood hadda akhriyaysid iqk oo badankoodu wali aan soo bixin.

Tixraacyo:

Sheekh Maxamed Xaaji Ismaaciil,
|Caalamka Innaga qarsoon, dhibaatada Jinka Iqk|
Youtub, Maktabadda Alxusayni... Sh.Maxamed Cabdi Umal
|Sixirka iyo dhibaatooyinkiisa. Muxaadiro,
Youtube, Samafalmedia. Sheekh Mustafe Xaaji I. Haaruun,
muxaadiro |Shayddaan iyo Ibliis. Muxaadiro, Youtube Taleex..
Sheekh Xaamud Aadam, |Faalalawgii Toobbad keenay|
muxaadiro, Youtbe, Buuloxuubay.
sheekh Xasan Cabdillaahi, |Saaxirkii Suudaaniga ahaa|
muxaadiro, Youtube, Samafalmedia|
Sheekh Daa'aad |Mucjiso dhab ah oo la tusay
saaxirkii toobbad keenay| turjumaad iyo soo koobid,
youtube, Daarulkhayr.
Cali Ileeye|Sixirkii ay i bareen Suufiyadu|Sookoobid
iyo faafin|FacebookwwwCali Ileeye|
Sanan Iyo Sixir|Waraysi 1980-kii iyo qoraal
|https://arcadia.sba.uniroma.31t|

الثقلين

ATH-THAQALAYN

SAQALAYN

Jin, Insi Iyo Sixir

Cabdikariim Maxamuud Cabdi "Xikmaawi"

DHAMMAAD